Bogga Xuquuqda Daabacaadda

# 20 SANO
# IYO SOYAALKII PUNTLAND.

@ Siyad A Jama (buryar)

Xaquuqda daabacaaddu way xafidantahay lama badasan karo si kastoo loo dhigo, iyadoon oggolaansho loo haysan.

Daabacaadda labaad 2018,

Nairobi, Kenya
Email- siyaadj@yahoo.com
Facebook Siyad Ali Jama

## Xasuusin

Dhamaan Buugaan dhacdooyinka ku qoran waxaa ay yihiin dhacdooyin dhacay, waxaa dhici karta in qaar ka maqan yihiin laakiin waxaan hubaa inay ku dhan tahay mihiimadii Sooyaalkii 20 sano ee Puntland.

Waxaa kaloo buugan kaaga soo baxaya wax badan oo jira balse laga leex leexdo waxaana dhici karta inaad is weydiiso muxuu u qarin waayay waxaan hadaba wixii la qariyo waxaa ay ku danbeeyaan waxaan la filayn, hadaba in la sheego oo kadibna saxeeda la aado ayaa mihiima.

Khaladka oo lasheegaa waa saxa oo la gaaraa.

Aqoontu ma aha khaladka oo aad daboolato ee aqoontu waa khaladaadka oo aad ku beegto indhaha bulshada si aynan u dhicin mar danbe.

Ma aha inaan qabiil gaara iyo guruub gaara ku maagay balse wixii dhacay oo aan loo baahnayn inay sii jiraan, waxaan u qoray si loogu gudbo midnimo wada tashi ku qotonta wada lahaansho.

Waxaan ka tegey warbixino badan oo dhacdo ah oo iyaga aan loo baahnay in la qoro balse 20 Sano kadib hadii sidaan lagu sii jiro ay lagama maarmaan ay noqonayso in la qoro oo banaanka lasoo dhigo.

Waxaana dhul-udug u rajeynayaa in 20 Sano kadib ay hesho hogaamiye ku haga jidka Cadaaladda, Amniga iyo Horumarka.

***Mahadnaq***

***"Ilaahayow Ilaah kale majiro adiga mooyaane***

***Ilaahnimada kaligaana waan kugu addeecnaaye***

***Ergadaad Muxamed (NNKH) soo fartaan aan ajiibnaaye"***

*Gabay hore*

*Waxaan halkaan u mahadnaqaya waalidkay oo sabab u ah inaan idin la wadaago buugaan intii dhimatay Ilaah ha u Naxariisto inta noolna Cafimaad iyo cibaado suuban akhriana janatul fardawso. Ameen Ameen.*

*Waxaana aan halkan kuxusayaa dhamaan intii ila garab taagnayd ka guul gaarista Buugan oo ay ugu horeeyaan Xaaskayga iyo Caruurtayda oo ila shaqeeyay la'aantooda aynaba ii suura gasheen.*

*Waxaa kaloo aan u mahadnaqayaa dhamaan Asxaabtaydii igala qayb qaadatay oo ay ugu Horeeyaan*

*Ustaat Qoraagana ah Dr. Abdiqani Faarah.*

*Ustaad Qoraana ah Mohamed Hassan Ciro*

*Ex Xildhibaan Mohamoud Abdi Omar (Adooyo)*

*Gudoomiye Mulki Xaaji Husseen*

*Gudoomiye Abdiweli Ahmed Warsame*

*Isimo iyo Cuqaal tariikhda haya*

*Saraakiil Waasarad maliyada PL*

*Saraakiil Madaxtooyadda PL*

*Siyaasyiin Dalka kasoo shaqaysay iyo kuwa hada shaqeeya.*

*Saraakiisha Wasaaradda Dekeddaha*

*Saraakiisha Ciidamada kala duwan*

*Ganacsato iyo Aqoon yahano kala duwan*

*Haldoor badan oo ah Qurba Joog iyo Daljoogba*

*Madaxda Jaaliyahada Puntland ee Yurub iyo USA*

*Dhamaan waxaan halkaan usoo marinayaa mahadin Balaaran, Xogihii, Tariikhihii iyo caawintii ay ila wadaageen Xurmadlayaashaas kor ku xusan.*

## TUUSMADA BUUGGA

Hordhaca……………………..…………………………………..……10
Yagleelkii Puntand…………………………………………..……12

**Doorashadii Dowladii AUN Cabdullahi Yuusuf 1998…….15**
Dhismihii Barlamaanka ugu Horeeyay ……..
Dhismihii Dowladii ugu horaysay……………..
Dowladii AUN Cabdullahi Yuusuf…………………………….17
Waxqabdadii Dowladii AUN Cabdullahi……..
Dhismaha ciidanka
Hirgalinta qaadista cashuuraha
Arrimaha bulshada
Dhanka caafimaadku
**Dhaliilihii dowladdii AUN Cabdullahi Yuusuf iyo wixii dhacay………………………………………………………19**
Maxkamada, Isimada iyo AUN Cabdulahi………..
Dowladii Carta iyo Lugtay ku lahayd Xaladaas….
Dagaaladii ka dhacay Bosaaso, Garoowe
Tegidii Gaalkacayo Cabdilaahi Yuusuf,,,,,,,,,,,,,,

**Doorashadii Jaamac Cali Jaamac……………………………24**
Qaabkii Doorashadu u dhacday ……………………

**Abaabulkii Gaalkacyo iyo Dib ugu soo noqoshadii Awooda AUN Abdulaahi Yuusuf……………………………..……….33**
Jamhadii JBP ……………………………………………35
Hishiiskii JBP iyo Yuusuf

**Madaxweyne Maxamed Cabdi Xaashi (2004-2005)………..38**
Mudadii gaabnayd iyo wax qabadkii Xaashi.

**Madaxweyne Maxamuud Muuse Xirsi (Cadde) 2015…….39**
Xubnihii Sare ee Dowladii AUN Cade………..
Wax qabadkii Dowladii AUN Cade ……………
Khilaafaadkii Xubnihii sare Dowladi iyo Laascaano……..43
Dhaliilaha Dowladii AUN Cade Muuse……………..45

**Doorashadii Cabdiraxmaan Faroole 2009.,,…………………47**
Wax Qabadkii Dowlada Faroole…………...................
Dhaliilaha Maamulkii Madaxweyne Faroole……….
Qowda Maqashii Waxna ha u Qaban…………..
Musuq-maasuqii Dawladdaas…!.............................56
Maaliyada iyo Maaraynteedii…………………………..67
Daabiciddii Lacagata Shilinka ……………………..65
**Ciidamada ay Masruufaan Ajnebigu, ee Gaarka ah………69**
Sarancen iyo Pathfinders………………………………
Gobalada Maqan iyo Doorkii Dawladii Faroole..........

**Gobalada Maqan iyo Deeganadii laga mucaaraday Dowladii Faroole…………………………………………………………76**
**Quustii Reer Sool, wadahallada SSC iyo Somaliland.........84**
Dhismihii Khaaatumo State………………………..….90
**Ilaalinta xuduudaha Qabaa'ilka iyo Colaadeedii…………96**
Gooni ukala istaaga beelaha wada dhashay……….
Idhiga Hoos bey ka halawdaye................................98

Isbedelkii Golaha Xukuumadda Faroole…………………100

**Xaaladii Siyaasada Faroole, Gaas iyo Federaalka……....105**
Saamaynta Puntland..........................................................108
Murashaxiintii oo ka digey Musuqmasuq…………………115
Ololihii iyo Marxaladihii Doorashadii Puntland…………121
Doorashadii Federaalka 2012……………………………..….128

Musharaxiinta Madaxweynaha Puntland………………...129

**Cabdiweli Cali GAAS Madaxweynaha Puntland............139**
Madaxweyne Gaas iyo Magacaabistii Golihiisii....140
Dowladda Gaas, Dhanka Amniga.......................146
Khilaafkii Galan iyo Madaxweyne Gaas..............161

**Xaquuqaha Bulshada Reer Puntland iyo Cabashooyinka Awood Qaybsiga...................................................166**
Khilaafkii Wasaradda Dekeddaha iyo Madaxtooyada.....180
Mashaariicdii Horumarineed ----------------------------------.190
Mashaariicdii fashilmay ...........................
Hummaaggii Baarlamanka........................................193
Heerkii ugu Sareeyay ee musuq'maasuq......................195
Qandaraasyada iyo Musuqmaasuqa ............................210
Haayada Shaqaalaha Rayidka Musuqmaasuqedi..........214
Hosaynta sharciga iyo kobcinta musuqmaasuqa............216
Arimaha Siyaasada Dowladda Federaalka....................219

**Heerka Musuqmaasuqa Dowladnimo ee Xukuumadan dhamaadka ah ee Madaxweyne Cabdiweli Gaas............221**

Waxay na Badeen Waxay na Bareen baa ka daran........232
Ololaha Barlamanka iyo Madaxweynanimada ..............237

**Madaxweynaha Mustaqbalka Puntland, Talo Puntland 2019......................................240 ilaa ....................247**

Xasuusin..........................................................257

# Hordhac

## 20 Sano Punland

## 01.08.1998 - 2018

Deegaanada Puntland dhulka Uduga) ee Somaliya waxay soo mareen marxalado kala duwan, waxana ku loolamay kooxo siyaasad ahaan isdiidan, ka dib 1991 marki dowladii dhexe Mohamed Siyaad Bare la riday. Loolankaasi waxaa uu ahaa mid awood iyo mid siyaasaded oo u dhexeeyey jabhadihii, wuxuu keenay kala qaybsanaan xagga fikirka iyo u jahaynt masiirka ummadda dhinacyada siyaasada iyo dhaqaalaha.
Bulshadii deegaanku waxay noqdeen kuwo u kala qaybsa-may laba koox oo mid walba arragtideeda la qumanayd, waxaana jiray dadaalo ay wadeen waxgaradka gobolka oo aha in la mideeyo kooxaha iska hor imaanayay siyaasad ahaan kuwaas oo salka ku hayay guruubo hanoqoto Maanafesto ama Tuutaalay waxaa kaloo iyaguna dadaal ku jiray urur Diimeed.

Magaalada Boasaaso waa halbowlaha dhaqalaha gobolka, waxayna koox walba u lahayd ahmiyadda koowaaad, waxay leedahay dekad yar oo aan saas usii balaarneen waxaana ka dhoofijiray xoolaha kana soo degi jiray badeecado kala duwan kana timaada wadano kala duwan, waxaa dagaal nafbadan iyo maalba lagu waayey ay ku dhexmareen Jamhadii SSDF iyo Xoogagii Al-itaxaad, wallow ay marki danbe awoood kula wareegtay jamhada SSDF oo tageero weyn ka helaysay Beelaha ku nool Gobolka bari, dagaalkaas oo gaaray ilaa Buuraha.
1996 waxaa magalada Boosaaso laga dhisay maamul uu leeyahay gobolka Bari, waxayna timid ka dib marki beelaha degaanku ay muddo u soosocotay shirar looga arrinsanaayey xaladda siyaasadeed iyo mid amni ee gobolka Bari, madaama u gobolku uu la daala dhacayey

hardan siyaasadeed ka soo wajahay jamhadihi iyo madaxdii dowladii dhacday, waxana Gudomiye loogu dortay Gudiga Mamulka Gobolka bari Shiikh Yusuf (Heeryo), waxana dadaaladaas door wayn ku lahaa waxgaradka gobolka Bari, inkastoo uu iska casilay xilka markii dambe hadana wuxuu muddadii yarayd ee uu joogay soo dhameeyay mashaariic wax ku ool ah sida dhismaha garoonka, ballaarinta dekeda, dhismaha Isbitaal hooyada iyo dhallaanka, dhismaha xabsiyo iyo qalab ciidanka booliska iyo asluubta loogu deeqay, iyo Joojintii Xaalufinta deeganka ee ahayd Dhuxusha. Is casilaadiisii kadib mashruucyadaas wax buuran kama ay qabsoomin aan ka aheen dhisida xabsiga dhexe ee bosaso, iyo gaadiid dagaal oo lasiiyay ciidanka.

**Yagleelkii Puntand**

Aasaaskii Puntland waxay ahayd arrin lagu doonayay in lagu mideeyo jabhadihii SSDF, SNDU iyo USP, kuna salaysan awood qaybsi qabiil iyo degaan, waxaana u qayb ka ahaa mamul ka curta dalka Soomaaliya ka dib marki meesha laga saray talisku Siyaad Bare. Ujeedooyinka bud dhiga u ahaa maamulkaas ka curtay degaanada Waqooyi Bari Sool, Sanaag, Mudug iyo Degmada Buuhoodle ee Soomaliya wuxuu ahaa in la helo nabadgelyo iyo sharci kala haga siyaasiyiinta iyo taageerayaashooda oo garba u kala fadhiyey iyo in la raadiyo Soomaali wayn, loona maro nidaamka federaalka si ayan mar dambe u soo noqon wxiii horay looga dhaxlay dhibaatada ku habsatay Somaaliya oo kelitalisnimada ku dhisnayd oo qolo walba dulmiga ka tirsanaysay. Nidaamkaas oo loo arkayay inay Soomaali ku kala badbaadi karto, islamarkaana lagu qancin karo kala tabashada degsiimooyinka Soomaaliyeed dhexdooda. Magaalada Garoowe ee haatan ah caasimadda Puntland ayaa la isugu yimi shir looga tashanayay aayaha iyo masiirka gobollka Waqooyi Bari ee Soomaliya, shirkaas oo ay kasoo qayb galeen ergooyin isugu jiray siyaasiyiin, odayaal dhaqameed, culumaa’udiin, aqoonyahano,

ganacsato, haween iyo dhamaan bulshawaynta, ergooyinkaas oo ka koobnaa 500 xubnoon, una qayb san gobolada iyo degmooyinka ay kala degaan qabaa'ilka ku noolaa goboladaas. Dadka tariikhda yaqaan waxa ay tilmaamaan in magaalada Xuddun la yiraahdo ee gobolka Sool, ay ahayd meeshii dadka dega gobolada la isku yiraahdo Puntland ay ku heshiiyeen waxa loo yaqaan xeer Harti, ayna ku heshiiyeen sida ay u qaybsanayaan saldanada, magta iyo waxyaabo kale oo badan, waqtigaas waxaa lagu tilmaamaa qarnigii 17aad 1600 – 1700, sidey doontaba ha noqotee goobtii heshiiskaas ka dhacay waxaa lagu magacaabey Xuddun, oo macnaheedu yahay meeshii lagu xuddumay xeerka Hartiga (Xudun waa Deegaan katisan Gobalka Sool). Saldanada iyo magaca isimadu taariikh dheer iyo door shariif ah ayey ku leeyihiin bulshada degta Puntland, mar bay ahaayeen kuwo taladu iyaga ka go'do ardaaga ay ka taliyaan waxaa ku xeernaa garcas garasho iyo aqoon dheer leh kuwaas oo ka talin jirey beeshaas iyo barta ay taalaba wixii dani ugu jirto, waxayna lahaayeen wakiilo meelaha aysan gaari karin ku metela. Haddii aan taariikhdaas fog soo dhaweeyo markii xukunka daakhiliga la qaatey sanadihii 50-aadkii, waxaa goboladaas talo loogu noqon jirey isimo kooban oo magac iyo maamuus weyn bulshada ku lahaa, Boqor, Garaad, Ugaas, Beeldaajiyaal iyo Isalaano.

Markii guumeystuhu yimid dalka waxaa is badalay xaalka Soomaaliya, waxaana la ridey saldanooyin badan oo waagaas jirey.

Qaar kamid ah isimadu waxa ay sii wateen taladii bulshada iyaga oo xubno ka ahaa Golihii Shacabka ee fadhigiisu ahaa Muqdisho, sida Ugaas Yaasiin Ugaas Cabdiraxmaan iyo Beeldaaje Xaaji Cabdullaahi Beeldaaje Maxamed, Garaad Cali Garaad Jaamac iyo qaar kale oo 60-kii ku soo biiray golaha shacabka.

Kaddib markii talada dalka ay la wareegeen ciidamdii xoogu 1969, doorka isimadu waxa uu ahaa mid ku eg beelaha soo caaleema saartay, waxayna ku dedaali jireen in beeluhu nabadgelyo kala helaan, deris walaalnimo lagu wada noolaado, wixii dhib ah ee dhacana xeer iyo xaal waayeel lagu dhameeyo, waxaana ay dawladda ka heli jireen mushahar yar oo aan ahayn wax la sheego.

Burburkii Dawladdii uu Madaxweynaha ka ahaa AUN Maxamed Siyaad Barre, gobolada waqooyi bari waxaa taladii markiiba gacanta ku dhigay Isimadii gobolka, kuwaas oo tiradoodu aysan ka badneyn 10 isim. Tusaale, siyaasiyiintii SSDF waxa ay ahaayeen kuwo leh difaaca dalka iyo doorka arimaha dibadda isla markaana waxaa ay tala wadaag la ahaayeen Dhaqanka, laakiin arimaha gudaha waxaa bud-dhig u ahaa isimada oo ay talada u danbeysana ka go'i jirtey markay adkaato.

Waxaa la tilmaamaa in ay ahayd markaas marka ay bilowdeen in isimo cusub oo aan soo jireen ahayn markaas la caleemo saaro, waxaana beelaha qaarkood caleema saareen isimo. Waxaana arintaasi ay salka ku haysey beelaha caleema saarey isimada cusub oo aan horey u lahaan jirin isim, isla markaana doonaayey in cadkoodu muuqdo oo aan qof kale mindida daabkeeda u qaban. Laakiin muddooyinkii hore ma jirin beel isim lahayd in ay mid kale ka dhinac taagto.

Kadib markii ummadda Soomaaliyeed ay ku guuleysan waayeen in ay dhistaan dawlad ay u dhanyihiin oo lagu wada qancsan yahay, waxaa loo guntadey in la samaysto maamul ka balaaran kii ku koobnaa gobolada Waqooyi Bari. Waxaana la isku raacay in Puntland la aasaaso oo ay tahay dawlad goboleed lagu baadi doono qaranimadii Soomaaliyeed, laguna dhawro inta bulshada degta koonfurta Soomaaliya ay u bislaanayaan in la asaaso dawlad federaal ah. Ergada shirkaas fadhidey waxay dhamaayeen 433 ergay oo ka kala socdey 5 gobol iyo

degamada Buuhoodle. Waxaa saxiixey asaaskii Puntland 26 Isim oo keliya.

- Gobolka Bari 8 Isim
- Gobolka Nugaal 4 Isim
- Gobolka Mudug 5 Isim
- Gobolka Sool & Deegaanka Buuhoodle 6 Isim
- Gobolka Sanaag 3 Isim

Waxayna 13 March 1998-dii qalinka ku duugeen mid ka mid ah heshiisyadii ugu wanaagsanaa ee dhulkaas lagu qabto, waxayna ahaayeen isimadii saxiixay.

1. Boqor Maxamuud Boqor Muuse (Majeerteen/ Cismaan Maxamuud
2. Ugaas Yaasiin Ugaas Cabdiraxmaan ( Moorocase /Dashiishle
3. Beeldaaje Xaaji Cabdullahi Beeldaaje Maxamed (Majeerteen / Cali Saleebaan)
4. Beldaaje Yaasiin ( Majeerteen/ Siwaaqroon)
5. Islaan Maxamed Islaan Muuse (Majeerteen/ Ciise Maxamuud
6. Garaad Cabdiqani Garaad Jaamac (Dhulbahante )
7. Suldaan Siciid Suldaan Cabdisalaan (Warsangali)
8. Islaan Bashiir Islaan Cabdulle (Majeerteen / Cumar Maxamuud)
9. Beldaaje Cali Faarax (Beesha Cali Jibrahil Maajeerteen)
10. Islan Maxamed Islan Maxamud (Beesha Cabdiraxim Ibrahim Maajeerteen)
11. Suldaan Cabdiraashid Muuse Faray (Beesha Maxamud Ibrahim (Reer Maxamud Maajeerteen)
12. Suldaan Xaaji Xasan Suldaan Baale (Beesha Cali Ibrahim (Rer Bicidyahan) Maajeerteen)
13. Ugaas Cali Ugaas Maxamuud Ugaaska beesha Tanada Daarooe (Leelkase)

14. Garaad Cabdi Qaani Gaarad Jaamac (Besha Siicid Harti (Dhulbahante)
15. Gaarad Saleban Gaarad Maxamed (Beesha Maxamud Gaarad (Dhulbahante)
16. Garad Cabdulahi Gaarad Soode (Beesha Faarax Gaarad Dhulbahante)
17. Garad Abshir Salax (Beesha Barkaad Dhulbahante)
18. Gaarad Saleban Buraale (Beesha Yaxye Dhulbahante)
19. Garaad Cabdisalan Maxamed (Beesha Cumar Wacays Dhulbahante)
20. Iyo isama badan oo aanan halkan kusoo koobi karin

Mana jirin isim ka maqnaa madasha shirka ergada gobollada, waxayna iska dhexdoorteen 5 xubnood oo shirka hogaaminayay. Waxayna kala ahaayeen:-

1: Islaan Maxamed Islaan Muuse (gudoomaha shirwaynaha Puntland)
2: Axmed Maxamed Goonle (gudoomiye ku -xigeen)
3: Bashiir Yuusuf Nuur (xubin)
4: Bootan Barre Samatar (xubin)
5: Cawad Axmed Casharo (xubin)

**Doorashadii Dowladii AUN Cabdullahi Yuusuf**

Shirkaas waxaa la iskula gartay in Puntland ka koobnaato 3 qaybood oo kala ah: awoodaha dowladda, golaha wakiilada, xukuumad iyo garsoorka. Bishii 5-aad, 1998dii waxaa magalada Garoowe ee shirku ka socday lagu ansixiyay axdiga qabyo qoraal ah, kaas oo ka koobnaa 35 qodob.
Qaybintii xubnaha wakiilada cusub sida uu qorayo axdiga qabyo-qoraalka ah. Gobolka Bari waxaa la siiyay 21

xubnood oo mid tahay haween, Gobolka Sool iyo Degmada Buuhoodle 15 xubnood oo mid tahay haween, Gobolka Sanaag 11 xubnoon oo mid tahay haween, Gobalka waqooyiga Mudug 10 xubnood oo mid tahay haween, Gobolka Nugaal 9 oo mid tahay haween iyo 3 xubnoon lagu sharfay gudoomiyaashii jamhada ee kala ahaa SSD, USP, SNDU, taas oo aan lagu salayn gobol ee lagu sharfay gudoomiyaashii sadexdaa jamhadood, haddii ay ka tagaan cid kalle qaadan karin.

Wadartii aqalka baarlamaanka cusub ka dhigtay 69 xubnood. Waxaa iyaduna aan laga tegi karin in ay jirtey beelo badan oo kamaqan golaha baarlamaanka Puntland iyo weliba isu dheeli tir la'aan. Muddo dheer markii shirkii yagleelka Puntland socday waxaa la isla gartay in la doorto madaxweyne iyo ku xigeenkiis, kahor intaan la soo xulin xubnaha barlamaanka.

Waxaa magalada Garoowe lagu doortay madaxweyne Cabdullahi Yuusuf Axmed Alle ha unaxariistee 1/ 08/1998, waxaana madaxweyne ku xigeen loo dortay Maxamed Cabdi Xaash, waxaana kalloo dhinac socday dhismaha Barlamanka Puntland. Waxaa xiligaas gudoomiye barlamanka loo doortay Yusuf Xaaji Siciid, ku-xigeen ka kowaadna Xasan Daahir Afqurac. Waxaa kale oo loo doortay gudoomiye ku-xigeen labaad Maxamed Axmed Kulan.

**Dowladii AUN Cabdullahi Yuusuf**

Madaxweyne Cabdullahi Yuusuf wuxuu soo dhisay xukuumad ka kooban 9 wasiir, oo ahaa golahii wasiirada ugu horeeyay Puntland 1998. Waxay kale ahaayeen:

1) Wasiirka Arrimaha Guddaha, Hassan Abshir Faarax
2) Wasiirka Maaliyada, Siciid Caduur
3) Wasiirka Warfaafinta Cawad Xasharo
4) Wasiirka Ganacsiga, Cali Ismaaciil Abdi Giir

5) Wasiirka Arrimaha Diinta Iyo Awqaafta, Sh Cali Nuur
6) Wasiirka Gadiidka Iyo Howlaha Guud, Axmed Cabdi Xaabsade
7) Wasiirka Arrimaha Bulshada, Dr Yaasiin Faarax Cartan Beeldaaje
8) Wasiirka Dakadaha, Maxamed Maxamuud Jestar
9) Wasiirka Xanaanada Xoolaha, Dr Hussien Ismail.

Dowladdaan ma lahayn wasiiro ku-xigeeen balse muda yar kadib waxaa golaha xakuumada lagu soo daray hal wasiir ku-xigeen oo loo magaacabay Wasaarada Kalluumaysiga iyo Dekeddaha Mr. Cabuud Balbalaare.

Xukumadaas ayaa ahayd mid aad u yar, balse dadka siyaasadda Puntland falanqeeya ay dhahaan waxay lahayd tayo aad u wanaagsan, waxayna qabatay talaabooyin wax tar uleh dadka iyo deegaanka. Waxaana wax qabadkeedii ka midka ahaa waxyaabaha soo socda:

**1. Dhismaha ciidanka**

Dowladdii Madaxweyne Cabdullahi Yuusuf waxay ay aasaastay ciidan iskugu jira daraawiish, police iyo ciidan asluub ah, ciidamadaan ayaa waxay ka qayb qaateen qaadista isbaarooyin badan oo si sharci daro ah loo dhigtay wadooyink Puntland, waxaana laga xusi karnaa wadada isku xirta magaalooyinka Galkacanyo iyo Bosaso.
Waxyar kadib waxaa si toosa Puntland u yeelatay awood ciidan oo kala duwan, waxaana ay awood u yeesheen inay sugaan dhamaan amniga dalka, waxayna xoreeyeen Gobalka Sool oo ay Somaliland gacanta ku haysay.

**2. Hirgalinta qaadista cashuuraha**

Dowladdii AUN Madaxweyne Cabdullahi waxay hirgalisay qaadista cashuuraha, taas oo mudo yar oo kooban ku hergilasay, waxayna ay dejisay shuruucda cashuuraha, kuwa dhoofinta iyo soodejinta. Waxa ugu badan oo ka dhoofa degaanka Puntland oo loo dhoofsho waddama

dibadda ah ayaa waxaa ugu badnaa xoolaha nool iyo maydiga.
Badeecada dibada ka iman jirtay waa mid aad uga badan tan uu dhoofsho wadanku, waxaana laga xusi karaa, raashinka oo nooc walba leh, cabitaanada kala duwan, biyaha sifeeysan iyo qalabka dhismaha, waayo Puntland malahayn warshado wax soo saar dowladdii kacaankana kama aanay hirgalin wax warshado ah deegaanka Puntland.

**3. Arrimaha bulshada**

Dowladdii Madaxweyne Cabdullahi Yuusuf Axmed waxay ahayd sidaan horay u sheegnay dowlad curdun ah, xiligaas ganacsigu wuxuu ahaa mid soo koraya, ganacsatada reer Puntlandna waxay ahaayeen kuwa horumar sameenaya, wadankuna waxa uu ahaa mid soo koraya guud ahaan.

Waxa la xanibay 1999kii xoolihii soomaalida ee loo dhoofin jiray dalka Sucuudiga, taas oo dhabarjab xoogan iyo hoos u dhac dhaqalo oo sameeyay dhamaan dadka Soomaaliyeed miyi iyo magaaloba, taas ayaa sababtay in dhaqaalihii reer Puntland hoos u dhac balaaran soo wajahay.

**4. Dhanka caafimaadku**

Caafimaadku waxa uu ahaa mid aan gaarsiisnayn deegaamada marka laga reebo magaalooyinka waaweyn oo iyagu lahaa isbitaallo ay dhistay dowladdii Soomaaliya, dowladda Puntland ee xiligaasna wax weyn kuma ay darinn, inkastoo hay'ada UN ee qaabilsan dhanka caafimaadka World Health Organization (WHO) iyo Unicef ay caawin jireen dhanka isbitaalada iyo goobo kalkaaliso siina jireen daawada iyo deeqaha caafimaadka oo kalle.

Waxbarasha Puntland waxay ahayd mid aad u taag daran, mana lahayn manhaj waxbarasho. Ardayda reer Puntland waxay dhigan jireen manjah dalalka carabta qaar, iskooladu Puntland badankooduna waxa uu ahaa mid si

gaar ah loo leeyahay. Dugsiyadu waxay isugu jireen dugsi dhexe, hoose, sare. Waxaa kale oo meesha aan ka maqnayn macadyo bixiya xirfado yar yar.

**Dhaliilihii dowladdii AUN Cabdullahi Yuusuf Axmed iyo wixii dhacay**

Waxaa jiray mashruucyo aad u waa weyn kuwaas oo horay uu u soo dhameeyey Sheekh Yuusuf Heeryo oo dhismahii Puntland ka hor ahaa godoomiyaha gobolka Bari, mashaariicdaasna waxaa ku deeqay dawladda Imaraadka Carabta, waxaana ka mid ahaa dhisidda Madaarka Boosaaso, balaarinta dekedda Boosaaso, dhisidda xabsiyo iyo deeq gawaari ah. Deeqda waxaa ka hirgalay xabsiga Gaalshire iyo gawaari ciidan oo aan saas ubadnayn.

Nasiib xumo mashruucyada wax ku oolka ah waxaa lagu eedeeyaa maamulkii uu madaxda u ahaa Madaxweynihii hore Cabdullahi Yuusuf Axmed, eedayntaas oo ilaa iyo iminka aan la aqoon waxay salka ku haysay.

Waxaa kaloo aad loogu dhaliilay Cabdullahi Yuusuf Axmed qaabkii uu dagaaladii kasocday Kismaayo.
Ciidamadii uu u diray iyo sarakiishii la socotay hanoqoto xiriir toosa oo uu la yeehsay odayaashii kismaayo qaarkood taasoo sababtay kala qaybsanaan inay ka dhacdo Kismaayo kadibna fursad waxa helay ciidamadii kasoo horjeeday ilaa ay laba wareegeen ayna dhacday qasaaro dhimasho, hanti iyo dhulkii oo lala wareegay sidaasna gacanta uga baxay ilaa hada, iyadoo lagu eedaynayo inuu sabab u ahaa burburkii iyo jabkii ku dhacay Jamhadii uu hogaaminayey Gen.Mohamed Saciid Xirsi Morgan.

Waxaa kaloo lagu dhaliilay dhinac maridii dastuurka Puntland taasoo sababtay dagaallo iyo burbur, waxaana wax u dheceen sidan: Kadib markii ay dhamaatay mudadii 3-da sano ahady ee loo doortay xilka, isla markaana aynan

jirin hanaan doorasho oo ay qabanaysay Dowladdii Madaxweyne Cabdilaahi Yuusuf, iyagoo isku dayay inay 1-dii Luuliyo ay ku dhawaaqeen in uu yahay Madaxweynaha kumeelgaarka ah Guddoomiyihii maxkmadda sare Dr. Yusuf Xaaji Nuur, xaalka ayaa cirka isku shareeray.
Waxaa Garoowe ku soo qulquley Isimadii Puntland sida, Boqor Maxamuud Boqor Muuse, Beeldaaje Xaaji Cabdullaahi, Beeldaaje Cali Beedlaaje Faarax, Garaad Cabdiqani, Islaan Maxamed Islaan Muuse, Suldaan Siciid Maxamed Garaase iyo qaar kale oo badan, waxaana shir u socdey muddo ka dib ay ka soosaareen in ay u aqoonsan yihiin Dr. Yusuf Xaaji Nuur ku simaha madaxweynaha. Go'aankaas ayaa soo baxay 25 July 2001, waxaana ay siiyeen muddo 30 cisho ah in lagu soo doorto madaxweyne rasmi ah.
Waxaa go'aankaas si weyn u soo dhaweeyey maamulkii Gobolka Bari gaar ahaan ciidankii dekadda Bosaso. Col.Cabdullaahi Yusuf qiimo weyn ayuu gobolka Bari ugu fadhiyey, waxaana uu cidla ka dareemay caasimaddii Puntland, kadib markii loo diidey in uu u dabaaldego 01-da Agoosto 2001, lagana carqaladeeyey, waxaana looga gacan haadiyey gobolka Bari.

Col.Cabdullaahi Yusuf oo wata Dowladiisi iyo ciidan waxay gudoodi ku soo galeen magaalada Bosaso 5-tii Agoosto 2001. Waaberkii markii ay ahayd waxaa uu tegay garoonka diyaaradaha oo ay kusugnaayeen ciidamao tageersanaa go'aankii isimada, halkaas ayaa waxaa ka bilaamay iska hor imaado saameeyay magaalada Bosaaso dagaalkaas waxa uu ahaa bilowgii dagaalo dhawr ah oo ay isaga horyimaadeen dhinayacyadii loo kala jabay, dagaalkaas waxa uu ku khasbey Col.Cabdullaahi Yusuf in uu ka baxo garoonka markii bulshadii Boosaaso ku dhaqneyd dhamaantood dagaalka soo galeen.

Alle Ha u Naxariistee Col.Cabdullaahi Yusuf waxaa kufurmay dagaal sokeeye, waxaana uu dib ugu laabtey

Garowe, laakiin bulshadii ku dhaqneyd Garowe waxay ka hor yimaadeen oday Cabdullaahi una diideen in uu dib u galo aqalkii uu muddada saddexda sano ah ka talinaayey, taas oo kaliftey in uu 6-dii August dib ugu laabto Gaalkacyo.

**Wareegtadii Gudoomiyaha Maxkamadda**

*Ku: Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Puntland (DGPL)*
*Mudane Cabdullahi Yusuf Axmed, Garoowe*
*Ku: Madaxweyne Ku Xigeenka DGPL*
*Mudane Maxamed Cabdi Xaashi, Garoowe*
*Ku: Guddomiyaha Golaha Wakiillada DGPL*
*Mudane Yusuf Xaaji Siciid, Garoowe*
*Ku: Shir-guddoonka Isimmada*
*Islaan Maxamed Islaan Muuse, Garoowe*
*Ku: Xeer-ilaaliyaha GDPL*
*Mudane Bashiir Yusuf, Garoowe*
*Og: Taliyaha Ciidanka Daraawiishta*
*Og. Taliyaha Ciidanka Booliska*

***Ujeeddo: U hoggaansanaanta Axdiga Ku Meel Gaarka ah ee DGPL***

*Ka dib markii aan ka baaraan degay Axdiga ku meel gaarka ah ee DGPL, oo jidaynaya in Dawladda Puntland tahay dawlad ku dhisan Sharci (State of law)*
*Aniga oo cuskanaya in shareecada Islaamku tahay asaaska qawaaniinta. Axdiga ku meel gaarka ahina yahay qaanuunka ugu sarreeya ee qaanuunnada lagaga dhaqmo DGPL.*

*Aniga oo qirsan in Axdiga Ku Meel Gaarka ah ee DGPL ka soo baxay shirweyne ay ka soo qayb-galeen ergooyin ay soo wakiisheen dhammaan gobollada iyo deegaammada u bahoobay dhismaha DGPL, ayada oo aanay ilaa hadda suurto gelin u gudbidda dawlad ku timaadda doorashooyin*

*xor ah oo la waafajiyey dastuur lagu ansaxiyey afti dadweyne, sababa kasta awgood.*

*Aniga yaqiinsaday in bulshoweynta Puntland uu ku weyn yahay dareenka ah in la xurmeeyo Axdiga ku meel gaarka ah, oo ah asaaska sharciyeed ee DGPL, dareenkaas oo ay ku muujiyeen baaqyo ka soo baxay deegaammada iyo qaybaha kala geddisan ee bulshada Aniga oo gudanaya xilka masuuliyadeed ee u farayo Axdiga Ku Meel Gaarka ah.*

*Aniga oo ka welwelsan in garabmaridda Axdiga Ku Meel Gaarka ahi ay halis gelin karto jiritaanka GDPL Waxaan soo bandhigayaa:*

1. *In qodobka 34.2 2 Axdiga Ku Meel Gaarka ah, una Qoran, haddii sabab kasta awgeed dawladdu diyaarin weydo dastuur cusub saddexda sano ee kala guurka ah, golaha wakillada iyo golaha xukuumaddu waa jiritaan beelayaa. Xilka Madaxweynaha xukuumaddu wuxuu u wareegayaa Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, oo laga doonayoinuu 30 (soddon) maalmood gudahood isugu yeero shirweyne gobolladii ku bahoobay dowladda Puntland si ay xaaladda cusub uga qaataan, uu jideeyey waddada saxa ee ku abbaaran xal u helidda xaaladda DGPL ku sugan tahay wakhtigan.*

2. *In aanu jirin qiil bannaynaya in Isimmada iyo Golaha Wakiiladu gaaraan go'aan khilaafsan qodobka 34.2, maa daama qodobkaasi si cad oo aan shaki ku jirin u tilmaamayo xal-u-helidda xaaldda DGPL ku sugantahay wakhtigan.*

3. *In jiritaan la'aanta golayaasha wakiillada iyo xukuumadda ee ka bilowda 30ka Juun 2001, kuna eg*

*marka shirweynaha uu jideeyay isla qodobka 34.2 ee qabsoonkiisu ku beeganyahay 1da Agoosto,2001 uu hawshiisa dhammaysanayo, aan macnaheedu ahayn inuu dumayo haykalkii maamul ee DGPL. Hawlihii maamul ee caadiga ahaa waxaa sii wadaya Agaasimayaasha Guud, Taliyayaasha Ciidamada iyi Madaxda Hay'adaha Madaxa Bannaan.*

4. *Mawqifkaygani waa mid qaanuuni ah ee aan sina ula xariirin han siyaasi ah oo shakhsi ah iyo xaglinta dhinac ama dhinacyo ka mid ah ah shakhsiyaadka tartanka ugu jira mansabyada ugu sarreeya hogaaminta dalka. Gabogabadii waxaan dadweynaha DGPL dareensiinayaa in u hoggaansanaanta*

*sharcigu tahay waajib saaran dhammaan muwaaddiniinta, sidaas awgeedna tahay tubta ugu habboon ee lagaga hortegi karo qalalaase siyaasadeed laguna gaari karo horumar dhisme dawladeed.*
*Wa billah towfiiq*
*Yusuf Xaaji Nuur*
*Guddomiyaha Maxkamadda Sare*
*Dawlad Goboleedka Puntland*

**BAYAAN**

Bayaan uu soo saaray AUN Beeldaaje Xaaji Cabdullaahi Beeldaaje Ismaaciil:-

Kadib Jahwareerkii Siyaasadeed waxaa Alah Ha u naxariistee beeldaaje Xaaji Cabdulaahi Beeldaaje Maxmaed Beeldaaje Ismaaciil uu soo saaray bayaan ku aadanaa xaaladii cakirnayd. Bayaanka Beeldaajaha oo ka tarjumayey dareenkiisa, wuxuu u qoranaa sida tan soo socota:

*Anigoo ah Beeldaaje Xaaji Cabdulaahi Beeldaaje Maxamed Beeldaaje Ismaciil, Waxaan salaan diirran u soo gudbinayaa dhamaan dadweynaha reer Puntland, anoo ugu hambalyaynaya barwaaqo iyo Bash-Bash.*

*Waxaan sidoo kale uga mahad celinayaa Beesha Cali Saleebaan, Shirwaynihii ay ku qabteen Carmo 2dii ilaa 6dii Juun 2001, kaas oo si wanaagsan loo abaabulay, talooyin wax ku ool ahina ay ka soo baxeen, dadweynaha gudaha iyo dibaduna ay aad ugu riyaaqeen.*

*Waxaan kale oo aamin sanahay in Shirkii Garoowe lagu qabtay1998dii, oo lagu dhisay D/G/P/land ee Soomaliya, uu ahaa mid dhaxal gal ah, oo gacan weyn ay ka geesteen Isimada, Siyaasiyiinta, Culimaa'u diinka, haweenka, uu noqday shirweyne Hartiyeed oo wax ku ool ah.*
*Haddaba iyada oo ay dhamaatay mudadii 3da sano ahayd ee dhismaha D/G/P/Land, Waxaan ku talinayaa aniga oo leh Khibrad Isimnimo, oo 60 sano ah, in wixii Bulshada dhib uga imaanayso laga dheeraado. Waxaa iga talo ah qodobada soo socda*

- *In axdiga P/Land la dhawro.*
- *In Isimau aanay ku deg degin Go'aanno aanay bulshadu raali ka hayn*
- *In doorasho aan la qaban karin balse qaabkii*
- *ergooyinka la samayo sidii 1998dii*
- *In doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne ku xigeenka ay doorasho ergo ku timaado*
- *In Isimadu ay xaq dhawraan dadweynaha a wakiilka ka yihiin, oo talada wax ka siiyaan*

*Wabilaahi Towfiiq*
*Beeldaaje Xaaji Cabdullaahi Beeldaaje*

**Doorashadii Garoowe**

Dadka xog ogaalka ahi waxay sheegeen in doorashadaasu u dhacday si hagaagsan oo deggan, ergooyinkuna ay si xor ah codkooda u bixiyeen waloow ay ka dhexmuuqatay gacmo

kala duwan oo ku ahaa musuq maasuq laakiin Buuq kama maqnayn, taasoo najiidadeedii noqotay Jaamac Cali Jaamac oo loogu doortay halkaas cod aqlabiyad ah Madaxwayne iyo Axmed Max'ed Goonle oo isna loo doortay madaxwayne ku xigeen.

**Hadaba Sidee loo arkay doorashadii Jaamac Cali Jaamac.**

Aragtiyo kala duwan baa ka soo baxaya sida wax u dhaceen, warar xoog leh oo aad u fara badan baa waxay sheegayaan in waxyaabo badan lays daba mariyey, musuq maasuq badani ka jiray.
Wurarku waxay sheegayaan in ergooyinka intooda badan la iibsaday codkooda, wararku waxay kaloo sheegayaan in ergooyin aan meeshaba joogin kaararkooda dad kale ay ku codeeyeen.
Arimahaasi oo dhami way jiraan waxaa socda abaabulo lagu taageerayo maamulkii hore ee Col. Cabdulaahi madaxda ka ahaa iyo kuwo dadkii markii hore ka soo horjeeday doorashada Jaamac oo haatan iyaguna u ololaynaya inay wax ka dhisaan maamulkaan cusub.

Waxyaabaha xaqiijiyey waxaa ka mid ahaa Khaliif Ciise Mudan oo ah ninkii shirkaddii Hart Group iyo PIDC madaxda ka ahaa oo ku codeeyey kaar uusan lahayn, ayadoo uusan caadiyan horey shirka u imaan jirin, maalinkii cod bixinta oo ka mid ahaa maalmo yar oo uu yimaado shirkaas kana soo qayb galo, ayaa waxaa wararku xaqiijinayaan in Khalliif uu ku codeeyey kaar uu leeyahay nin la yiraahdo C/laahi reer Bari oo ka yimid North America.

Cabdilaahi Reer Bari oo ay nin ku kulmeen balliga Laag ayaa waxa uu u sheegay in beeshu ay ku khasabtay in uu ka tago madasha shirka oo uu tago magaalada Boosaaso, ayadoo uu ka mid ahaa taageeroyaashii Maxamed C/rashiid markii hore la socday.

Marka arintaas ayaa ka mid ah waxyaabixii sida cad u muuqday ee ay dadkku tilmaamayeen khaasatan dadka ka soo horjeeday Jaamac Cali Jaamac, doorashadiisa oo ah arrin aan cidina isku inkirsanayn, waxaa warku intaas iigu daray in xitaa shir guddoonka la gaarsiiyey iyo guddiga doorashada arinta ninkaas, ayadoo maalmihii ka horeeyey lagu cel-celin jiray in aan la aqbali doonin dad kaarar aysan lahayn ku codaynaya, waxaana dhici karta in dad kaloo aan sida Khaliif madasha uga muuqnayey aan uga muuqan inay jireen oo ay waliba ku badnaayeen. Musharixiintii la tartamaysay Jaamac Cali Jaamac maxay ka yiraahdeen sida wax u dheceen?

Musharixiintii, wax mawqif ah oo cad oo ka soo baxay ma jirin, mana jirin cid ku gacan qaaday madashii shirka Jaamac ama ugu hanbalyeysay, hase ahaatee wararku waxay sheegayaan in marka laga reebo Cabdi Cabdille Saciid (Jini boqor) oo isagu si cad ugu gacan sayray waraysi uu Idaacadda Midnimo siiyeyna ku sheegay in uusan sharciyad ku haysan aqoonsanayna ee uu taageersan yahay maamulkii hore, musharixiinta kale wax war ah oo ka soo baxay majiraan. Hase ahaatee waxa wararka laysla dhex marayo magaalada Garoowe ay sheegayaan in laga yaabo C/laahi Cayrow iyo C/risaaq sheek Cismaan (Cali Baadiye) inay ku biiraan dawladda inay dhici karto, ayadoo kuwo kalana la sheegayo in laga yaabo inay xagga Col. Cabdulaahi u biyo shubtaan.

**Xafladdii xil wareejinta**

15 bilyan oo dayn ah buu la wareegay Jaamac Cali Jaamac mudadii koobnay ee Gudoomiyaha Maxkamaduhu xilka hayay walow ay jirtay lacag badan oo iyaduna ka imaanaysay dowladii Carta.
Xafladdu si wanaagsan ayey u dhacday, marti sharaf badana way ka soo qayb galeen hase ahaatee arinta

lacagtaas, waxay ahayd mid ka dhaka-faarisay dadwaynaha reer Puntland iyo isimadii iyo masuuliyiintii kale ee xafladdaas ka soo qayb gashay. Islaan Maxamed ayaa meeshaas ka cadeeyey in aan la qaadan karin mudadii yarayd ee Yuusuf xilka hayey daynta uu soo qadimay, hase yeeshee uusan doonayn in uu madasha kaga hadlo maadaama suxufiyiin ay joogaan iyo niman rikooro iyo wax wata “waa sida Islaanku hadaalka u dhigaye.”

Jaamac Cali Jaamac oo ah Madaxwaynaha Cusub ee Shirka Garoowe lagu doortay ayaa isaguna waxaa uu muujiyey oo uu aad u iftiimiyey lacagtaan faraha badan ee amaahda ah ee lagu wareejiyey wuxuuna yiri.

"hadde waad u jeedaan waxaanu la wareegnay marka wax qabadka nalaka fili karaa lug bay ku yeelanaysaa" wuu ku ceceliyey waliba taas, isagoo muujinayey indhaha dadkana ku soo jeedinayey lacagta amaahda ah ee uu la wareegay. Wararka ugu badan ee laga hadlayey wuxuu ahaa arinta lacagtaas amaahda ah oo Yuusuf Xaaji Nuur uu soo qadimay waxayna dadku u badinayaan in arintani ay tahay miduu wax ka ogaa Jaamac Cali Jaamac.Waxaa loo badinayaa in arinta lacagta musuq-maasuq ku jiro ayna isla ogaayeen Yuusuf iyo Jaamac.

Arintaasi aad bay u xoog badnayd, waxa la sheegayna inay ku jireen lacagihii Kaanbaynka (Ololaha) Jaamac ku galay, lacago gaar ah oo dad la shaqaynayey la siiyey waxyaalahaas oo dhan baan meesha marna laga saarin, lacagtii abaabulkii ciidan xilligii C/llaahi ay dagaalka kula jireen lacagihii ku baxay iyo ganacsatadii taageertay lacagihii ka baxay, waxyaabahaas oo dhan inay ku jiraan ayaa la rumaysnaa.
Jawigii cusubaa ee Puntland ay gashay sawir noocee ah buu ahaa?  Waxaa la oran keray labo garab iyo SSDF-94, baan dhihi karay kuna koobayaa.

## Dowladii Carta iyo Lugtay ku lahayd Xaladaas.

Dowladii Carta ee uu Cabdi Qaasim ka ahaa Madaxweyn-aha Ra'iisul wasaarana uu ka ahaa Cali khaliif Galayr waxaa ay aad lug ugu lahayd xaaladii dhacday waxaana ay dhaqaalo ku bixiyeen sidii AUN Cabdulaahi Yuusuf loo dhaafsiin lahaa Maamulka Puntland.
Waxaana ay la galeen dagaal aan kala har lahayn waxaa la shaqaynayay AUN Kinkoon oo ahaa Wasiirkii Difaaca iyo Xasan Abshir oo ahaa Wasiirkii macdanta mana ahayn Dagaalka Dowladaasi mid ku koobnaa Puntland oo keliya ee waxaa dagaalkaas oo kale ay ku qaadeen Gen. Morgan oo haystay Kismaayo iyadoo loo diray Ciidamo watey 85 tiknika ah halkaas oo dad badana lagu laayay lagana Saaray Ciidamadii Moorgan, dhamaan arimaahaan oo dhan waxaa ay Salka ku hayeen inaan Somaaliya ka hana qaadin iftiinka kasoo ifay Puntland ee ah Fedaraalka.

## Muxuuse Kayiri Madaxweyne Cabdilaahi Yuusuf Ahmed mar la weydiiyey sida wax u dhaceen?

Hogaanka Puntland Diyaar Baan u ahay in aan dhiibo Abdulahi Yusuf Madaxweynaha Puntland oo u waramayey Idaacadda Midnimo ee ku taalay Boosaaso ayaa sheegay in uu diyaar u yahay in hogaanka Puntland uu ku wareejiyo ciddii shacabka Puntland ay u doortaan.

Wuxuu Cabdullaahi Yusuf ku tilmaamay inqilaab aan la aqbali karin shirkii ay qabanqaabiyeen qaar ka mid ah isimada Puntland, shirkaas oo u doortey Jama Ali Jama madaxwenaha Puntland, taas oo sababtay in Puntland ay yeelato laba Madaxweyne oo midba ay taageersanyihiin qaar ka mid ah Isimada Puntland.

AUN Abdullahi wuxuu ku daray in dadka reer Puntland aay u taallo ciddii ay hogaankooda u dhiiban lahaayeen. Wuxuu kale oo raaciyey in Reer Puntland ogolayn gardaro, boob iyo siyaasado laga hogaaminayo Carta iyo meelo kale. Hogaan Puntland u qalma waa in loo helaa ayuu yiri Cabdullaahi Yuusuf.

***November 21,2001***

***PRESS STATEMENT***

***For Immediate Release***
***The President of Puntland State of Somalia, H.E. Abdullahi Yusuf Ahmed, had returned to Garowe, the State's Administrative and Political Capital, this morning, after an extended working visit to Galkayo.***
***During the return of the President to Garowe, Al Itihad extremists led by Jama Ali Jama tried to make some disturbances, which have been quickly put off by the combi ned forces of Puntland State Police and Darawishta.***

***Ismail H. Warsame***
***Chief of Cabinet.***
***PS: President Abdullahi Yusuf Ahmed can be reached in Garowe at***
***002525 440152 or Sat phone at 008821634110032.***

Waxaa uu Ala Ha u Naxariistee Madaxweyne Cabdilaahi Yuusuf uu Soo saaray Qoraal uu ku sheegay in Magaalada Gaalkacyo ay noqonayso Meesha uu ku shaqayn Doono: -

*Go'aan ka soo baxay Golaha Xukuumadda D.G.PL*
*Fadhi uu yeeshay Golaha Xukuumadda PL 12/08/2001, Magaaladda Galkacyo waxaa lagu falan qeeyey xaaladda adag ee ka taagan Degaanka PL.*
*Horudhac*

*Khatar weyn ayaa soo foodsaartay DGPL, khatartaas oo ay abaabuleen isuna bahaysteen kooxo ay ka mid yihiin:*

*Kooxda xag jirka ah ee Al-itixaad oo muddaba ku taamaayey awoodda Soomaaliya in ay la wareegaan gacana ka helaan meelaha kala duwan*
*• Kooxo u adeegaya Carta oo ka amar qaata Muqdisho lagana taakuleeyo, ujeedda dooduna tahay in ay shanta Gobol iyo Buuhoodle oo PL ka koobantahay mid mid u kala gooyaan kuna xiraan kooxda Carta oo Xamar fadhida oo hadda sal dhig bulsho oo ay Dawlad ku noqdaan lahayn si ay saldhig uga dhigtaan bulshada iyo Goboladda PL.*
*• Koox Isimada Puntland ka tirsan oo khilaafay Go'aankii 60 Isim, kabadan oo reer Puntland ah gaareen ku-waas oo lagu hawlgaliyo u jeeddooyin ka qarsoon.*
*Xoogaagaas is bahaystay ee kor ku xusan waxay dhaawaceen nidaamkii iyo habkii maamul ee DGPL, gaar ahaan Degmadda Boosaaso oo ahayd Dagaan muhiim u ah DGPL.*
*Haddaba, xaaladahaasi haday dhaceen waxaa goleyaasha Dawladda guud ahaan maamulka PL iyo Bulshadaba khasab ku ah in ay difaacaan jiritaanka iyo kala danbaynta dariiq kastana loo maraa si arrintaas wax looga qabto. Siddaas awgeed, waxaa lagaaray go'aamadda soo socda:-*
*B) Siyaasadda Gudaha:*
*Dawladda Puntland ayaa ah xukuumadda sharciga ah ee ka jirta Deegaanka Puntland Dadweyuhuna taageersan yahay*

- *Waxaa la cadaynayaa in ay Caasimadda Puntland ee Dastuuriga ah ay tahay Magaaladda Garoowe hadana si ku meel gaar ah loogu shaqayn doono Magaaladda Gaalkacyo inta xaaladdu ku soo noqonayso kala danbay.*

- *Waxaa dhamaan xubnaha Gole yaasha Dawladda Madaxda iyo shaqaalaha Dawladda, Madaxda gobollada iyo degmooyinka iyo dhamaan, ciidamadda iyo Madaxdooda la farayaa in ay ilaaliyaan kala danbaynta hawlaha Dawladda ee ay u xil saran yihiin.*
- *Isimada PL ee go'aamiyey jiritaanka PL in ay u istaagaan sidii loo ilaalin lahaa jiritaanka PL ayna qaataan kaalinta Bulsho ee ay leeyihiin.*
- *In aan gudaha PL lagu qaban karin shir lagu bur burinayo PL cidii qabatana ay masuul ka tahay wixii ka yimaada.*

*Dibadda Hay'adaha Caalamiga ah iyo NGOS-ka ka shaqeeya Deegaanka Puntland in ay wadaan shaqadii ay ka hayeen Deegaanka Puntland waxaana looga digayaa in ay xiriir iyo wada shaqayn la yeeshaan Dad ka baxsan maamulka Puntland sharcina ku dhisnayn, ciddii ka mid ah Hay'adahaas oo ka tilaabsata nidaamka iyagaa ka masuul ah wixii ka yimaada. Waxaan soo dhaweynaynaa cid-allaale ciddii gacan nagu siineysa bad-baadinta iyo Amniga Puntland. Waxaan eedeyn iyo canbaarayn kulul u soo jeedinaynaa qaar ka mid ah Dawladdaha Carbeed oo siiya dhaqaale Al-itixaad iyo Carta oo ku xad gudubtay balan qaadkii ahaa nabadeynta una badashay xasuuq bulsho sida ka dhacday Kismaayo iyo isku daybBur burin maamulladii jiray sida Puntland iyo Somaliland, iyaga oo u adeegsatay dhaqaalihii ay bixiyeen Dawladdo Carbeed, haatanna arrinta*

*Soomaaliyeed u Baddalaya Dagaal sokeeye oo keena bur bur hor leh oo dhamaystiran haddaba, waxaanu ka codsanaynaa Ururada Caalamiga ah sida. UN, OAU, OIC, AL, E.U IGAD iyo Duwalka Aduunkuba ka hortagaan taageerada dhaqaale iyo ciidan ee ay siinayaan Dawladdahaas Carbeed kooxda Carta iyo Al-itixaad ee lagu bur burinayo Soomaali inta ka hartay.*

*Waxaa dhamaan jaaliyaddaha Reer Puntland ee ku nool Dibaddaha loo soo jeedinayaa in ay ka qayb qaataan dhinac fikrad iyo dhinac dhaqaalaba bad baadinta Puntland.*
*Cabdullahi Yuusuf Axmed*
*Madaxweynaha Puntland*

**Dowladii Carta iyo Lugtay ku lahay Xaladaas.**

Dowladii Carta ee uu Cabdi Qaasim ka ahaa Madaxweynaha, Ra'iisul wasaarana uu ka ahaa Cali khaliif Galayr waxaa ay aad lug ugu lahayd xaaladii dhacday waxayna ay dhaqaalo ku bixiyeen sidii AUN Cabdulaahi Yuusuf loo dhaafsiin lahaa Maamulka Puntland waxaana ay la galeen dagaal aan kala har lahayn waxaa la shaqaynayay AUN Kinkoon oo ahaa Wasiirkii Difaaca iyo Xasan Abshir oo ahaa Wasiirkii macdanta. Mana ahayn Dagaalka Dowladaasi mid ku koobnaa Puntland oo keliya ee waxaa dagaalkaas oo kale ay ku qaadeen Gen. Moorgan oo haystay Kismaayo iyadoo loo diray Ciidamo watey 85 tiknika ah halkaas oo dad badana lagu laayay lagana Saaray Ciidamadii Moorgan, dhamaan arimaahaan oo dhan waxaa ay Salka ku hayeen inaan Somaaliya ka hana qaadin iftiinka kasoo ifay Puntland ee ah Fedaraalka.

**<u>Baaqii ay soo saartay beesha Cumar Maxamuud</u>**
**KU: Isimmada Puntland**
**KU: Dhammaan Dadweynaha Reer Puntland**
**KA: Waxgarad Beesha Cumar Maxamuud ee ku nool dibedda**

***UJEEDDO: Baaq ku saabsan dhacdadii Garoowe ee 21/11/2001***

*Salaamu Caleikum wa Rahmantulaahi wa Barakaatu*

*Annagoo ah waxgarad u dhashay beesha Cumar Maxamuud, waxaa aad noo taabatay naguna reebtay qalbi-xumo qoto dheer, weerarkii qaawanaa ee lagu qaaday Magaalo Madaxda Puntland Garoowe (21/11/01), iyo dhimashadii xaq-darrada ahayd ee meeshaas ka dhacday. Waxaan u aragnaa inay ahayd gardarro aan geed la isugu soo gabban, aysan jirinna wax macnayn kara in dad walaalo ah dhiigooda dan shakhsiyeed ee qaawan welibana qaldan loo daadsho. Waxaan dadweynaha Puntland ka codsanynaa inay ogaadaan inaysan arrintaasi ahayn mid ay u dhanyihiin dadka u dhashay reerka Cumar Maxamuud ee ay ahayd mid gaar u ah ninka duulaanka qaaday iyo dad calooshooda u shaqaystayaal ah ama si khaldan wax loogu sheegay ee aan ku raacin talo reer, iyo dadkii Garoowe uga gacan haadshey. Waxaannu si gaar ah ugu tacsiyeyneynaa xigtadii walaalahayagii goobtaas ku dhintay. Waa garabkayaga oo bannaanaaday. Alle ha u naxariisto, Aamiin! Sidoo kale, waxaa dhaleecayn buuxda u soo jeedinaynaa caqliga foorara ee farta ku fiiqaya meelo ka mid ah Puntland ama Somaliya, kaasoo leh waxaa ku jira argagixiso. Somaliyi waa iska warqabtaa, waana la ogyahay ujeedada ka dambaysa fitmada la rabo in beelo Somaliyeed lagu baro-kiciyo, ayaadoo dano raqiis ah laga leeyahay.*
*Sidoo kale, waxaan uga degaynaa dalalka deriska ah inaysan ku dhicin marin habaabinta qaawan, ayna dhawraan daris-wanaagga ay Puntland la leedahay dariskeeda. Qas laga sii oogo Puntland cidna dan uma aha, ruux uusan doonayn dadka Puntlandna dalal shisheeye ama ciidamo shisheeye kuma khasbi kararaan reer Puntland. Waxaan ka xunnahay in siyaasiyiin Somaaliyeed hadda aamintay inaysan Somaliya xukumi karin haddii aysan xoog shisheeye soo kaxaysan, dadkuna uga baqin, "war waa ina bara-kicinayaaye balada inaga daayaa ha iska joogee". Waannu ka xunnahay meesha arrintu gaartay. Waxaan ilaah ka baryayenaa, waa bil Ramadaane,*

*inuu qaluubta ummadda Puntland iyo tan Somaliyeedba isu soo jeedsho, inta xumaanta wadddana rabbi ka qabto. Waxaan u soo jeedinaynaa ciidanka Garoowe xoogga ku qabsaday inuu isaga baxo sharuud la'aan intaan talo faraha ka bixin oo aynaan gayaan u noqon wixii Xamar ka dhacay, arrinu noqon deriskaa marna ku diin marna ku dayo.*
*Mahadsanidin*
*Baaqaan waxaa saxiixay:*
*Qoraalkaan waxaa kusaxiixan 102 qof oo sida qoraalka kucad kala jooga wadamada UK, Canada, USA, Saudi Arabia, Holland, Sweden.*

**Abaabulkii Gaalkacayo ee Madaxweyne Cabdilaahi Yuusuf**

Wuxuu Gaalkacyo ka bilaabay Abaabul Ala Ha u Naxariistee Cabdilaah Yuusuf, abaabulkaas oo mudo uu waday kadibna Madaxweyne Yuusuf waxaa uu galay dagaalo gaaraya 6 kuwaas oo kadhacay Boosaaso, Garowe, Muqlataagtaag, Alxmadulilaah, Kaladhacda iyo Dhuudo, waxaana aas-aasantay jamhad layiraahdo GBP.
Waxaa dagaaladaas ku dhintey dhalinyaro laba boqol ku dhaw labada dhinacba, kuwaas oo haddii la badbaadin lahaa dalka wax u tari lahaa.

Waxaa muddo 9 bilood ah kadib la afganbiyey Madaxweynihii ka soo baxay shirkii ergooyinka ee Garowe 2001-dii Jaamac Cali Jaamac, waxaa la diley dad birimageydo ah sida Suldaan Hurre, waxaa dalka isaga baxay hay'adihii UN-ka iyo kuwii gargaarka, waxaa hoos u dhacay booskii ay siyaasadda Soomaaliya kaga jirtey Puntland, natiijada ugu weyn ee khilaafkaas ka dhashey waa in ay meesha ka baxdey maqaamkii Isimadu kulahaayeen Puntland.

**Jamhada Badbaadinta Puntland" (JBP),**

Jamhadaas Gudoomiye Waxaa Ka ahaa Ala ha u Naxariistee Gen. Maxamuud Muuse Xirsi (Cade), oo isagu ku noola wixii ka danbeyey burburki Dowladii dhexe ee somaliya Dalka dibadisa gar ahan wadanka Canada. Jamhadan aya ahayd mid xanbarsan ujeedoyin kal duwan isla markaana xiriiro la lahayd meela kala duwan oo kasoo horjeeday Madaxweyne Yuusuf waxayna dagal la gashay Cabdull-ahi Yusuf iyo weliba Xulafadiisa.
Biloowgi 2003 aya waxaa magaalada mashquulka badan ee Xarunta u ah Ganacsiga Puntland ahna magala madaxda Gobolka bari ee bosaaso hishiis ku dhexmaray garabka Cabdullahi Yuusuf Axmed iyo Gudoomiyii Jamhadii Badbaadinta Puntland (JBP), Gen. Maxamuud Muuse Xirsi (Cade), waxaana heshiiskaas kasoo shaqeeyey salaadiin iyo waxgaradka deganka Puntland oo ay weheliyeen kuwa ka soo jeeda Somaaliland waxaana hor bodayeyey shaqsiyaad xurmo ku leh Puntland iyo kuwa kasoo jeeday Maamulka Somaliland. Ujeedadii heshiiskan ay wada gaar- een labada dhinac waxa uu ahaa sidan:-

1. In lasoo cesho midnimadii iyo kala danbayntii Shacabka Reer Puntland
2. In labada Hogaamiye dhisaan Maamul loo dhan yahay
3. In ay muqadas tahay In la difaaco sharaf iyo midnimada umada Puntland.

Waxaana ay isla qaateen oo kale qodobo aan la shaacin Balse gadaal laga arkay!

Waxaa muuqatay hishiiskii uu qaatay Cabdulaah Yuusuf inuu sal u ahaa hankii siyaasadeed ee uu ka qabay mar unuu noqdo Madaxweynaha Soomaaliya taasoo ay beesha caalamku ku saartay cadaadis inu xal nabad gelyo ah ka gaaro colaadaas.

Waxaa kadanbeysay fulintii hishiiskii oo ay Cabdulaahi Yuusuf kasoo food saartay culays weyn taasoo ay ka mid ahayd hishiisyo uu horay u galay iyo arima ka danbeeyay oo quseeyay dhanka siyaasada iyo shirkii kasocday Kenya:- AUN Cabdullaahi Yusuf waxaa shirkaas ku weheliyay Gen. Morgan oo shirka ku metalayay SPM, balse ay isku saf ahayeen Yuusuf isla markaana maadaama uu ku sugnaa Puntland iyadoo abaabul dagaal ay kasocotay, Cabdullaahi iyo Morgan waxaa ay ku hishiiyeen inay wada doonaan sidii Cabdullaahi Yusuf uu u noqon lahaa Madaxweynaha Soomaaliya halka Morgana uu noqonayo wasiir sidaas bayna ku galeen ololihii shirkii Ceeldooreed iyo Embagati.

Xasan Abshir Faarah oo ahaa Raysal Wasaarihii Dowladii Carta ayaa markii ay luntay awoodii Carta shirkana looga diiday inay noqdaan dhinac loona ogo laaday hal xubin oo uu ku fariisanyo Cabdiqasin Salad Xasan ayaa Abshir waxaa uu bilaabay olole siyaasadeed oo kasoo horjeeda Yuusuf waxaana uu sheegay inuu isu sharaxayo Gudoomiyaha Barlamaanka Tasoo dhabar jab ku noqonaysay Yuusuf.

Dadaalo badan oo la sameeyay haba ugu horaysee Beesha Wabeeneeye oo Gogol u dhigtay Beesha Aawe Magalada Nairobi taasoo suura gelisay inuu ka baaqsado. Muda kadib waxaa dib usoo afuufmay kacdoon qaboow oo ka imaanayey dhanka Xasan Abshir isagoo sheegay in uu aadayo Puntland isla markaana uu is sharaxayo taasoo Xasan Abshir uu kaga galgal ficanaa Cade Muuse.

Arinkaas Cade Muuse oo kusugnaa Nairobi ayaa waxaa uu ka muujiyay walaac waxaana uu culays ku saaray Yuusuf inuu xal ka gaaro arinkaas. Wada tashi kadib waxaa soo baxday in Xasan Abshir loo balan qaado Wasiirka Majeerteen amaba Booska Majeerteen wixii aan Madaxweyne ahayn hadii lahelo ama lawaayaba. Halkaas

waxaa kasoo baxay in Gen. Morgan looga baxay balantii taasina waxaa ay sababtay inuu xumaado xiriirkii Morgan iyo Yuusuf.

Morgan waxaa uu galay gudaha dalka isago ka degey Degmada Jawhar waxaana uu uga sii gudbay Gobalka Bay oo ciidamo u joogeen wuxuuna weerar ku qaaday Kismaayo Balse garbo badan oo isu kaashaday waxaa lagu jebiyay dagaalkii iyadoo loo aaneyo dhex gal lagu sameeyay ciidan kiisa iyadoo loo arkayay hadii uu Kismayo uu qabto in waxbadan iska bedelayaan shirka Embagati iyo in Beesha Mareexaan oo baaqi ku sii noqota Kismaayo uu Cabdulaahi Yuusuf ka helayo taageero codeed xiliga doorashada.

Shirkii Kenya 2003 Shirweyne Soomaaliya loogu soo dhisayay Dowladii Federaalka, waxaa Puntland u Fadhiyay Cabdilaahi Yuusuf iyo ergo uu hogaaminayay isagu waxaa mudo kadib soo gaba geboobay Shirkii waxaana la gaaray soo Xulidii Xubnihii Baarlamaanka Soomaaliya waxaana dhacday in tiradii Barlamaanka aan loo cadaalad samay bulshadii lagu metelayay madasha wixii qaldamay markaasna waxaa masuuliyadeeda lahaa Dadkii metelayay Bulshada Puntland sidii ay u qaybiyeen Xubnihii Barlamaanka.

Sandki 2004 ayaa waxaa madaxweyne dowladda federalka Soomaaliya loo dortay Cabduulalhi Yusuf oo aha Madaxweynihi Mamulka Puntland isla markana waxa xilki madaxweynenimo ee Puntland qabtay madaxweyne ku xiegeenki Puntland oo sharci ahan xaq u leh in u qabto jagadaan Maxamed Cabdi Xaashi waxaana Booskiisii buuxiyay Gaagaab oo loo dortay ku Madaxweyne ku xigeen.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed wuxuu puntland madaxweyne ka ahaa intii udhaxaysay 1998 illaa 2004 marka laga reebo mudo kooban oo uu Jaamac Cali jaamac ka talinayay, waxa

uuna ahaa madaxweynihii ugu horeeyey puntland hadana noqda Madaxweynaha Somalia 2004.

**Madaxweyne Maxamed Cabdi Xaashi (2004-2005)**

Madaxweyne Maxamed Cabdi Xaashi waxaa uu ahaa hogaamiye heerkiisa maamul uu aad usareeyay waxaana uu wax kasta ka hormarinjirey danta dowladnimo iyo wada Jirka umada waxaa kaloo xusid mudan waxaa uu ahaa nin ka fiyow qabiilaysiga walow mar mar ladhoho tan hoose wuu dhigi jirey.

Waxaa xusid mudan in xiligii ugu danbeysay lala qabsaday maamulka isagoo lagaarsiiyay inaan saxiixiisu shaqayn sida magacaabid uu sameeyay iyo xil ka qaadid uu sameeyay waxaana ay dhiiri gelintu ka imaanaysay awoodii jamhadii kusoo birtay maamulka ee uu hogaaminayey Gen Cade.

Waxaa xusid mudan in mara uu booqasho ku jireyna loo diiday inuu booqdo xarumaha qaarkood isla markaana xabado lagu riday sida Bankiga Bosaaso. Waxaa bilaamay xiligii ololaha xulida barlamaanka waxaa uu magacaabay Xaashi gudigii khilaafaadka balse waxaa iska diiday Gen.Cade Muuse oo isagu isu arkayay inuu yahay madaxweynaha dhabta ah muda yar kadibna waxaa ay kusoo ururtay inay wada magacaabaan Xaashi iyo Cade Gudiga Khilaafaadka Doorashada.

Wax kasta oo uu dareemayay waxaa uu xiligii koobnaa ee uu hayeey xilka madaxweynenimo ee Puntland Maxamed Cabdi xaashi uu hirgaliyey doorasho guud mudo yar oo aad u kooban iyo inuu noqday Xaashi Madaxweynihii ugu horeeyey ee Puntland oo si dimuqaraadi ah uga dega xilka kadib markii looga guulaystay doorashadii is garabsigii Cade iyo Faroole.

Waxaan la ilaawi karin xiligii uu wareejinayay xilka Madaxweyne Xaashi hadalkii uu kula balamay Cade Muuse kasoo ahaa "waxaan kugu wareejiyay dad iyo dal mid ah leh dowlad sida ay uwada joogaan una midaysan yihiin halaguugu yimaado," Mr Xaashi dadka reer puntlandna ay ku tilmaamaan Madaxweyne Maxamed Cabdi Xaashi shaqsi ay ku weyntahay midnimadu.

**AUN Madaxweyne Maxamuud Muuse Xirsi (Cadde)**

**2005-2009**

Madaxweyne Maxamuud Muuse Xirsi (Cadde) Gudomiyihi hore ee Jamhadii JBP Gen. Cadde waxa u Puntland madaxweyne ka ahaa intii u dhaxaysay bilowgii 2005 illaa 2009. Maxamud Muuse Xirsi Madaxweynihi Puntalnd waxa uu dadaal dher u galay sidi Puntland dhaqaaleheeda kor loogu qaadilahaa balse amaanki aya sanadadii ugu dabyeey noqday mid sii xumanyey marka loo ego maamuladi Yusuf Iyo Xaashi ee ka horeyeey Cadde.

**Waxqabadkii Xuukamdii Cade**

**1. Ladagaalanka Musuq Maasuqa**

Cade Muuse waxaa Balanqaad yadiisii kamid ahaa inuu la diriri doono Musuq maasuqa hareeyay Puntland 08.01.2005 markii ladoortay waxaa uu amar ku bixiyey inaan wax dhaqaala bixina la samaynkarin dalka waxaana uu xiray dhamaan wixii qarash ahaa wuxuuna laalay dhamaan wixii waraaqo dakhli bixin ahaa ee laamaha dakhli bixintu ay gacanta ku hayeen maalamo kadibna waxaa uu Gen. Cade amar ku siiyay hanti dhawrka inay dhamaan baaris ku sameeyaan Puntland laga bilaabo madaxtooyada ilaa meesha uugu hoosaysay.

Amarkaasi wuxuu ahaa mid cabsi weyn ku abuuray dhamaan Hay'adihii Dawlada. Muda gaaban kadib waxaa

Hanti dhawrku soo saaray warbixin ku aadan waxa ay soo arkeen waxaana warbixintooda ku cadayd liis ay ku qoran yihiin magacyo iyo hantida ku maqan liiskaas oo ka bilaamayay Madaxtooyadii Puntland uuna ku dhamaanayay Agaasima-waxeed iyo Madax qaybeed wuxuna ahaa musuq maasuq uu aad uga yaabay Cade. Fal celintii warbixintii ma ay noqon mid dhaqan gasha marka laga reebo Agaasime-waaxeedkii Maamulka wasaarada Dekedaha iyo Kaluuaysiga SHARLAAWE iyo maareeyihii Hay'adii Nesha AUN Cabdishakuur Mire, mana jirin cid kadanbeysay iyo talaabo kadanbeysay waxaana la oronkaraa baqdin yar kadib halkeedii buu nin kastaa kasii waday Musuqmaasuqii.

### 2. U Cadaalad Samaynta Dadka dhanka Xilalka Lamaha Dowladda Puntland

Madaxweyne Cade waxaa uu amar ku bixiyey in dhamaan saraakiisha dowlada ee wasaaradaha lasoo tirakoobo iyadoo lasoo raacinayo faahfaahin dheeraada oo ah meeshuu ku dhashay iyo qoladiisa.

Dhamaan shacab weynaha Puntland waxaa ay u riyaaqeen dhamaan ficilada kasoo yeeraya Madaxweyne Cade iyadoo dad aad u badan ay aad ula dhaka faarsanaayeen sida awooda iyo maamulka aaan loogu sinayn. Dhamaan wararkii waxaa ay noqdeen wax aan meel marin waxaana loo aaneeyaa in Madaxweynaha ay ka tan badiyeen xayndaab ku xeernaa oo lataliyayaal u ahaa balse aan ka diiwaan gashanayn Wasaarada Shaqada iyo Shaqaalaha Puntland.

### 3. Horumarinta iyo Mashaariicda Dalka

AUN Maxamuud Muse Xirsi(Cadde) waxa uu xoogga saaray sidii uu Puntland dhaqaaleheeda uga dhigi lahaa mid meel sare jooga, si ay dalka iyo dadkuba ay u helaan kobac dhaqaale.

1. Madaxweyne Cade wadanka waxaa uu keenay Shirkado laga leeyahay Debeda oo kala duwan kuwa Shidaal baris iyo kuwa macdan qodasho ah
2. Madaxweyne Cadde waxa uu Puntland ka hir geliyeey mashaariic badan oo ay ka mid tahay Dhisidda Terminalka Airporka Magaalada Ganacsiga ah ee Bosaaso
3. Dhisidda Maxjarka Xoolaha Magaalada Bosaaso,
4. dhisida xafiiskii ugu weynaa ee dabakha ahaa ee ay kuwada shaqeeyeen Wasaarada Maaliyada iyo Kaluumaysiga oo laga dhisay Dekedda Bosaaso
5. Taagaaerida Dowlada Fedraalka ah ee Soomaaliya, ayadoo dowlada puntland ay siisay dowladda federalka taageero ciidan iyo mid dhaqaaleba, si loo helo dowlad dhexe oo Soomaaliyeed, ayadoo walibana taageeradaasi ay saamayn ku yeelatay Dowlada Puntland hoosna u dhigtay waxqabadkii puntland ee dhanka amaanka iyo weliba dhaqaalaha walow ay xiliga ku soo aday xili ay aduunka ka jirto Sicir barar baahsan kaas o sababay in shirkado badan oo calamka ah ay musalafan.

### 4. Amniga iyo Ciidamada

Gen. Cade waxaa uu bilaabay dhisid ciidan kadib markii xoogii ciidamadu ay u wareegeen Dowladda Federaalka. Cade waxaa uu magacaayab Taliyaha PIS una magacaabay AUN Cismaan Diyano oo ay isku hayb yihiin Madaxweynaha waxaana booska baneeyay Aadan Bidaar oo ay isku hayb ahaayee AUN Cabdulaahi Yuusuf waxaana

uu Aadan aadey Madaxweyne Yuusuf. Ciidankaan waxaa dhaqaalihiisa bixiya USA waxaana lagu magacaaba la dagaalanka Arga gixisada.

Waxaa uu Madaxweyne Cade dhisay ciidan markaa ku cusbaa Puntland oo loo bixiyey BIRMADKA isagana waxaa loo dhiibay nin dhalinyara ah oo layiraahdo Ina Gantaal kana soo jeedey Besha Madaxweynaha Ciidanka Birmadka. Waxaa liiskooda qoraal ee Mushahar Bixineed ahaa 75% isla beesha Madaxweynaha waxaana ciidankaas lagu tilmaami jirey inay ahaayeen Jamhadii JBP oo sharka loo bedelay isla markaan waxaa ay shaqadooda ugu badan ay ahay ilaalinta awooda Madaxweynaha.

Balse amniga iyo sugida xaduudaha dalka door weyn kuma lahayn. Xiligii Cade Muuse Puntland waxaa guluf colaadeed kaga yimid meela kala duwan. Aktoober 2007 waxaa gacanta Puntland kabaxay Magaalada Laascaano oo ay la wareegeen Maamulka Somaliland, waxaa sidoo kale koonfurta soomaaliya ka dhacay guluf dagaal, colkaas oo ahaa Maxkamadihii iyagoo sheegay inay rabaan in ay dalka qabsadaan kadibna ay ku xukumaan Diinta Islaamka, "Mar Idaacad ay weydiisay Gen,Cade muuse ayaa wuxuu ku jawaabay mar la arko anaga waa qaadanayaan ku dhaqan Diinta Islaamka."

Waxaa bilaamay dagaal gacanta laysula tegey dowladda Puntland iyo Maxkamadihii waxaana dagaalkii ku jabay Maxkamadihii iyagaa si dhaba loo baa'biyey awoodoodii ciidamada Puntlanad waxaa ay garab ka heleen oo ga dhinac dagaalamayey ciidamada Itoobiya. Gen. Cade Muuse oo khibradiisu ahayd ciidan isla markaana ka gaaray Darajo Sare.

**Wax yaalihii aadka loogu amaanay hogaamintiisa AUN Gen. Cade.**

1. Cade Muse waxaa uu ahaa nin aad u fur furan isla markaana aad u tixgeliya dhaqanka iyo qabaa'ilka wax kastoo dhexmarana ka gaara xal siduu doonaba haku xaliyee.
2. Cade Muse ma ahay nin wax qarsada waxa uu qabo wuu sheegi mana ahayn nin beenta yaqaan.
3. Cade muuse ma ahayn nin gacan xiran oo waxaa uu ahaa nin dhaqaaleeya dadka dhaqaalaynta mudan
4. Cade muuse waxa uu sheego oo aan waxba uga hoosayn qiyaamo ah isla markaana malahay cuqdad wuxuu ahaa nin hishiiska yaqaan
5. Cade muuse waxaa uu ahaa nin dadka la tashada ee aan ahayn keligiis taliye
6. Dhismihii dawladaha hoose oo ay hirgelisay Dowladii Cade Muuse waloow cabasha badan ay ka jirtay dhanka cadaalada deegaanada qaar Balse wax -aa uu ahaa guul weyn oo la Gaaray waxaana ku amaanaa Wasiirkii Xiligaas Cali Cabdi Awaare oo da -daal badan geliyay waana arin dadka reer Puntland ku amaanaan.

**Xubnihii Sare ee Dowladii AUN Cade Muuse**

Xubnihii Sare ee Dowladii Cade is qab-qab sigoodii waxaa uu ahaa mid sababay dhaawac siyaasadeed iyo mid dhulba: Waxaan ka xusi karnaa Wasiirkii Maaliyada (Gaagaab) Wasiir Faroole iyo Wasiir Xaabsade. Faroole iyo Xaabsade waxaa ay isu ahaayeen xiligii doorashada madaxweyne iyo ku-xigeen balse waa laga guuleystay waxaana ay kamid noqdeen Golihii Xakuumada Gen. Cade, Faroole waxaa uu degenyahay dalka Australia oo uu qaxootinimo mudo hore ku galay, shirkad shidaal baarisa oo degen dalkaa Austarelia ayaa waxaa Dowlada Cade lasoo gashay hishiis

waxaana wax kala socday Faroole, balse markii danbe waxaa si toosa looga xirtay albaabka markii uu dhaqaaluhu bilaamay iyadoo Dubai ay ka dhacday kala shakigii iyo gees isgelintii mar laysugu tegey Dubai oo ay Shirkadu ku bixinaysay dhaqaale halkaas oo Faroole uu ka qaaday xanaaq iyo mucaarad nimo.
Colaadii halkaa ka bilaamatay ee ka dhacday Dubai ayaa waxaa wadanka gudihiisa ka bilaamay in si siyaasadaysan laysaga takhaluso halkaas oo Gen. Cade Golihiisi Xukuumada uu horgeeyay Barlamaanka inay mid mid u arkaan si kalsoonida baarlamanka uu u helo Wasiirku waxaana kamid ahaa Xaabsade iyo Faroole, Xaabsade waxaa uu hor istaagay Baarlamaanka waxaana ay u diideen kamid noqoshada Xukuumada halkaasuun Xaabsade kuwayay Wasiirnimadii iyadoo loo aaneeyo in Barlamaankii loo qaybiyey dhaqaale.

Faroole ma aqbalin arinkaa waxaana uu ka door biday inuu ka dagaalamo. Waxaa barlamanka hortiisa ka dhacay dagaal aan muda socon balse dad ku dhinteen, Faroolane eedaas waxaa uu ku waayay wasiirnimadii, waxaana ay ku noqotay mudo yar kadib inuu Magaalada Bosaaso ka dhoofo isagoo u hayaamay Rugtiisii Labaad ee Australia.

Xaabsade waxaa uu ku sugnaa Garoowe waxaana kusoo adkaanayey xaalada walow Gobalka Bari iyo Karkaar xushmad fiican looga hayay. Balse Garoowe ayaa waxaa kaga furmay shucaac siyaasadeed kasoo kaga imaanayay ragii ay is hayeen oo iyagu u dawladeeyay.

Waloo dadka qaar ay yiraahdeen Faroole wax buu ka ogaa balse warar sugan ma aha inkastoo aan sheki ku jirin Faroole xiriirka uu la leeyahay Soomaaliland.
Waxaaa si joogta ah u gaarayay Xaabsade dagaal afeed iyo handadaad ilaa layiri halaga soo qaado baaburka uu ku socdo taasi waxa ay ku keliftay inuu habeenimo ka baxo Garoowe isagoo galay Gobalka Sool halkaas oo uu ka

bilaabay xiriir toosa oo uu la yeeshay Somaliland waxaana uu abaabul ciidan uu ka galay Laascaano si uu uga saaro Puntland.

Ciidankii Puntland ee Laascaano degenaa waxaa qabsaday dagaal qorshaysnaa waxaa ayna noqotay in Laascaano ka baxdo gacanta Puntland. Mar uu Xaabsade Idaacada BBC la hadalayey isagoo jooga Somaliland wuxuu cadeeyay inaan dowladi ka jirin Garoowe.

### Dhaliilaha Dowladii Cade Muuse

Inta uu hayay xukun madaxtinimada AUN Madaxweyne Cade Muuse Xirsi, Puntland waxaa ka dhacay waxyaalo badan oo dib u dhac ah sida dadka siyaasada udhuun daloola dhahaan waxaana ka mid ah.

1. Qabsashadii dowlada soomaliland qabsatay magala madaxda gobolka sool ee Laascaanood, taas oo xiligii hore ay katalinjireen maamulka puntland.
2. Amniga magaalooyinka oo faraha ka baxay.
3. Dagaalo udhexeeya maamulka general cade muuse iyo qabiiladii dhistay puntland qaar ka mid ah oo uu dagaal laba saf ah ku dhexmaray magalada bosaso khaasatan xaafada biyo kulule.
4. Faragelin dhanka dhaqaalah oo ganacsatada qaarkiis ku eedeeyaan
5. Musharahaadka shaqaalaha dowlada oo aan bilkasta lahelijirin musuq maasuq hareeyay dawladii Cade owgeed
6. Ka gaaabin dhanka xiriirka caalamiga ah waloow door aynan lahayn dowladiisa maadama Dowlada Federaalka uu Madaxweyne ka ahaa AU Cabdulaahi Yuusuf
7. Waxaa aasaasmay koox burcad-badeed ah oo ka qowlowsata badaha Puntland oo fariisimo ka

sameestay degaanada xeebaha Puntland iyadoo markabkii ugu horeeyay lagu kala gatay duleedka dekedda Bosaaso.

8. Dagaal adag oo dhex maray Beel iyo Dowlada oo isana ka dhacay Deeganka Majiyahan oo ah dhul leh macdanta TIINKA
9. Dagaalo sakooye oo ka dilaacay deegaano siiba tuulada Laag taasoo loo aaneeyo xaaladii Majiyahan iyo inay Dowladu kadanbaysay
10. Maamulka dawliga ah inay ka sareeyeen dad aan maamulka ku jirn sida niman odayaala oo ay Madaxweynaha beel ahaana isu xigeen.
11. Dhamaan shirkadihii barista ama macdanta oo uu gacanta u geliyay qaraaba u dhaweyd Madaxweyne Cade.
12. Raridii dhagixii bada (coral reef) ee laga raray dekeda Boosaaso loona raray UAE

AUN Madaxweyne Gen Cadde Muuse, oo waraysi bixiyey (Sept 9, 2007) siiyey idaacadda Codka Maraykanka isagoo joogey Dubai, ayaa la weydiiyey in uu madaxweynanimada ku daalay, waxana uu ku jawaabey:
"haddaan runta kuu sheego wax lagu ordo ma aha, waana dhib aad iyo aad u badan oo farabadan, maanta waxaan jiraa 70, waa waqtigii aan nasan lahaa, laakiin waxbaan qabtay, waxaas waxaan rabaa teeramkayga marka aan gaaro in aan wadan kayga wax u qabto, markaasna waan ka tashan doonaa, laakiin anigu waan daaley, runtaa weeye," ayuu yiri.

Hadana Gen. Cade waxaa uu ka midnoqday Musharaxiintii 2009!

## Doorashadii Xukuumada Faroole 2009.

Sanadkii 2009 ayaa waxa Puntland ka dhacay doorasho aan ka dhicin deganka Puntland ee somaliya markaa ka hor taas oo ahayd mid wadata xamaasad gaar ah iyo weliba soo jiidasho ay soo jiidatay dadka Puntland iyo weliba dhamaan dadka daneeya arimah siyaasada Puntland. Murashaxiin kor u dhafaya 20 murashax ayaa isku soo tagay xilkan ugu sareeya puntland ee madaxweynenimo kuwaasi oo isugu jiray rag siyaasada Puntland mudo kusoo dhex jirey iyo weliba wajiyo ku cusub siyaasada puntland.

Murashax walba waxa uu isku dayaayeey in uu soo jiito dareenka shacabka basle nasiib daro shabacku ma ahayn kuwa wax dooranaya ee waxa wax doranayey 66 xildhibaan. Amaanka guud ee magaloyinka Puntland ayaa si weyn loo xoojiyeey, ayado ay ugu horeyso magaalada xarunta ah ee Garoowe iyo weliba magalada xeeebta ah ee Boosaaso.

Murashax walba waxa uu watay maliishiyo ay hayb hoosaad wadaagaan kuwaasi oo watay gadiidka gaashaaman ee dagaalka iyo weliba kumanan ilaalo u ah. Dhanka kale murashax walba waxa uu kaga hadlayeey warbaahinta in u yahay kan Puntland maantay u keni kara isbedel buuxa iyo weliba soo celinta gobolada puntland gacanteeda ka maqan korna u qaadi doona dhaqaalaha,waxbarsha ,caafimadka iyo weliba dhaman arimiha bulshada meeshana ka saari doona kooxda Puntland sharafteeda hoos u dhigtay ee burcad badeedka si weyn uga qowleysata badaha Soomaaliya xaruna ka dhigtay deganka Eyl ee gobolka Nugaal.

Sikasta oo ay arintu ahaataba waxa isku soo biyo shubatay in la isugu yimado hoolka barlamanka oo ahayd mesha ay ka dheceyso dorashada madaxweynenimo.

Waxaa xusid mudan inay isku soo hareen wareegii dhexe Gen. Cade Muuse, Gen. Ilka Jiir iyo Faroole, waxaana wareegii u danbeeyay usula gudbay Gen. Ilka Jiir iyo Faroole waxaase dhacay hugun iyo saan saan ku gud inkastoo Madaxweyne Cabdulla Yusuf uu doonayey in Gen. Ilka Jiir soo baxo kama uusan ogolaan Gen. Cade dalabka uga yimid Yuusuf waxaana uu u hiiliyey Faroole oo horay uga hiiliyay Maxamed Cabdi Xaashi.

Dadka qaar ayaa aminsan inay jirto wax la ilaaliyo in aan laga gudbo!

Bishii January, 8-deedii ee sanadkii 2009 waxaa ku guuleestay madaxtinimada Puntland Cabdiraxman Maxamed Maxamuud Faroole.

## Wax Qabadkii Dowlada Faroole

Madaxweyne Faroole waxaa lagu amaana maamul wanaag aad u balaaran balse ay haraynaysay ceeba badan oo ku xeernaa madaxtooyada. Waxaa uu bedelay nidaamkii ahaa qabiiliga iyo lacagtii fadlanta iska qaado ahayd.
Biloowgiisii maamul,

1. Waxaa uu dhisay xiriika arimaha dibada oo uu gaarsiiyay horumar balaaran.
2. Dhanka waxbarashada, caafimaadka, waxay dowladiisu ka gaartay horumar aanay kagaarin dowladihii ka horeeyay.
3. Dhanka amniga waxa uu dhisay ciidan aad u badan, tiro iyo tayo ahaanba fiican, inkastoo ciidanka intiisa badan ay istaafka madaxweynaha ubadanyihiin, iyo caasimada.
4. Ladagaalanka burcad badeeda, oo shirkad qalaad maamulaysay SARASON kadibna ay ka gadatay

Emirates mushaharka ciidankaas ma bixiso Puntland ee waxaa bixiya gacmo kale !
5. Dastuurkii dowlada federalka soomaliyeed oo qayb lixaadleh ka cayaartay dowlada puntland iyo ka guuristii dowlad ku meel gaar ah si loo helo dowlada aan ku meel gaar aheen taas oo markii danbe lagu guuleestay,
6. Kasaaridii kumeelgaarka Dastuurka Puntland,
7. Iskudaygii ka guurista hanaanka qabiil si loogu guuro hanaanka xisbiyada badan ee Puntland.
8. Qurxintii iyo dhisida caasimada Puntland ee Garoowe.

**Dhaliilaha Maamulkii Madaxweyne Faroole**

1. Maamulka Madaxweyne Faroole waxaa uu xiligiisii balan qaaday hirgelinta hanaanka dimuquraadiya-da ee ku saleysan xisbiyo siyaasadeed iyo yagleelida guddi doorasho, Maamulka Faroole waxaa la isku deyay qabasho hanaanka xisbiyada badan, taas oo loo arkayay doorasho xeeladeesan laguna doonayay xildheeraysi, taas oo dhalisay iska hor imaad dhaliyay dhimasho iyo dhaawac, ka kala dhacayna magalooyinka Gaalkacayo, Qardho, hase ahaatee dowlada ayaa waxay joojisay dhamaan doorashooyinkii dhaliyay iska hor imaadkii.
2. Madaxtooyada ayaa waxaa ay ahayd mid ay Maamulaan ilmaha uu dhalay Madaxweynaha iyo koox lamagac baxay AARAN JAAN iyagoo awood u lahaa magacaabis ama xilka qaadis isla markaana waxaa ay maamulan jireen dhamaan hay'adaha

dhaqaalaha, Madaxweynuhuna uma arkayn wax dhiba ila markii danbe uu umagacabay wiilkisa xil

3. Inuu Faroole xiriir dhaw la lahaa Somaliland taasoo sababtay inaan dib loo soo celin Laascaano.
4. Inuu sameeyay saraakiil badan oo beeshiisa ah isagoo sacabada ugu miisay derajada xidig ilaa janan-nimo kuwasoo aan lahayn khibrad ciidan.
5. Inuu dhisay ciidamo gaar loo leeyahay isla markaana aan loo cadaalad qorin kuwaasoo beelo kooban ay ahaayen 75% samaynta ciidamadaasi waxaa ay dhaxal siisay inay kala tagaan ciidamadii daraawishta Puntland kadib markii uu ciidamadaas gaarka ah ay qaadanayeen lacag boqolaal doolar, halka cidamadii dawladuna ay waa yeen musha'haradoodii kayaraa boqolka doolar dantuna ay ku qasab tay inay hadba meel ay isbaaro dhigtaan

**1. Dhanka Amniga.**

Waxaa dhacay dilal qorsheesan oo lagula kacay masuuliyiin, shacab, isimo iyo dagaalo qabaa'il. dilalkaas badankoodu waxa ay ahaayeen dilal aan waxba loo qaban, una dhacayayna si farsameedeesan, dilalkaas ayaa ukala badnaa magaalooyinka Puntland, magaalada bosaso ahna xarunta ganacsiga waxay noqotay meel lagu dilay dadkii ugu tira badnaa, dadka dhintay waxaan ka xusikarnaa dadka magaca ku dhexlahaa shacabka.

- Tusaale ahaan, 05/08/2009 ayeey ahayd xiligii Wasiirkii Warfaafinta ee dawlada Puntland Warsame Cabdi Shirwac (Seefta Banaaka) ay rag hubaysani toogasho bareer ah ugu gaysteen gudaha magaalada gaalkacyo ee xarunta gobolka Mudug waxayna wateen ragani dilka ugaystay wasiirka

tuutaha ciidanka dawlada Puntland.

- November 11, 2009, waxaa magaalada Garoowe ee caasimada Puntland lagu dilay mid kamid ah xildhibaanada Golaha Wakiilada ee Puntland oo kamid ahaa xildhibaanadii ugu horeeyey ee kamid noqda Baarlamaanka Puntland.
- November 11, 2009, waxaa Salaadii makhrib kadib bartamaha magaalada Boosaaso lagu dilay Guddoomiyihii Maxkamada Darajada 1-aad ee Bosaso Shiikh Maxamed Cabdi Awaare.
- January 5, 2010 xili fiidnimo ah ayaa waxa lagu diley magaalada Boosaaso Xildhibaan Cabdullaahi Cali Cismaan (Kaarad), dilka xildhibaanka ayaa dhacay isaga oo gelaya Masjidka AL Qudus ee Bariga Magaalada Boosaaso, waxaana dilka geystey laba dhalinyaro ah oo hubeysnaaa kuwaas oo hal xabad ku dhuftey, iyaga oo madaxa kala beegsaday xildhabanka.
- January 19,2010 kooxo hubeysan oo aan la aqoon haybtooda ayaa gudaha magaaladda Boosaaso ee xarunta ganacsiga Puntland, ku dileen Xildhibaan Maxamed Cabdi Jabriil Dhible Barlamaanka Dowladda Puntland.
- December 20,2009 xili habeenimo ah aya waxa weerar lagu qaday Gudoomiyihii Xiligaa Baarlamaanka Puntland Cabdirashiid Maxamed Xirsi iyo kolanyo gadiid ah oo la socday Gudoomiyaha xili uu ku sii jeday hoyga uu Garoowe ka deganaa.
- 2010 waxaa Magaalda Boosaaso lagu dilay Suldaan Ciise Xasan Cumar xili uu kasoo baxay salaadii maqrib masjid lagu magacaabo Al Aqsa kuna yaal xaafada baalade.
- March 2009 waxaa bariga Boosaaso ka qarxay dagaal u dhexeeya laba beelood oo wada dega. Dagaalkaas waxaa loo aaneeyay inuu ka qarxay

isuk qabsasho Deegaan kadib markii ay deeganadaas gaareen Shirkad Baarida shidaal iyo qodid Macdaneed oo ay Dowladu wadatey waxaa uuna socday mudo waxaana ku naf waayay dad aad u badan mana jirin door muuqda oo ay Dawladu ka qabatay baajinta dhiiga Dadkaas ehelka ah. Dhamaan dadkaas waxay ka mid ahaayeen dad aad ufara badan oo lagu dilay degaanka puntland kuwaas oo aan waxba loo qaban lana ogeen sababtii loo dilay ama ay isu laayeen Beelaha Walaalaha ah .

**2. Dhanka Dhaqanka**

Dhanka dhaqanka waxaa la oran karaa waa hay'ada ugu saraysa Puntland lakiin Madaxweyne Faroole waxaa uu ka xayuubiyay taladii iyo maqaamkii ay ku lahaayeen madaxtooyada iyo xalintii ay wax la xalin jireen madaxtooyada, doorkaas oo noqday gaab ka maqnaaday maamulkii Faroole waxaana dhacday in qabaa’ilo badan ay dagaalo dhexmareen ayna suurtoobi weysay in xal deg deg ah laga gaaro waloow ay soo baxeen in culimadu ay qayb ka qaataan dhacdooyiinka colaadaha ama abaaraha.
Iyadoo dadka qaar ay yiraahdaan Madaxweyne Faroole dhanka culimada oo weliba jinaax ah ayay aad isugu dhawaaayeen oo raali buu ka ahaa.
Arimahaa khliifka dhaqanku waxaa uu sababay inay kala aragti duwanaadaan, waxaan so qaadan karnaa shirkii dhaqanka ee Qardho lagu qabtay May 2016 sidii ay isugu khliaafeen oo ay dhacday in isimo ay fariistaan Garoowe iyaagoo yiri nalakalama tashan, halka Isimo kale oo uu hogaaminayo Boqor Burhaan ay Qardho ku qaabileen Boqol Isim oo isaga kala yimid inta Afka Somaaliga ku hadasha Deegaamadooda.

### 3. Armimaha Bulshada

Wasaarada waxbarashada ee uu wasiirka ka ahaa Juxaa waxa lagu sifeeyaa in ay aasaastay manhaj meeshana ka saartay manaahiijtii kala duwaana ee ubadka reer Puntland wax ku baranjireen. Waxay aasaastay hal shahaado oo ay leedahay dowlada Puntland taas oo laga aqoonsanyahay wadama dhawra oo dibaada ah, waxa kaloo ay ku guuleesatay deeqo waxbarasho oo lasiiyo ardaydii ugu dhibcaha sareesa dugsiyada sare Puntland.

### 4. Caafimaddka

Caafimaadku sidoo kale waxaa lagu amaanay wax qabad baxadiisu aynan badnayn oo ay qabatay inta ay jirtay iyadoo ka heleesay deeqo iyo taba baro hayadaha qaramada midoobay. Wasaaradu waxay ay hirgalisay adeegyo caafimaad oo koban.

Wasaarada caafimadka waxaa hoostaga afar cusbitaal oo ku kala yaal, Galkacanyo, Garoowe, Qardho, Boossaso, waana afarta ugu waaweyn mana lahayn adeeg dhamaystiran. Waxaa kaloo jira MCH hoostaga Wasaarada Caafimaadka oo aad ubadan. Balse waxaa bukaanka reer Puntland hareeay tayo xumo daawo taasoo noqotay in dadka loo keeno daawo aan taya lahayn isla markaana aynan kaga soo kaban xanuunada ay la tacaalayeen, taasina waxaa ay dhashay in shacabka reer Puntland ay ku kalsoonan waayaan gudaha Puntland inay isku daaweeyaan marka laga reebo dadka danyarta ah ee aan awoodin dhaqaale ay ku aadaan goobaha caafimaad ee ka baxsan Puntland. Mana jirin door aay Dowladu ku xalisay Amuurtaas.

## 5. Heerkii uu Gaaray Musuqmaasuqu

Deegaanada Puntland ayaa si weyn looga dareemayaa raadadkii ay reebeen musiibooyinkii rabbaaniga ahaa ee roobabkii mihiigaanka ahaa ee watey dabeylaha iyo qabowga dilay dad badan oo reer guuraa ah iyo kaluumeysatada deegaanada xeebaha bari ee dalka Soomaaliya. Musiibadan rabbaaniga ah ayaa kusoo beegantay xilli ay deegaano badan oo kamid ah Puntland ay soo mareen abaaro iyo biyo la'aan xooggan. Dhibaatooyinkaasi hore iyo kuwii duufaantii 03A ayaa intooda badan ku dhacay bulshada saboolka ah ee hore xoolahooda ugu waayey abaarta, iyagoo barakacayaasha ku noqday dhulkooda. Xoola dhaqatadii xoolahooda ka badbaadeen abaarihii iyo dadkii kaluumeysatada ahaa waxay eegayeen gurmad hadaba musiibooyinka rabbaniga ah waa wax illaahay uun wax ka qaban karo balse bulshooyinka caalamka ku dhaqan ayaa intooda badan isku daya inay u tabaabusheystaan dhibaatooyinka noocaan oo kale ah haddii ay dhacaan, waxaa kaalinta ugu weyn ee gurmadka shacabka u xilsaaran dowladaha ama maamulada ay shacabkaasi doortaan.

### Kaalintii Dowlada Puntland



Haddaba waxaa isweydiin mudan dowladii Puntland maxay iyadu ka qabatay dhibaatooyinka ku dhacay shacabka ay matasho, iyadoo ay soo baxeen cadeymo daliil u noqday musuq-maasuqii wadanka ka dhacay inuu raad xun kusii reebay awoodii maamulka uu wax uga qaban lahaa musiibooyinka noocaan ah?

Sanadkii 2004 dhamaadkiisii ayey sidan oo kale deegaanada Puntland ka da'een roobab watay baraf dhagaxaan ah kaasi oo laayey xoolo badan oo ku dhaqanaa gaar ahaan gobalada Bari iyo Nugaal, waxaana bilo kadib ku xigay musiibadii Tsunami-ga oo bishii December 2004 ka dhacday gobalada xeebaha bari ee Puntland and Koonfurta Soomaaliya.

Xiligaas oo sidan oo kale deegaanada Puntland u kaceen sidii loogu gurman lahaa dadkii waxyeelada soo gaartay, ayaa waxaa jirtay hadalo ay kamid ahaayeen "…Puntland waa inay u tabaabusheysataa musiibooyinka noocaan ah ee mustaqbalka…" fikirkaas ayuu ahaa kii ka danbeeyey dhismihii hay'ada Hadma ee Puntland. Hay'ada Hadma ayaa loogu talo galay inay wax ka qabato gurmadka loo fidinayo dadka musiibooyinka rabbaaniga ah ku dhacaan, waxaana loo sameeyey sanduukh dhaqaale loogu kaydiyo gurmadka sida deg-degta ah loogu baahan karo.

Hay'add Hadma ayaan la isweydiin meeshii ay ku danbeysay, waxaan arrintan loo sababeynayaa in dowlada aysan gebi ahaanba wax keyd dhaqaale ah ku shubin sanduukhii gurmadka deg-dega ah, isla markaana aan la aqoon miisaaniyadihii hore loogu qoondeeyey meeshii ay mareen.



Waxaa taas ka sii daran Wasiirkii Qorsheynta iyo iskaashiga oo siyaasadda “junior” ama da’yar ku ah, in uu Hadma ku tilmaamey mid bixisa ogeysiis keliya oo aysan shaqadeedu dhaafsiisneyn in ay xog ururiso mooyee wax kale, taas oo noqotey la yaab iyo dhabana hays.

**Qowda Maqashii Waxna ha u Qaban**

Kaalinta dowlada Puntland ayaa xiligan kusoo ururtay in ay qaylo dhanaan afka ku shubato oo tiraaho beesha caalamka hana soo gaarto iyadoo aan wax la iska weydiin meeshii ay mareen dhaqaalihii shacabka Puntland looga qaaday canshuurta.

Madaxda dowlada Puntland ayaa ku mashquulay inay saxaafadda Garoowe sii wataan oo ay socod kooban ku tagaan tuulada Sunijiif oo 60km Garoowe u jirta halkaasi oo ay isku masawiraan jidka laamiga ah ee biyaha roobabka kala jareen.

Waxaa nasiib darro ah in waddada laamiga ah ee biyuhu jareen dowlada laga codsanayey inay dayactirto muddo 15 sano ah, balse dhamaan dowladihii soo maray Puntland ay ku fashilmeen inay ugu yaraan adkeeyaan buundooyinka waddada dheer, haddii aanba wax loo hayn guud ahaan dayactirka waddada dheer.

Waxaase kasii yaab badan in maanta xukuumada Puntland ay eedaynayso hay'adihii Caalamiga ahaa ee sida WFP oo raashin gaarsiiyey Dangoranyo, Bander-bayla iyo Eyl, maadaama raashinkaasi oo gaaraya 340 tan aan lasoo marsiin Xukuumada Garoowe fadhida. Tani waxay kamid tahay casharada laga bartay qowda maqashii waxna ha u qabanta xukuumada!

**Musuq-maasuq aan Qarsooneyn!**

Duufaantii 03A ayaa kusoo beegantay xili shaqaalaha dowlada Puntland aysan qaadan mushahar muddo 1 sano ah, iskaba daa cid kale oo loo gurmadee shaqaalihii dowlada ayaa iswedyiinaya miisaaniyadii mushaharka dowlada meesha ay martay.
Taasi oo jawaab u noqon karta su'aalaha la iska weydiinayo halka ay martay miisaaniyadii loogu talo galay sanduukha Hadma iyo gurmadka deg-dega ah, mar haddiiba la la'ayahay mushaharkii oo ahaa 70% miisaaniyada dowlada.

Waxaa isweydiin mudan dhaqaalihii meesha uu aaday. Arrintan oo marar badan laga hadlay ayaa jawaabtoodu fudud tahay, haddaan tusaale usoo qaato waxqabadka dowlada Faroole.

Afar qodob ayaa mar walba soo noq noqda oo ay shacabka markaasi carbaabaan oo kala ah:

1. Dowladan waxay ku fiican tahay Xiriirka Caalamiga & Maamul Wanaaga!
2. Dowlada Waxay qabatay Shirarkii waaweynaa oo ay ku jiraan Garoowe 1 & Garoowe 2 iyo Galkacyo.
3. Waxaa la dhisay Guriga cusub ee Baarlamaanka!
4. Bilicda Garowe ayey wax ka qabatay!

Hadii aan qodob qodob bal u qaato afartaas qodob ee kusoo aruurtay waxqabadkii dowlada xiligaa ka arriminaysay Puntland ee uu hogaaminayey Cabdiraxmaan Maxamed Faroole.

**Qodobka maamul wanaaga** wax badan ku dheeraan mayo illeen mushahar la'aan ma dhacdeen muddo ka badan 1 sano, hadii maamul wanaagsan joogo, balse waxaan rabaa inaan wax ka tilmaamo nasiib xumada Puntland ka heysata xiriirka caalamiga ah.

Dowlada Puntland waxay xooga saartay inay kaalin ku yeelato dhismihii Dowlada Federaalka Soomaaliya iyo sidii Puntland xiriir toos ah ulla yeelan lahayd waddamada deeqda bixiya xiriirkaasi oo soo bilowday tan iyo sanadkii 2004 xiligii lagu jiray shirkii dib u heshiisiinta ee Kenya ka dhacay ee lagu soo dhisay Dowlada Federaalka.

Waxaana taasi guulihii Puntland ka gaartay kamid ahaa in la qaato nidaamka Federaalka iyo in Puntland loo oggolaado hawlaheeda u gaarka inay sii wadato inta laga helayo dowlada dhexe oo Federaal ah.

Maamulkii Faroole xilligiisi wuxuu kusoo beegmay xili hoggaan cusub Federaalka yimid sanadkii 2009, taasi oo meesha ka saartay culeyskii Puntland ka heystay taakuleyntii dowladii uu hogaamin jiray Rabbi ha u naxariistee Madaxweyne Cabdullahi Yusuf Axmed.

Haddaba xiligaasi kadib Puntland waxay fursad u heshay inay danaheeda albaab walba u garaacdo, waxaana jiray waddamo badan oo wax ugu deeqay Puntland, balse waxaa nasiib darrada ugu weyn ah in aysan ka muuqan bulshada Puntland dheef walba oo laga helay deeqahaasi oo noqday kuwo intooda badan la iswedyiiyo meesha ay ka baxaan.

Wasaarada Xiriirka Caalamiga ah waxaa wasiir ka ahaa Maxamuud Caydiid oo aan khibrad badan ulahayn xilkaasi loo dhiibay, magacaabistiisana ay kusoo beegantay xili wasiirkii hore Daa'uud Maxamed Cumar uu xilkaasi isaga tagay kadib markii hawshii Wasaarada Xiriirka Caalamiga ah ay la wareegtay Madaxtooyada Puntland.
Nasiib darro wasiir khibradiisu sidaa u koobnayd oo xil uu qabto ee dowladeed iyo diblumaasi ugu horeysay Wasiirka Warfaafinta Xili uu Maxamed Faroole wiilka Madaxweyn-aha u keenay sidii loo xakameyn lahaa saxaafadda madaxa banaan, in xiligan lagu aamino Qorsheynta Puntland iyo xiriirka caalamiga ah waxayna ahayd mid musiibo ah. Waana miraha ka dhashey in uu Hay'ada Hadma ku tilmaamo hay'ad iclaan iyo ogeysiin keliya ka shaqeysa.



Waxaana usii dheer Eng.Maxamuud Caydiid inuusan khibrad ahaan u dhigmin Wasiirada Somaliland iyo Federaalka u qaabilsan arrimaha dibada iyo xiriirka caalamiga ah. Madaxweynaha Puntland Cabdiraxmaan Faroole iyo wiilka Madaxweynaha ayaa iyagu jecelaa inay maamulaan dhamaan wasaaradaha muhiimka ah ee Puntl-and, waana mida sababtay in wasiiro badan oo mutacalim-iin ah isaga tagaan Puntland, Golaha Wasiirada ayey xiligaas isugu hareen koox daacad u ah Madaxweynihii lagu yaqanay hadalo adag iyo oraah qalafsan, balse markii waxqabad la yiraaho aan istaahilin waxaan ahayn casilaad iyo xil ka xayuubin. Waana midii Xukuumadii Faroole ka dhigtay "…Madax Kanool…"

### 1. Baaqii Madaxweyne Faroole uu u diray Beesha Caalamka

Madaxweyne Faroole waxaa uu baaqaq isdaba jooga u diray beesha calamka lakiin kamuusan helin jawaab fiican, maadaama dhamaan waddamadii deeqda bixin lahaa ay la socdaan musuq-maasuqa jira iyo halkii ay mareen dhaqaalihii hore Puntland loogu siiyey inay ku dhisto kaabayaasheeda dowladeed. Tani waa mid kamid ah casharadii laga bartay musuq-maasuqa masaxay horumarkii mushatamaca Puntland.

### 2. Shirarkii Garoowe I and Garoowe II

Walow shirarkaasi dhaqaalihii ku baxay ay bixisay Qaramada Midoobay haddana waxay sumcad u ahayd Puntland in lagu qabto caasimadeeda. Waxaana shirkaas kasoo baxay Road Mapkii lagu galay doorashadii uu ku guuleystay Xasan sheikh iyadoo uu madaxweyne Faroole uu la diriray Shiikh shariif oo ahaa madaxweynihii ay kawada shaqeeyeen shirarkii Garoowe 1 iyo 2 isagoo soona dhaweeyay Xasan sheikh oo noqday madax weynihii bedlay Shiikh Shariif.
Balse nasiib xumo taageeradii uu Madaxweyne Faroole u fidiyey xiligii doorashada madaxweyne Xassan Shiikh Maxamuud isagoo ka cararayey musharaxiintii Puntland kasoo jeeday iyo shariifkaba,waxay dhashay in hada xiriirka Puntland iyo Federaalka uu joogsaday, waxayna kamid tahay siyaasad xumadii Puntland ku musaliftay wixii dadaal ah ee loogu galay in Soomaaliya laga saaro kumeel gaarka, "…Maana moodeyn in Xassan oo aanu taageernay sidan noqon doono…" waa jawaabtii uu Madaxweyne Faroole ka bixiyey taageeradiisii uu ku khasaaray, waxay ka mid tahay "dhaxalka" siyaasad xumada xambaarsan aragtida aan dheerayn oo ku xiran, nin ximin iyo shaqsi naceyb. Waana mid kamid ah

casharadii musuq-maasuqa masiirka mujtamaca Puntland oo hadba nin sidii uu doono ka yeelo.



**3. Waxaa la dhisay Guriga cusub ee Baarlamaanka!**
Baarlamaanka waxaana mushruuca lagu dhisay ka tageeray Qaramada Midoobay, kaalinta uga soo aaday Dowlada Puntland waxay ahayd inay qaadato dhameystirka gudaha baarlamaanka sida kuraasta iyo Miisaska la dhigayo Xafiisyada Baarlamaanka iyo Hoolka Shirarka.

Musuq-maasuq Puntland waa mid aan isbedalin, meeshii laga rabay in baarlamaanka la dhigo kuraas iyo miisas cusub, Madaxweyne Faroole wuxuu soo fujiyey kuraastii hore ee ku fadhiisan jireen Golihii Wakiilada. Intii ka dhinaataynа waxaa lagu kabay kuraas caagaga ah ee kamid ah kuwa Makhaayadaha la dhigto, arrintan oo keentay in maanta aysan islaheyn daarta iyo Kuraasta dhexyaal Baarlamanaka Puntland. Tani waa Casharadii laga bartay Musuq Maasuqa Qaan gaaraya ee Puntland.




**4-Bilicda Garowe ayey wax ka qabatay!**

Waa hubaal in dowlada Puntland isugu geysay wax walba Caasimada Puntland, inkastoo ay tani ka horimaaneyso nidaamka baahinta maamulka ee Federaalka iyo dooda Faroole ku qabsado xukuumada Muqdisho fadhida, hadana waa wax wanaagsan haddiiba wax laga qabto Magaalo Madaxda Puntland ee muraayada bulshada u ah.




Hase yeeshee haddaad dib u milicsato waxqabadka Garowe wuxuu ku kooban hay'adaha dowlada iyo kuwa si gaar ah ay u dhisteen xubno kamid ah dowlada, Madaxtooyada Puntlan ee Garoowe ayaa noqonaysay Madaxtooyada ugu wey Soomaaliya marka lasii fiiriyo naqshadana waxaa ay noqonaysaa mida uguna quruxda badan taasoo ah waxqabad lagu faani karo. Waxaase dhismayaashaas dhinac socday qasriyo ay dhisanayeen masuuliyiin iyo qayb kamida qoyska madaxweynaha siiba wiilashiisa taasina

maaha bulsho wax loo qabtay ee waa bulsho laga shaqeystay.

Tusaale waxaan usoo qaadanayaa sawiro guryo sanadkii 2012 magaalada Garoowe ay ka dhisanayeen kuwa si toosa u boobayay hantida umada, waxaan layaabay wasiiro mushaharkoodu yahay $1500 dollaar oo aan meel kale dakhli kasoo gelin oo dhisanaya guryo qaarkood ku kacaya $200.000 (labo boqol oo kun oo dollar)! La yaab maleh marka in la isweydiiyo dhaqaalihii iyo mushaharkii Puntland meesha uu ka baxay, hadiib musuaq-maasuqa aan qarsooneyn uu heerkan gaarsiisan yahay.

Waxaa kasii daran xiligaa ay dhismayaashaas ay wadeen waxaa ay ahay xili abaar giyiga ay aafaysay oo dadku haraad u dhimanayay xooluhuna ayba socon waayeen.




Cali Yusuf Xoosh
Wasiir kuxigeenka
Villa 2


Qasriga Madaxweyne kuxigeenka
Gen.Cabdisamad Cali
$500000+


Wasiir kuxigeenka
Villa 1

Dabcan sawiradan waa kuwo kooban oo ahaa 2012, xiligii abaaraha ba'an ay hayseteen bulshada, waxaana guryo badan oo ay dhisteen madaxda dowlada mana jirin warbaahin usoo bandhigi karta bulshada Puntland. Tasoo ay sabab utahay cago jugleynta lagu hayo.
Mid kamid ah muwaadiniintii reer Puntland ee ka qeyb qaatay gurmadkii ayaa mar xiligaas la weydiiyey farqiga u dhaxeeya culumaa'udiinkii, shacabka waxa ay qabteen iyo xukuumadii, ayuu wuxuu iigu jawaabay arrin u baahan feker dheer iyo waliba garasho; wuxuu yiri:
"….walaal dowladan waxna ka sugi meyno, haddii dakhligii dowlada la dhowri waayey, waxaan ka codsaneynaa Madaxweyne Faroole bal inuu dhowro diinta dadkan…."
Anigoo arrintan la yaaban baan siiweydiiyey waxa uu ula jeedo in diinta dadka la dhowro hadii la dhowri waayey dhakhligii dalka!

Isagoo arrintan ii micneenaya ayuu ku jawaabay:
"…musuq maasuqa waanu ognahay, balse waxaa kasii daran haddalada aan loo meel dayin ee kasoo baxa madaxda, sida dastuurka ayaa dhameystiran oo shariicada ma dhameystirna….shacabka Puntland waa ka daaleen hadalada qalafsan ee madaxdii ugu sareysay maamulka maalin walba kasoo yeeraysa… "



Arrintan ayaa la xariirta hadalo jees jees ka muuqdo oo uu bishii April ee sanadkii 2012 uu yiri Madaxweynaha Puntland oo ay dadka qaarkood si weyn u dhibsadeen oo ah in Shariicada Islaamka aysan wax walba ku qornay kuma qorna sida baabuurta loo kala celiyo iyo sida dadka xabsiga loo geeyo dhameen balse uu dhan yahay dastuurka cusub ee Puntland, culimo badan baa ka hadashay oo ka hortimid.
Tani waa wixii laga dhaxlay tawradii – kacaanka ee Maxamed Siyaasad Bare oo uu horey ulla soo shaqeeyey Madaxweyne Faroole. Taasi ayaa horey musiibo uga dhaxashay dilkii culumaa'udiinkii ka dhiidhiyey ku xad-gudubkii ayaadaha Qur'aanka sanadkii 1975. Dilkaasi ayey shacabka Soomaaliyeed ka dhaxleen musiibo deg deg ah, kadib markii isla maalinta culumada la dilay ay hawada Muqdisho fooda isku dareen labo diyaaradood oo ay lahaayeen ciidamada circa.

Musiibadaasi oo ay ku dhinteen dad badan kadib markii ay diyaaradaashi kusoo dhaceen xaafada Waaberi oo qeybo badan oo kamid ah burburtay. Waxaa xiligan muuqata casharadii Soomaalida soo martay sanado hore, iyadoo ku-celis ah inay xiligan ka socoto Puntland marka loo eego musuq maasuqa iyo falalka midnimada ummada wax u dhimaya, waxaana ka rajeenaynaa in natiijada aysan noqon tii dhacday 1991dii oo kale. Illaahay marna waa soo dadajiyaa musiibooyinka, marna dib buu u dhigaa, waxaase la gudboon dadka Muslimka inay mar walba Illaahooda uu toobad keenaan.

Hadaba waxaa mahadleh Illaahii na abuurtay oo Quraankiisa Kariimka ah noogu sheegay in bulsho walba aan laga bedalin marxalada ay ku jirto hadii aysan iyadu isbedal la imaan.

لَهُۥ مُعَقِّبَٰتٌ مِّنۢ بَيۡنِ يَدَيۡهِ وَمِنۡ خَلۡفِهِۦ يَحۡفَظُونَهُۥ مِنۡ أَمۡرِ ٱللَّهِۗ إِنَّ ٱللَّهَ
لَا يُغَيِّرُ مَا بِقَوۡمٍ حَتَّىٰ يُغَيِّرُواْ مَا بِأَنفُسِهِمۡۗ وَإِذَآ أَرَادَ ٱللَّهُ بِقَوۡمٖ سُوٓءٗا فَلَا
مَرَدَّ لَهُۥۚ وَمَا لَهُم مِّن دُونِهِۦ مِن وَالٍ ١١

Soomaalida ayaa muddo nus qarni ah ka cabanaya hogaamiyayaashooda, halka qaar kalena ku taageerayaan si indho la'aan ah hab qabiil iyagoo aan ogsooneyn in musiimada ummada uu u horseedo hogaanka qaloocsama in laga dhaxlo musiibooyin wada taabta dhamaan bulshada oo dhan.

Shacabka Puntland ayaa xiligan heysta fursad ay wax uga bedali karaan dhibka heysta una sameysan karaan mustaqbalka ku dhisan cadaalad iyo sinaan, walow aan la aqoon fursadaasi inay ka faa'iideysan doonaan ama ay doorbidi doonaan inay sii heystaan siyaasadii laga dhaxlay casharadan musuq maasuqa ah iyo musiibooyinka la degay ummada dhibaateysan ee Soomaaliyeed.

Musuq maasuqu kuma ekayn boobka dhaqaalaha ee waxaa musuq maasuq uu ka dhacay in magaalooyinka qaarna ilbaabada loo xiro kuwana keligeed lashido. Magaalada Boosaaso waa magaalada lafdhabarta u ah Puntland waxaa degenaa, hay'ado caalamiya oo ka shaqeeya dalka Madaxweyne Faroole waxaa uu kuli ku amray inay usoo guraan Garoowe taasoo ahayd mid aad u muujinaysay inuunan Boosaaso dan ka lahayn Faroole balse magaalada Garoowe uu ka fekerayo.

**Maaliyada iyo Maaraynteedii**

Wasiirkii Wasaaradda Maaliyadda DGPL oo hadana ah musharax Madaxweyne 2019 Dr. Faarax Cali Shire oo siweyn u bayaamiyey siyaasadda dhaqaalaha oo uu sheegay inay asaas u tahay laba arrimood oo kala ah ilaalinta lacagta (monetary policy) iyo kharash iyo dakhli isu dheeli tiran (fiscal buget balance). Waxaa uu wasiirka Maaliyadu qiray iinaan Puntland lahayn siyaasad lacag ilaalineed oo xoog leh. Side darted ayaanu noqon karin bajadka la sameeyaa xaqiiqada dhaqaale ee puntland ka jirta. Dr. Faarax Cali Shire waxaa uu sheegay qiyaas Miisaniyadedka la odorosay sannadka 2009–ka ee Puntland inay dhan tahay 545 bilyan oo ah Shilinka Soomaaliga dakhli iyo kharash. Halka ay sannadkii 2008-dii miisaaniyadda la odorosay dhamayd 363 bilyan oo ah Shilinka Soomaaliga.

Wasiirka waxay saxiibo dhaw ahaayeen Madaxweyne Faroole islamarkaana ay kuwada noolaayeeb Australia waa Farah Cali. Shire inkastoo wasaaradaas uu horay wasiir uga ahaan jirey Faroole, waxaa wasaaradaas lagu eedeeyaa in amni daradii dhacday dhaqaalihii lagu maarayn lahaa dhanka amniga aynan ku marayn hanoqoto dilalka qorshaysan ama qabaailka islaayey, iyadoo Farah lagu dhaliilay dagaalkii bari ka dhacay ee labada beelood inuunan door muuqda ka qaadan deminta colaadaas isagoo labadaba ku metalayay boosaka uu fadhiyey Gobalka Bari ahaan.

(dhaqaalaha ayaa hogaamiya siyaasada xaqiijiyana amniga) waxayna kala mid ahayd wasaaradihii xiliga ugu danbeeya aan bixin jirn mushaharka waxay kaloo kala mid ahayd wasaaradihii ruux togi jirey hanti dhawrka dalka (si aynan u dhicin isla xisabtan.

## Daabicidda Lacagata Shilinka ah iyo Warshada Boosaaso taal

Wasiirka maaliyaddu wuxuu si toos ah iyo si dadbanba wax uga qaban waayey lacagta lagu daabaco magaalada Boosaaso. Wakhtigaas waxaa caadi ahaa in laga sheekaysto lacagta lagu daaboco Boosaaso iyo sida ay dhaqaalaha gobolka wax ugu dhintay. Waxaana Jirtay sababta keentay in aan laga hadlin oo warbaahinta Puntland ka hadlin. Taasna waxaa cadaatay in wiilka uu dhalay Faroole uu u hanjabey dhamaan warbaahinta iyadoo loo shegay in laba xirayo warbaahintaas iyo dadka ka shaqaynayaba ayna dhacday in dad kunteenar laguba xiro sida Suxufi horayna usoo noqday Wasiir ku xigeen Bile Qaboowsade.
Waloow aan la xaqiri Karin in iyadoo ay socoto daabacaada lacagtu ay dowladu ku guulaysatay inay xakamayso sarifka lacagta Dollarka ah.

Wasiirka mar laweydiiyey deyn badan oo ay ku wareejiyeen dowlada iyo mushahaar bixin la'aanti iyo weliba in wasaarada lala maamulayay xiligaas isla markaana ay ku takri faleen awoodii iyo dhaqaalihii kuma uunan jawaabin jawaaba qancinkara bulshada Puntland.

## Ciidamada ay Masruufaan Ajnebigu, ee Gaarka ah.

Dastuurka Puntland Qodobkiisa 94raad waxaa uu cadaynayaa in Ciidamada Puntland ay ka kooban yihiin b) Boolis t) Boolis-Daraawiish j) Asluub.
Balse waxaa samaysmay ciidamo kala duduwan oo dhibaato weyn ku noqday ciidamadii jirey lana oran karo way baa'biyeen kadib kuwana markay shirkado siiyeen Boqolaal dollar haka ciidankii rasmiga ahaana ay waayeen wax ka 100 dollar ee musharka u ahaa mana jirin oo lama horgayn Barlamaanka lagumana soo xusin Cidamada Dalka ee Dastuurku ogol yahay.

Xog uruurintan waa mid ku salaysan walaaca ay shacabku ka qabaan amniga magaalooyinka iyo degmooyinka gobalada Puntland iyo is dhex yaaca hay'adaha tirada badan ee amaanka qaabilsan oo qaarkood ajaanib yihiin iyo saameynta ay ku yeelan karaan mustaqbalka deegaanada Puntland.




Deegaanada Puntland oo ah goobo si weyn loogu yaqaaney nabada iyo horumar kasocdo tan iyo burburkii dagaaladii sokeeye ee ka dhacay dalka Soomaaliya, ayaa waxaa mar walba ka socday dadaalo badan oo lagu doonayo in lagu kobciyo dhaqaalaha iyo horumarinta, xili si weyn uu caalamka isha ugu hayey qorshahii. Shidaal Baarista ee ka socotay Gobalka Bari ee Puntland xiligaas ayaa waxaa sidoo kale garab socoday walaac ay shacabka ka qabaan dhanka amaanka oo muddooyinkii danbe noqday mid isbedal ku yimaadey.

Dowlada Puntland ee xiligaa uu hogaaminayey Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud Faroole ayaa iyadu ku dadaashay in ay amniga wax ka qabato, ayadoo si weyn loo sugay amniga magaalooyinka waaweyn qaarkood halka ay jiraan arrimo badan oo wax ka qabasho u baahan oo weli

ka jira deegaanada Puntland. Dowladaa ayaa ahayd middii ugu horeysay ee dalka keenta saraakiil ajaanib ah oo dowlada gacan kasiisa dhanka amaanka sida la dagaalanka burcad badeeda iyo amaanka goobaha shidaalka laga qodayo ee Bariga Puntland. Waxaana deegaanada Puntland ku sugnaaday wakhtigaa labo hay'adood oo si gaar ah loo leeyahay kuwaasi oo amniga gacan kasiiya dowlada Puntland, labadan hay'adood ayaa kala ah.

**Sarancen iyo Pathfinders**

Hay'adahan ayaa ah kuwo ay hogaamiyaan saraakiil ajaanib ah oo u badan caddaan kuwaasi oo hogaanka u haya ciidamada ka amar qaata labadan hay'adood, ayadoo labadan hay'adood ansixinta joogitaanka dalka aan loo soo bandhigin shacabka iyo saxaafada. Xubno kamid ah Baarlamaanka Puntland oo arrintan wax laga weydiiyey ayaa ka gaabsaday inay si rasmi ah uga hadlaan arrimaha shirkadahan iyo in baarlamaanka uu ansixiyey iyo in kale. Horey waxaan uga soo hadalnay Hay'ada SARANCEN oo ayadu sheegtay inay tababari doonto ciidamada la dagaalama burcad badeeda. Hase yeeshee hay'adan ayey shacabka Puntland intiisa badan aaminsan yihiin in ay si toos ah ugu hawlan tahay arrimaha Macdanta. Shirkada Sarancen oo xarumo kuleh magaalooyinka Boosaaso iyo Garoowe ayaa isugeyn waxay leeyihiin 3 doonyood oo yar yar, kuwaasi oo intooda badan xarumahaasi ku xareysan oo aan bada gelin, marka laga reebo tababarada ciidamada lagu siiyo ama marka xaxaafadda caalamiga ah loo soo bandhigayo.

Hase yeeshee weli lama arag ciidamada Sarancen oo gacanta kusoo dhigay wax burcad badeed ah ama ayagoo fulinaya hawlgalo ballaaran oo Burcad badeeda wax looga qabanayo. Balse ciidamadan ayaa inta badan taga goobo ka baxsan magaalooyinka waaweyn ee dhulka miyiga ah,

ayadoo aan wax xog ama faah faahin laga bixin hawlgalada ay baadiyaha ka qabtaan ciidamadan sida wanaagsan u tababaran ee Sarancen.

Sanadkii 2011, ayaa Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay loo gudbiyey su'aalo ku aadan hawlaha ay SARANCEN ka qabato Puntland, ayadoo warbixintaasi lagu sheegay in hay'adan ay lug weyn ku leeyihiin Aasasayaashii shirkadii horey loo burburiyey ee BLACKWATER oo laga lahaa dalka Maraykanka, kuwaasi oo iyagu ahaa ciidamo la kireysto oo u adeega hadba cidii lacag siisa.

Shirkada SARANCEN ayaa xarunteeda ugu weyn kuleh Galbeedka Airporka Boosaaso, ayadoo halkaasi ka sameysatay xero militari iyadoo sidoo kale usoo degaan diyaarado u gaar ah shirkada isala markaana aan la aqoon marka ay dhoofayaan wax ay qaadan.
Waxaa iyaduna jirta warar sheegaya in shirkada SARANCEN ay xiriir la leedahay shirkada (Sarancen Mineral Holdings Limited) oo fadhigeedu yahay magaalada Melbourne ee dalka Australia shirkadaasi oo ah mid baarta Macdanta dhulka ku jirta.

Waxaa ayaduna jirtay eedaymo loo soo jeedinayo shirkad kale oo lagu magacaabo Southern Ace Lt taasi oo la sheegay in ayaduna ka timid Koonfur Afrika isla markaana daroogo ku beerto deegaano kamid ah GALMUDUG.

Marka laga yimaado shirkadahan waxaa ayaduna jirtay Shirkad ku sugan Puntland balse aan dadka intiisa badan la socon taasi oo ah iyadu mid u shaqeysa nooca sirdoonka isla markaana ah mid hab militari u dhisan, shirkadan ayaa la leeyahay dalka Koonfur afrika magaceeduna waa Pathfinders Corp. Qaar kamid ah Saraakiisha Pathfinders

Corp oo ay wada taagan yihiin xiriiryaha Puntland ee shirkaddaas



Shirkadan waxaa dalka keenay shirkadda African Oil ee shidaalka ka baaraysey xiligaas dalka, waxayna ku sheegtay in ay u qaban doonto arrimo la xariira talo siin arrimaha amniga ah (consulting). Waxaa sidoo kale arrimahan si weyn ugu dhexjiray xubno si weyn ugu dhaw dhaw Madaxweyne Faroole kuwaasi oo ayagu sidoo kale talooyin ku bixiyey in dalka la keeno shirkadan oo ah mid qaab militari u dhisan isla markaana waxaa ay si toos ah u maamusha dhamaan ciidamada Puntland ee ku sugan goobtii shidaalka laga qodayey ee dooxada Dharoor.

Pathfinders Corp waxaa hogaamiya ninka lagu magacaabo Marius Roos oo asagu hada ah korneyl kamid ah ciidamada reserve-ka (kaydka haa) ee dalka Koonfur Afrika, waana nin kasoo dagaalamay goobo kala gedisan. Shirkadan ayaa waxaa u joogay 8 sarkaal oo cadaan ah oo iyagu ah kuwa dusha sare ka maaamulayay ciidamada illaalada ah kuwaasi oo ah rag horey uga soo mid ahaan jiray ciidamadii Koonfur Afrika. Qaar badan oo kamid ah ciidamada Puntland iyo saraakiishooda ee ku sugan goobta shidaalka ayaa si weyn uga cawday habka ay Saraakiishan

cadaanka ah ulla dhaqmaan Soomaalida halkaasi ka shaqeysa, ayadoo marar badan ay dhacday in Saraakiishan cadaanka ah ay gacanta ulla tagaan qaar kamid ah askarta Soomaalida ah iyo saraakiisha kamid ah ciidamada Puntland ee illaalada goobahaasi ka haya.



**Abdisalaam**

Dhanka dowlada Puntland ayaa u magacowday nin dhalinyaro ah oo dalka dibadiisa ka yimid oo lagu magacaabo Cabdisalaan inuu noqdo xiriiriyaha guud ee amniga ee Dowlada Puntland iyo hay'adaha batroolka baaraya iyo shirkadooda amniga qaabilsan ee Pathfinders. Inkastoo masuulkan cusub uu yahay muwaadin reer Puntland ah oo dhalinyaro ah balse Madaxweyne Faroole si weyn ugu dhaw, hadana maaha nin horey ugu soo dhex jiray arrimaha amniga iyo maamulka, mana uu xakameyn karin hay'adahan awooda leh sida Pathfinders Corp iyo saraakiishooda sida sirdoonka u dhaqma ee ku sugan gudaha Puntland.

Shirkadan Pathfinders Corp, ayaa sidoo kale soo saartay Warbixino ama xog ay siiso shirkadihii Shidaalka ee African Oil iyo Red Emperor ayadoo talo kasiineysa arrimaha amaanka iyo cabsida laga qabo kooxaha khatarta ku noqon kara amaanka goobaha lagu tilmaamay in shidaal laga qodayo.



Waxaa ayaduna jira warbixino loo diray hay'adaha gargaarka oo aan la aqoon meesha laga soo xigtay kuwaasi oo looga digayo hay'adaha Gargaarka inay tagaan deegaanada Xaafuun, Banderbayle, Qandala iyo dhulka ku teedsan oo haba yaraatee aanayn wagaas wax ka jirayba aynan jirin ayadoo warbixinadaasi lagu sheegay in halkaasi Al Shabaab iyo Alqacida ay ku sugan yihiin. Walow maamulada deeganadaas iyo odayaashooduba waxaa ay waxkama jiraan ku sheegeen warbiximaha laga faafiyey deegaanadaasi ayagoo ku tilmaamay warar dano gaar ah laga leeyahay oo lagu doonayo in deegaanadaasi looga jaro gargaarkii soo gaari jiray isla markaana laga beero amni xumo.

Warbixinada kasoo baxa Pathfinders Corp, ayaa intooda badan sheega in kooxda Al Shabaab ay tahay mid khatar weyn ku ah amaanka shidaalka Puntland, ayadoo xiliyadaas kooxda ku sugan buurta Galgala sheegeen inay ku biireen Al Shabaab kuna hanjabeen inay weerari doonaan goobaha shidaalka laga qodayo. Dowladii Puntland ayaa 21kii July 2011 heshiis la saxiixatay kooxaha iyo dadka ku sugan buurta Galgala ee horey ulla dagaalamay dowlada Puntland, kadib markii ay dowlada Puntland siideysay 9 kamid ah raggii lagu soo qabqabtay

dagaaladii ka dhacay deegaankaasi iyo kuwo kale oo ay ciidamada amniga ku qabteen gudaha Bosaaso.

Macada waxa keenay in heshiiskii hore uu burburo isla markaana kooxaha Galgala ku sugnaa ay xiligaas ku dhawaaqaan inay ku biireen Al Shabaab oo ayaduna sheegtay inay ku biirtay Al Qaida.
Waxaa ayaduna is weydiin muddan sababtii keentay in xiligaas ay kooxaha ku sugan Galgala ay usoo degaan dhanka laamiga isla markaana weeraro kusoo qaadaan kantroolka Boosaaso oo ay markii ugu horeysay ay soo weerareen. Arrintan ayaa la yaab ku ahayd shacabka maadaama ay dalka ku sugnaayeen ciidamo badan iyo waliba shirkadahan sheegay inay amniga wax ka qabanayaan ee shisheeye.

Xubno xog ogaal ahaa oo ku dhaw dhawaa Madaxtooyada Puntland ayaa sheegay inay wadeen qaar kamid ah ragga arrimaha shidaalka u qaabilsan dowlada in ay talo ku bixiyaan in ciidamo gaar ah ay dalka keensato hay'ada Pathfinders si ay gebi ahaan ulla wareegaan amaanka goobaha shidaalka, taasi oo loo sababeenayay khatarta ay sheegtay hay'adan inay uga imaaneyso dhanka Al Qaida iyo Al Shabaab. Hay'ada bartroolka ee Puntland ayaan ayadu wax hadal ah kasoo saarin joogitaankii shirkada Pathfinders Corp iyo waliba qorshaha lagu doonayo inay gudaha Puntland ku sameysato ciidamo u gaar ah.

Su'aasha isweydiinta leh ayaa ah hay'adahan shisheeye ee ku sugan Puntland ma amniga Puntland ayey adkeenayeen mise waxay sababeen khal khal hor leh oo ku yimid nidaamkii iyo amnigii ka jiray deegaanada, ciidamadan sida gaarka ah loo leeyahay ee shaqsiyaadka ka amar qaadanayay kuwo khal khal ku abuuray nidaamkii dowliga ah ee ka jiray deegaanada Puntland?

Dib usoo noqoshada dhaq dhaqaaqii Galgala ka socday iyo waliba saameyntii ay ku yeelatay wadada dheer ee laamiga ah ee isku xirta gobalada Puntland, ma tahay mid dowlada ay wax ka qaban weyday xiligii mise wax kalaa jirey. Hadaba waxaa ku soo kufinayaa anigoo aynan iga maqnayn mashaariicda macdanaha iyo oil-ka dhulalka laga sameeyo waxaa ka dhaca hawla badan oo ay ka shaqeeyaan shirkadaha iyo maamulada keensada kuwaasoo ah amni daro colaad dadka dhexdiisa ah iwm.

## Gobalada Maqan iyo Deeganadii laga mucaaraday Dowladii Faroole

Madaxweyne Faroole waxaa kamid ahaa balanqaad yadiisii inuu soo celinayo gobalada maqan isla markaana uu u cadaalad samayn doono dhamaan dadka reer Puntland balse ma dhicin waxaa dhacay kuwii maqnaana inay garaabid la'aan iyo weliba maagis la kulmaan kuwa joogayna ay bilaabaan inay yiraahdaan waxaan ka tashanaynaa ayahayaga sida Maakhir iyo Raas Casayr hadaan soo qaadano Gobalka Sool oo aan gacanta ku jirin markii uu Madaxweyne Faroole xilka qabtay, markay dadki arkeen inuunan usocon xoraynta deegaamadaas waxaa ay ku qasabtay inay isu taagaan sidii ay deegaankooda ku xorayn lahaayen waxaaana ay bilaaben dadaalo gudaha iyo debedaba ah hadaba waxaa ay Reer Sool sameeyeen sidan.

## Bilowgii Dhismihii Maamulka Gobalada Sool, Sanaag iyo Cayn (SSC)

October 3-deedii 2009, waxaa sii rasmi ah uga furmay magaalada Nairobi shirweyne ay leeyihiin dadka SSC. Waxaa shirkaan ula jeedkiisu ahaa xoraynta Gobalka Sool iyo inay dadka rer SSC ay ka tashadaan ayahooda

mustaqbal kadib makii Dawladii Puntland ay inadhaha ka qabsatay xoraynta Gobalka Sool isla markaasna ay wax garadku ay kala kulmeen marar badan waji gabax iyo hadalo aynan istaahilin.
Dadka reer Sool siiba Madaxweynaha Puntland Mr Faroole iyagoo kulana badan kula yeeshay dalka gudihiisa iyo debadiisaba kuligoodna waxaa ay ku dhamaadeen gaarabis la'aan uunan u garaabin iyadoo Sool ay kamid tahay dastuurka uu ku yahay Madaxweynaha.

Shirka Ka furmay Nairobi ayaan aad u farax gelin Madaxweyne Faroole isagoo si dhaw ula socday, isla markaana xubno u xan qaada ayaa u fadhiyey madasha Shirka.

Mudo kadib waxaa xarunta dalka Kenya la gu soo gaba-gabeeyey shirkii muddooyinkan uga socday dadka SSC, kaas oo ay ka soo qayb galeen wufuuud ka kala timi dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, waxaana shirkaan oo si heersare ah loo agaasimay isugu yimi dadweyne aad u tiro badan, iyadoo halkaasna lagu dhaariyey hoggaanka badbaadada iyo midaynta SSC Ee Soomaaliya.

Waxaana muxaadaro kooban ka dib lagu soo dhaweeyey Mikrafoonka isaga oo shirka furayey Garaad Abshir Saalax, oo sheegay in shirkii tolka SSC isugu yimi magaalada Nairobi guul laga gaadhay, ayna ahayd midaynta beesha, horena loosii anba qaadi doono hawlaha haatan la isku afgartay, midnimada Soomaaliyana lagu dadaali doono lagana shaqyn doono.
Waxaa isaguna ku xigay oo madasha ka hadlay Garaad Cali Buraale, oo gabay guubaabo ah halkaas ka soo jeediyey, wuxuuna aad ula dardaarmay hoggaanka badbaadada iyo midaynta SSC ee Soomaaliya, waxaan

hadalka garaadka aad ugu bogay dadweynihii ka soo qayb galay shirkan. Waxaa isaguna goobta warbixin dheer ka soo jeediyey shir guddoonka shirka SSC, Md C/qaadir Axmed Aw Cali, wuxuuna halkaas ka akhriyey go'aamadii ka soo baxay shirka, wuxuuna sheegay in laysku afgartay in la sameeyo hoggaan loogu magac daray hoggaanka badbaadada iyo midaynta Sool, Sanaag iyo Cayn ee Somaliya.

Wuxuuna sheegay Md C/qaadir in hoggaankani qaban doono dhammaan hawlaha beesha ka qabyada ah insha alaahu. Waxa kale oo uu aad mahad balaadhan ugu soo jeediyey uguna ammaanay kaalinta ay shirka ka qaateen Ururka NSUM, wuxuuna sheegay in ay qayb libaax ka qaateen sidii shirkani u hirgali lahaa, taariikhduna xusi doonto, lana ilaawi doonin.

Waxaa iyaguna shirkan ka hadlay mas'uuliyiin Soomaaliyeed oo uu ka mid yahay Gen. Maxmed Siciid Xirsi (Morgan), wuxuuna aad ugu dheeraaday midnimada Soomaaliya, wuxuuna dhiirri galin u soo jeediyey hoggaanka badbaadada iyo midnimada SSC, wuxuuna Morgan macneeyey xarfaha SSC, isaga oo ku sheegay (Soomaali-weyn, sinnaan iyo caddaalad), wuxuuna sheegay in ay intaasba Soomaali u baahan tahay, oo ayna meel gaar ah ku koobnayn.

Ergayga Ururka NSUM uga joogay xafladda Maxmed Xasan Buraale ayaa sheegay isaga oo ku hadlaya Afka Ururka NSUM in ururku isla qaatay in la taageero hoggaanka lagu sameeyey shirka ka socday Nairobi, wuxuuna sheegay in ay si daacadnimo ku jirto ula shaqyan doonaan Hoggaankan.

Madaxweynihii hore ee dowlad Goboleedka Puntland Maxamed Cabdi Xaashi ayaa isaguna halkaas ka soo jeediyey weedho gaaban, isaga oo sheegay in uu aad ugu

faraxsan yahay natiijada ka so baxday shirka, uuna taageersan yahay xubnaha loo doortay hoggaanka; wuxuuna aad ugu dheeraaday midnimada Soomaaliya, isaga oo tilmaamay in la taageero dawladda Soomaaliya. Wuxuuna dhalliil u soo jeediyey walaalkiis Axmed Cabdi Xaashi (Xashara), oo aad uga soo horjeeda dawladda kumeel gaadhka ah.

Waxaa iyaguna madasha ka hadlay xildhibaano ka tirsan dawlada federaalka, oo uu ka mid yahay Jinni Boqor, oo sheegay in ay soo dhaweynayaan hogaanka SSC. Maxamed C/laahi, oo isagu xilli ahaan jiray madax Laanta Afsoomaaliga ee BBC-da ayaa hadal uu ugu boogaadinayo hoggaanka ka soo jeediyey goobtaasi, wuxuuna sheegay in la ilaaliyo midnimada Soomaaliya, iyada oo aad looga digtoonaanayo kuwa iyagu ka shaqeeya kala faquuqida bulshada Soomaaliyeed, wuxuuna intaas ku daray in maanta adduunkii aad isugu soo dhawaanayo, oo mel kasta midnimadeeda ka shaqaynayso.

Intaasi ka dib waxaa la dhaariyey labada xubnood ee loo dortay hoggaanka badbaadada iyo midaynta Dr. Saleebaan Ciise Axmed (Xaglatoosiye), iyo Col. Cali Sabaray, oo Kitaabka Qu'aanka Kariimka ah gacanta loo saaray, iyada oo lagu dhaariyey in ay daacad u noqdaan wixii ka soo baxay shirka sidii ay uga midho dhalin lahaayeen. Hoggaamiyaha Badbaadada iyo Midaynta SSC Soomaaliya Dr. Saleebaan Xaglatoosiye, oo hadalka u baxay dhaarta ka dib ayaa waxa uu sheegay "In ay ka soo bixi doonaan ballanka ay qaadeen, dhaartana aysan baal mari doonin, ballanta iyo goobta halkan ku xigta ee uu rajeynayo idinka Ilaahay in laysku arkaa ay tahay gudaha magaalada Laascaanood, wuxuuna sheegay in ay sida ugu dhakhsiiyaha badan gudaha u gali doonaan.

Ku xigeenka Hoggaanka Badbaadada iyo Midaynta SSC Col. Cali Sabaray, ayaa isagu waxa uu ka hadlay sidoo kale in yoolkoodu yahay Laascaanood sidii gacanta loogu soo celin lahaa, wuxuuna intaasi ku daray "In kuwa Hargeysa

joogaa tolkood ku soo noqdaan, Saamaxaadna weydiistaan si meel loogu wada jeesto."

Garaadka Guud ee beelaha SSC Garaad Jaamac Garaad Cali, oo soo gaba-gabeeyey shirka ayaa sheegay in maanta xilka halkan logu dhiibay xubnaha yahay mid ay beesha SSC iyadu u dhiibatay, wuxuuna shacabka ku boorriyey in ay is garabtaagaan, oo taageero weyn u muujiyaan hoggaanka la doortay. Wuxuuna intaas ku daray in shacabka loo horseedo waddo ay kaga baxaan kala firiqsanaanta, ugu danabytii wuxuu Ilaahay uga baryey in uu la garab galo xilkan loo dhiibaty.

Kadib waxaa ay bilaabeen ergooyinkii iyo Madaxdii ladoortay inay kusoo guryo noqdaan iyagoo ay ka go'nayd inay halgan balaaran ay galaan kuna soo celiyaan dalka balse nasiib daro waxaa ka horyimid cadaadis uga yimid Madaxwene Faroole isagoo ka hor istaagay inay kaba soo degaan Puntland nimanka loo magacaybay SSC taasoo ku ahayd dhawac horusocodka iyo hiigsashadii xoraynta, kadib marka meesha kaba baxday inaynan wax garaba ka helayn Dowladda Faroole.
Si kastba hanoqotee iyo meelkastaba hakasoo dageene waxaa ay dhaman ergooyinkii intii dalka imaan lahayd ay soo gaareen gudaha SSC waxaana kulan ka dhacay degaanka Buurawadal ee Gobolka Sool ayaa waxaa ka qayb galay dhamaan waxgaradka, siyaasiyiiinta, aqoonyahanada, culumida ururada bulshada rayidka ah ee deegaanada SSC ee ay degto jifada Dhulbahante ee beelwaynta Harti.

Kulanka ayaa waxaa looga hadlayay sidii loo xorayn lahaa deegaanada ay ciidamada SNM-tu haystaan ee ay degto beeshu waxaana halkaas lagu dhisay maamul loo baxshay SSC iyo gole khusuusi ah oo ay ku jiraan dhamaan qaybaha kala duwan ee bulshada SSC kulanka ka dib iyo ka quusashadii maamulka puntland looga quustay soo celintii magaalada laascaano dadka deegaanka degan waxaa ay bilaabeen inay iyagu is abaabulaan diyaarshaana stratiijiyaddii lagu soo celin lahaa magaalada Laascaanood

iyaga oo diyaarshay dhalinyaradii ciidanka ka mid noqon lahayd, agabkii iyo qalabkii lagu qaban lahaa, dhaqaalihii loo baahnaa. Diyaar garow dheer ka dib Ayaa dadka deegaanka Sool Sanaag iyo Cayn waxaa ay isu diyaariyeen inay weeraro ku qaadaan maamulka SNMta ee xoogga ku haysata magaalada Laascaanood iyo deegaanada la xariira.

Markii uu dhacay dagaalkii ugu horeeyey Madaxdii Puntland waxaa ay bilowday inay muujiso colaad ay u qabto dadka SSC iyada oo la takooray cid kasta oo taageersanayd ururka SSC. Dhacdooyikii dhacay waxaa ka mid ahaa kuwan:

1. Waxaa la amray inaysan garoomada puntland ka soo dagi karin cid taageersan SSC iyo madaxdoodu
2. Waxaa Garoowe laga cayrshay odayaashii u dhashay SSC ee taageersanaa
3. Waxaa xilka laga qaaday baarlamaankii taageeray dagaalkii SSC la gashay SNM,
4. Waxaa la diiday in dhaawicii soo dhaawacmay la keeno Garoowe iyada oo la geeyey Gaalkacyo oo u jirta meesha dagaalku ka dhacay masaafo dhan 300 Km halka Garoowe u jirto wax ka yar.

Waxaan marna aan meesha qaban in dad dhalasho iyo deegaanba la wadaago saas loola dhaqmo iyaga oo ay cadow is hayaan!

Arimaha ugu badan ee ay is weydiiyaan shacabka SSC iyo kuwa kale ee rer Puntlanad ayaa u badnaa waxa ay ka damcsantahay. Dowladu iyo sida ay u dhaqmayso, waloo ay shaki weyn ka muujiyeen inuuba jiro xiriir labada Madaxtooyo ee Somaliland iyo Puntland ka dhexeeyay: -

- Puntland oo cududeeda la arkay maanta maxaa ka hor taagan inay soo celiso gobolada maqan iyo inay isu soo uruuriso dadkeeda ku qaxootiyoobay baadiyaha Lascanod iyo Buuhoodle inta u dhaxaysa ayna meesha ka saarto qowlaysatada diratada

waqooyi ee xoogga ku haysata gobolada SSC iyo sanaag bari

- Galgala waxaa haystay dad cadow ku ah jiritaanka Puntland doonayayna inay burburshaan Puntland, halka Laascaano iyo deegaanka laxiriirana (SSC) ay Somaliland xoog ku haysto oo cadow ku ah jiritaanka puntland maxaa midna loogu duulay midna loog aamusayaa?
- Maxaa Dadka reer SSC iyo xildhibaanadooda loo colaadiyaa ama xilka looga qaadaa xildhibaanada taageersan SSC hadii aysan marna cadowtinimada ay SNM u qabaan aysan u qabin dadka puntland?
- Aqoon yahanada, siyaasiyiinta, waxgaradka, odayaal dhaqameedka ururada haweenka Puntland iyo kuwa dhalin yaraduba waxaa ay aad u taageersanaayeen talaabadii ay Dowladda Puntland ka qaaday kooxihii galgala, hadaba maxaa diidin in cadowga ugu wayn reer Puntland ee Somaliland ee xoogga ku hasyta dad iyo dal reer Puntland ah in dowladdu tilaabo ka qaado
- Maxaa dowladda Punltland tilaabo ciidan oo cashar lama ilaawaan loogu dhigi waayay ciidamada Somaliland ee xasuuqa ka sameeyay deegaanka Kalshaale iyo kuwa lamidka ah.
- Mise Puntland waxaay ku gaabsatay inay Ogaysiin (cc) siiso hay'adaha Caalamka dhibta halkaas ka dhacaya
- Madaxwaynaha Puntland miyaysan ka mid ahayn maalintii uu dhaaranayay dadkii uu lahaa waa ilaalinayaa dadkani la xasuuqayo
- Aawaye odayaashii idaacadaha ka hadli jiray markii Galgala dagaalku ka socday ee ka xumaaday dhibaatada ay kooxda Atom ka waddo deegaankaas? Somaliland waxaa ay ku doodaa dhulka waxaa na siiya Britain, puntland waxay ku doodaa inay wada yihiin HARTI aaway Hartigii mise. Waxa uu ahaa awr ku kacsi iyo ujeedooyin lagu hagardaaminayo dadka kunool.
- Waa dhab inay jiraan qawlaysato ka dhashay Gobalada SSC balse waxaa ka sareeya go'aankii lagu

dhistay Puntland waxaana ay ahayd in loola dagaalamo sida sharcigu qabo hadii dowladnimada lasoo weeraro waxaana isku mida cadowga Puntland gudaha ama debedaba. Taasna diidaysa qiil kasta oo aan micna lahayn ee la hordhigo shacabka SSC.

### Quustii iyo Wadahal u Bilaamay SSC iyo Somaliland SNM

Mudo kadib waxaa adkaatay inuu sii socdo halgankii SSC waxaana bilaamay xiriiro u dhaxeeya Somaliland iyo SSC 28. Jun. 2011. Xukuumadda Somaliland iyo ergooyinka Beelaha dhulbahante iyo garabka hubaysan ee SSC ayaaa ka qeyb galay shirweyne nabadeed ooka dhacay deegaanka Widh-widh, ayaa si ramsi ah loogu kala saxeexday heshiis hor dhac ah oo ka kooban 8 qodob, si loogu gudbo wajiga labaad ee wada hadalada shirweynaha nabadeynta.

Heshiiskan hordhaca ah waxa saxeexay dhinaca Xukuumada Somaliland Wasiirkii Xanaanada Xoolaha Dr. Cabdi Aw Daahir Cali, ahna madaxa weftiga xukuumada u metalaya wada hadalada shir nabadeedka Widh-widh, dhinaca garabka hubaysan ee SSC waxa u saxeexay Guddoomiyaha Golaha Khusuusiga C/Risaaq Xasan Ismaaciil, waxa kale oo isna wax ka saxeexay madaxa shir nabadeedkan Keyse Cabdi Yuusuf iyo laba Xildhibaan oo ka kala socday Goleyaasha Baarlamaanka kuwaas oo kala ah Md. Maxamed Axmed Barre (Garaad) oo ka socday aqalka odayaasha iyo Md. Maxamed Faarax Qabile oo ka socday Golaha Wakiilada..

### Go'aamada Heshiiskan hordhaca ah oo ka Kooban Dhawr Qodob ayaa Udhignaa sidan:

1. Shirweynahaas nabadda lagu sheegay waxa la isla gartay Nabad iyo midnimo waarta oo dhex marta SSC, Dhulbahante iyo dawlada Somaliland
2. Shirkaas nabadda lagu sheegay waxa la isla qaatay awood qaybsi siyaasadeed iyo wada tashi buuxa, waxaana lagu soo qabyo tirayaa wareega dambe ee wada hadalada shirka.
3. Shirkaas nabada lagu sheegay waxa la isla qaatay in wixii ku saabsan arrimo ciidan in looga wada hadlo si hoose gaar ahaan Madaxweynaha Somaliland iyo Guddida gaarka ah ee shirka Widh-widh.
4. Shirka nabada lagu sheegay waxa la isla gartay in la sii daayo maxaabiista dagaal ee SSC, isla markaana maxaabiista kale ee loo haysto dambiyada gaarka ah la horkeeno Garsoor lagu wada kalsoon yahay sida ugu dhakhsaha badan.
5. Shirka waxa la isla qaatay in la joojiyo dhul qodista iyo dhul durugsiga aan la ogolayn
6. Shirku wuxuu ku baaqayaa in la xaliyo shaqaaqadii iyo dhibaatadii ka dhacday Kalshaalle.
7. Shirka nabadda lagu sheegay ee Widh-widh waxa la isla qaatay in ahmiyad weyn la siiyo deegaamada Dhulbahante oo dib u dhac badani ka muuqdo si loo gaadhsiiyo gobolada kale ee dalka, gaar ahaan dhinacyada waxbarashada, caafimaadka, biyaha iyo wixii la mid ah.
8. Shirka Nabada lagu sheegay waxa la isla qaatay in si kama dambays ah loo qaato gogol nabadeed oo ay ka soo qeyb galaan SSC iyo dhulbahante inta shirka ka maqani."

Hadaba Dowladdii Madaxweyne Faroole see u aragtay Hishiiska Somaliland iyo SSC, run ahaantii dareenka kasoo baxayey waxaa uu ahaa mid aanay ka muuqan dhawac labaad oo gaaray Puntland madama Awal Somaliland ay deegaan Puntlanda ay Xoog ku haysatay inay ku darsato shacabkii Puntland ee deeganadaas SSC

2010 Kalfadhigii Golaha Baarlamaanka Puntland oo ay ka soo qeyb galeen 52-Mudane isla markaana uu goob joog ka ahaa Madaxweyne C/raxmaan Xaaji Max'ed Faroole iyo xubno ka tirsan Dowladda Puntland, waxaana fadhigaas uu yeeshay Baarlamaanku ay xilkii ka qaadeen saddex mudane oo xil ka qaadistooda loo cuskaday qodobo dhowr ah.
Xildhibaanada Baarlamaanka ayaa cod u qaaday in xilka laga qaado saddexda mudane oo magacyadoodu kala yihiin: Ibraahim Max'ud Guure, Axmed Jaamac iyo Cumar Jaamac Ismaaciil, hase yeeshee 26 mudane ayaa ogolaaday xil ka qaadista, halka 22 xildhibaan ay diideen xil ka qaadista, 4 mudane ayaa iyaguna ka aamusay mooshinkaasi la soo hor dhigay.

Qodobada loo cuskaday xil ka qaadista saddexda Xildhibaan ayaa kala ahaa: dhowrid la'aanta awaamiirta Baarlamaanka, inay ka qeyb galeen shirar ay lahaayeen ururka SSC oo lagu eedeeyay inuu kala qeybinayo Puntland, isla markaana doonayo inuu maamul uga dhawaaqo gobolada Sool, Sanaag iyo Ceyn.

Kulankaa Baarlamaanka Puntland yeeshay saddexda mudane ee xilka laga qaaday, waxaa ka hadlay mid ka mid ah mudanayaasha xilka laga xayuubiyay, waxa uuna sheegay in tallaabadaasi ay ka dambeeyeen shaqsiyaad ka tirsan Baarlamaanka oo uusan carabaabin magacyadooda, kuwaasi oo uu ku eedeeyay inay u adeegayaan dano ka baxsan Xoraynta iyo wada jirka bulshada Puntland.
26.10.2018 waxaa dagaalo qaraar uu dhex maray laba jifo oo ka tirsan Beesha Dhulbahante Bah`hararsame iyo Qayaad iyadoo dagaalkaas uu sabab khasaaro aad u lixaad leh dhimasho iyo dhaawacba.

Dowlada Federalka ayaa waxaa ay usoo dirtay diyaarad qaada dhaawacaas oo geeysa Caasimada si loogu dabiibo waxaase diyaradaas hareeyay khilaafkii siyaasadeed ee

kadhexeeyay dowlada dhexe iyo Gaas. Diyaarada waxaa loo diiday inay timaado Puntland wallow markii danbe la isku raacay inay timaado balse waxaa diyaaradaas la socday Xildhibaano iyo wasiiro ka tirsan DFS kana soo jeeda beesha Sool kuwaas oo loo diiday inay diyaarada kasoo degaan oo ay dhulka cagaha soo dhigaan waxaa laga dejiyay agab daawa ah kadibna.
Diyaaradii waxaa ay u dhooftay Gaalkaco oo ay yaaleen dhaawaca badankiisa markii ay ka degtay Gaalkacyo lana saaray dhawicii waxaa gebi ahaanba ka buuxsantay diyaaradii xildhibaanadii iyo wasiirkii lasocday kadib waxaaa arinkii galay odayaasha Gaalkacyo inay Gaas ka codsadaan in caawa ay seexdaan Magaalada Gaalkacyo sidaas bayna ku heleen degenaasho maalin ah.

Halkaas waxaa kaaga soo Baxaya in aan dadka
Reer Sool iyaguna isu Turin Cidkalena aynan u turayn. Tan iyo wixii ka dambeeyey markii ay ciidamada Somaliland qabsadeen deegaanka Tukaraq oo fariisin u ahayd Xarumaha Puntland ee gobalka Sool, waxaa sii kordhayey kala Fogaansho haraysay Isimada Beesha Dhulbahate waxaa kaloo Iyana hadalo iyo xifaaltan ka dhaxeeya Siyaasiinta ka soo jeeda gobalada Sool, Sanaag & Cayn ee xilalka kahaya maamulada Puntland iyo Somaliland, waxaana qolo kasta ay muujinaysay damaceeda ku aadan sidii meelmar uga dhigi lahayd in Sool si buuxda looga mid dhigo labada maamul midkood. Garabka taageersan Somaliland oo ay wadajir u hogaaminayaan Prof, Cali Khaliif Galeyr iyo Baashe Maxamed Faarax oo ah gudoomiyaha baarlamaanka ee maamulka Somaliland ayaa xoogooda dhan iskugu geeyey sidii ay ugu qasbi lahaayeen Madaxweynaha maamulkaas in uusan marnaba ogolaan in uu ciidamadiisa si nabadgalyo ah uga saaro deegaanka Tukaraq ee ay gaareen horaantii sannadkan.

Baashe oo arrintan sharciyad uga dhigay kalfadhiga aan caadi aheyn oo ay yeesheen golaha wakiilada ee maamulkas, ayaa kusii daray in Cali Khaliif loo diro gobalka Sool, si uu taageero uga keeno beeshiisa, isla markaasna ciidamadoodu uga mid noqdaan kuwa Somaliland, lana dardargaliyo heshiiskii lagu saxiixay Caynaba.
Cali ayaa booqasho ku tagay Buuhoodle iyo Laascaanood, wuxuuna labada safarba daaranaa fulinta qorshaha Madaxtooyada Somaliland ee ah in saameyn hoose lagu yeesho jifooyinka beesha Dhulbahante, waxaana Cali Khaliif guul wanaagsan ka gaaray shir ka dhacay deegaanka Widh-widh oo uu ka qeybgalay garaadka guud ee Beesha Dhulbahante Garaad Jaamac Garaad Cali oo lagu taageeray wada hadalka uu Cali kula jiro maamulka Somaliland.

Dharbaaxo siyaasadeed oo xoog badan ayay tani ku ahayd siyaasiinta gobaladaas ka soo jeeda ee kujira Puntland, Waxaa kaloo ahayd dhiiri gelinta ciidanka iyo hajuumka siyaasadeed in ay Tukaraq ay soo gaaran wasiiradda, xubnaha baarla-maanka iyo Madaxweyne kuxigeenka Somaliland iyagoo iskaga soo qaaday sawiro una qudbeeyay ciidamadooda  kuna muujiyeen dhoolatus ciidan, taas bedelkeedana aysan wasiiradda, xildhibaanada iyo madax kale ee gobalkaas ka soo jeeda dadka deegaanka ugu tagin si la og yahay oo dawladeed inkastoo muda yar kadib uu Madaxweyna ku xigeenka Puntland uu safar ku kala bixiyey Gobalka Cayn isagoo si fiican loogu soo dhaweeyey halakaas isagoo kusoo Guulaystay inuu kasoo kaxeeyo ciidan ka qayb noqda aaga Tukaraq sidaas oo ay tahay.

Inta badan wasiiradda iyo xildhibaanada beeshan ee kasoo jeeda gobalka Sool ayaa lagu eedaynayaa in ay si buuxda ilaa hadda uga qeyb noqon qorshaha dib u xoreynta gobalkaas, iyagoo aan haba yaraatee aan wax abaabula oo

muuqda aynan ku lahay gudaha deegaanadii ay u dhasheen.
Waxaa xusid mudan qabsashadii Tukraq inay ahay fursad soo martay Puntland taasoo Dowlada Puntland ay ku heshay abaabul ciidan kii ugu sareeyay kadib markii dhamaan shacabka Puntland ay soo dhoobeen ciidan iyo calafba aaga tukaraq waxaa dhacay laba dagaal oo khasaare badan geystay kasoo naf iyo gaadiidba lahaa. (Nin odaya oo kayimid aaga Hore oo la weydiiyay Xaalada ayaa yiri (*XOOLANA NAGUMA HARIN XABADINA MADHICIN).*

Falanqeeyaasha siyaasadda ayaa rumeysan in siyaasiinta ka soo jeeda gobalkaas ee kusugan Puntland aysan waxba horumar ah sameynin 7-dii bilood ee ay Somaliland haysatay Tukaraq, waxaana loo arkay in ay tahay arrin kale oo looga dheereeyey xataa in ay gudaha deegaanadooda saameyn wanaagsan ku yeeshaan, taas oo hubanti ka dhigaysa in siyaasadda lagu kala adkaaday.

Wasiiradda, madaxda sare iyo xildhibaanada beesha Gobalka Sool ee kusugan Puntland ayaa ku mashquulsan loolan siyaasaded iyo raadinta kuraastooda oo muddo xileedku hadda uga dhiman yahay wax ka yar bilo, iyagoo markale doonaya in ay matalaan shacabka gobalka Sool oo gebigiisaba ay maanta gacanta ku heyso Somaliland. Hardanka doorasho ee ay kumashquulsan yihiin xubnahan ka sokow, waxaan ilaa hadda si cad loo fahamsaneyn siyaasadda ka dhalan karta raadinta kuraastooda, xili aysan heysan deegaanadii ay matalaad rasmi ah uga ahaan lahaayeen hay'adda dawliga ah.

Waxaana la oran karaa dhanka kale maqnaashaha deegaanku waxaa uu u yahay ku sii baaqi ahaanshaha metelaada shacabka iyo dhulka maqan madaama aynan bulshadaas ku mashquul sanaanayn dawladd aan la joogin inay maskabkeeda isu sharaxaan ama u suxul duubaan.

**Madaxweyne Kuxigeenadii soo maray Puntland lagasoo bilaabo Dowladii AUN Cade Muuse.**

Waxaa lagu tilmaama halka ay u go'een dadka reer Sool waxaana ay ahaayeen dhamaantood asal madoorshayaal aan haba yaraatee aan ka danqan waxaa dadkooda iyo deegaankooda ka jira waxaana cadayn kuugu filan hadii ay hagardaamo ka arkeen madaxa ka sareeya maxay isu casili waayeen oo ay u noqdeen kuwa ka fekera noloshooda oo qudha iyadoo u dheertahay bahdilmo iyo inaan wax la weydiin waxayna door bideen iska noolow  waxa keliya oo ay wax qabadkooduna ahaa inay cambaareeyaan Somaliland

**Dhismihii Khaaatumo State**

Bulshadda SSC waxaa ay ahaayen kuwa 100% ay ka go'nayd inay maruun iska dul qaadan ciidamadan galbeed uga soo duulay ee qorshahoodu yahay inay xoog ku haystaan dhulkooda waxaan ka xusi karaa hadaladii qiirada lahaa ee u badnaa kicinta, dhiiri gelinta iyo abaabluka:
*SSC: -Gobanimo Nafta Loo Huro Mise Gunimo Joogto Ah.*
*-Inta Laasku Maqan yahay-SSC Gunimo tahay, Guuleed Hurda Jirro,*
*Dhaantadda Inoo Tumma.*
*-SSC:- Kashmiirnimo Mise Darwiish.nimo.*
*SSC:- Ficil Dab Ah Mise Durbaano Maaweelo.*
*SSC:- Difaacida dhulkeda, Daryelka Bulshadeeda Iyo Deris Wanaag.*
*SSC:- Hadaan Loo Hiiliin Miyaa Loo Ooyiin*
*SSC:- Hogaamiyayaal aan Han lahayn mise Halgamayaal aan hoos dhuganaym*

Iyo halku dhigyo kaloo badan oo ku qotoma iska tuura heeryada waad kari karaysaane.

**Shirarkii Taleex iyo Dhismihii Khaatumo State.**
Sida lawada ogsoonyahay magaaladda Taleex, waxaa lagu qabtay shirkii ugu horeeyey ee lagu dhisay maamul goboleedka Khaatumo State shirkaas oo ay kasoo qeybgaleen qeybaha kala duwan ee bulshada ee gobolada Sool iyo Cayn kuwaasoo ay hoggaaminayeen isimadooda, waxayna ku dhawaaqeen in ay ka madax bannaanyihiin dowladda Puntland.
Isla Taleex waxaa lagu qabtay shirkii labaad ee Khatumo State dhammaantood shirkaasi waxay ku qabsoomeen si nabad gelyo ah, waxaa kaloo xusid mudan in dhismaha Khaatumo State uu isbadel Juquraafi Siyaasadeed ee ku sameeyey Puntland maxaa yeelay sideedii gobol ee ku xusnaa dastuurka Puntland, waxaa ka baxay laba gobol oo iskood u istaagay.

Waxaa is weydiin mudan haddii labadii shirweyne ee hore ay si nabadgelyo ah ku qabsoomeen maxaa keenay maantay in lagu duulo Taleex iyadoo la diidanyahay inuu qabsoomo shirweynihii Saddexaad ee Khatumo State iyadoo ay nagu soo food leeyihiin doorashadii loo balansanaa 08.01.2014?

Maamulka Puntland, ayaa ka hadlay dagaal dhawr maalmood ka dhacay degmada Taleex ee gobolka Sool, halkaas oo ay ciidammada Puntland ka qabsadeen Maamulka Khaatumo, war-saxaafadeedka ka soo baxay Madaxtooyada Puntland ee Garoowe oo ka hadlayay dagaalkaas, ayaa Puntland kaga hadashay sida wax u dheceen, waxaanu qoraalka War-Saxaafadeedkaasi u dhignaa sidan:- “Ciidamada ilaallada Madaxweyne-ku-xigeenka Dowladda Puntland Gen. Cabdisamad Cali Shire oo jooga Degmada Taleex ee Gobolka Sool ayaa iska difaacay weerar maalintii November 28 ay ku soo qaadeen maleeshiyo uu hogaamiyo siyaasi-isku-sheega Mr.

Maxamad Yusuf Jamac (Indhosheel) oo ka yimid qurbajoogta Europe.

Waxaa isku dhacaasi ku dhintay hal askari oo ka tirsan Ciidamada Puntland iyo dhaawac culus oo soo gaaray askari kale, iyadoo maleeshiyadii Mr. Indhosheel ay ku soo weerareen ciidamada ilaallada Madaxweyne-ku-xigeenka Puntland hub culus sida lidka taangiga.
Waxaa isku dhacaasi ku dhintay todobo (7) ka mid ah maleeshiyadii Mr. Indhosheel oo soo weerartay ciidamada Puntland.

Maalintii November 27, Mr. Indhosheel iyo maleeshiyada uu hogaamiyo waxay yimaadeen wadada laamiga ah oo isku xirta Garowe iyo Hargaysa, tuulada lagu magacaabo God Qaboobe oo 11km dhanka bari ka xigta magaalada Tukaraq oo ah xarunta KMG ah ee Gobolka Sool, isla markaasna uu ku yaalo Kastamka iyo difaaca hore ee Dowladda Puntland.

Ciidamada Puntland waxay laamiga ka baacsadeen Mr. Indhosheel iyo maleeshiyadisii si aan hakad u gelin isu socodka dadka, gadiidka iyo ganacsiga u dhaxeeya gobollada ku yaala Puntland iyo Somaliland. Mr. Indhosheel wuxuu damacsanaa inuu Tukaraq ka go'doomiyo gobollada Puntland, uuna carqaladeeyo isu socodka, deegaankaasina ka abuuro jawi amnidarro ah lakiin Indhosheel waxaa u baxsaday dhanka xuduudda Somalia iyo Ethiopia.

Umad Marka loogu yimaado naftiisa, gurigiisa, qoyskiisa, hantidiisa iyo xurmada karaamadiisa, marka dhinac walba albaabadu ka soo xirmaan xal raadiinta iyo samaan helida,xaaladaas iyo mid ka daran ayaa hadda ama intii muddo ahba ka taagneyd degaamadda SSC Khaatumo xaaladuna gaartey xad-gudub joogto ah iyo gunimo ku hoos jirid qofkii damiir,dareen nool iyo dadnimo lehi ogolaan

kareeyn, maanta nabad, iyadoo Maalin walba la jiido dumarka iyo inta xushmada mudan iyadoo la xir xiro kadina la iibsado.

Hagrdaamada Heshay Shacabka Sool mala oran karaa waxaa looga jarayaa u adeegidii Dowladii Kacaanka ee AUN Maxamed Siyaad Bare iyo Halgankii Daraawiisht Sayid M C Xasan.
Dadka kasoo jeeda Deegaankaas waxaa ay dhexda uga jiraan beelihii kacdoonka ciidan la galay Dowladii Kacaanka oo isla markaasna taariikhaysta inay halgan la galeen Dowladaas iyagoo qaarkood u yaqaanaan ragii Dagaalka galay (mujaahid).

Xeel dheerayaal ka faalooda siyaasada waxaa ay aminsan yihiin dhibaatada haysata dadka reer Sool inay saldhig u tahay Dowladii Kacaankii ee ay ka tirsanaayeen iyo weliba taariikhdoodii hore ee halgankii Daraawiishti Sayid Maxamed Cabdulle Xasan Doorkii ay ku lahaayeen, marka ma la oran karaa ciqaabta haysa Gobalka Soo waataas.

Xeeldheerayaashu  waxaa ay soo qaateen dhismayaashi labada maamul inay dadka deegaankaas ay si niyada wax ula dhisteen. Hadaan ku horeyno dhismihii Somaliland waxaa ay reer Sool si niyada wax aula dhisteen SNM iyagoo kula midoobay Dowlad loogu yeeray Somaliland iyagoo u arkayay inay dadkaa yihiin dad deegaan iyo dhaqanba wadaaga balse kama aynan faa'iidin ilaa ay dhibaato ka mutaan mooyee waxaana marag u ah sida ay Burco u hor martay Laas-caanonana ay u densantahay dhanka Puntland waxaa ay iyadan si niyada oo weliba kala'har aan lahayn oo ay ka muuqato wada dhalasho ula dhisteen SSDF.
Maamulka Puntland balse waxaa iyana ay ka muteen mid lamida amaba kasii weyn oo hagardaamo iyo hiil xumo hosaasin iyo sheegasho aan wax qabad lahayn waxaa sii weheliya maaga iyo afxumada ah "ordoo dhinac isu raaca

iyo marna soo socda marna sii socda" waxaana marag iyana ah sida ay Garoowe u hormartay Laas-caanona ay u dib dhacday. Reer Sool ma ay helin gacan sadexaad oo ay la kaashadaan dhibaatada ka haysata labadooda garab, marar badan oo ay isku dayeen Dowlada Faderaalka ah waxaa culays kaga imaanayay maamulada sheegta ee Puntland iyo Somaliland waxaana xog lagu kalsoon yahay sheegaysaa in USC, SSDF iyo SNM ay ka midaysan yihiin cadaadinta iyo nacaybka Dadkii kacaanka.

Waxaa ay ahayd malin isbedel siyaasadeed uu ka dhacay Soomaliya 08.02.2017, waxaana ku guuleystay Mohamed Cabdulaahi Farmaajo wuxuuna rai'sul wasaare u Magacaabay Kheyre labaduba ma ahayn jamhadihii lasoo dagaalamay kacaankii balse waxaaba la oran karaa waxaa ay yihii Ilmihii kacaanka waxaa ay Shacabka Sool u ahayd farxad balse waxaa ay kala kulmeen hungo iyo weliba niyad jab weyn.

Waxaa marka xaqiiqdu tahay in ay daraawishtu ay ku jiraan ciqaab uga timid Taariikho is kaashaday. Balse waxaa xaqiiqa hadii ay mideeyaan maskaxdooda iyo maalkooda dhan dhaqan iyo dhan siyaasadeedba waxaa ay gaari karaan guul wax ku oola oo gobaladaasin ay uga baxaan dhibka hareeyay.

Waloow ay hada marayaan in ay dhexdooda Colaado aad u adag laga dhex abuuray 22.10.2018 waxaa Bariga Laascaano ka qarxay dagaal lagu hoobtay oo u dhaxeeya laba beelood oo kasoo jeeda Besha Dhulbahnte mar Faysal Cali Waraabe ka hadlayna waxaa uu cadeeyay Dowlada Somaliland inay iyadu masuul katahay. Mala oran karaa waxa arimahani salka ku hayaan ee deegaan kaas dadka la dhex dhigo colaad ay iyagu kuwada noolaan waayaan si qaybina u qaxdo kuwana ay ku hoos noolaada SNM deegaanka isla markaana SNM ay kusoo fidaan. Dowlada Puntland dhankeeda ma dhaafsiisana Baaq inay soo saarto

mana jirro wax ficil ah.Waxaase wax weyn ka qaatay wefti uu hogaaminayey Islaan Ciise oo ka baxay Garoowe isla markaana gaaray Aagi waxaa kaloo yimid isimo kayimid DDSI kadibna waxaa la dhigay Jijiga gogol nabadeed oo labadii beelood ah waxaana laga gaaray guul.
Sidoo kale Boqor Burhaan ayaa gaaray goobta kadibna kasii aaday Taleex halkaasoo ay taalay colaad bilaamatay xiligii Madaxweyne Faroole kadib markii madaxweyne ku xigeenkiisu uu ka sameeyay arin awood sheegasha ah iyo u kala hiilin laba beelood oo walaala Boqorka iya wafrigii lasocday oo uu ka mid ahaa Ugaas Xasan waxaa ay ka soo gaareen iyaguna Nabadayn. Waxa ay ka dhiman la'dahay puntland waa isimada waloow iyaga laftigoodu aynan is rabin.

Gooni isu maamulka iyo Danaysiga gaarka ahi wuxuu dhaxalsiiyay umada gooni isu taag iyo xusul duub ka dhaxeeya qabaa'ilada dhexdooda!

Kadib dhismihii Puntland waxa soo baxayay dareen qabaa'ilka dhexdiisa guuxay kasoo salka ku hayay kala jiidashada awoodaha. Deegaanka iyo dhaqankaba taasoo kadhalatay in qabaa'ilka qaar ay fariisiyeen xaaladooda darajo ama deegaan. Hadaba aan hoos ugu dhaadhaco xusul duubka awood muujin iyo yeelasho goob deegaan iyo dhaqan, iwm jifo walba waxay laamiga ka dhisatay tuulo u gaara ama ay ku haminaysaa; si ay ugu noqoto xarun iyaga loo yaqaan.

Tuulooyinkaas la weegaaray maaha deegaan samaysi iyo magaalo dhisasho midna ee waa ficil lagu muujinayo jiritaanka gaar ahaaneed ee jifadaas. Si kale haddii loo dhoho waa ku dhawaaqid dawlad gaara iyo gooni isu-taag ay jifadu isaga soocayso dadka kale ee dhalashada ama deegaanka la wadaaga waxaaa dhinac socda in loo helo warqad sheegaysa inay degmo tahay.

Si arrintaa loo xaqiijiyana jifadu waxay tuuladeeda dhigataa kaantarool ama isbaaro, dadka kalena waxay u diiddaa inay la dagaan, ilaa la wariyey in meelaha qaarkood aan loo oggolayn inuu ninka inan layaalka ah guri ka dhisto; si aanu marna gooni isu-taagga jifada u carqaladayn! Si kastaba ha ahaatee waxaynu ku jirnaa samankii gooni isu-taagga iyo ictiraaf raadinta oo heer jifo iyo heer tuulo maraysa nadaamadii soo marayna waxaa ay kala kulmaan tuulooyinkaa sacab iyo durbaan tumid marka ay marayaan waxaana uu noqdaa codsiga ugu weyn degmo hanala siiyo.

**Dagaalada ka dhashay ilaalinta xuduudaha Qabaa'ilka**

Waxaa arrintaa aad u sii caddaynaya colaadaha waaweyn ee lagu hoobtay ee ka dhacay ama ka socda deegaanada qabaa'ilku iska soo galaan, sida: Mareexaan Celi iyo reer Biciidyahan, Cumar Maxamuud iyo Bah'hararsame, CaliSaleebaan iyo Cali Jibraahiil ,Cabdirahiin Ibaraahin Iyo Dubeys ,Dishiishe iyo Ismaaciil Saleebaan Cismaan Maxamuud iyo Siwaaqroon, Kaskiqabe iyo Cismaan Maxamuud, Cali Saleebaan iyo Ugaarsaleemaan, Qayaad iyo Bah'hararsame, Habargidir iyo Leelkase, Habargidir iyo Cumar maxamuud oo intaba colaadahoodu salka ku hayaan dhul la isku haysto ha ahaado Barkedo ama dhul daaqsina ama dhul beereed amaba dhul deegaan. Meelahaas qabaa'ilku isku hayaan ma jirto Dowlada Puntlan xal rasmiya oo ay ka samayso ilaa dhimasho lagu hoobtay ay dhacdo mooyee, mana jirto xal rasmiyoo laga gaaray waana joogto soo noq noqodka colaadahan.

**Haysiga iyo dagista shisheeyahu dhib ma leh**

Waxaa yaab leh sida aan looga dhiidhiyayn haysiga iyo ka arriminta shisheeye ee deegaanka beesha iyo sida aan kala harka lahayn ee looga hortagayo barkad ama beer qof ama qoys walaalohood ah ka samaysteen deegaankay

sheeganayaan! Mar mar bay kugu soo dhacaysaa malaha dadkeena meeluu joogaba kumbuyuutarkaa loo eegay.

**Madax banaanida Jifooyinka dhexdooda iyo Goni isu tag**

Waxaa jira arrimo kale oo beryahaan jifooyinku ku muujiyaan madax bannaanidooda, waxaana ka mida samaysiga oday dhaqameed iyo qabqable u gaara jifada. Haddii loo baahdana waa in la unko urur siyaasadeed oo kolley magiciisu ka bilowdo. Waxay kaloo sameeyaan inay tolka ka goostaan magtii ay wada bixin jireen oo ay iyagu si gaara isaga baxshaan, si gaarana u qaataan.

Taas oo ka dhigan waxaan nahay: ummad gaara oo leh jiritaan, deegaan, dhaqan iyo hoggaan u gaara, ha ahaado hoggaan dhaqameed ama hoggaan siyaasadeede, mana jirto cid kale oo arrimahayaga wax laga weydiin karo ama magacayaga ku hadli karta. Sidoo kale waxaan nahay ummad isku filan oo wixii lagu yeesho si gaara isaga bixin karta, wixii ka maqana doonan karta iyadoon cidna la kaashan. Waxay arimahaasi sababeen isku qabsiga gudoonka beeshii midaysnayd magacaabista xubinta baarlamanka iyo xubna boosasaska sare iyo kuwa hooseba ee dowlada halkaas oo dowladu ay guruub kastaba gooni u qaabisho iyadoo garabka saarta dhinacay ka aragto masaaliixdeeda.

Gooni u goosiga iyo ictiraaf raadintu ma jifooyinkay ku gaar tahay? Mayee waxaa jira muuqaallo kale oo madax bannaaniyeed oo qaybaha bulshada qaarkood ku dhawaaqaan ama si ficila ugu kacaan, waxaana ka mida: a) gooni isu-taagga diimeed ee ururada iyo dariiqooyinka, b) gooni isu-taagga dumarka, gaar ahaan madaxbannaanida ay afadu uga xoroobayso saygeeda, c) gooni isu-taagga ubadku uga xoroobayaan waalidkood.

Waxaa la dhihi karaa ictiraaf iyo madaxbannaani raadintu waxay gashay nolosheena oo dhan. Haddii la dhiso shirkad

ganacsi ama mid waxbarasho ama urur jaaliyadeed (community) muddo yar ka dib waxay u sii kala jabayaan intii la doono oo ururo iyo shirkado ah kama na marna laftigeedu inay jiraan bulshooyin ku hawlan inay ku biiraan bulshooyin kale kadibna waxaa ay dantu ku qasabtaa inay ka raadsadaan ictiraaf dhalasho iyagoo loo malmalooqo abtirsiiyo aan la aqoon meesha lagasoo min guuriyay.

Waloow beelaha badan kooda uu ku dhacay bur burkaas waxaase jira qayba ka bad baaday oo iyagu ka ilaaliya dhaqankooda in uu ku yimaado khilaaf awoodeed si aynan u wiiqmin awooda ay hada haystaan waxaana ka mida Sadexda Maxamuud Saleebaan dhanka kale waxaa amaan mudan Beesha Mooracase oo iyagu ka bad baaday gebi ahaanba walow mar laysku deyey.

**Hooseey ka halaawday!**

Intii lagu mashquulsanaa ilaalinta seeraha madaxtooyada ayaa loo sii kala jarjarmay, qayb kasta jifo jifo iyo tuulo tuulo loo sii kala qoqobay. Waxaa la yiri: nin macallin ah baa arkay bisin si qaldan loogu qoray mundul dushiis, markaas buu yiri: i qaada aan laaxinka soo sexee, ka dibna raggii qaadayey midkood baa yiri: usbillaahi (bisin qaldan buu ku dhawaaqay). Kolkaas buu yiri macallinkii: war i dhiga! i dhiga!" Maxaa jira markii la yirina, wuxuu ku jawaabay: Maxaan kor ka hagaajiyaa hoosbeyba ka Haloowdee.

**Waa maxay sababaha jifooyinku u goosanayaan?**
Haddaynu ogaanay waxyaabah jifadu ku muujiso madax bannaanideeda, sida: tuulo dhisashada, suldaan samaysiga, qabqable magacaabashada, urur samaysiga, mag goosiga iyo awliyo soocashada waxaynu is weydiinaynaa sababaha jifooyinka ku kallifay inay goostaan? Waxaa ka mida sababahaas:

- dhab ahaan waxaa lagu soo uruurin karaa hal sabab oo ah jahli iyo wacyidarro. Haddii aynu soo qaadno sababaha jifada kacdoonka galiyase waxaa ka mida:
- inay jifada is qabtaan suldaanka beesha ama qabqableheeda. Isagoo qaata dhamaan awooda Isla Markaana siiya xigtadiisa.
- inay jifada is qabtaan jifada suldaanku ka dhashay ama tan qabqabluhu ku abtirsado.

- waxaa kaloo arrimahaan ka qaybqaata abaabulka uu sameeyo nin oday dhaqameed ama qabqable noqon kara oo meeshii nin kale kaga gudbanyahay. Taa waxaa caddaynaya sida xawliga leh ee jifooyinku ay u samaysmayaan oday dhaqameedyada iyo qabqablayaasha, iyo deegaana hoosaadka jifo walba unkayso.
- Waxaa kaloo kala furfurka beelaha qayb ka ah siyaasadaha qalloocan ee dawladihii isbedelay tusaale ahaan: waxaa la qadinayaa qabiil waxaana cad libaax la siinayaa qabiil. Waxaa kaloo dhacday Isimadii qabaa'ilka qaarkood waxba laga soo qaadi waayey halka qaar lasiiyay awood taas waxay keentay kala fogaansho iyo in nacayb laysu qaaday taasoo cida kasta u suxul duubtay inay is xorayso oo hoggaamiye cadkooda u soo dhacsha si gaara u magacaabato!

**Isbedelka Golaha Xukuumadda Puntland ee Ugu danbeeyay Madaxweyne Faroole.** March 2, 2010

Madaxweynihii Dawladda Puntland ayaa soo saarey wareegto uu isbedel ku sameeyay qaar kamid ah wasiiradiisi halka qaar kale xilkii laga qaadey, iskubedelka wasiirada ayaa ahayd mid muddooyinkii la so dhaafey la hadal hayey, Madaxweynaha Puntland ayaa sabab uga dhigey isbedelka la sameeyay markii uu garwaaqsadey baahida loo qabo isbedel lagu sameeyo xukuumadda dawladda Puntland.

Wasaaradaha isbedelku saamaynta weyn ku yeeshay waxaa kamid ah: Amniga, Qorsheynta iyo xiriirka caalamiga ah, Arimaha gudaha, Dekadaha, Ganacsiga iyo wershadaha, Caafimaadka iyo qaar kale oo wasiir ku xigeenadii la isku badalay.

Sida ku cad wareegtada Madaxweynaha Puntland waxaa booskoodi baneeyay lix wasiir iyo laba wasiir ku xigeen isku dar waa sideed wasiir, kuwaas oo dhamaantood boosaskoodi la buuxshey waxaana wareegtada lagu sheegay in ay xilkii baneeyeen:

C/laahi Siciid Samatar
C/risaaq Yaasiin Cabdulle
C/laahi Cali Xirsi
Faarax Aadan Dhalac
C/risaaq Xuseen Gacayte
Bashiir Cali Biixi
C/kariim Saalax Cali
Xaliimo Maxamuud Maxamed

**Xubnhaha cusub ee ku soo biirey golaha wasiirada ayaa waxaa kamid ah:**

Dr. Cali Cabdullaahi Warsame
Siciid Maxamed Raage
Xassan Faarax Maxamuud
Cabdi Khaliif Xaaji
Dr.Dauud Maxamed Cumar
Prof.C/qaadir Cabdi Xaashi
C/qaadir Muuse Yuusuf
Maxamed C/laahi Saalax Deer
Maxamuud Maxamed Sheikh Ibraahim
C/risaaq Maxamed Ismaacil
C/qani Salaad Yuusuf

Sida ka muuqata tirada wasiirada xilka baneeyay iyo kuwa ka mid noqdey golaha wasiirada waxaa badan kuwa cusub ee kamid noqdey, waxaana wareegtada cusub ay muujineysaa in hal wasiiru dawle iyo laba wasiir ku xigeen oo cusub ay ku sii biireen golaha wasiirada Puntland kuwaas oo loo kala magacaabey wasaaradda ganacsiga iyo wershadaha oo markii hore aan lahayn wasiir ku xigeen, sidoo kale waxaa wasiir ku xigeen labaad loo magacaabey wasaaradda beeraha iyo waraabka, wasaaraddan ayaa ahayd wasaarad cusub ee Dr. Cabdiraxmaan Faroole ka soo gooyey wasaaarad kale, markii hore magaca la siiyey waxa ay ahayd wasaaradda hormarinta biyaha, inkasta oo wareegtada danbe lagu sheegay wasaaradda Beeraha iyo waraabka, waxa ay hadda leedahay laba wasiir ku xigeen.

Wasiirada la magacaabey qaar kamid ah waxa ay ahaayeen kuwo la soo shaqeeyay dawladdii hore ee Puntland iyo wasiiro kuxigeeno u dalacay wasiir, waxaana ka mid ah wasiirka Amniga Gen.Yusuf Axmed Kheyr oo dawladii hore ee uu madaxweynaha ka ahaa Gen.Cadde Muuse, taliyaha ciidanka Booliska Puntland, sidoo kale waxa uu dawladda Dr. Faroole ka ahaa wasiir kuxigeenka arimaha gudaha, waxaana hadda loo magacaabey Wasiirka Amniga, amniga Puntland ayaa muddooyinkii la soo dhaafey ku jirey khlakhal kadib markii dilal iyo qaraxyo isdaba joog ah ay ka dhaceen Puntland, dadka amnidarida ka wada Puntland ayaa lagu tilmaamey in ay yihiin kooxaha mayalka adag ee ka dirira koonfurta Soomaaliya kuwaas oo wacad ku maray inaysan Puntland degin, hase yeeshee inta badan falalkaas waxaa loo qabtey dad u dhashey deeganada Puntland, lama oga waxa uu ka badali karo jeneraalku amniga Puntland.

Wasiirka cusub ee dekadaha iyo gaadiidka badda Siciid Maxamed Raage, waxa uu ahaan jirey ganacsade, kadib waxa uu kamid noqdey xildhibaanadii Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, inkasta oo markii danbe uu kursigiisi siiyey Prof. Juurile, sanadkii 2006dii ayuu noqdey wasiirka kaluumeysiga dekadaha iyo kheyraadka

badda, waxaana uu xilkaas iska casiley bilowgii sanadkii 2008 kadib markii ay is qabteen Cadde Muuse, waxa uu sanadkii 2009 isu soo sharaxay xilka madaxweynaha Puntland, markii laga guuleystey waxa uu dib ugu laabtey dalka Ingriiska halkaas oo uu ku noolaa muddooyinkii danbe.

Wasaaradda loo dhiibey Mr. Raage maaha mid ku cusub waa meel horay uga soo shaqeeyay, waxbadana ka qabtey, waxyaabaha uu ka qabtey waxaa laga xusi karaa samaynta sharciga kaluumeysiga ee Puntland ay caalamka kula dhaqmeyso, taas oo ay kala shaqeeyeen khuburo caalami ah.

Dr. Cali Cabdullaahi Warsame, ayaa kamid ah wasiirada cusub ee wareegtaddii ka soo baxdey Madaxweyne Dr. Faroole lagu magacaabey. Dr. Cali Cabdullaahi waa aqoonyahan dhalinyar muddo dheer ayuu ku noolaa dalka Norway, waxa uu u wareegay kadib dalka Malaysia halkaas oo uu ku dhamaystey waxbarashadiisi, Dr. Cali Cabdullaahi waxa uu kamid ahaa raxan aqoonyahan ahayd oo waday musharixii hore ee madaxweynaha Puntland Nuradin Adam Diiriye, xukuumadda cusub ee Dr. Faroole ayuu ka noqdey Agaasimaha Tacliinta sare ee Puntland, isaga oo lafdhabar u ahaa hormarka wasaaradda waxbarashada Puntland ay ku talabaasatay sanadkii la soo dhaafey.

Dadka aan lahayn aqoonta dawliga ah ama fikirkoodu hooseeyo waxa ay u haytsaan in wasaaradda caafimaadka loo dhiibo qof dhakhtar ah taas oo ah mid aan aqoonta dawliga sal ku lahayn, waana midda kaliftey in wasaaradda caafimaadku dhakhtar u dabranaato, dhakhtarkaas oo bulshadu u baahneyd in uu ku daaweeye isbitaalada. waxaa horyaala Cali Cabdullaahi in uu wax ka qabto arimaha caafimaadka Puntland isla markaana gaarsiiyo in bulshado hesho adeeg caafimaad oo wanaagsan, xisaabtan dhab ah lala galo ganacsatada

dawooyinka kuwaas oo waddanka kusoo waarida daawooyin dhacay iyo kuwo bulshada aan wax tar u lahayn, iyo sidii xad loogu samayn lahaa goobaha lagu gado daawooyinka kuwaas oo ka badan dukaamada lagu iibiyo cunooyinka daruuriga ah, sidoo kale sidii loo samayn lahaa barnaamij caafimaad oo lagula socdo cunnooyinka dalka soo galaaya (food quality control).

Inkasta oo Dr. Cali lagu badalay Dr. Bashiir Biixi iyada oo la tixgelinaayo sida maamulku ku dhisan yahay, haddana waxaa dad badan aaminsan yihiin in Dr. Cali uu tartan adag la geli doono Wasiirka waxbarashada Mr. Juxaa oo ay meel ka wada shaqeeyn jireen isla markaasna ah nin muujiyey dedaal dheeraad ah.

**Wasaaradda Qorsheynta**

Isbedelka wasiirada ayaa saamayn weyn ku yeeshay Wasaaradda Qorsheynta, waxaana wasiir looga dhigey Dr. Da'ud Maxamed, waxa uu ahaan jirey ganacsade, reer Laascaanood ah, waa nin aqoonyahan ah isla markaasna ka soo shaqeeyay arimaha bulshada gaar'ahaan waxbarashada.

Sidoo kale waxaa wasiir dawlaha wasaaradda qorsheynta laga dhigey Prof. Cabdulqaadir Cabdi Xaashi oo kamid ah qurbajoogta reer Puntland ee ku dhaqan dalka Maraykanka, waxaa uu shahaadada PhD ku diyaarinaayey Jaamacada West Virginia. Prof. Cabdulqaadir ayaa ahaa gudoomiyihii hore ee Puntland Diaspora Forum (PDF), magacaabista Cabdulqaadir ayaa noqon karta mid wax weyn ka bedesha siyaasadda arimaha dibadda ee Puntland ama beesha caalamka looga gadi lahaa qadiyada Puntland.

Wasiirada kale ee ku cusub waxaa kamid ah Col. Xassan Faarax Jaamac, ninkaani waxa uu kamid ahaan jirey saraakiishii hore ee dawladii Soomaaliya, waxa uu muddo

dheer la soo shaqeeyay Somaliland, isaga oo ahaan jirey Taliyihii ciidanka Somaliland ee fadhiye jirey Adhicadeeye sanadkii 2004, waxaana uu markii danbe ka mid noqdey guddiga fulinta xisbiga UCID, isaga oo ugu danbeyntii u soo digo rogtey Puntland, Xassan Faarax Jaamac ayaa lagu badalay Timacadde oo isagu tan iyo sanadkii 2005tii ahaa wasiir aan dhicin.

Dhanka wasiir kuxigeenada waxaa kamid ah, qaar la soo shaqeeyay xukuumaddii hore ee Cadde Muuse kuwaas oo kala ah Cabdulqaadir Muuse Yusuf oo loo magacaabey ku xigeenka Kaluumeysiga iyo kheyraadka badda, waxaa kale oo kamid ah: Maxamuud Maxamed Sheikh Ibraahim oo ahaan jirey dawladdii hore wasiir ku xigeenka hawlaha guud iyo gaadiidka, waxaa hadda loo magacaabey wasiir-kuxigeenka beeraha iyo waraabka, magacyada kale ee cusub waxaa ka mid ah C/qani Salaad Yusuf oo lagu badalay Cabdishakuur Mire iyo Cabdirisaaq Xareed Ismaaciil oo Arimaha gudaha wasiir ku xigeen ka ah. Wasiir ku xigeenada kale oo dhan waxaa laga soo badalay wasaarado kale taas oo qayb ka ah isku shaandheynta.

Duqii hore ee magaalada Bosaso Cabdirisaaq Xareed Ismaaciil ayaa kamid ah xubnaha xilalka loo magacaabay asagoo loo magacaabay Wasiir kuxigeenka 2-aad ee Wasaarada Arrimaha Guddaha.

Isbedelka la filaayey ayaa waxaa kamid ahaa in tirada wasiirada la yareeyo isla markaasna wasaradaha la kala qaadey la isu keeno, si dhaqaale faro badan oo ku bixi lahaa wasaaradahaas shaqada ay qabtaan aysan muuqan loogu buuxin lahaa adeeg kale, laakiin taasi may dhicin ee tirada wasiirada waxaa ku soo darsamay laba wasiir ku xigeen oo cusub.

Tirada guud ee wasiirada Puntland ayaa ah 52 wasiir, kuwaas oo isugu jira 18 wasiir, afar wasiiro dawle iyo 30 wasiir kuxigeen, marka lagu daro madaxweynaha iyo

kuxigeenkiisa tirada guud ee golaha fulinta ayaa ah 54 xubnood. Tirada badan ayaa ka imaanaysa wasiir-kuxigeenada, wasaaradaha Dowladda Puntland ayaa iska leh laba wasiir ku xigeen halka Wasaaradda Maaliyaddu ay leedahay sadex wasiir ku xigeen.

Badnida xukuumadda ayaa Madaxweynuhu sal uga dhigey in la qanciyo beelaha dega Puntland, laakiin weli waxaa jira beelo cabanaaya, kuwaas oo ku doodaya in ay ku dulman yihiin golaha xukuumadda Puntland, Qabiilku malahan dhamaad, waana mid sarifma markasta ayna adagtahay in la qanciyo, carabtuna waxa ay ku maah maahdaa "Rida Naasu qaayatun laa tudrak – Dadka oo la qanciyaa waa yool aan la gaarayn."

Haddii aad tirada 100 gaarsiisid waxaa la helayaa beelo cabanayaa, waana adagtahay in qancin beeleed maamul ku hagaago, marka haddii cabashadu markasta jireyso waxaa la gudboon Madaxweynaha in uu la yimaado geesinomo isla markaasna uu magacaabo wasaaraddo iyo wasiiro tiro yar oo dalka gaarsiin kara horumar, 52 WASIIR MEEL UGAMA BANAANAY PUNTLAND Ilaa Culays dhaqaale oo ay soo kordhiyaan ma ahee.

**Xaaladii Siyaasadeed Xiliyadii Faroole, Gaas iyo Saamayntii Puntland ee Dowladii Federaalka.**

R/wasaarihi hore ee DKMG ahayd ee Soomaaliya Cabdiwali Maxamed Cali Gaas waxa uu soo qabtay howl wanaagsan mudadi uu xilka hayay waxa uu dhaliyay in Muqdisho doorasho ka dhacdo isaga iyo golihiisii xukuumada waxay dardar galiyeen in la gaaro Tala wadaag ku salaysan hab doorasho oo sugan .Cabdiwali Gaas waxa uu u tartamay doorashada madaxwaynaha Soomaaliya waxa uuna helay codad Gaaraaya 30- cod wareegi koowaad halka uu ka tanaasulay in uu u gudbo wareega labaad, Cabdiwali Gaas waxa uu yeeshay sumcad iyo taageero uu ka dhex helay dad badan oo Soomaaliyeed

mudadi uu xilka hayay balse gagabadi ayaa dhaawac soo gaaray Sumcadaas .

Cabdiwali Gaas waxa uu olole u galay Madaxwayne-nimada Soomaaliya balse waa ku hungoobay in uu xilkaas qabto, waxaa loo aanaynayaa guuldaradiisa dhowr arimood
1: In uu uu qayb ka ahaado ogolaanshaha kala qaybinta Xildhibaanada Beesha SSC:
2: In Madaxwayne Faroole uusan Rabin in Madaxwayne ka soo jeeda Puntland uu xiligaan Soomaaliya hogaamiyo
3:In madaxwayne Faroole Saxiixayaasha kaligiis ka haro.

Cabdiwali Gaas ka raali noqoshadii rabitaankii Madaxweynihii Puntland ee lagu kala qaybiyay Xildhibanaada Beesha SSC waxay aad ugu keentay dhaawac sumcadeed waxay dadka Siyaasada Soomaaliya falanqeeyaa ku tilmaameen in Gaas aysan munaasib ku ahayn arintaasu loogana baahnaa in uu ka kaco sida Shariif Sheekh Axmed ama dadaal dheer u gallo in Maamulada iyo xildhibaano soo xulida oo oday dhaqameed loo igmaday la kala saaro, waxaa arintaan lagu xoojiyaa ah in Gaas uu ku fududaaday in ay jirto is-haysasho dhamaan beelaha Soomaaliyeed marka ay timaado in la qaybsado xildhibanaada lagu soo xulaayo 4.5-ta ee jifi kasti rabto in ay badsato ama sida cadba ay dhacayso in la qadiyo jifiyo ka mid ah Beelaha kale sababta oo ah waa wax aan haddi wax lagu qaybiyo aan marna Cadaalad laga dheehan karin dhaliishuna ay taagan tahay, markaas haddi ay is-haysashada jifiyaha mid beel kasta ka dhex alosan tahay waxay ahayd in Gaas uusan damaca Madaxwayne Faroole uusan la dhinac noqon.

Arinka kale ayaa ah in Madaxwayne Faroole uusan raali marna ka ahayn in Gaas Madaxwayne noqdo, dibindaabyo siyaasadeedkaas Madaxwayne Faroole ee ah hab fakarkiisa siyaasadeed ee odorosashadiisa mustaqabkiisa ayaa ku qotamey in yoolka siyaasadiisu tahay in uusan arkin awood Madaxwayne Soomaaliyeed oo uu hello qof ka soo jeeda

deeganaada Puntland, sababta oo ah waxaa wiiqmaaya awooda ay Puntland xiligaan ku leedahay Soomaaliya.

Haddi shakhsi Reer Puntland ahi ku soo baxo sidi xiligi Cadde Muuse oo uu Soomaaliya Madxwayne ka ahaa Cabdulaahi Yusuf Axmed AUN, xiligi Cabdulaahi Maamulki Puntland ee Cadde Muuse ma ahayn mid wax saamayn ah ku leh Soomaaliya sababta diidaysayna waxay ahayd Kursiga Cabdulaahi ku fadhiyay. Madaxwaynaha Puntland Cabdiraxmaan Faroole waxa uu ka mid ahaa saxiixayaasha lixda ahaa ee Road-Map-ka ka arimin jiray saxiixayaashi lixda ahaa waxaa maalinkaa ka joogay Madaxwayne Faroole intoodi kale waa ka dhamaaday waqtigu.

Galmudug Doorasho aya ka dhacday, madaxde sare ee DKMG waa isla dageen oo Shariif Xasan ayaa la dagitaanki ugu dambeeyay ka sheegay xaflad Shariif Sheekh Axmed qabsaday waxa uu Shariif Xasan si nacsiin ah u yiri Shariif Sheekh Axmed waa saxiibkay waana la rabaa, Shariif ma garan guul daradu in ay harsanayso xiligaa Shariif Xasan oo aan sumcad badan ku lahayn shacabka Soomaaliyeed sababta oo ah waxa uu ku guulaystay isku dayo badan oo siyaasadeed sidaas darteed shacabku waxay u arkeen nin afmiishaar ah oo isku xir iyo dhisida kooxaysiga qatar ku ah, balse aan danta dalka iyo dadka wadin.

Gaasna dhankiisa ayuu Shariif Axmed u waydaarinaayay karkaarka, Ahlusuna Waljameeca lama sheego ayaamihii KMG-ki laga baxay kama dambayn walow ay maamul goboleedka Galmudug la midoobeen markii danbe iyadoo ay ka shaqaysay dawladan aan ku meel gaarka ayhn ee Farmaajo.

Aan ku soo noqdee marka waxaa saxiixayaashi ka jooga Madaxwayne Faroole libin sheegashada howshi Road-map-ku waa mid u taal Faroole oo fursadda ka hadlida xaladaas

la soo dhaafay isagga ayaa ku lib sheeganaayey ragi kale Micraphone-ku ma ahan mid ay haleelaayaan sababta oo ah waa kuwo aan xilal hayn. Dagaalku wali ma dhamaan Waxa uu Cabdiwali Gaas olole ugu jiraa in uu dib ugu soo noqdo R/wasaarenimadiisi oo uu soo doorto Madaxwayne Xasan Sheekh Maxamuud, Madaxwayne Faroole waa ka go,an tahay in uu Gaas saaxada Siyaasada ay ka dhamaato, dhanka Kale Madaxwayne Xasan Sheekh waxaa la wadaa in uu keenaayo qof ka tirsan kooxdiisa Al-islaax faraca Dam jadiid (Dhiiga Cusub) ama qof dhantaali kara Federal-ka Puntland ku dhagan tahay iyo gooni isu taaga Somaliland waa haddu madaxwaynuhu qabo in uu balaariyo dawaldiisa goobo ka baxsan Koonfurtana ay ka howl gasho.

Cabdiwali Gaas waxa ay saadaashu u ekayd mid Shariifyo iyo caalin ku darsamaaya balse waxaa si gacan hoosaada ay u jirtey guruubka dhamu jadiid iyo Gaas laftigiisa balse Faroole ma ogayn dhamaana hawlaas waxaa ka shaqaynayay rag xirfad weyn u leh hanaanka is haysi ee Puntland.

Cabdiwali Gaas ka hor xiligi uu qabtay Wasiirka Qorsheynta iyo Iskaashiga Caalamiga ma ahayn mid siyaasada ku dhex jiray sooyaal siyaasadeedkiisu waxa uu ahaa mid kooban oo ku eg sanad iyo todoba bilood, si xamaasadi ku jirto ayuu u wajahay ololihiisa isku xir iyo kooxaysiga balse waa meel mari wayday.

**Saamaynta Puntland**

Maamul Goboleedka Punland tan iyo marki uu xilka qabsaday Madaxwayne Cabdiraxmaan Faroole waxa soo wajahay Puntland dib u dhac gudaha ah , dhanka dibadda waa Soomaaliyee Faroole shacabka Puntland waxa uu u muujiyay mid dagaal kula jira dad Federal diid ah iyo in uu xaqooda usoo dhicinaayo, inti uu dhankaas ku maqnaa gudihi ayaa doc faruurmay waxaa bilaabatay dhismihii

Khaatumo State, Raascasayr State, Maakhir State, Amniguna Faraha ayuu ka baxay, haldoor badan waala bartilmaameedsaday, kooxo xagjir lagu sheegay dhowr dagaal waa lala galay. Sracen duqaymo deegaano dad maato ahi dagan yihiin waa ku samaysay, hebel waa hadlay ee hala xiraddu ma lahayn tiro.

Waxaase intaasba ka darnayd marki Garoowe lagu ansixiyay Dastuurka Puntland laguna sheegay in uu yahay mid Maamulka Madaxwayne Cabdiraxmaan Faroole ugu daraaya hal sano oo dheeraad ah, arintaas Siyaasiyiin reer Puntland ah ayaa ka soo horjeestay oo sheegay in haddi nadaam axsaab ah loo guuraayo ay howsha dhiman dhamaystirto xukuumad cusub oo ka dhalata Puntland 08-01-2013 xiligaas oo ah xiliga Maamulka Madaxwayne Faroole ku egyahay, siyaasiyiintaas dhaliilay arinta sanad ku darsashadu waxay ku doodayeen dastuurkaan la ansixiyay ee sanadka lagu darsaday yaa gaynaaya, Sool, Cayn, Bari dagmooyin ka mid ah oo ah dhul aysan ka howl galin Puntland, Madaxwayne Faroole siyaasiyiintaas Cadoowga Puntland ayuu ku tilmaamay iyo kuwo amniga khalkhal ku wadda.

Gaas inkasta oo uu siyaasada barbarad ku ahaa haddana waxaa lagu tilamaama inuu Gaas qayb ka qaatay Fashilintii Hanaankii Xisbiyada ee uu Faroole wadey iyadoo loo daliishaday labadii magaalo ee ka horyimid inay u ahaayeen qaraabo hoose taasoo u ahayd guul Gaase mustaqbalkiisa siyaasadeed tusaale, waxa dhacaysa haddi loo dareero Puntland oo ay meel marto nadaam xisbiyó tartama in uu ku soo baxo Xisbiga Madaxwayne Faroole Markaasna madaxwayne Faroole uu sii daadihiyo Puntland ilaa 2019 kusoo bixida xisbiga Madaxwayne Faroole inta badan doorashooyinka xisbiyada ee markaas bilowdaa waxa ay noqdaan meelaha ay ka bilowdaan kuwo lagu shubto, Gaas oo rajo siyaasadeed kiisa ah in uu 2016 madaxwayne noqdo waxay ku noqon caqabad uu horay usoo arkay in Madaxwayne Faroole joogo Puntland.

Cabdiwali Gaas ayaa fursad u heli kara in uu meesha dhaafiyo Faroole sababaha soo socda dartood, Gaas waxa uu helay xiligi uu R/wasaaraha ahaa isimada soo jireenka ah ee Puntland ka soo jeeda halka ay Faroole ka diideen in ay dib ugu soo laabtaan Garoowe arintaas oo ahayd ismuujin awood siyaasadeed yeelasho ku fadhida oo Faroole hello, Gaas waxa uu saadaalin karaa in uu isaggu keeno qof ay isu siyaasad dhow yihiin Puntland oo la galla xiliga doorashada Soomaaliya ee soo socota olole ah in Gaas soo baxo.

In Madaxwayne Faroole uu yahay mid aan lahayn isku xirka kooxaysiga gudaha marka laga taggo wasiiradiisa Garoowe jooga, waxaa sidoo kale jirta in xukuumadiisa ay ka buuxaan dad badan oo aan la dhacsanayn hanaanka Maamul ee madaxwayne Faroole, Gaas halka kale ee uu wajahi karo ama uu ku ololaynaayo in Faroole la waydaarsiiyo maamulka ayaa ah waa in dib loo soo celiya Puntland-ta wayn, waxaa arintaan ku jira oo kaleeto haddaan Puntland wayn la soo celin waxaa fashilmaaya oo meesha ka baxaaya nadaamka federalism ah ee dadka Puntland aadka u aminsan yihiin tusaale marka dhul ku xusan Dastuurka Puntland ay dawlada Soomaaliya uga howl gasho hanaanka dawlad midaysan markaas Federal-ku waa soo koobmayaa , soo celinta Somaliland waxay ka tahay qayb haddi dhulka dastuuriga ah ee Puntland ay dib ugu soo noqdaan Gacanta Puntland , arinta ah Puntland-ti 1998-di la dhisay ayaa loo baahan yahay waxay noqonaysaa mid hesha taageero badan oo shacabka ah waxaana halkaas ka imaan kara In Maamulka Faroole uu meesha ka baxo.

Waa siyaasad iyo siday u dhacdo waxaase ka horeya in uu Gaas leeyahay sawirashada mustaqbal siyaasadeedkiisa oo ay muhiim u tahay in uu hello taageerada Puntland isagga oo haysta casharki guul daro ee ku dhacay 10-09-2012 marki uu helay 30-cod oo ah marka la kala qaybiyo xubnaha koox odayeedka uu ka tirsan yahay (Daarood sida

Soomaalidu isu taqaan) arintaasna ay qayb ka tahay aanno siyaasadeed Faroole gaystay iyo isagga oo aan Gaas madaxwayne-nimadiisa ku faraxsanayn kana raali ahayn danahiisa siyaasadeed dartood.

Waxaa dhici kartay in madaxwayne Faroole oo gaashaan adag la soo baxo meesha ka saaro hamiga cidkasta oo rabta i n ay carqaladayso sanadkiisa uuna sida uu u dhigtay ay ku meel marto isagga oo dhinacyo badan kaashanaaya sida ciidamadda. Madaxweyne Faroole siyaasadaah kusoo Butaacayey wuu la xisaabtamay isagoo dhiniciisa ka waday hawlo uu ku bad baadinayo awoodiisa iyo isbahaysigiisa siyaasadeed oo Somaaliya

Hadaba maxaa uu sameeyay Faroole markaas? Dhamaadkii Xiligii Madaxweyne Faroole waxaa uu bilaabay inuu ololeeyo Doorasho Qaabaysan oo layiri waa wadadii Xisbiyada waxaana uu Samaystay sisbi layiraahdo Horseed oo ay ku midaysnaayeen isaga iyo inta badan xakuumadiisa balse waxaa ay sababtay inay qalalaase kasabto.

**Warsaxaafadeed kasoo baxay Madaxweynihii Puntland Cabdiraxmaan Maxamed Faroole ayaa lagu sheegay in la joojiyey doorashooyinkii la qorsheenayey inay ka dhacaan deegaanada Puntland 15-ka July**

Go'aankan ayaa ka danbeeyey kadib markii magaalooyin badan oo kamid ah Puntland laga diiday doorashada xukuumada Madaxweyne Faroole wado, waxaana qeybo kamid ah gobalada Puntland maanta lagu gubay sanaadiikhda doorashada.

Dhinaca kale dagaal ka dhacay saaka magaalada Qardho ayey ku dhinteen ugu yaraan shan qof oo ay ku jiraan askar iyo rayid, waxaana magaaladaasi lagu gubay sidoo kale sanaadiikhdii halkaasi la geeyey.

Warsaxaafadeedka kasoo baxay xafiiska Madaxweyne Faroole ayaa lagu sheegay inuu wadatashi la sameeyey Madaxweyne kuxigeenka Puntland iyo Golaha Wasiirada oo dhamaan kamid ah xisbiga uu hogaamiyo ee Horsed ayuu ku sheegay inay joojiyeen doorashadii la waday kadib markii ay arkeen marxalada Puntland ay xiligan ku jirto. Warsaxaafadeedkan ayaa lagu sheegay in kooxo Argagaxiso ah, waa sida hadalka loo dhigayee iyo kuwo kale oo nabad diid ah isu aruursadeen khal khal gelinta amniga Puntland, arrintan oo kasii careysiisay qaar badan oo kamid ah dadkii shacabka ahaa ee ka qeyb qaatay mudaharaadyadii ay dadka ku dhinteen.

Horey ayey u jireen digniino kasoo baxayay nabadoonada iyo waxgaradka Puntland oo dowlada looga digayey waxyaabihii dhacay, arrintaasi oo ay dowladu horey dhegaha uga xiratay, balse warar ku dhaw dhaw Madaxtooyada ayaa sheegayay in dowladu ku talo galeysay rabshado in ay dhacaan si Beesha caalamka loo tuso diidmada xoogan ee looga soo horjeedo Barnaamijka dimuquraadiyeynta oo ay Beesha Caalamka dhaqaalo badan kusiisay dowlada Puntland ee xilka heysay.

Waxaase nasiib xumo lagu tilmaamay in doorashadan lagu beegay bil Ramadaan iyadoo la og yahay xiisadaha kasoo socday arrimaha Doorashooyinka oo si weyn la isugu heystay qaabka ay dowlada u hirgelinaysay.

**Warsaxaafadeedkii Madaxweynaha Puntland Siduu u Qornaa.**




Madaxweynaha Dowladda Puntland Dr. Cabdiraxman Maxamad Maxamud Farole, markuu si qotodheer ah ula tashaday Madaxweyne ku xigeenka, Gudoomiyaha Golaha Wakiilada, Golaha Wasiirada iyo xubnaha Guddiga Nabadgelyada Dowladda Puntland, Gudoomiyaha Guddiga Doorashooyinka KMG ah, iyo dad xurmo ku leh bulshada Rayidka ah, wuxuu soo saaray go'aankaan ku saabsan joojinta doorashooyinka Golayaasha Deegaanka, oo ka dhici lahaa Puntland.

**Isniin July 15, 2013**

*Madaxweynaha Dowladda Puntland:*
*Markuu qiimeeyey mas'uuliyadda iyo xilka weyn ee ka saaran ilaalinta amniga, xasiloonidda, iyo midnimada dadka Reer Puntland;*

*Markuu arkay kooxo isu soo bahaystay khalkhalgelinta degenaanshaha iyo waxyeeleynta midnimada Puntland, kuwaasoo ay ka mid yihiin argagaxiso doonaya inay si xun uga faa'idaystaan qabsoomidda Doorashada Golayaasha Deegaanka Puntland;*

*Markuu aqoonsaday dadaalkii dheeraa oo Puntland usoo gashay hirgalinta iyo meelmarinta nidaamka doorashooyinka iyo axsaabta badan, iyadoo tallaaboyin badan oo lagu guulaystay la soo maray ilaa hadeer;*

*Markuu qiimeeyey qaswadayaasha gudaha iyo khalkhalgeliyaasha dibedda oo maalgelin iyo abaabul uga qaybgalaya abuurida xasilooni-darro iyo isku dhac xilliga doorashada Puntland;*

*Markuu aqoonsaday khatar ku imaan karta amniga, nabadgelyada iyo xasiloonidda dadka Reer Puntland; Markuu qiimeeyey himilooyinka dadka Reer Puntland ee dowlad-wanaaga, nabadda, iyo cadaaladda;*

*Dowladda Puntland waxay si rasmi ah u joojisay Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka Puntland oo qabsoomi lahaa July 15. Iyadoo la qaatay go'aankaan adag, Dowladda Puntland waxay shacabka usoo jeedinaysaa mahadnaq balaaran niyadda ay u hayaan una muujiyeen in geedi-socodka nidaamka doorashooyinka socdo, waxayna Dowladdu dadka u balanqaadaysaa inay weli ku taagan tahay mowqifkeeda ahaa sidii loo hormarinlahaa nidaamka doorashooyinka iyo axsaabta badan, doorashada-na la qaban doono wakhtiga ku habboon, inshallah;*

*Dowladda Puntland waxay u mahadcelinaysaa Beesha Caalamka oo soo taageertay nidaamkaan muddo 10-sanno ku dhowaad ah, marxalado badan oo lagu guulaystay lasoo martay Dowladda ilaa wakhtigaan xaadirka ah. Dowladda Puntland waxay kalsooni ku qabtaa in Beesha Caalamka ka taageeri doonto sii wadida nidaamka asxaabta mustaqbalka.*

*Dowladda Puntland waxay ugu yeeraysaa dadka Reer Puntland oo nabadda jecel iyo Ciidamada Amniga inay daafacaan Midnimadooda iyo Amnigooda.*

**Madaxweyne Faroole waxaa kasoo Baxday Digreeto ay ku xusnaayeen laba arimood 13. 11.2013**

Ilaalinta amniga Casimada Puntland ee Garoowe balse kuma xusnayn aminga Puntland oo dhamaan Magaalooyinka Dilalku ay ka bilaaman Qorax kastoo dhacda sida Bosaaso ama Gaalkacyo halka Sool iyo Sanaagana ay dhex mushaaxaan.

Somaliland isla markaana ay ku caburiyaan cid kastoo ay ku jirto rabitaan Puntlandernimo marka miyaa la orankaraa waxaa ay ka dhignayd wixii raba ha ka dhaceen "Galkacayo ha la isku dilo, Qardho biyo ha qaadeen, Sanaag Somaliland horay ha u raacdo, Sool ha sii wada huleesho, Boosaaso xabsiyada ha la isku dumiyo qofna yaan loo qaban” oo hadana wuxuu yiri musharax Puntland baan ahay.

Madaxweynuhu wuxuu yiri” …dadkii ha loo gurmado” oo hadana wuxuu u hoos geliyey wareegta siyaasadaysan oo isagu isku magacaabay oo lagu yiri “GUDIGA ILAALINTA GAROWE” Marka loo eego xaalada ma ahayn mid ay Haboonayd inuu ku dhiirado Madaxweynuhu inu maanta oo dadka iyo dalkiiba naf iyo maalba diifaysan yihiin inuu ku dhiirado warqaadaas.

**16.11.2013**
**Waxaa warsaxaafadeed uu kasoo baxay Musharaxiintii u Tartamaysay Xilka Madaxtooyada Puntland**

13 musharrax oo ka digay in Faroole kaalmada gurmadka duufaanta uga faa’iideysto ol-olaha doorashada Puntland. Ilaa, 13 ka mid ah musharrixiinta u tartamayey xilka madaxtimi-ada maamulka Puntland ayaa ka digay in madaxweynaha xilligaas C/raxmaan Faroole inuun-an kaalmada gurmadka duufaanta ku dhufatay xeebaha

deegaanadaas uu uga faa'iideysen ol-olaha doorashada Puntland.

Baaqa digniinta ah ee ay soo saareen 13 mushararx ayaa u dhignaa, sidan, iyadoo qeybta hoosana ay ku qoran tahay magacyada 13ka musharrax ee baaqan soo saaray.

**BAAQ III-aad**

**MURASHAXIINTA PUNTLAND**

Musharaxiinta u tartamaya mansabka Madax-weynaha Dowladda Puntland ee Soomaaliya, iyaga oo soo xiganaya:
– Baaqii Gaalkacayo ay isla-qaateen murashaxiin siddeed ah (28-11-2013)
– Baaqii Nairobi oo ay isla-qaateen murashaxiin shan ah (6-11-2013)
– Hadallada murashaxiintu, mid-waliba keli-ahaantiisa uu ka jeediyo fagaarayaasha ololaha doorashada, oo ay warbaahinta mariyaan wax-ay soo saareen baaqan oo ah midkii saddexaad:

**Gurmad Aan Loo Kala Harin**

1. Waxaan si murugo leh ula-wadaagayaan dad-weynaha reer Puntland, dhibaatada naf iyo maal gaadhey oo ay sababtey duufaanta.
2. Waxaan dad-weynahayaga ku samirsiineynaa fufka ka danbeyn-doona dhibaatada ee leh baad, duunyo iyo dad, Eebena aanu ka rajeynaynaa kana Baryeynaa isla markaana aan ugu mahadinaynaa.
3. Waxaan dhiirigelineynaa gurmadka aan kalaharka lahayn ee shacabka Puntland la garab taagan yahay walaalahooda ay sida tooska ah u saameysey duufaantu.

4. Waxaan bogaadineynaa gurmadka dowladda Federaalka Soomaaliya ay ku baaqdey in ay u fidiso shacabka duufaantu saameysey. Islamarkaas waxaanu dalbeynaa in gurmadkaas laagu hubsado gacmo la hubo in ay gaarsiinayaan dadka tabaaleysan
5. Waxaa kaloo aanu mahad-celin u direynaa dhamaan hey´adaha madaxa-bannaan iyo kuwa dowliga ah ee dowladaha deriska ah iyo beesha caalamka ee gacanta ka geystey masiibada.

**Talo ku Aaddan Maamulka Gurmadka**
Murashaxiintu waxay ka digayaan, howlaha gurmadka eek u-soo beegmey xilligan xasaasiga ah, in looga faa´iideysto ololaha doorashada.

Sidaa darteed waxay ku talinayaan:
1. Xubno ku jira doorasho-siyaasadeed in aanan gacanta loo gelin howlaha gurmadka iyo abaabulkooda.
2. Gurmadiyada kala duwan ee ka imanaya dowladda federaalka ah, hey´adaha dowliga ah, hey´adaha madaxa-bannaan iyo dhamaan deeqaha loo yaboohey dadka tabaaloobey, in lagu xoomiyo hey´adda HADMA.
3. Waxaan adkeeneynaa in hey´adda HADMA ay tahay midda dastuur ahaan u xil-saaran gurmadka musiibooyinka dabiiciga ah eek a dhaca Puntland
4. Xilka hey´adda HADMA waxaanu raacineynaa, in iyagana fursad la siiyo hey´adaha kale ee waddaniga ah iyo kuwa caalamiga ah ee ka qeyb-qaatey gurmadkii Tsuani, si ay ugu faa´iideeyaan khibradda iyo waaya-aragnimada ay ka dhaxleen gurmadkaas
5. Waxaanu ku baaqeynaa in gurmadkan laga takooro dhinac kasta oo uu damac ka haayo ka hodmidda musiibada aadanaha.

**Cambaareyn**

Waxaanu si wada-jir ah u cambaareeneynaa wareegtada taariikhdeedu tahay 14/ 11/ 2013, taas oo uu soo saarey sii-hayaha xilka madax-weynaha Puntland Cabdiraxmaan Sh. Maxamad. Waxaanu muujineynaa, wareegtadaas in ayan ahayn mid xilligan ka shaqeeneysa Puntland, sababtuna waxay tahay:

1. Maalmahan, dalka iyo dadku waxay ku jiraan xilli loo gurmanayo sidii gar-gaar loo gaarsiin lahaa dadkii ay ku habsatey musiibada
2. Awoodda Cabdiraxmaan Sh. Maxamad ma gaarsiisna in uu soo saaro wareegto uu ku hagayo qaab-socodka ay doorashadu u dheceyso, sababtuna isaga ayaa murashax ah
3. Golihii sharci-dejinta ee ansixin-lahaa wareegtada uu madax-weynaha soo saaro, waa la-kala direy oo wakhtigoodii waa dhamaadey. Gole kalena weli lama magacaabin.
4- Xilka Cabdiraxmaan Sh. Maxamad uu hayo waa gaarsiin dowladda la dhisi-doono laba bilood dabadeed
Haddaanu nahay murashaxiinta isu-taagey doorashada, waxaanu ka digeynaa wareegtada ceynkan oo kale ah. Waxay inoola muuqataa daan-daansi iyo sii kordhin khilaafka taagan.

Sidaa awgeed, wareegtadaas iyo guddigii lagu magacaabey, murashaxiintu waxay caddeynayaan in ag-tooda ay ka tahay arin aanan aqbal ahayn.

### War saxaafadeed Gudiga wada tashiga Gobalada Bari iyo Sanaag Puntladn Bosaaso

**12.11.2013**
Sida lawada ogsoonyahay magaaladda Taleex, waxaa lagu qabtay shirkii ugu horeeyey ee lagu dhisay maamul goboleedka Khaatumo State shirkaas oo ay kasoo qeybgaleen qeybaha kala duwan ee bulshada ee gobolada Sool iyo Cayn kuwaasoo ay hoggaaminayeen isimadooda, waxayna ku dhawaaqeen in ay ka madax bannaanyihiin dowladda Puntland.

Isla Taleex waxaa lagu qabtay shirkii labaad ee Khaatumo dhammaantood shirkaasi waxay ku qabsoomeen si nabad gelyo ah, waxaa kaloo xusid mudan in dhismaha Khaatumo uu isbadel juquraafi Siyaasadeed ee ku sameeyey Puntland maxaa yeelay sideedii gobol ee ku xusnaa Dastuurka Puntland, waxaa ka baxay laba gobol oo iskood u istaagay.

Waxaa is weydiin mudan haddii labadii shirweyne ee hore ay si nabadgelyo ah ku qabsoomeen maxaa keenay maantay in lagu duulo Taleex iyadoo la diidanyahay inuu qabsoomo shirweynihii Saddexaad ee Khaatumo State iyadoo ay nagu soo food leeyihiin doorashadii loo balansanaa 08.01.2014?

Jawaabtu waxay noqoneysaa in xukuumadda Faroole ay dooneyso marmarsiiyo dib loogu dhigo doorashada iyadoo la sameynayo sabab wakhtiga lagu dheereysto si xukunka loogu sii nagaado.

Dhanka kale arrintaas waxay muujineysaa in isla qorshahaas loogu talagalay goboladda kale ee Puntland, waana xeelad la doonayo in lagu caburiyo rabitaanka dadweynaha.

Horaa loo yiri nina caadadii madaayo bahalna ceeriin madaayo maxaa yeelay Xukuumadda Faroole waxay caadeysatay in muwaadiniinta reer Puntland loo xasuuqo si loo meel mariyo Siyaasada qaloocan ee ku saleysan xukun jeclaysi waxaana tusaale inoogu filan dadkii lagu laayey BARAN, QARDHO IYO GAALKACYO markii aga horyimid Doorashadii aan sharciga waafaqsaneyn ee lagu guul dareystay.

Guddiga wadatashiga Bari iyo Sanaag, waxay ku baaqayaan in si shuruud la'aan ah loo joojiyo colaada iyo dagaalada la dhexdhigay dadka walaalaha ah ee kasoo jeeda goboladda Sool iyo Cayn, sidoo kale Guddigu wuxuu ku baaqyaa dadka deeganadaas kunool in loo ogolaado iney aayahooda ka tashadaan kaasoo ah xaq Dastuuri ah.Sidoo kale Guddigu, wuxuu issimada, Xukuumadda Puntland iyo Beesha Caalamka ba la socod siineynaa in aan Doorashada dib loo dhigi karin, mar marsiiyo iyo xeelad kasta oo ay dowladdu la timaado.

Guddigu wuxuu kaloo dadweynaha reer Puntland ka codsanayaa in walaalahooda reer Sool iyo Cayn si buuxda ugu taageeraan Xuquuqdooda Dastuuriga ah, waxayna uga tacsiyeynayaan wixii dhibaato iyo dulmigii loo geystay.
Gaba-gabadii guddigu wuxuu horay ugu taliyey shirweynihiisii in la fuliyo go'aamadii kasoo baxay shirkii wadatashiga ee ay kasoo qeybgaleen dhammaan qeybaha kala duwan ee bulshada rayidka ah kaasoo xudun u ahaa midnimada, nabadgelyada iyo doorasho xaq ah oo ka qabsoonta Puntland.
Waxaa lawada ogsoonyahay in wixii uu ka digay shirweynahaasi ay ugu horeysey arrintii ka dhacday Taleex ilaa hadana hurgumadeedu taagan tahay.

## Bogaadin

Murashaxiinta mansabka madax-weynaha Puntland waxay bogaadinayaan shirkii wada-tashaiga ee dad-weynaha gobollada Bari iyo Sanaag ee ka dhacay magaalada Boosaaso 11-12/ 11/ 2013.

Murashaxiintu waxay taageerayaan war-murtiyeedkii ka-soo baxay madashaas. Waxayna u arkaan shirkii ay qabteen ergooyinka labadaas gobol in uu yahay yididiilo cusub ee horseedaya dib u-hanashada dhaqankii wada-tashiga ee shacabka Puntland uu hiddaha u lahaa.

## Dalladda Murashaxiinta

Murashaxiinta baaqan soo saarey waxay bil gudaheeda ku unki doonaan magaalada Garoowe dallad ay ku mideysan yihiin. Ujeeddada dalladdu waxay ka bilaabataa kuna dhamaataa in Puntland ay ka dhacdo doorasho:
1. Xor ah 2. Xalaal ah 3. Mid loo dhanyahay ah
Murashaxiinta isku raacay Baaqan waxay yihiin:
1. Maxamad Yaasiin Ismaaciil
2. Gen. Cabdullaahi Siciid Samantar
3. Cali Xaaji cabdulle Dhegoole
4. Maxamad Cali Yuusuf (Gaa-gaab)
5. Dr. Yaasiin Faarax Cartan
6. Cali Xaaji Warsame
7. Cabdi-weli Maxamad Cali-Gaas
8. Axmad Cabaas Axmad (Gacma-gaab)
9. Cabdiraxmaan Shiikh Maxamad (Gablax)
10. Dr. Saadiq Maxamad (Enow)
11. Cali Cabdi Awaare
12. Shire Xaaji Ciise
13. Cabdi-Daahir Guuleed Yuusuf

**11. 2013 ila 7. 01. 2014**

**Marxaladihii ugu adkaa Ololihii Doorashadii Puntland.**

Markii ay bilaamatay olollihii dorashada waxaa Musharaxiintu la kulmeen culaysyo badan oo kaga yimid Magaalada Garoowe Halka dhamaan magaalooyinka kale aynan dhib ku qabin tasoo muujinaysay in Madaxweyne Faroole uu Garoowe ka Xigsaday Musharaxiinta.

Garoowe, December 3, 2013 – Afar musharax oo ka tirsan u tartamayaasha xilka madaxweynenimo ee Puntland kuna sugan Garoowe ayaa si wayn uga soo horjeestay digreeto ka soo baxday xafiiskii madaxweyne Faroole, taas oo uu ku magcaabay xubnaha guddiga ansixinta iyo xalinta khilaafaadka ee Puntland.

Musharaxiinta afarta ahaa ee Garoowe joogey ayaa si wadajir ah u qabtay shir jaraa'id, waxayna kala ahaayeen Cali Xaaji Warsame, Maxamed Cabdinuur, Cabdulaahi muuse Aw-cali, iyo Cali Xaaji Cabdulle iyagoo yiri:-
"Waxaan halkaan ka cadaynaynaa sida horay aan u sheegnay in lagu heshiiyey in guddigaas si wadajir ah loo magcaabo, lagalana tashado musharaxiinta madaxweynuhu ka mid yahay, isimada. Wax garadka iyo bulshada rayidka ah. Ayuu yiri Musharax Cali Xaaji Warsame.

Musharax Cali Xaaji Warsame oo hadalkiisa siiwatay ayaa yiri waxaan halkan ka cadaynaynaa inanan guddigaa aqoonsanayn, madaxweynuhuna uusan sharci u halayn asaas ahaan, annaguna waxaan ku heshiinay inaan soo magcowno guddi cusub oo aan kala tashanayno musharaxiinta uu madaxweynuhu ku jiro.

Musharaxiinta ayaa si cad u sheegay in ay talaabo ka dhan ah magcaabista madaxweynaha ay maalmaha fooda nagu soo haya qaadi doonaan, iyagoo keenaya guddi balaaran oo

ah guddiga ansixinta iyo xalinta khilaafaadka ee Puntland, sida ay hadalka u dhigeen.

Ma aqoonsanin guddiga madaxweynuhu magcaabay mana oggolaanayno. Sidaas waxaa shirka jaraa'id ka sheegay Musharax Maxamed Cabdinuur oo ka mid ah tartamayaashii Garoowe joogay.

Madaxweynihii Puntland Dr. Cabdiraxmaan Faroole ayaa waxaa uu magcaabay guddi ka koobnaa 7 xubnood iyo Xoghayn, Faroole ayaa ku tilmaamay mid dastuuri ah magcaabistiisa guddiga ansixinta iyo xalinta khilaafaadka ee Puntland.

Xilli lagu jirey maalmihii ugu danbeeyey ee u diyaar garowga doorashadii Madaxweynaha iyo Madaxweyne kuxigeenka Puntland  8-da bisha Janaayo 2014, ayaa waxaa soo shaac baxay murran xoogan oo markale soo dhexgalay isimmada qaybtood iyo xukuumada xilka heysay.
Murrankaas ayaa ahayn mid cusub balse xilligaas waa mid ku aaday awooda ay Isimmada uleeyihiin inay noqdaan Marjica kama dambaysta ah ee xalinta khilaafaadka ka yimaada xulista xubnaha Baarlamaanka Puntland ee iyagu dooranayay Madaxweynaha iyo kuxigeenkiisa.

Isla wakhtiyadaas ayay shacabweynaha Puntland si weyn ula socdeen khilaafkii ka dhashay guddigii diiwaangelinta iyo xallinta khilaafaadka Xildhibaanada ee uu Madaxweynaha Puntland Cabdiraxmaan Maxamed Faroole uu kaligiis magacaabay, guddigaasi oo ay diideen Murashaxiinta kale ee xilka u tartameysa balse ay ku qancisay beeshu caalamku.

Khilaafkan xoogan ayaa lagu guuleystay in  xal laga gaaro kedib markii ay dedaal dheer u galeen isimmada Puntland oo markaa ku wada sugnaa Garowe marka laga reebo

Isimmada gobalada Sool iyo Ceyn badankood oo aan joogin. Murashaxiinta ayaa isku raacay in loo daayo isimmada Puntland inay xaliyaan wixii khalad ah ee uu ku kaco guddiga uu magacaabay Faroole, iyadoo marjica kama dambeysta ah uu yahay guddiga Isimmada soo-jireenka ee dhisay Puntland 1998-dii, ahaana kuwii marjica loogu noqon jiray doorasho walba oo Puntland ka dhacda.



**Diidmada Faroole**

Madaxweynihii markaa xilka hayay Cabdiraxmaan Maxamed Faroole oo doonaya in markale shan sano u taliyo Puntland ayaa isagu diidan in isimmada soo-jireenka ah ay qaataan kaalintoodii marjica kama dambeysta ah arrintan oo uu arko mid xakameyn karta fursadaha uu u heli karo gal-galka iyo musuq maasuqeynta guddiga uu magacaabay oo ah kuwo diiwaangelin doona Xildhibaanada beelaha ka imaanaya ee wax dooranaya.

Madaxweyne Faroole habka kaliya ee arrintan uu uga hortagi karay ayaa ahayd inuu isimmada Puntland laftooda kala dhantaalo isagoo culeys ku saaray isimmada Gobalka Nugaal inay arrintan gacan ku siiyaan, waana

midii keentay in khilaaf xoogan uu soo kala dhexgalo isimmada Puntland.



**Tusaale Khilaafka Xildhibaanada Burtintle Islaan Ciise iyo Islaan Bashiir**

Hadaan wax kasoo qaadano isku qabadkii kuraasta Barlamaanka murrankii ka dhashay waxaa ka mid ahaa sida Xildhibaanada ka imaanaya degmada Burtinle ee gobalka Nugaal inuu saxiixo Islaan Ciise Islaan Maxamed xubnaha ay ku leeyihiin beesha Cumar Maxamuud Arrintan ayaa ah mid ka duwan qaabkii isimmada u ansixin jireen Xildhibaanada beelaha soo xulaan oo laga rabo Xildhibaan walbo inuu wato saxiixa isimmka soo-jireenka ah ee beesha uu kasoo jeedo. Marka la eego Xildhibaanada Gobolka Sanaag, tiradooda guud waa 11 Xildhibaan laba kamid ah waxaa soo saxiixa Garaad Saleebaan Garaad Maxamed waxaana ay ka soo jeedaan Beesha Ugaaryahan Siyaad, Suldaanka guud ee Sanaag Suldaan Siciid Cabdisalaam wax faro gelin ah kuma lahan arrintaas.

Islaan Bashiir Islaan Cabdulle oo ah Isimmka Soo-jireenka ah ee Beesha Cumar Maxamuud ayaa qaadacay sharciga cusub ee Islaan Ciise ku saxiixayo Xildhibaanada Burtinle ka imaanaya ee kasoo jeeda beesha Cumar Maxamuud. Arrintan ayaa la xaliyey kadib markii isimmada soo-jireenka ah soo gaareen magaalada Garoowe, waxayna qarka uu fuushay in lagu kala tago shirkii isimmada ee Garoowe ay isugu yimadeen markaas, balse waxaa ay ku dhamaatay is afgarad iyo guul.



**Tusaalaha 2aad Guddoonka Boqorka Beelaha Daarood Boqor Burhaan Boqor Muuse**

Madaxweyne Faroole ayaa si weyn walaac uga muujinayay doorashadii ka socotey Qardho ee lagu magacaabayey Boqorka Beelaha Daarood oo ugu danbeyntii loo magacaabay Boqor Burhaan Boqor Muse oo isagu ahaa siihayaha xilka Boqorka ee sanadihii ka horeeyay intaan loo idman, tan iyo markii uu xanuunsadey Boqor Maxamuud Boqor Muuse sanadkii 2005 isla markaana taageero ka helay dhamaan golaha Nabadoonada ee beesha Cismaan Maxamuud iyo waliba qoyska reer Boqor. Madaxweyne Faroole oo adeegsanaya Axmed Cismaan Shibin (Xoghayaha Qorsheynta ururkii Faroole ee Horsed) oo kamid ah xubnihii u ordayey inay noqdaan

Xildhibaanada Beesha Cismaan Maxamuud ayaa ka codsaday Axmed Boqor Cabdullahi wiilkii uu dhalay Allaha u naxariistee Boqor Cabdullahi King Kong inuu isaguna isu sharaxo xilka Boqortooyada, walow arrintaasi ay ka horyimaadeen Nabadoonada iyo in badan oo ah beesha Cismaan Maxamuud ah shirweynahoodii Qardho.

Axmed Boqor Cabdullahi ayaa (26 December 2013) hotel ku yaal Bosaaso uga dhawaaqay inuu isagu yahay Boqorka Beelaha Daarood, Axmed ayaa kamid ahaa xubnihii kasoo jeeday reer Boqor ee ku qanci-waayey go'aankii Nabadoonada Beesha iyo waliba qoyska reer Boqor. Waxaana uu safar ku gaaray magaalada Garowe, kadib markii uu casumaad ka helay Madaxweynihii xiligaa Dr. Cabdiraxmaan Faroole.

Qorshahan ayaa ahaa mid lagu doonayey in wakhtigii doorashada ka dhimanaa in la carqaladeeyo guddoonka Isimmada soo-jireenka ah ee la rabay in ay marjic u noqdaan wixii khilaaf ah oo ka yimaada Doorashadii 2014.

16kii bishan December ayey magaalada Garowe shir ku yeesheen xubno kamid ah isimmada Puntland oo uu shir-gudoominayey Suldaan Siciid Maxamed Garaase, shirkaasi ayey ku dhiseen guddi ay sheegeen inay u sameeyeen Isimmada Puntland oo shir guddoon uga dhigeen Islaan Ciise Islaan Maxamed. Marka laga yimaado Islaan Ciise, Ugaas Xassan iyo Islaan Maxamuud oo kamid ah guddigaasi ayaa intooda kale ahaa isimmadii aan soo-jireenka ahayn, arrintaasi oo la dedajiyey xili qaar ka mid ah Isimmadii Puntland aysan imaan magaalada Garoowe. Madaxweyne Faroole oo ku faraxsan guddiga Suldaan Garaase aasaasay ayaa habeenimadii 17-kii December Madaxtooyada Garoowe casho sharaf ugu sameeyey isimmadii xiligaasi ku sugnaa Garoowe.



**Sawiro Cashadii Faroole u sameeyey Isimmadii ku sugnaa Garowe 17 December 2013**
**Madaxweyne Faroole oo tujinaya Isimmadii uu casumay!**

Arrintan ayaa ahayd mid lagu garab waday guddigii isimmada soo-jireenka ah oo mar walba marjica noqon jiray kuwaasi oo lagu tilmaamo soo-jireenka ama aasaasayaashii Puntland 1998.

Kadib markii ay dhamaan Isimmada soo-jireenka ah wada yimaadeen Garowe ayaa waxaa bilaabatay dedaalka loogu jiray in guddiga marjica ah ee isimmada hawshiisa bilaabato arrintan oo durbaba murran keentay, kadib markii Suldaan Garaase ka sheegay qado sharaftii loo qabtay Isimmada imaanshihii Boqor Burhaan, in Guddiga isimmada taliya ay yihiin kuwii ay dhiseen 16-kii December oo uu shir guddoon ka yahay Islaan Ciise Islaan Maxamed.
Qodobkan ayaa keentay in qadadaasi isimmada loo sameeyey ay dhamaato iyadoo aan isimmadii soo-jireenka ah aan wax is af faham ah laga gaarin.
**Doorashadii Federaalka 2012**

Ma ahayn markaas markii ugu horeysay oo uu Madaxweyne Faroole khilaaf dhex dhigo isimmada Puntland.




Sanadkii 2012, xiligii lagu jiray soo xulista Xildhibaanada Baarlamaaka Federaalka Soomaaliya, ayaa kulankii isimmada Beelaha Darood ku yeesheen magaalada Muqdisho waxaa kasoo baxay isimmo uu hogaaminayo Suldaan Garaase oo dib ugu soo noqday magaalada Garowe, kadib markii uu Faroole diyaarad khaas ah u diray.

Xiligaasi ayaa la isku heystay habka loo xulayo Xildhibaanada iyo waliba arrimo siyaasadeed oo la xariiray Doorashada Guddoomiyaha Baarlamaanka.

Isimmada Daarood ee soo-jireenka ah ee ku haray magaalada Muqdisho ayaaa iyagu doonayey in beesha Daarood isu sharaxdo xilka Madaxweynaha, arrintaasi oo keentay khilaafkii ugu horeeyey ee isimmadii Muqdisho ku haray ee soo-jireenka ahaa iyo kuwii Garoowe dib ugu soo noqday.
Si kastoo ay ahaato is jiijiidkii siyaasadeed kama marnayn umad badan oo lagu tumanayey, lana luminayay inay xaq u yeeshaan waxa ay xaqa u leeyihiin, walow aynan helikarin xaquuqdooda sababtoo ah, Puntland cidii ku xaqirnayd maxaa u yaala Federaal.

Waxaa Xusid mudan Xubnaha Barlamaanka Federaalka Somaliya oo ku dhisan qabaa'il, waxaa ay badankoodu ku qaybsadaan jifooyin iyagoo hadana ku go'aansada kuwii qada inay heli doonaan xubinimada Barlaman xiliga danbe waxaa ka mida Hawiye Jifa hoosaadkooda, Dir Jifi hoosaadkeeda, iyo Daaroodka qaybtii sida Mareexaan, Leelkase, Awrtable, Dhulbahante, Warsangeli, halka Majeerteen Beelihii ka helay xubnaha Barlamaanka 2004 ay noqdeen kuwa iska leh, iyagoo sii xayndaabtay amaba kusii darsaday boosasoka maamulka ee dowlada hanoqoto wasiiro, safiiro iyo dhamaan shaqaalaha.

Hay'addah dowladda, halka qabaa'iladii kale ay noqdeen kuwa nolosha lagu boobay isla markaana sii dareema in korkooda la isku sii haysto sidii loosii kala Badsan lahaa. Dulqaadka iyo samirka ay ku noolyihiin dadkaa badan wax lagu suureeyo lama yaqaan! sidaas oo ay tahay xili kasto oo ay soo dhamaato wakhtigii cunida oo ay u baahato dibu cusboonaysiin waxaa loo baahdaa dulmanayaasha si looga helo codka lagu farfiisto Madaxtooyada Garoowe waana mida hadhow iyadu gacanta ku miisaanta wax u qaybinta Bulshada Reer Puntland. Xulidii Barlamaanka Puntland oo soo dhamaatay khilaaf badan.

**Musharaxiinta Madaxweynaha Puntland oo shuruud looga dhigay in ay isku-diiwaan geliyaan $10,000**
**Sunday, January 5, 2014**

Guddiga Baarlamaanka maamul goboleedka Puntland ee qaabilsan doorashada madaxweynaha iyo madaxweyne xigeenka ayaa Axad Janaayo 5, 2014 waxay soo saareen go’aan ay ku kordhinayaan lacagta ay isku diiwaan gelinayaan musharaxiinta u tartamaya xilka madaxwey-naha iyo ku xigeenkiisa ee maamul goboleedka Puntland.

Go’aankaas soo baxay Maanta (janaayo 5, 2014) iyo shuruudaha lagu xiray musharaxiinta waxaa shardi laga

dhigay in ay soo buuxiyaan berri oo ah Isniin Janaayo 6, 2014. Shuruudahaas oo ah in:

1. Musharaxa Madaxweynaha uu bixiyo lacag dhan $10,000 (toban-kun oo doolar) si loo diiwaan geliyo.

2. Musharaxa Madaxweyne ku xigeenka in uu bixiyo $5,000 (shan kun oo doolar) si loo diiwaan geliyo.

Lacagtaas sannadkan 2014 ayaa ah laban -intii ay ahayd doorashadii 2009 ee Puntland oo lagu diiwaan geliyey Madaxweynaha ($5,000), iyo madaxweyne ku xigeenka ($2,500).

Sidoo kale waxaa shuruudaha ka mid ah in musharaxiintu ay soo buuxiyaan sida uu dhigayo Qodobka 78-aad ee Dastuurka maamul goboleedka Puntland, oo ah:

1. Muwaadin kasta oo Puntland ah waa u furan tahay in uu u tartamo Madaxweyne ama Madaxweyne Ku-Xigeen haddii uu buuxiyo shuruudaha xilka oo ah:

(b) Inuu yahay muwaadin Puntland ah, Muslim ah, ku dhaqma diinta Islaamka, miyirkiisu dhan yahay, da'diisuna aanay ka yarayn afartan (40) sano, qabin xaas ajnabi ah inta uu xilka hayana guursan karin.

(t) Inuu leeyahay tacliin sare, waayo aragnimo hogaamineed, aqoon la xiriirta dhaqanka iyo hiddaha Soomaaliyeed. dalkana ku sugnaa labadii sano ee ugu dambaysay.

(j) Inaan xuquuqdiisa muwaadininimo go'aan maxkamadeed lagu hakin shantii sano ee ugu dambeysay.

(x) In uusan hore u gelin khiyaamo qaran ama ku xad gudbin xuquuqda bani'aadamka.

2. Musharraxiinta jagada Madaxweynaha ama Madaxweyne ku-xigeenku waxay ka imaan karaan Golaha Wakiillada iyo dadweynahaba.

3. Haddii xubin ka mid ah Golaha Wakiillada loo doorto Madaxweyne ama Madaxweyne ku-xigeen wuxuu bannaynayaa xubinnimadii Golaha Wakiillada, waxaana beddelaya qofkii xubin- sugaha u ahaa. Janaayo 6, 2014 ayaa Gudoomiyaha Guddiga Doorashada Saadiq Abshir Garaad waxa uu ku dhawaaqay in ay shuruudahaas soo buuxiyeen 11 musharax oo madaxweynaha iyo 9 musharax oo ah ku xigeenka madaxweynaha, magacyadoduna kala yihiin:

Liiskii Musharixiintii 2014 ee Madaxweynaha Puntland oo ah 11 musharax

1. Cabdiraxmaan Maxamed Faroole
2. Cali Cabdiqaadir Yuusuf
3. Cabdilaahi Siciid Samater
4. Cabdiwali Maxamuud Guray
5. Shire Xaaji Faarax
6. Maxamuud Cabdiraxmaan Cuuke
7. Maxamed Cabdinuur Xirsi
8. Cali Cabdi Awaare
9. Cali Xaaji Warsame
10. Cabdidaahir Maxamed Yuusuf
11. Cabdiwali Maxamed Cali Gaas

Liiska Musharixiinta Madaxweyne ku xigeenka maamulka Puntland oo ah 9 musharax

1. Cabdilaahi Cali Xirsi Timacade
2. Cabdirisaaq Maxamed Cumatr
3. Axmed Cilmi Cismaan Garaash
4. Xusen Xaashi Xasan
5. Cabdisamad Cali Shire
6. Maxamuud Caydiid Dirir
7. Cabdixakiin Cabdilaahi Xaaji Cumar
8. Daahir Xaaji Khaliif Maxamed
9. Maxamed Xirsi Ducaale

Waxaana tanaasuley oo ka haray doorashadaas waa musharaxiin kale oo tiradoodu tahay ugu yaraan sagaal.

Janaayo 7, 2014 ayaa musharaxiinta xilka u tartamaya waxay hor tageen baarlamaanka Puntland oo ay ka hor jeediyeen khudbado. Baarlamaankaas oo ka kooban 66 xildhibaan ayaa Janaayo 8, 2014 waxay u codaynayaan musharxiintaas madaxweynaha iyo ku xigeen kiisa.

December 30, 2013 ayey ahayd markii lagu dhawaaqay xildhibaanada cusub ee Puntland oo ka kooban 66, oo hawl gelaya 2014-2018, waxaana xildhibaanadaas la dhaariyey Janaayo 1, 2014.

Xildhibaanadaas cusub ayaa Janaayo 4, 2014 ayaa Gudoomiyaha Golaha Wakiillada Puntland waxay u doorteen Saciid Xasan Shire iyo ku xigeenadiisa oo ah C/xamiid Sheekh C/salaan Ciise iyo Xuseen Yaasiin Xaaji.

Doorashada madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa ayaa ku beegnayd Arbaco January 8, 2014.

## Sidee bay u dhacday Doorashadii uu ku Guuleystay Prof. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas

## Cabdiweli Maxamed Cali GAAS Madaxweynaha Puntland

## 2014-2018.

Dhamaan musharaxiintu waxaa ay akhriyeen qudbadahoodii waxaana ay sameeyeen balan qaadyo inkastoo Madaxweyne Gaas uu ka duwanaa Musharaxiinta oo isagu hadalo badan sheegay walow kuwa uu horay u sheegay ay xasaasiyad ka kicisay dal iyo debedba kuwana loo riyaaqay waxaan kasoo qaadanaynaa 4 taan halkudhig markii ololaha doorashada: -

- Puntland waa gabar qurux badan balse aarkuliiste guursata!
- Cadaalad daro baa jirta cadaalad baan samayn maamul xumaa jirta maamul wanaagsan oo gaara guri kasta baan samayn, horumar la'aan baa jirta horumar baan samayn,
- Laascaano faataxo laguma qabsan lagumana soo celinayo faataxo.
- Ma dhacayso in musuq maasuqa aan sii naaxino balse waa la dagaalamaynaa iyo anigu shantaasano Puntland isbedel baan ka samayn.

Waxyaalo badan oo soo dhacay kadib waxaa lasoo gaaray kudhawaaqidii natiij-ooyinkii doorashada sidaan bayna u dhaceen:-

## Natiijadii Wareegii 1-aad

Wareega 1aad ee codeynta doorashada madaxweynaha ayaa dhamaatay iyadoo guud ahaan la tiriyey codadka oo uu hogaaminayey Madaxweynihii xilka hayay **Cabdiraxmaan Maxamed Faroole oo helay 27 cod.**

- ✓ Faroole: 27 cod
- ✓ Gaas: 13 cod
- ✓ Cali Xaaji: 12 cod
- ✓ Maxamed Cabdi Nuur: 6 cod
- ✓ Shire Xaaji Faarax: 4 cod
- ✓ Cali Cabdi Awaare: 3 cod
- ✓ Cabdullahi Siciid Samatar: 1 cod

**Hoos ka eeg wadarta guud cododka ee Natiijada Wareega 1aad!**
Sida xeerka Doorashada uu qorayo hadii hal murashax uu ku guuleysan waayo inuu helo 44 cod, waxay noqoneysaa wareega 2aad in loo gudbo oo ay ku tartamayaan sadexda murashax ee ugu cod badan kuwaasi oo kala ah:
Cabdiraxmaan Faroole
Cabdiweli Gaas
Cali Xaaji Warsam

Wareega 1aad

| | |
|---|---|
| ➢ CabdiraxmaanFaroole | 27 |
| ➢ Cabdiweli Maxamed Cali Gaas | 13 |
| ➢ Cali Cabdulqadir Yusuf | 0 |
| ➢ Cabdiweli Macalin Gurey | 0 |
| ➢ Shire Xaaji Faarax | 4 |
| ➢ Maxamud Cabdiraxmaan | 0 |

Cuuke

- Cabdullahi Siciid Samater 1
- Maxamed Cabdi Nuur 6
- Cabdi Yusuf Yey 0
- Cali Cabdi Awaare 3

**Natiijadii Wareegii 2aad**

- Cabdiraxmaan Maxamed Faroole 31
- Cabdiweli Maxamed Cali Gaas 18
- Cali Xaaji Warsame 16

Waxaa xumaaday 1 cod. Sidaa waxaa ku dhan 66ka cod ee Xildhibaanada baarlamaanka puntland waxaa wareegan markale ku hogaaminayey Madaxweyne Cabdiraxmaan Faroole, hase yeeshee Madaxweynaha ayaa ku guuleysan waayey labadii wareeg ee hore inuu helo 44ka cod ee guusha uu murashaxa ku qaadan karo, waxaana hada loo gudbay wareega 3aad oo ay isugu soo hareen,
Faroole vs Gaas.

Waxaa lagay codeynta wareegii 3aad ee codbixinta oo ah wareegii ugu danbeeya ee doorashada Madaxweynaha. Waxay natiijadii noqotay:

| | Wareega 3aad |
|---|---|
| Cabdiweli Maxamed Cali Gaas | **33** |
| Cabdiraxmaan Maxamed Faroole | **32** |

Sida muuqata hal cod baa xumaaday Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa ku guuleystay hal cod oo kaliya isagoo

wareegii 2aad helay 18 cod oo kaliya, halka Faroole uu helay 31, waxaana muuqata in Faroole helay hal cod oo dheeraad ah wareegii sadexaad balse kuma filneyn waxayna guusha raacday Cabdiweli Maxamed Cali Gaas oo ku guulaystay 33 cod, kadib markii ay wareega saddexaad isugu yimaadeen Cabdiraxmaan Faroole iyo Prof. Gaas ayaa natiijo yaableh waxay guushu ku raacdey Prof. Cabdiweli Cali Gaas, waxaana codadkii la dhiibtey uu heley 33 cod, Faroole wuxuu heley 32 cod hal cod ayaa isaguna xumaadey, Prof. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa noqonaya Madaxweynihii shanaad ee Puntland yeelato waxaana madaxweyne ku xigeen loo doortay C/xakiin C/llaahi Xaaji Cumar (Camey)

Madaxweynaha xilka ka degayey Cabdiraxmaan Maxamed Faroole ayaa soo dhaweeyey natiijada waxaana uu ogolaadey in tartanka looga adkaadey, waxaana uu jeediyey khudbad si weyn loogu riyaaqey.

Waxaa isaguna ka hadley doorashadii guushu ku raacdey Prof. Gaas, Madaxweynihii hore ee Puntland Gen.Cadde Muuse iyo Ergayga Qaramada midoobey ee Soomaaliya Nick Kay.

Durba waxaa ka bilowdey magaalooyinka waaweyn ee Puntland dabaaldeg, magaalada Bosaso ayaa dad badan isugu soo baxeen halka loo yaqaano Gaaca waxaana ay aad ugu tamashleeyeen isbedelkii puntland, meelaha kale ee laga soo sheegayo dadka banaan baxaya waxaa kamid ah Qardho, Gaalkacyo, Badhan iyo caasimadda uu ka dhacdey doorashadu inkasta oo ay tahay mid xaafadaha ka dhacaysay maadaama aan la oggolayn isusocdoka tasoo ahayd amar guddiga amnigu ay amreen.

**Madaxweyne Gaas waxaa uu soo Magacaabay Golihiisii Wasiirada**
**28.01 2014**

Agaasimaha Guud ee madaxtooyada Puntland Dr Deeq Suleymaan Yusuf, waxaana ay wasiiradu gaarayaan 44 Wasiir.

Wasaaradaha ayaa gaarayey 18 Wasaaradood, halka Wasiiradu ay gaarayaan 44 Wasiir, Wasiiro xigeeno iyo Wasiiru Dowlayaal.Wasiirada ayaa u badan kuwo cusub halka qaar ay yihiin Musharixciintii Madaxweynaha Puntland 2014. Haweenka waxaa ay ku lahaayeen laba Wasiir. Liiska magacyada xubnaha xukuumadii ayaa u qornaa sidan:

**Wasaaradda Cadaaladda.**
Wasiir, Ismaacil Maxamed Warsame.
Wasiirku-xigeen, Maxamed Faarax Aadan.
**Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dowladaha Hoose.**
Wasiir, Axmed Cilmi Cismaan (Karaash).
Wasiir ku-xigeen, C/laahi Xaashi Warsame.
Wasiiru-dowle, Cali Yuusuf Jaamac.
**Wasaaradda Amniga.**
Wasiir, Xasan Cismaan Maxamuud Alloore.
Wasiir ku-xigeen, C/casiis Maxamed Aadan.
Wasiiru-dowle, Maxamuud Beeldaaje Faarax.
**Wasaaradda Maaliyadda.**
Wasiir, Shire Xaaji Faarax.
Wasiir ku-xigeen, Axmed Yaasiin Saalax.
**Wasaaradda Dastuurka, Federaalka iyo Dimuqraadiyadda.**
**Wasiir, Sahro Siciid Nuur.**
Wasiir ku-xigeen, C/raxmaan Cabdi Ismaaciil.
**Wasaaradda Qorsheynta iyo Xiriirka Caalamiga Ah.**
Wasiir, Cali Axmed Faatax.
Wasiir ku-xigeen, Siciid Faarax Maxamuud.
Wasiiru-dowle, Axmed Ibraahim Cawaale.

**Wasaaradda Xannaanada Xoolaha.**
Wasiir, C/laahi Ducaale Cali.
Wasiir ku-xigeen, C/weli Seed Cilmi.
**Wasaaradda Waxbarashada.**
Wasiir, Cali Xaaji Warsame.
Wasiir ku-xigeen, Maxamed Cali Faarax.
**Wasaaradda Caafimaadka.**
Wasiir, Dr. Saadi Eenow.
Wasiir ku-xigeen, Aamina Maxamed C/laahi.
Wasiiru-dowle, C/laahi Jaamac Cali.
**Wasaaradda Howlaha Guud.**
Wasiir, C/rashiid Maxamed Xirsi.
Wasiir ku-xigeen, Liibaan Beddel Maxamuud.
**Wasaaradda Duulista Hawada iyo Garoommada.**
Wasiir, Xasan Xaaji Siciid Xasan.
Wasiir ku-xigeen, C/laahi Jaamac Roorshe.
Wasiiru-dowle, C/qani Jaamac Maxamuud.
**Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka.**
Wasiir, Cabdi Ismaaciil Boos.
Wasiir ku-xigeen, Saciid Xuseen Cali.
**Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda.**
Wasiir, C/nuur Cilmi Maxamuud Biindhe.
Wasiir ku-xigeen, Maxamuud Maxamed Cali
Wasiiru-dowle, C/raxmaan Jaamac Kulmiye.
**Wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda.**
Wasiir, C/laahi Jaamac Saalax.
Wasiir ku-xigeen, C/rashiid Gaani Cali.
Wasiiru-dowle, Axmed Siciid C/raxmaan.
Wasaaradda Shaqada, Shaqaalaha iyo Dhallinyarada.
Wasiir, C/raxmaan Sheekh Axmed Cabdulle.
Wasiir ku-xigeen, C/risaaq Shire Ismaaciil.
**Wasaaradda Haweenka.**
Wasiir, Aniiso C/qaadir Xaaji Muumin.
Wasiir ku-xigeen, Farxiyo Yuusuf Xirsi.
**Wasaaradda Deegaanka, Duur-joogta iyo Dalxiiska.**
Wasiir, Guuleed Saalax Barre.
Wasiir ku-xigeen, Faarax Cali Cabdi

**Wasaaradda Ganacsiga iyo Wershedaha.**
Wasiir, Maxamed Xasan Soo-cadde.
Wasiir ku-xigeen, C/risaaq Nuur Cumar.

**Madaxtooyada.**
Wasiiru-dowlaha Madaxtooyada iyo Xiriirka Gobollada, Bashiir C/raxmaan Xaaji Gurxan.

Wasiiru-dowlaha Madaxtooyada iyo Xiriirka Caalamiga ah, Maxamed Cabbaas Cumar.

**02.02.2014** Madaxweyne Gaas waxaa uu horgeeyay Barlamaanka xukuumadiisa cusub in loo ansixiyo.
Madaxweyne Dr. Cabdiweli ayaa baarlamanka u akhriyey waxqabadka ay hiigsanayso xukuumadiisa iyo himilooyinkeeda, wuxuu ku celceliyey inay ka dhabayn doonaan fulinta balanqaadkoodii ahaa wax qabad iyo horumar la taaban karo.

Madaxweynaha Puntland ayaa ku tilmaamay golihiisii Wasiirada ee uu soo dhisay kuwo lagu kalsoon yahay inay si hufan uga soo baxaan xilka loo idmaday, Madaxweyne Gaas ayaa khudbadiisa kusoo qaatay qorshihiisa ku aadan Xoojinta Amaanka Puntland, Dib usoo celinta deegaanada maqan, kobcinta Dhaqaalaha Puntland iyo barnaamijyada horumarinta dalka.

Guddoomiyihii hore ee golaha wakiillada Puntland, Siciid Xasan Shire oo shirguddoominayey kulankaa ayaa sheegay in kulanka ay soo xaadireen 56 xildhibaan, kuwaas dhammaantood codka kalsoonida siiyey xukuumadda, sidaas daraadeedna ay ansax tahay oo ay shaqaynkarto xukuumaddu.

Madaxweynaha Puntland Dr. Gaas oo hadal ka jeediyey munaasabasii ayaa u mahadceliyey wakiilada sida wanaagsan ee ay kalsoonida u siiyeen xukuumadiisa,

wuxuu baarlamanka ka dalbaday ka hor ansixinta inay codka siiyaan.
*"Ma dhacayso in midnimo dhamaystiran la helo iyadoo aan dhulka oo dhan gacanta ugu jirin dowladda, hadaba si aynu u soo celino dhulka maqan waxaa lagama maarmaan ah inaan isku duubnaano."* Ayuu yiri Madaxweyne Gaas oo sheegayey ajandaha xukuumadiisa.

Madaxweyne Gaas oo soo xireyey kulanka ayaa u mahadceliyay mudanayaasha Barlamaanka sida sharafta leh ee ay u ansixiyeen xubnaha xukuumadda.
*"Sharaf wayn bay ii tahay qadarin iyo maamuus aan la soo koobi karin inaad ansixiseen golaha wasirada, anagoo kuna soo xulnay intaanu karnay si caddaalad ah" ayuu yiri Madaxweynuhu oo raaciyay inuu bilaabmay wakhtigii la xisaabtanka iyo shaqada"*

Xakuumadan Madaxweyne Gaas waxaa ay ahayd Xukuumad kutimid isbedel ay isbahaysi ku midoobeen inay isbedel ridaan taasaana uu mar kasta Gaas codka ku helayey weliba hal cod sida ku cad wereegyada 1 iyo 3 ba sidaas Daradeed Madaxweyne Gaas waxaa uu dhisay golo xakuumadeedd oo ay ka dhex muuqdeen Musharaxiintii ugu cad cadaa kuwasoo ahaa kuwii ugu shubay codka.

Muda kooban waxaa dhamaan Xafiisyada ka soconayay shaqo aad loogu riyaaqay siiba Wasaaradaha Waxbarashada iyo Caafimaadka, Haweenka iyo Qoyska iyadoo ay hirgeliyeen Baahiyo badan oo ay Wasaaradduhu Qabeen

**Dowladda Gaas,**
**Dhanka Amniga Dhacdooyin Xusid mudan**

Maarso 17, 2014: Ururka Al-shabaab ayaa sheegtay mas'uuliyadda dilka taliyihii ciidamada Daraawiishta Puntland ee ku sugan aaga tuulada Gal-gala, Jaamac Siciid Warsame (Af-guduud).

April 7, 2014: Garoonka diyaaradaha magaalada Gaalkacyo ee gobolka Mudug ayaa maalintaas lagu toogtay laba sarkaal oo u shaqeynayay hay'adda UNODC oo la dagaalanta daroogada iyo damiyada.

June 07, 2014: Sheekh Maxamed Siciid Atam oo hoggaaminayay xoogagga Al-shabaab ee ka dagaalama Buuraha Galgal ee Puntland ayaa isku soo dhiibay dowladda Soomaaliya arintaas waxaa soo dhaweeyay Madaxweynaha Puntland Gaas.

August 4, 2014: Taliyihii Ciidanka Booliska qeybta Bari ee maamulka Puntland Cabdirixmaan Cali Xuseen ayaa ku geeriyoodey qarax lagula eegtay gudaha magaaladda Boosaaso ee xarunta gobolka Bari.

August 17, 2014: Nicholos Kay ayaa Magaalada Garoowe ee xarunta dawlad goboleedka Puntland kula kulmay Madaxweynaha Puntland Cabdiwali Maxamed Cali Gaas kullan gaar ah oo ay wada qaaten Cabdiwali Maxamed Cali Gaas iyo danjire Nicholos Key ayaa waxa ay uga wada hadleen qodobo ay ka mid ahaayeen, xiriirka u dhaxeeya Q.M iyo dowladda puntland iyo sidii loo sii xoojin lahaa, xiriirka u dhaxeeya puntland iyo dowladda fadaralka.

October 1, 2014: Ciidamada puntland ayaa gebi ahaan la wareegay gacan ku haynta buuraleyda Galgala kadib dagaal qaraar oo ka dhacay buuralayda walaw aan la hubin meesha aadeen Alshabaabkii ku sugnaa, "dagaalka ayaa buuraha galgala waxa uu ku dhex maray dagaalyahano ka tirsan xarakada Al-shabaab iyo ciidamada puntland oo iyagu weeraray, hadalkan waxaa shir Ja'aaid ku sheegay Madaxweynaha Puntland Gaas isagoo intaa raaciyay in ay daba joogaan firxadkooda"
October 10, 2014: Ra'iisul wasaaraha Soomaaliya, Cabdiweli Sheekh Axmed Maxamed iyo wafdi uu hogaaminaayo ayaa ka degay garoonka diyaaradaha

magaalada Garoowe ee xarunta maamulka puntland. Hogaanka sare ee maamulka puntland oo u horkacayo madaxweyne, Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa ku soo dhaweeyay wafdiga.

14, 2014: Heshiiska ayaa waxaa magaalada garoowe ku kala saxiixdeen dowladda federaalka soomaaliya oo uu wakiil ka ahaa Ra'isulwasaare Cabdiwali Sheekh Axmed iyo maamulka Puntland.

October 21, 2014: Shirka Maalgashiga Africa ayaa ka furmay Hotel Savoy ee London, waxaana ka soo qeyb galay madax badan oo Africa ah, Shirkan ayaa waxaa ka qeyb galay wafdi balaaran oo ka socda maamul goboleedka puntl -and oo uu hogaaminayo madaxweyne Cabdiweli Maxamed Gaas.Shirkan ayaa waxaa lagu casumay wadama Rwanda, Puntland, Uganda, Tanzania iyo Gana sida madaxweynay- aasha wadamadaas oo kala ahaa Madaxweynaha Ruwanda "Paul Kagame" Madaxweynaha Puntland "Dr. Abdiweli M. Ali Gaas", Madaxweynaha Uganda " Yoweri Kaguta Museveni", Madaxweynaha Gana " John Dramani Mahama" iyo Ra'iisal wasaaraha Tanzania "Mizengo Pinda".

October 27, 2014: Madaxweynaha dawlada Puntland Dr. Abdiweli Mohamed Ali Gaas iyo weftigii la socday oo ka yimid Magaalada London oo mudo todobaad ah ay booqasho ku joogeen ayaa soo gaadhay Magaalada Addis- Ababa ee caasimada dalka Ethiopia waxayna halkaas kulan kula qaateen Wasiirka arimaha dibadda Itoobiya Tedros Adhanu. Kulanka Madaxweynaha Dawlada Puntland Wasiir Tedros Adhanu oo ku weheliyeen Wasiirka Beeraha Puntland mudane.

Boos iyo Wasiir dawlada lacagta ee Ethiopia ayaa waxaa sidoo kale looga wada hadlay xiisada siyaasadeed ee ka aloosan Soomaaliya iyo waxa sababay khilaafka Ra'iisal

wasaaraha DFee Soomaaliya Iyo Madaxweynaha DF Soomaaliya iyo doorka amuurtaasi dawlada Puntland ka qaadan karto sidii loo damin lahaa xiisada ka aloosmay magaalada Muqdisho.

Ooctober 28, 2014: Heshiis ayaa dhex maray maamulka puntland iyo shirkad kaluumeysi laga leeyahay dalka Thailand si shirkadaas uga kaluumeysato Biyaha Puntland wasiirkii kaluumeysiga iyo kheyraadka badda wasiir, AUN C/nuur Cilmi Maxamuud Biindhe ayaa sheegay in heshiis-kan oo mudo gaaban socon doono uu wax ka tari doono xiriirka labada dal.

Waxaa si joogta ah u dhaca Dilal iyo amni daro kaloo baahsan waxaan aad shaqadooduu u badnayn ciidaka booliska Puntland marka loo fiiriyo falalka dhaca iyo sida aan loogu guulaysan waxaa sidoo kale iyaguna aad u liitay dhanka garsoorka.

**August 07. 2015** Madaxweynaha Puntland Dr Cabdiwali Maxamed Cali Gaas ayaa wareegto uu soo saaray ku magacaabay Taliyaha ciidamada Booliska Puntland Gen. Cabdirisaaq Maxamuud Yuusuf Af-gaduud oo horay xilal ciidan uga soo qabtay Puntland iyo Soomaaliya kana mid ahaa saraakiisha dalka joogay ee aan xil hayn. Xilka taliyaha Ciidamada Booliska Puntland waxaa sanado badan soo hayey Gen Maxamed Saciid Jaqanaf, Taliyahii hore ayaa sheegay in uu soo dhaweynayo xilka qaadistiisa iyo magacaabista Taliyaha Cusub. Gen. Cabdirisaaq Afguduud ayaa horey ula soo shaqeeyey Madaxweynihii ugu horeeyey ee Puntland, waxaana uu horey u qabtey isla xilka hadda loo magacaabey, xiligii AUN Abdilaahi Yuusuf. Sanadkii 2005 ayuu u wareegay dhanka federaalka soomaaliya, waxaana uu noqdey taliyihi ciidanka milteriga ee aaga kismaayo waloow marki dane laga soo saaray. Gen. Afgaduud markii uu xilka la wareegay waxaa uu ku dhawaaqay in dhamaan Ciidanka Booliksa Puntland ay

mamnuuc ka tahay inay goobta shaqada ku cunaan qaad taliye afgaduud waxaa uu isla muda yar kadib ku dhaqa-aqay qorshe lagu tababarayo ciidamada booliska puntland si ay u noqdan kuwa aqoon u leh shaqada ay qabanayaan, waxaa kaloo taliyuhu uu amar ku bixiyey in tirokoob lagu sameeyo dhamaan ciidanka booliska Puntland.

Afgauud waxaa uu bilaabay kor u qaadida tayaynta saraakiisha ciidanka booliska waxaa laga dheehday dham-aan deegaanada puntland isbedel ku yimid booliskii puntl-and muda kooban kadib waxaa taba'bar kasoo baxay dafca-dii koobaad ee boolis ah iyadoo loo qabtay manaasibadii koowad eee Tababar loogu soo xirayay Ciidamada Booliska Puntland ayaa waxa ay ka dhacday xerada Tababarka Ciidanka Abqaale ee Gobolka Mudug. Munaasabadda waxaa ka qayb galay Madaxweynaha Dowlad Gobolleedka

Puntiland Cabdiwali Maxamed Cali Gaas, Wasiir Amniga Puntilan, Taliyaha Ciidanka Boliiska, Maamulka Gobolka Mudug saraakiil iyo Mas'uuliyiin kale. Taliyaha Ciidanka Boliiska Puntiland Cabdirisaaq Afgaduud ayaa bogaadiyay Ciidamada Tababarka loo soo xiray, isagoo ammaan u soo jeediyay Ciidamada Booliska sida ay u wadaa howshooda.



Wasiirka Amniga Puntiland Cabdi Xersi Cali Qarjaf ayaa sheegay in loo baahan yahay qof kasta in loo sameeyo cadaalad isla markaana cidwalba shaqadeeda lagu ixtiraamo laguna xaqdhowro.

Madaxweynaha dowlad Puntiland Cabdiwali Maxamed Cali Gaas ayaa sheegay in ay jirto kalsooni ka wayn tii hore oo ay ku qaban ciidamada Boliiska Puntiland isagoo tilmaamay in dowladnimada ay Ciidamada Boliiska u yihiin laf dhabar.

Afgaduud wuxuu xooga saaray sidii uu u tirakoobi lahaa ciidamada booliska oo dad badani rumeysan yihiin in ay dhex jiifaan tiro been abuur ah oo badan oo puntland gudaheeda looga yaqaan (caaglayaal), talaabadan waxaan jecleysan saraakiisha sar sare ee qaybaha booliska qaarkood oo uu arkay faragelin qaawan oo taliyaha cusubi la soo dagaal tagey, halkaasna waxaa ka bilaamay wadashaqayntii saraakiisha booliska inay soo dhex gashay khilaaf iyo kala amar qaadasha la'aan.

**Hadaba maxay tahay Cilada ka jirta Booliska Puntland.**

Wixii ka danbeeyey sanadkii 2016 waxaa isa soo tarayey jaahwareer balaarran oo ka jira hanaanka shaqo ee booliska puntland iyo awoodaha taliyayaasha qaybaha booliska iyo talsika gud e booliska, waxaa muuqday in xilka taliyaha boolliska puntland ay harreysay degenaasho la'aan, sidaas awgeed ayaa waxaa soo noqnoqanaya su'aal ah xagee xaaladu iska qabsan la'dahay.

Si aynu jawaabtaas u helno bal aynu falanqeyno heerarkii kala duwanaa iyo magacaabistii is dabajooga aheyd ee madaxweyne Gaas marba taliye cusub u caleema saarayey,

gacan-ka-hadalka, adeegsiga rasaasta nool, dhaawacyo masuuliyiin sare iyo saraakiil ciidan ayaa ka dhashay labadii sano ee u danbeysay xilka taliyaha booliska puntland, Mudadii uu maamulka Puntland Madaxweynaha ka ahaa Dr. C/wei Maxamed Cali Gaas waxaa dhowr goor isbedel lagu sameeyey Taliyaha Ciidanka Boolkiska Puntland, waxaana markii ugu horeysay 7 Agoosto 2015 uu xilkaas u magacaabay Gen. C/risaaq Maxamuud Yuusuf (Af-gaduud).

Maalin Isniin ah oo ku beegneyd 8-dii bisha Agoosto 2015 xilkii Taliyaha ciidanka Booliska Puntland waxaa si rasmi ah ula wareegay Taliyaha cusub ee mudao 9 bilood gudah-ood ah ayuu xilkaas hayey Taliye Af-guduud waxaana 4tii May 2016 uu Madaxweynaha Puntland uu mar kale xilka ka qaaday Taliyihii cusbaa ee uu xiliga dhow magacaabay. Xil ka qaadistaas ayaa ku soo begantay xili taliyaha birmadku uu u gacan qaaday taliyaha booliska kadibna ay bilaabatay is rasaaseyn dhex martay ilaalada taliyaha booliska puntland Gen. Af-guduud iyo taliyihii birmadka puntland G/Sare Cismaan Xasan Cawke (Af-dalow), oo xiligaas dagaalkoodu uu ka dhashay wada shaqeyn la'aan ka timid tirkaoobka ciidamada Birmadka.

4tii May 2016 ayay aheyd markii uu isku dhacaas ku dhaawacmay Wasiirka Amniga Puntland Cabdi Xirsi Qarjab, halka dhimasho iyo dhaawac kasoo gaaray ciidamo ka tirsanaa Booliska iyo ilaaladoodiiba, wuxuu kaloo Dr. Gaas xilkii ka qaaday Taliyihii Birmadka Puntland Cismaan Af-dalow.

Xil-ka-qaadistaan ayaa Madaxweyne Gaas uu daliil uga dhigtay guddi uu usaaray dhacdadii ka dhacday magaalada Boosaaso 4tii bisha May,2016 waxaana Guddigu warbixin-tooda ku soo af-jareen in la sheegay iney gacanta isula tageen labada sarkaal taasoo sababtay rasaas ay fureen

ilaaladoodu dhimasho iyo dhaawacyo soo gaaray Saraakiil sarsare iyo Wasiirka Amniga Puntland.

Waxaa kaloo Guddigu ku soo bandhigeen go'aankoodaas in uu la xiriiray dhibaatada ka taagneyd wadashaqeyn la'aanta ka dhex jirtay qaar kamid ah Saraakiisha sare ee Ciidanka booliska Puntland.

4tii May 2016 Madaxweynuha Puntland wuxuu si ku meel gaar ah xilkii Taliyaha Booliska Puntland ugu magacaabay Sarreeyo Guuto Cabdirisaaq Shire Faarax (Ereg) waxaana jagadii KMG aheyd isu bedeshay mid si rasmi ah uu xilkaas ula wareego Sareeyo Guuto (Ereg).

Gen. Ereg oo ah nin aqoontiisa ciidan ay wanaagsan tahay, aana jecleyn in shaqadiisa ay soo farageliyaan madaxda ka sareysa ayaa si rasmi u noqday taliyaha booliska puntland, waxaana jiray xiliyo kala duwan oo uu ka biya diiday khal-adaad maamul oo uga imaanayey dhinaca madaxtooyada, waxaana ugu weyneyd hawlgal ay ciidamada daraawiishtu ka sameeyeen magaalada garoowe kuwaasoo loo xil saaray in ay ilaaliyaan amniga caasimada puntland xiligaas oo ay ka dhacaysay doorashadii Xildhibaanada Qaranka.
Ereg ayaa 21.08.2016 dhaliilay qorshahaas xukuumadu faraha ugu gelisay sugida amniga magaalada Garoowe ciidamo ka tirsan Daraawiishta Puntland, wuxuna isagoo ku sugan Akadamiyada ciidamada Booliska ee magaalada Carmo  VOA u sheegay in amniga Puntland uu wanaagsan yahay 80%, haseyeeshee wuxuu dhaliilay qorshaha ka socda magaalada Garoowe oo uu tilmaamay in uusan wax lug ah ku laheyn taliska booliska Puntland, wuxuu intaas ku daray qaabka loo sugayo amniga Puntland in uu yahay mid hareer marsan Dastuurka iyo xuquuqda shacabka isla markaana in ciidamo bilaa anshax ah lagu soo daadiyey magaalada Garoowe, wuxuuna xusay in askeri ka tirsan ilaaladiisa lagu dhaawacay magaalada Garoowe , isagoo tilmaamay in dad shacab ah dushooda xabado lagu rido,


wuxuu kaloo tilmaamay taliyuhu in dadka shicibka ahi leeyihiin ixtiraam isla markaasna laamaha amniga ay ka mudan yihiin ilaalin, sidaas awgeed aan loo baahneyn in iyaga waxyeelo loo geysto.

Gen. Ereg oo ah sarkaal akadeemig ah oo dowladii kacaanka aheyd ka soo mid noqday ciidamada qaranka ayaa la rumeysan yahay in uu yahay nin aqoon u leh sharciyada iyo aqoonta ciidanka booliska, sidaas awgeed ayuu mar walba uga hor yimaadaa khaladaadka ay madaxda ka sareysaa ku soo fara geliyaan shaqadiisa. 27 Agoosto 2017 Madaxweyne Ku xigeenka Puntland C/xakiin Cumar Caamey ayaa shaqadii ka joojiyay taliyihii ciidamada booliska xiligaasoo uu dalka ka maqnaa madaxweynaha puntland, waxaana dad badan ka yaabiyey go'aanka deg deg ah ee uu madaxweyne ku xigeenku ku talaabsay, balse Gen. Ereg ayaa sharaxay sababtu waxa ay tahay: Ereg ayaa sheegay in madaxweyne ku xigeenka Cameey uu isaga ku amray in uu taliye qeybeed xilka ka qaado,laakiin uu Ereg ku jawaabay Madaxweynaha in uu warqad soo qoro, kaddibna uu madaxweynaha ku hanjabay in uu isaga shaqada ka joojinayo.
Taliyaha booliska puntland ayaa sheegay in 13 dhallinyaro ah oo la xiray caddeyn la'aan uu taliye qeybeed xabsiga ka siidaayay kaddib markii ay xirnaayeen 5 maalmood, Maxkamad la'aanna ku jireen xarig, isaga oo intaas ku daray in qeybta ay Garsoorku soo arakeen, balse taas waa uu ka carooday Camey.

Gen. Ereg ayaa intaas ku daray in Camey si wanaagsan ula hadlin intii ay taleefanka ku wada hadlayeen waxaana uu ku dooday in xabsiyada Puntland oo dhan ay dhibaato ka jirto, waxaana uu sheegay in dhibkaas oo dhan uu C/Wali Gaas mas'uul ka yahay.

Halkan waxaan ka dheehan karnaa in wadashaqeyn la'aantu aysan ku koobneyn Booliska Puntland balse ay

hadda lugaha la sii gashay Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa.



Dawladda Puntland
Ee Soomaaliya,
Xafiiska Madaxweyne Kuxigeenka

ولاية بونت لاند
في الصومالية
مكتب نائب الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE VICE PRESIDENT

Ref: MWK/DPS/329/2017 Garoowe Date: August, /27/ 2017

Ku: Taliyaha Ciidanka Booliska Dawladda Puntland

Og: Dhamaan Ciidamada Booliska meelkastay jogaan DPL

Og: Wasaarada Maaliyada Dawladda Puntland

Og: Wasaarada Amniga iyo DDR Dawladda Puntland


**Ujeeddo Shaqo kafadhisin**

Waxaa dhamaan masuuliyinta warqadani toska iyo ogaysiinta ku tahay lagu wargelinaya shaqadii laga fadhisiyey illaa amardabe Taliyaha Ciidanka Booliska Dawladda Puntland,C/qaadir Shire Faarax (ereg) manta oo tarikhdu tahay, August/27/2017.

Fulin Wacan

Cabdixakin Cabdilaahi Cumar Camay
Madaxweyne ku-xigeenka Dawladda Puntland

Tell: 0906798033/7794813/ 0907423380
E-mail. vp@plstate.so website: www.plstate.so



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

الرئاسة
مكتب الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Ref: MW/DPS/590/2017 Bosaso October 7, 2017

Ku: Taliyaha Ciidanka Booliska Dowladda Puntland
Og: Dhammaan Qaybaha iyo Fadhiyada Ciidanka Booliska Dowladda Puntland
Og: Wasaaradda Maaliyadda DPL
Og: Xisaabiyaha Guud DPL
Og: Wasaaradda Amniga iyo DDR-ta Dawladda Puntland
Og: Madaxweyne ku xigeenka DPL

**Ujeeddo: Shaqo Fasixid**

Waxaa Dhammaan Hay'adaha ay warqadani tooska iyo ogeysiinta ay ugu socoto lagu wargelinyaa in Shaqadii loo fasaxay Taliyaha Ciidanka Booliska Dowladda Puntland C/qaadir Shire Faarax (Ereg), maanta oo ay taariikhdu tahay October 7, 2017.

Fulin wacan

Dr: Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dowladda Puntland

DOWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

State House Bosaso, Puntland, Somalia Tel: +252907797712, 7796067
Office E-mail address: Oop@plstane.so, Puntlanddp@gmail.com,
Website: www.plstate.so;

,



7dii Oktoobar waxaa mar kale uu madaxweyne Gaas dib ugu fasaxay shaqadiisii Taliyihii Booliska ee uu shaqada kaga joojiyay Madaxweyne ku xigeenku Gen. Ereg, balse, waxaa halkaas ka abuurmay koox taageersan madaxweyne ku xigeenka isla markaasna aan la dhacsaneyn tallaabada uu madaxweyne gaas dib ugu soo nooleynayo soo celinta Gen.Ereg, waxaana ka akhrisan karnaa dhacdadii 22 Oktoobar ka dhacday Hoteel Jubba ee magaalada garoowe oo lagu tilmaami karo in ay ka sii fool xumeyd isku dhacii dhex martay Taliyihii hore ee ciidamada booliska Gen. C/risaaq Afgaduud iyo Taliyihii hore ee ciidamada birmadka Gaashaanle Sare Cismaan Afdalow.

Taliye Ereg ayaa horay u ahaan jiray gudoomiyaha gobolka mudug wuxuuna shaqada uga tegay faragelin shaqo oo uga timid madaxtooyada puntland, waxaana hadda cad in ay adag tahay in Gen. Ereg uu si sahlan u aqbalo in laga gar-daran yahay.

Maxay Tahay Dhibaatada ka jirta Hayadaha Ammniga Puntland?

Madaxweynaha Puntland ayaa ah hogaamiyaha ciidamada qalabka sida, sidaas awgeed, wuxuu khaladku ka soo

bilaabanayaa in taliyaha ciidamada booliska puntland uu u magacaabo nin beeshiisa ka soo jeeda, mana aheyn dhaqan ama xeer hoosaadka qarsoon ee maa- mulka Puntland gudihiisa ka jiray, balse waxaa moodaa in ay faraha ka sii baxayso awood qaybsigii beelaha Puntland u dhignaa oo waayadan danbe ay muuqato in boob qarsoon uu ka bilowday.

Guud ahaan Puntland waxaa laga helayaa sharciga iyo qawaaniinta kala hagaya wadashaqeynta hayadaha dowliga ah, balse waxaa wax badan ay xumaadeen markii loogu dhaqmi waayey sharciyadaas sidii loo qoray, kadibna waxyaabo badana xeer jajab iyo qaraabanimo lagu dhameeyo halka kuwana lagu ciqaabo ama awoodaha loogaba qaado.

Dadka badankiis ayaa Maamulka Puntland ku xanta in uu yahay mid Madax kanool ah, taasoo micnaheedu yahay in aysan jirin hay'ad dowli ah oo u madax banana shaqadeeda, balse Madaxweynuhu uu go'aamada shaqo fulineed isagu leeyahay, taasina ay niyadjab iyo kalsooni xumo ku reebtay masuuliyiinta intooda badan oo ay ku adkaato in ay saxaan khaladaadka ka dhex jira hay'adaha ay maamulaan.

25.01.2018 Taliye Ereg waxaa markale Xilka ka qaaday Madaxweyne Gaas waxaana uu magacaabay Taliye cusub S/Guuto Cabdulaahi Shire Dool waxaana uu Taliye k/xigeen u magacaabay G/sare Cusmaan Xassan Cuuke (Afdolow), Afdolow waxaa uu ahaa Sarkaalkii la dagaalamay Taliyhii Booliska Afgaduud balse waxaa uu isagu noqday mid shaqadii hore uu hayn jirey laga dalacsiiyey (durbaan ama garabkaaga hakuugu jiro ama gacalkaa hakuu hayo).

Mar 19, 2018 Taliye ku xigeenka ciidanka Daraawiishta Puntland Mudane Dayr Xaaji Cabdi ayaa xilkaasi iska casilay isla markaana cadeeyay inuu uga tegay xaquuq la'aanta ciidama Daraawiishta iyo Madaxtooyadoo dumisay Taliskii Ciidanka Daraawiishta kuna bedelatay Ciidamo Beeleedyo ay hogaamiyaan ninman Saraakiil laga dhigay ciidamadaas oo kasoo jeeday Madaxtooyooyinkii is bedelay.

28.10.2018 waxaa hadana Madaxweyne Gaas Magacaabay Taliye cusub oo Boolis isagoo u magacaabay S/Guuto Muxyadiin Axmed Muuse oo horay u ahaa Taliyaha Xasilinta Gobalka Nugaal iyo taliyaha la dagaalanka argagixisada iyo weliba taliyaha xasilinta garoowe.

Waxaa maalmahan hareeyay madaxtooyada khal khal dhinaca saraakiisha ah waxaa 27.10.2018 madaxweyne gaas uu xilka ka qaaday 9 sarkaal oo ka mid ahaa Booliska iyo Daraawiishta Puntland iyadoo lagu eedeeyay inay ka horyimaadeen siyaasada madaxtooyada.

Saraakiishaa oo maalma ka hor uun miidiyaha ka sheegay inay xaquuqdoodii ka maqantahay isla markaana waxaa ay ka hadleen shirkii ka dhacay Garoowe inuu ahaa mid qaran dumisa. Taasaana galaafatay saraakiishaas walow ay ka hor yimaadeen xil ka qaadidaas.

28.10.2018 waxaa Madaxweyn isu sharaxay Taliyihii Daraawishta Puntland Saciid Dheere waxaana isla maalinkaasba uu madax weyne Gaas uu magacaabay Taliyaha Daraawiishta Puntland S/Guuto Cabdishakuur Cabdullaahi Xusseen.

Xabsiga Bosaaso oo iska Hor imaad sababay dhimasho iyo dhaawac ka dhacay. 27.09.2018.

Xukuumadda Puntland waxay bishii ku bixisaa musharooyinka, Goonooyinka iyo quudinta maxaabiista ee

guud ahaan xabsiyada ku yaal Puntland lacaga gaaraysa **Labo boqo iyo labaatan kun oo dollar (220,000)** . Saddex meelood oo labo Miisaaniyadaasi waxay ku baxda xabsiga Bosaso oo ah midka ugu weyn, maxaabiista ugu badanina ay ku xiran yihiin oo ay ku jiraan maxaabiista loo qabqabtay falal aragagaxisnimo.
Ciidamada Gadooday ayaa markii hore ku andacoonayey inay waayeen mushaharko- odii iyo xuquuquhii kale ee ay lahaayeen muddo saddex Bilood ah. Sidaasna ay ku diideen amaradii taliska ciidamada Asluu- bta, waxayna ku hanjabeen inay sii dayn doonaa maxaabiista ku xiran xabsiga. sidoo kale waxay xireen oo afduubeen taliyihii Xabsiga Shire Siciid Maxamed iyo Taliyihii saadka ee Xabsiga Bosaso.

Ciidamada Gadooday waxay u diideen in xabsiga uu soo galo Taliyaha ciidamada Asluubta Gen Cali Nuur Cumar, Guddoomiyaha Gobolka Bari Yuusuf Maxamed Wacays iyo Saraakiisha kale ee xukuumada. iyagoo maalintii khamiistii rasaas ooda uga qaaday saraakiishaas xili ay doonayeen in xabsiga geeyaan xoolo isugu jiray Geel iyo ari oo loogu talagalay askarta iyo maxaabiista meesha ku xiran.

Dhamaan kacdoonkaas waxay ku sifeeyeen inay ka maqan yihiiy xuquudoodii musharaadka ay sheegteen muddo saddex bilood ah, cabashooyinka kale ee ciidamadu soo gudbiyeen waxaa ka mid ahaa isbedelka iyo fadhi la'anta sarifka dollarka maraykanka ee suuqyada Bosaso oo ay sheegeen in xukuumadu qiimo hoose ay ku bixiso dollarka, weerarku wuxuu ku soo beegmay iyadoo xaalada amniga ee magaalada boosaso ay sii xumaanayso oo maalmihii u dambaysay bartamaha magaalada lagu dilay Ganacsato, saraakiil ka tirsan ciidamada Puntland iyo rag dhalinyaro ah, dilalkaas oo qaarkood dad loo qabqabtay, qaarna aan la garanayn cida dishay iyo sababaha loo dilay, weerarkaas oo

dhaliyay khasaare dhimasho iyo dhaawacba leh waxaa amar ku bixiyay madaxweynaha puntland Cabdiweli Maxamed Cali Gaas, waxaana fuliyay Ciidamo watay lix tikniko ah oo isugu jiray PSF, Madaxtooyada iyo ciidamada Booliiska, weerarkaasi oo socday muddo 30 daqiiqo ah ayaa ciidamadu waxay kula wareegeen xabsiga, waxaana ku dhintay maxbuus ku xirnaa xabsiga, labo askari oo ka tirsanaa illaada xabsiga ayaa dhaawacyo fudud ka soo gaareen.

Magaalada Boosaso oo ay dhegtu utaagnayd ayaa markii ay maqleen hugunka Rasaasta waxaa ku beermay qof kasta iyo qoys kasta walaac arinkaan oo kale markii u dambaysay ee shacabku maqlaan hugunka hubka culus ay ahayd February 2, 2016 oo ciidamada Puntland ay xili galab ah ay weerareen guri uu degaanaa Guddoomiyihii hore ee Gobolka Bari C/samad Galan oo xiligaas dhaliilsanaa maamulka xukuumada Gaas.

**20.10.2018** Waxay ahayd maalin ku cusbayd Puntland kadib markii subaxnimadii Jidadka magaalada Garoowe lagu arkay ciidamo taagan jidadka kuwaas oo ahaa ciidamadii Madaxtooyada Garoowe oo gadoodsan kadib markii ay waayeen musha’haradoodii mudo 7 bilood ka badan.
Waa ciidankii madaxtooyada waa kuwii ilaalinayay madaxweyne Gaas iyo madaxtooyada ugu quruxda badan Somaaliya isla markaana ah muraayada puntland waxaa kaloo xusid mudan in isla maalinkaas ay garoowe imaanayeen madaxweynayaasha maamul gobaleedyada. madaxweyne Gaas waxaa u ku guulaystay inuu u maro dhanka odayaasha kadibna waxaa lagu guulaystay in ciidamadii lagu qanciyo 2 bilood mushaharkood.waa markii koobaad tan iyo aas aaskii puntland in ay gadoodaan ciidanka madaxtooyadu iyagoo ka cabanaya mushahar la’aan, waxaase is weydiin mudan xaalada ciidamada kale

ee puntland noloshooda maadaama madaxtooyadii lagasoo qayliyey.

**21.10.2018 w**axaa garoowo ka furmay shir ay isugu yimaadeen midowga maamul mobaleedada soomaaliya shirkaas oo socday 4 maalmood ,waloow shirkaa uu ka maqnaa maamulka hirshabeele oo isagu xubin ka ahaa midowga, maamulkaas oo uga baaqday kadib markii uu ka baxay hishiis ay gaareen maamul gobaleed yadu shirkaan kii ka horeeyay oo ka dhacay magaalada kismaayo kasoo ay maamuladu ku gaareen go'aan ay xiriirka ugu jareen dowladda fedaraalka soomaliya, xiligaan oo la oran karo waa xili uu khilaaf weyn ka dhex aloosan yahay maamul gobaleedyada iyo dowlada federaalka soomaaliya.

**24.10.2018** waxaa dhamaaday shirkii maamul gobaleedada waxaana ay soo saareen war murtiyeed ay ku midaysan yihiin sida,

- In Ciidan wada jira ay samaystaan Maamul Gobaleedyadu.
- in Madal amni oo ay ku midaysan yihiin samaystaan
- in Shir weyne lagu qabto dhuusamareeb bil gudaheed iyadoo ay ka qayb gelayaan Ergooyin ka kalaimaanaya Maamulada oo gaaraya Boqolaal qof
- Gudoomiyaha madasha maamulada Shariif Xasan oo loo Doortay Gudoomiye iyo Xaaf oo u noqday ku xigeen.
- Samaynta xisbi cusub xisbigaas oo la yiraahdo Xisbiga Horusocod Qaran xisbigaan oo u eg xisbigii la sameeyay 1950 yadii waxaana Gudoomiye u noqday Cabdiweli Gaas.

02.11.2018 Waxaa subaxnimadii ciidama gadoodsani ay qabsadeen Airportka garoowe iyagoo ka cabanaya mushahar la'aan, ciidamadaan oo ka yimid Tuka-raq oo ah halka difaaca looga jiro ee ay isku hor fadhiyaan ciidamada Somaliland iyo kuwa Puntland, maalinkaas oo uu kusoo

wajahanaa Wakiilka cusub ee UN oo safari ku marayay dhamaan soomaliya, dadaal badan kadib waxaa laga gaaray xal waxaana shaqadiisii caadi kusoo noqotay Airportka garoowe.
24.11.2018 waxaa Laas-caano yimid Madaxweynaha Somaliland isagoo safar ku maraya deeganada Sool ayaa mar uu Garaad Jaamac kusoo dhaweynay Biixi u sheegay mucaarad iyo mu ayidba reer sool iyo reer sanaag adaa u ah madaxweyne waana ku geynaynaa dhamaan dhulkii ilaa Taleex.

## Khilaafkii Gudoomiyihii hore ee Gobalka Bari Cabdisamad Galan iyo Madaxweyne Gaas

Siyaasi Cabdisamad Maxmed Galan Gudoomiyihii hore ee gobalka bari waxaa xilka ka qaaday madaxweyne Gaas waxaana uu xilka warejiyay 28/05/2015 kadibna waxaa uu u dhoofay dalka debadiisa, waxaa uu dalka kuso noqday 03/01/2016 iyadoo kacdoon lagaga so horjeedo maamulka madaxweyne Gaas uu ka jiro gobolka bari magaaladiisa bosaaso, kacdoonkaas oo ahaa mid ay hogaaminayaan dhalinyaro iyo wax garadba isla markaana waxaa ay samaysten urur layirahdo danwadaag oo ay ku midaysan yihiin, soodhoweyntii boosaaso ee siyaasi Galan shacabkii kusoo dhoweynayey waxa ay lakulmeen carqalad kaga timid maamulkii gobolka iyo qaybta booliska.
Si kastaba ha ahaatee dadkii soo dhawayntiisa ka qayb galay ayaa ahaa masuuliyiin horay xilal uga soo qabatay. puntland, xubno ka tirsan xildhibaanada golaha deegaanka dagmada bosaaso, waxgardka gobolka, cuqaal, dhalinyaro siyaasiyii, haween, saraakiil katirsan ciidamada puntland. Soodhawayntaasi kadib ayaa gudoomiyihii hore ee gobolka bari mudane Cabdisamad Galan waxaa uu ka qaybgalay kulan kale oo is xog waraysi ah kaasi oo lagu qabatay Hoteelka Al-sabaax boosaso qaar kamid ah siyaasiyiintii iyo dadwaynihii ka qaybgalay soodhawantiisa oo kulanka ka hadlay ayaa si iskumid ah u soodhawaayay imashihiisa

xiligan boosaaso gudoomiyihii hore ee G.Bari, waxaana ay ku tilmaameen mid wax wayn ka qabtay gobalka Bari mudadii.

Gudoomiyihii hore ee gobalka bari Cabdisamad Maxmed Galan oo gabagdii hadalka qaatay ayaa uga mahad celiyay dhamaan intiii soo qaban qaabisay kulankan iyo kuwii ka qaybgalayba soodhawayntiiisa, waxaana uu xusay in uu maqsuud ka yahay sida ay shacabka boosaso u soo dhawee-yeen isaga oo aan wax xil ah haynin Mudane Galan ayaa ugu baaqay shacabka gobalka Bari in ay ka qayb-qaataan hormarka dalka iyo amniga oo uu sheegay in ay mihiim u tahay jiritaanka dowlada Puntland.

Galan ayaa gabagabdii wax laga xumaad ku tilaamay tacdiyado loogaystay qaarkamid ah dadwaynihii iyo wariyaal tabinaayay soo dhawayntiisa taasi oo uu sheegay in ay ka danbeeyeen maaamulka gobalka Bari iyo taliska Boliska gobalka, waxaana uu ku tilmaamay talaabada noocaasi ah mid maamulka iyo dawaynah iska horkenaysa waxaana uu ugu baaqay maamulka inay raali galin ka bixiyaan, kadib waxaa uu kulamo laqatay qaybihi kala duwanaa ee bulshada ku dhaqan Boosaaso iyo gudigi danwadaag shirar joogta ah buuna la yeeshay mudo 3 dodobaad ah.
Madaxweyne ku xigeenka Puntland Camey ayaa waxaa uu ku sugnaa markaa magaalada Bosaaso waxaana uu Xirir lasameeyay Siyaasi Galan si ay uga wada hadlaan xaaladaha kacsane ee Bosaaso ka jira maraan kaa waraystay sida ay wax u dheceen waxaa uu ii sheegay Galan sidan´´Camey baa iso wacay wuxuna iga codsaday inan kulano waxan ushegay inan shir kula jiro rag siyasiyin iyo waxgaad ah markan magacyadoodi ushegay wuxu iga codsaday inan ku salama dhamantayadana anu lakulano, kadib waxaa ay yeesheen kulan Madaxwayne ku xigenka wuxuuna ka codsaday in kacdoonada jira ladajiyo madama madaxwaynihii maqan yahay, isagoona balan

qaaday in wadahadal la furi doono marka uu yimaado madaxweynuhu, tasoo ay aqbaleen Galan iyo odayaashii la socday malin kadib waxaa magaalada yimi Gaas oo Kismaayo kayimi, waxayna Gaas iyo Camey codsadeen in kulan la isugu yimaado, "Galan waa aan aqbalay waana an la kulmay xili fiid ah waxaana aan wada hadlaynay mudo 2 saacadod kudhow wada hadaladiina waxay kusoo dhamaa-deen is faham la'aan qodobadii aan isku fahmiwaynayna waxaa kamid ahaa:-

- In waxgaradka bosaso jooga ee ka biya diiday sida gaas wax uwado inuu la kulmo isla markaana qanciyo
- In gobalada Puntland hal nidaam lagu dhaqo.
- in gobalada Puntland loo sinaado fursadaha shaqo, qandarasyo iyo xilalka her gobol, ama gobol walba lagu tix galiyo dadka udhashay gobolkaas
- In la qanciyo dhalinyarada aqoonyahanka ah ee kacabanaysa shaqo la'anta iyo cadaalad darada

Maalin kadib waxaa magalada lagu dilay sarkal cidamada darawishta katirsan kadibn mudaharadyo 2 casho socday baa magalada ka dhacay.

02/02/2016 waxaa xili casar ah weraray cidamo ku hubaysna gadiid dagal oo garayay 22 tikniko ah tiro ahaana ka badnaa 200 oo askari waxa weheliyay oo lasocday masuliyin ay kamid yihin wasiro agasimayal, gudomiyayal iyo taliyayaal ciidan, xiligas Galna guriga ayuu ku sugnaa waxana daqiiqado ka hor kulan dhamaysteen odayal dhaqameed ay malinkaa ku wada qadeeyeen Gurigiisa isla markaana ay kula haayeen shirar ay isaga waraysanayaan xaladda Puntland ku jirto gar ahan magaalada Boosaaso.

Galan waxa amnigiisa sugayay oo la jogay 5 askari iyo darawalkiisa oo kamid ahaa ciidanka booliska puntland oo madaxwaynu marku xilka kaa qaday uga reebay ilaladiisii

hore, Galan waxaa uu sheegay in weerarkaas gaadmada ahaa ee lagu soo qaaday waxa ku dhacwacmay laba kamida 4ti askari ee ilaladisa ahayd sido kale waxa ku dhawacmay 2 askari oo kamid ahaa cidanki soo weraray.
Waxaana dhamaan magaalada boosaaso gigilay jawi colaadeed waxaana bilaamay abaabul balaaran oo looga soo horjeeday maamulka gaas kasoo sababay in siyaasi Galan uu magaalada Bosaaso ka baxo uuna uruursado ciidamo iyadoo jamhadaas loo bixiyey Guuto Bari ciidamadaasi waxaa ay la wareegeen gacan ku haynta bariga hoose badankiisa oo dhan ilaa ay markii danbe soo gaaraan duleedka degmada carmo halkaasoo ay ka bilaamatay dhiilo colaadeed oo ay gaartay in ciidamo badan ay aagaas isku hor fariistaan, waxaa kaloo bilaamay dadaalo badan oo ay u kaceen culimada iyo wax garadka gobalka bari si loo baajiyo inuu dhaco dagaal weyn oo qasaaro ba'an geyst waxaana shirweyne nabadeed  lagu qabtay degmada carma halkaas oo lagu soo afjaray khilaafkii walow aynan muuqan qodobo lagu hishiiyey oo dhaqan galay waxa kaliya oo laga dheehan karaa in Galan uu dagaalkii ka door biday isbedelka soo socda inuu u istaago si nabada waxaana uu dhawaan ku dhawaaqay inuu yahay musharax u taagan xilka madaxweyne nimo ee Puntland 2019 waloow la oran karo sanadkaan waa sanadkii ugu xasaasi sanaa dhanka musharixiinta tiradooda iyo hadaladoodaba walow hadana magaalada doorashadu ka dhacayso ay ciidamo isku hor fadhiyaan Tukaraq.

October 28, 2018 Taliyaha guud ee ciidamada daraawiishta Puntland Gen. Siciid Maxamed Xirsi (Siciid Dheere) ayaa ku dhawaaqay inuu u taaganyahay doorashada madaxtinnimada Puntland ee sanadka soo socda, Gen. Siciid Dheere ayaa go'aanka qaatay isaga oo weli ah Taliyaha guud Ee Daraawiishta Puntland.

Gen. Siciid Maxamed Xirsi (Siciid Dheere) oo arrintaas ka hadlayo wuxuu yiri "Waxaa waayadan dambe dhankeyga ku soo badanayey talo iiga imaaneysa bulshada Puntland qeybaha kala duwan isimmada, cuqaasha, aqoonyahanka iyo qeybaha kala duwan ee

bulshada, taladaas oo ah in aan ka mid noqdo mas'uuliyiinta u tartameysa hoggaanka Puntland sanadka 2019-ka.

Isla maalinkaa Madaxweyne Gaas waxaa uu magacaabay Taliye cusub oo noqonay Taliyaha Daraawiishta Puntland.

## Xaquuqaha Bulshada Reer Puntland iyo Cabashooyinka Awood Qaybsiga.

Dhismihii dawlada puntland ee 1998-dii oo ay ku bahoobeen beelaha dega Mudug, Nugaal,Bari, Sool, Sanaag iyo Degmada Buudhoodle, goboladaas oo ay ka talinayeen sadexdii urur ee kala ahaa SSDF, SDNU iyo USP, wakhtigaa oo lagu heshiiyay axdi Qarameedkii sadex Sana ahaa laguna dhisay maamul xal ah ee aan loo qaybsan si xaq ah kaaso ku dhismay sad bursi beelaha qaar kood iyo tanaasul beelaha qaar kood sida {beesha tanade} sadex sano ka dibna loo gudbo doorasho qof iyo cod ah taasoo aan dhicin muddo 20 sano ah, madaxweyne Gaas ayaa mararbadan waxaa uu ka hadlay in cadaalad daro ay ka dhacday qaabkii loo qaybiyay barlamaanka puntland markii la qaybinayay, hadab eedaynta uu u soo jeediyay dadkii dhisay puntland maka ahay mid uu cadaalad ku goobayey mise waxaa ay ahayd dana kale oo isagu u arkay inay dani ugu jirto.

Waxaa hadaba xusid mudan xiligiisa Gaas masameeyay cadaalad waxaan soo qaadanaynaa sidii uu u qaybiyay Aqalkii sare ee dowladda federaalka ee uu isagu qaybiyay waxaan soo qaadanayaa siduu ugu qaybiyey beesha

majeerteen.



Majeerteen waxaa ay heleen 6 kursi sida ka muuqatay qoraalkiisii waxaana uu sameeyay in qaybna uu yiraahdo idinkaa gooni u leh, halka uu qaybna la shuraakeeyay Qabaa'ilo aan Majeerteen ahayn, kuwa uu goonida u siiyay waxaa kamid ahaa 3 Maxamuud Saleebaan iyo Cali Saleebaan taasi waxaa ay cadaysay Cadka majeerteen inaynan soo dhaafi dheerahaas (wax kastaa anay igu fiican yihiin ) halka beelaha kalana uu yiri sidan, Cabdiraxiin Ibraahi iyo Janbeel ku tartama , Reer Maxamuud, Wabeeneeye iyo Awrtablana ku tartama iyadoo ay labadaas kursi ay ka tanaasuleen qabaa'iilo kale sida Carab Saalax iyo Dir. Waxaa aynu ognahay in Beelaha uu goonida u siiyay ay horay matelaad ay ku lahaayeen Aqalka Hoose Barlamaanka Somaaliya iyagoo ku matelayay majeerten hadaba hadii Gaas cadaalada uu sheegayo ay dhab ka ahayd muxuu beelaha aan lahayn u siin waayay metelaad inay ku yeeshaan Baarlamaanada Federaalka haba ku tartameen iyaguye.

Hadba hadalkiisa iyo weliba dhiiri gelinta uu beelaha ku dhiiri gelinayay inay xaqooda doontaan soow ma aha hagardaamo iyo maskax jebin uu u geystay bulshadii, mise waxaa ay ka tahay inuu colaad ka dhex beero bulshadan samirka kuwada joogtey.

Waxaan soo qaadanyaa qabiilka Leelkase (Tanade Daarood) iyo sida loo abaabulay isla markaana loo dhabar jebiyay iyagoo juhdi iyo qarash badan ku galay.

Qoraalkaan waa war murtiyeed ay beesha Tanade Daarood ku faah faahiyeen wixii dhacay iyo sida loo hagardamiyay:-

*Warmurtiyeedka soo baxay Beesha Tanade Tabashada Awood-qaybsiga Puntland Garowe iyo Siday wax u dhaceen. 14/08/2017.*

Lagasoo bilaabo mudo hore waxaa jiray cabasho ay ka qabtey beesha tanade awood qaybsiga maamulka iyo matalaadda golaha wakiilada puntland, iyadoo taa laga duulayo ayaa Isimada, Siyaasiyiin, Cuqaal iyo waxgaradka beeshu ay sugu yimaadeen 2016 Garowe waxay kulamo gaar gaar ah layeesheen guddoonka golaha wakiilada, Madaxweyna, Madaxweynaha ku xigeenka, Guddoomiyaha Maxkamadda sare, Madaxweynihii hore ee PL Faroole, Siyaasiyiin, isimo iyo Ra'iisul wasaarihii hore Cumar Cabdirishiid.

Maxadweynaha PL oo isagu ah madaxa ugu sareeya dalka ayaa garoowshiiyo ka bixiyey cabashadaas waxaana uu qoray warqad ku socota Barlamanka PL kuna soo jeediyay in dastuurka la furo looguna daro beesha tanade matalaad golaha wakiilada ee ka maqan iyo beelo kale oo aan matal-aad ku lahayn baarlamaanka PL.

Nasiib darro waxaa dhacday in 61 xubnood oo ka mid ah Baarlamaanka PL kana soo jeeda beesha Harti ay uga jawaabeen warqaddaas hab qabiilaysan oo aan waafaqsanayn dastuurka, xeer hoosaadka iyo habraaca golaha wakiilada jawaabtaa oo aan loo marin golaha baarlamaanka fadhigiisa iyo guddiga joogtada ah midna. Waxaa beeshu mar labaad ergo isugu timi 1 June 2017 garowe ayna ku xaqiijinayso gunta iyo gunaanadka tabashadeedii looga garaabay soona jiitamaysay 19-ka

sano, beeshu waxay gogol u dhigtay dhammaan Isimada PL waxaana gogoshaa soo ajiibay 17 isim oo qayb ka mid ah ay kaga soo qayb galeen go'aankoodii oo qoraal ah sida Boqor Burhaan iyo Islaam Bashiir, isimo dalka ka maqnaana waxay soo wakiisheen isamo joogay.

Isimadii ka soo qayb galay Shirkaas waxay aqbaleen garawsadeenna tabashadii beeshu ay u soo jeedisay waxayna Maxadweynaha ka codsadeen inuu isugu yeero isimada PL 25 July 2017 si loo xaliyo tabashada beesha Tanade.

Shirkii isu imaatinka isimada PL waxaa furay Maxadweynaha iyo Madaxweyne kuxigeenka 25 July, 2017 waxaana kasoo qaybgalay isimada PL oo dhan, shirkaas oo socday muddo dhan 10 beri waxay isimadu gudoomiyeen.

• In Beesha tanade loogu daro goloha wakiilada 4 xubnood iyadoo beesho dalbatay in loogu daro 15 xubnood

• In Madaxweyna iyo golahiisa xukuumaddu iyo Golaha Wakiiladu ansixiyaan guddoonka isimada furaanna dastuurka PL

• In beesha Tanade aqbasho Guddoonnka isimada, beeshu waxay kulamo gaaargar ah la yeelatay si loo socodsiiiyo guddoonka isimada PL sidan hoos ku cad

1. 08/08/2017 waxaa ay la kulmeen Madaxweynaha PL waxayna codsatay beeshu inuu dhaqan geliyo waana ka aqbalay

• Inuu guddoonkii isimada ka ansixinayo golaha xukuumadda

• In uu muddo dheeraad ah ku daro kalfadhiga baarlamaanka oo fadhigiisu dhammad ahaa si loo asixiyo guddoonkii isimada ee tabashada beesha tanade.

2. 09/08/2017 waxay la kulantay beesha Warsangeli xubnaha kaga jira labada gole ee Xukuumadda iyo Baarlamaanka waxayna ka codsadeen inay ansixiyaan dastuurkana u furaan guddoonkii isimada waxay beesha tanade uga aqbaleen si sharaf leh.

3. 10/08/2017 waxay la kulantay beesha Dhulbahante xubnaha kaga jira labada gole ee Xukuumadda iyo Baarlamaanka waxayna ka codsadeen inay ansixiyaan guddoonkii isimada furaanna dastuurka waxay beesha tanade kala kulantay aqbalaad iyo soo dhawayn.

4. 11/08/2017 waxay la kulantay beesha Dashiishe xubnaha kaga jira labada gole ee Xukuumadda iyo Baarlamaanka waxayna ka codsadeen inay ansixiyaan guddoonkii isimada waxay beesha tanade kala kulantay aqbalaad iyo soo dhawayn.

5. 12 August, 2017 waxay beeshu kulan labaad la qaadatay Madaxweynaha iyagoo ka codsaday inuu fuliyo balanqaadiisii hore ee ahaa ka ansixinta guddoonkii isimada golahiisa xukuumadda iyo muddo ku darista kalfadhiga golaha baarlamaanka oo uu xaq u leeyahay, waxayna beeshu kala kulantay inuu ka baxay balanqaadkiisii hore uuna xirmay kalfadhigii golaha wakiilada culays kagayimi xildhibaanada isla maalintaa beesha tanade waxay la kulmeen Xubnaha labada gole (wasiirada iyo xildhibaanada) ee beesha Majeerteen, beesha majeerteen waxay shirkii ka caddaysay inay kasoo tashadeen guddoonkii isimada ee ku aadanaa u kordhinta baarlamaanka beesha Tanade ayna soo sameysteen afhayeen waxayna sheegeen,

a. inaysan ogolayn in baarlamaanka PL Tanade loogu daro 4 xubnood

**b.** waxay si cad ugasoo horjeesteen guddoonkii isimada PL ee xallinta tabashada beesha Tanade sidoo kale waxuu

sheegay afhayeenku in isimadii soo guddoonshay xubnahaas ay tanade lug gooyeen waxna u qaban karin.

**c.** waxay dureen beelihii ay golayaashoodu aqbaleen guddoonkii isimada PL haddaba beesha tanade markay aragtay

• In dulmiga awood qaybsi ee PL uu yahay mid qoto dheer kuna salaysan hab qabiilaya

• In xalintii tabashada beesha tanade iyo go'aankii isamada Pl ay hortaagan yihiin dhamman siyaasiyiinta beesha Majeerteen siiba inta hada hogaanka haysa oo iyagu ay yihiin kuwa ka shaqeeyay hor istaaga la hor istaagay beesha ee aan lagu sifayn kari tolweynaha Majeerteen

• In dastuurka PL iyo dhammaan nidaamkii dowliga ahaa uu u afduuban yahay siyaasiyiinta beesha majeerteen hada hor booda inta kale ee majeerteena aan cidi wax weydiin

• Markay u caddaatay inuu ka socon la yahay nidaamkii hal qof iyo hal cod siyaasiyiinta talada haysta ujeedkooduna yahay inay ku taraysato kursiga madaxweyhana iyo ku tagrifalka awoodaha dalka

• Markay u caddaatay in Dastuurka PL hal guruub ay ku ilaashato danaheeda lana dhumiyay danihii dalka iyo beelaha kale, dastuurkana la furo marka horjoogayaashaasi Majeerteen dantoodu gasho oo keliya.

**Go'aanka Beesha Tanade**

Beesha Tanade iyadoo ka duulaysa dulmiga iyo caddalad darada ka jirta Puntland ee 20 sano jirsatay waxay beeshu go'aansatay: -

Mahad Dhammaanteed waxaa leh Alihii lahaa Koonkan,

1. In beesha Tanade Daarood ka tashato masiirkeeda mustaqbal

2. In beesha Tanade shirweyne isugu timaado Magaalada Gaalkacayo 30 beri gudohood laga bilaabo taariikh go'aankaan.

3. Sidoo kale beeshu waxay u garaabaysaa dhammaan beelaha ku dulman Puntland iyo kuwa aan ku lahayn matalaada Golaha wakiilada loona awood sheegtay

4. Beesha Tanade Daarood waxay u mahadcelinaysaa dhammaan Isimadii sharafta
lahaa soona ajiibay wakhtiga dheerna geliyay gogashayadii kana soo saaray
guddoonka xillinta tabashada beesha Tanade,

5. Sidoo kale waxaan u mahadcelinnaynaa Isimadii wakhtigu u saamixi waayay ee kagasoo qayb galay qoraalkii garowshaha lahaa (sida Isimada beesha Dhulbahante ee Muqdisho joogay) iyo kuwii wakaaladda soo samaystay.

6. waxaan u mahadcelinaynaa Siyaasiyiinta labada gole ee Puntland (xildhibaanada iyo Wasiirada) ee Beelaha Warsangeli, Dhulbahante iyo Dishiishe ee balan qaaday inay ansixiyaan guddoonkii isimada kana garaabay dulmiga ay tirsatay beesha tanade ee awood qaybsiga Puntland.

7. waxaa kaloo beeshu u mahad celinaysaa Beelaha Majeerteen ee iyagu ka raali ahaa iyo isimadii ku garab istaagay.

**Liiska Ergada beesha Tanade ee Tabashada Awood qaybsiga Puntland saxiixay**

1. Suldaan Maxamed Jaamac Shire
2. Suldaan Subayr X Maxamuud Cali

3. Garaad Cali Diini

4. Ugaas Maxamuud Shoole

5. Caaqil Maxamed Axmed Faarax afjabay
6. Nabaddoon Aadan Warsame Cismaan
7. Caaqil Maxamuud Gaarcad
8. Nabaddoon Saciid Faarax Nuux (Garas)
9. Nabaddoon Maxamed Cabdi Kuus
10. Nabaddoon Bashiir Cali isaxaaq
11. Nabaddoon Jaamac Cabdi Gaawe (Basbaas)
12. Nabaddoon Maxamed Guuleed Muuse (Garcase)
13. Nabaddoon Axmed-nuur Sheekh Xasan Nuux
14. Nabaddoon C/Laahi Orhaye
15. Nabaddoon Cabdi faarax Gaadakeen 16. Nabaddoon Mxamuud Geeleeye (Maygaaag) _
17. Nabadoon C/Laahi Cilmi Gaadane
18. Nabaddoon Siciid Jaamac Roorshe
19. Nabadoon Khaliif Faarax Nuux Kilic
20. Nabaddoon Cabdinuur Oogaroor
21. Nabaddoon Cabdi Dacar Diini
22. Nabaddoon Abshir Ahmed Maxamed
23. Nabaddoon Cabdi Maxamed Yuusuf _
24. Caaqil Cabbaas Xaaji Maxamuud Cali
25. Caaqil Maxamuud Maxamed Jaamac Qayqay
26. Caaqil Cabdinaasir Cigaal Faracade
27. Sheekh Xaaji Sayid Cali
28. Sheekh Xuseen Aw Maxamed
29. Aqoonyahan C/Qaadir Nuur Cali Dheere
30. Aqoonyahan Saleebaan Maxamuud Siciid Dhoodi
31. Aqoonyahan Maxamuud C/Lahi Cali Siigo
32. Eng. Maxamed C/lahi Adan Seed
33. Eng Mukhtaar C/rizaaq X. Yuusuf
34. Aqoonyahan C/raxman Jamaac Xaashi
35. Dr. Xaashi Xirsi Muuse
36. Aqoonyahan Maxamed Cismaan Yuusuf
37. Aqoonyahan Cabdilahi Xusseen Xasan

38. Abwaan Cabdilahi Cawad (Abdwaad Cawgale)
39. Sheekh Cabdiqadir Salaad

(waa baaqii ay soo saareen beesha tanade daarood)

Allaa Mahad leh.

**Mashaariicda Horumarineed ee Madaxweyne Gaas ISKUTASHI: -**

- Balaarinta Dekedda Bosaaso
- Jidka Ceel Daahir
- Jaamacada Maakhir
- Airporka Bosaaso
- Airporka Garoowe
- Jidkii Garoowe Gaalkacyo
- Mashaariicdii Ladagaalanka Abaarah
- Dhamaystirkii Madaxtooyada Garoowe

➢ Mashruucii Dekedda Bosaaso.

May 28, 2015 Madaxweynaha Puntland Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa si rasmi ah u daahfuray mashruuca lagu ballaarinayo dekedda magaalada Boosaaso ee xarunta gobolka bari, xaflad kooban oo lagu qabtay madaxtooyada Boosaaso ayaa waxaa kasoo qayb galay madaxda shirkada Divers Marine Contracting L.L.C oo ah shirkada fulinaysa mashruuca ballaarinta dekedda Boosaaso, wasiiro, isimo iyo masuuliyiin kale, madaxda shirkadda divers marine contracting L.L.C Cabdallah Darwiish ayaa madaxweynaha u soo bandhigay naqshadda ay rabaan inay ka dhigaan dekeda Boosaaso, waxaana uu kula dardaarmay in ay mashruucaas si wanaagsan u hirgeliyaan maamulka Pl iyo shacabkiisuba.



Dhinaca Puntland waxaa heshiiska u saxiixey wasiirkii hore Dekedaha iyo Gaadiidka Badda Cabdullaahi Jaamac Saalax halka dhanka shirkadda Divers Marine uu u saxiixey Cabdallah Darwiish." Waxaa farxad weyn noo ah maanta uguna bishaaraynayaa dadka reer Puntland inaan halkaan isugu nimi si aan u saxiixno hashiiska ballaarinta dekeda Boosaaso oo muddo aad sugayseen kana mid ah balan qaadyadii aan samaynay" ayuu yiri Madaxweyne Gaas ayaa sheegay in keenista mashruucaan uu waqti badan ku bixiyey, balse maanta ay tahay maalin u weyn shacabka reer puntland maadama dhawaan la bilaabi doono fulinta mashruucaan oo faa'ido weyni ugu jirto dadka iyo dalkaba.


" Waxaan madaxda shirkada ku hashiinay in howsha ay si deg deg ah ku bilaabaan, waxaa dhawaan imaanaya qalabka lagu dhisayo dekeda, howshaasna si dhakhso leh ayey u bilaaban doontaa Isha'allah " ayuu yiri.
Ugaas Xassan Ugaas Yaasiin oo kamid ah isimmada Puntland ayaa wax lagu farxo ku tilmaamay daah furka mashruuca lagu ballaarinayo dekedda Boosaaso, isagoo Madaxweynaha uga mahadceliyey dadaalka uu u galay hirgelinta mashruucan.

Saxiixa Heshiiskaas waxaa goobjoog ka ahaa oo markhaati ahaan u saxiisay Madaxweynaha Dowladda Puntland

Cabdiweli Maxamed Cali Gaas, waxaa kaloo heshiiska goobjoog ahaa Ugaas Xasan Ugaas Yaasiin, ganacsade Ciise Xaaji Faarax, Wasiiro ka tirsan Dowladda Puntland oo uu ka mid ahaa Wasiirkii hore ee Maaliyada Shire Xaaji Faarax, oo hadda ah Wasiirka Qorshaynta Puntland.

Bishii January 12 2016, waxaa dekeda bosaso soo gaaray Qaybtii ugu horraysay qalab kooban oo la sheegay inuu yahay midkii lagu ballaarin lahaa dekeda Bosaso, kaasi oo uu jiidayay taag markii dambe dib ugu laabtay dalka Isutaga Imaaraadka Carabta.

*Naqshadii Koowaad Dekedda Bosaaso*



**Nashqadii hore ee loo dhisi lahaa Dekeda Bosaso balse buuq badan ka yimid.**

Sida uu dhigayay heshiisku waxaa Dekeda Bosaso lagu kordhinayaa qaybo cusub, waxaa kaloo ballaarin iyo horumarin lagu samaynayaaa qaybihii hore ee Dekeda, waxaana ka mid ah qaybaha la dhisayo.

- Waxaa la dhisayaa saddex Hangar oo waaweyn oo badeecadaha lagu kaydiyo
- Waxaa la dhisayaa Meelaha Saliida lagu kaydiyo, oo mug ahaan qaadi karta ilaa 250kun oo Barmiil.
- Waxaa laga dhisayaa Dekeda qaybta kunteenarada la dhigo, Waxaa laga dhisaya wiishashka wareega.

- Waxaa kaloo laga dhisayaa Saddex dhismo oo xafiisyada Dekeda ah Iyo dib u habayn iyo balaarin lagu samayn doono guud ahaan Dekeda.

Qiimihii lacagtii layiri waa ku baxaysa Dhismaha iyo balaarinti Dekeda Bosaso waxaa lagu qadaray 210 Milyan oo dollar, lamana sheegin cidii bixinaysey maalgalintaas, hase yeeshee qaar ka mid ah masuuliyiinta dowlada puntland oo uu ka mid ahaa wasiirkii dekedaha Puntland Cabdullah Jaamac Saalax ayaa siyaabo kala duwan uga hadlay arrinta, waxay sheegeen in shirkadda qandaraaska qaadatay ay bixin doonto oo ay maalgashan doonto dekeda Bosaso, lacagtana dib loogu celin doono marka dekeda la dhiso, iyadoo dekeda ay maamulayso isla shirkadaasi. Xogo kale ayaa sheegayey in maalgalintu ay ka imaan Lahyad Dalalka Talyaaniga iyo Imaaraadka Carabta midkood.

Madaxweyne Gaas waxaa uu u yeeray shan wasiir oo wasiiradiisa ugu samaynta leh kuwaas oo uu u diray baarlamaanka si ay u dhex galaan si ay u waayaan cod ku filan mooshinka ay ku ridayaan Xukuumada, wasiiradaasina waa ay ku guul daraysteen.


1

July 2017 waxay ahayd maalin ku cusub reer puntland, waana maalintii ugu horeysay oo baarlamankoodu

xasaanada kala noqday dhamaan gollihii xukuumadda oo lagu eedeeyay fashil iyo waxqabad la'aan.

Muddo 20 cisho ka dib madaxweynaha puntland Cabdiweli Maxamed Cali Gaas oo isla maalintiiba aqbalay go'aanka baarlamanka ayaa mar kale soo magacaabay golle wasiiro oo tiradoodu ka kooban tahay 53 oo u badan xukuumaddiisii horre ee baarlamanku riday.

Haddaba aragtidii shacabka ee ku aadanayd waxqabadka iyo dhaliilaha qaar ka mid ah xubnaha wasiirada dib usoo noqday iyo kuwa laga reebay magacaabistii.

Wasiirka kaliya oo kasoo noqday sanadkii 2014-kii xukuumaddii uu hogaamin jirey Dr Cabdiraxmaan Shiekh Maxamed (Faroole) waa Cabdiweli Xirsi Cabdulle (Indha guran) waxayna isweydiin badan ku xeeran tahay sababta kaligiis uu uga soo noqday xukuumaddaas oo ka koobnayd ku dhawaad 60 wasiir ma daacadnimo bey ahayd, ma hawlkarnimay ahayd, ma wadaniyad bey ahayd, mise arrimo kaloo ka duwan.

Waa masuulka kaliya ee ka mid ah kuwa ay Hay'addaha Qaramada Midoobay ku eedeysay 2014-kii musuq maasuq iyo isdaba marin mashaariic.

Marka ma dhiirigalin bey u ahayd xulashada loogu idmadey xilal sare oo xukuumadda puntland ah.



Waa wasiir lagu tuhmayo lahaanshaha mulkiyadda shirkaddo madax banaan oo ka hawlagala deegaanada Puntland sida Irmaan, Shirkadda Tayo dhowrka Puntland, oo dhawaan lagu daah furay boosaaso iyo kuwo kale, isago-ona muddo ka badan 5-tii sano ee lasoo dhaafay wax qabad ka uu sheego uu yahay xiriirka ganacsiga Itoobiya iyo puntland, furida kastamka Tuurdibi oo xaaladiisa lagu fasiri karo riyada puntland oo aan weli curan ama ilaa iyo hadda aan lagu guulaysan.

Cabdiweli Xirsi Cabdulle (Indha guran) oo xilal kasoo qabtay Xukuumaddii AUN Gen Cadde Muuse, Cabdiraxmaan Faroole iyo Tan iminka oo markii saddexaada, 07 Augsto 2017 loo magacaabay Wasiirka Ganacsiga iyo Horumarinta Wershadaha Puntland.

Axmed Karaash geed jilicsan ma haysto isaguna nin jilicsan maha.

Waa siyaasi kusoo biirey saaxada sanadkii 2009-kii, wuxuuna shaki badan ku xeeran yahay heerkiisa waxbarashada asaasiga, Dhinaca kale war badan lagama hayo khibradiisa shaqo marka laga reebo mashruucii Karaash Program ee Dowladii Kacaanka Soomaaliyeed oo sida la tilmaamo uu ka mid ahaa dadkii kasoo shaqeeyay muddo yar, burburkiina waxaa uu ahaa ragii koofunrta u qaxay waloow uu door mihiima ka qaatay difaacii maatadii u qaxday kismaayo.

Waxaa uu haystaa awood ciidan iyo huba, hubkaan oo ay soo iibisay Puntland iyo jaaliyadaha SSC sanadkii 2007-dii oo loogu tala galay soo celinta magaalada Laas-caanood oo xilligaas gacanta u gashay maamulka Somaliland.

Axmed Cilmi Cismaan (Karaash) oo soo qabtey hogaanka Khaatumo marna ma tagin degmooyinka uu kasoo jeedo sida Taleex, Xudun iyo Ceergaabo tan iyo intii uu hayay Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ka mid ah hay’addaha

ugu miisaanka weyn Puntland waloow uu ku taamo mar in Sool oo xora inuu arko doodiisa iyo hadalkiisa ugu badani waxaa uu ku wajahnaa mar kasta Xoraynta Sool balse cidna uma helin.

Halka taas bedelkeeda degmooyinka aanu kor ku xusnay sanadihii lasoo dhaafay ay fardo ku fuuleen Muuse Biixi Gudoomiyaha Xisbiga Kulmiye, Faysal Cali Waraabe Gudoomiyaha Xisbiga Ucid iyo Siyaasiin kale oo kasoo jeeda Gobolladda Waqooyi Galbeed sida Awdal iyo Togdheer Xili ay ku jireen Ololihii Doorashada Somaliland.

Waxaa kaloo wasiir Axmed Garaash lagu xasuustaa 3 markab oo raashin deeqa oo kayimid dalka Turkiga raashinkaas oo kusoo aaday xili cabsi weyn laga qabay inay deegaanadda puntland ay ku dhufan doonto abaaro halis ah, iyadoo ay xusid mudan tahay inuu la maamulayay Cabdirisaak Burgal oo ay qaraaba dhaw yihiin Madaxweyne Dr. Gaas isla markaana uu u qabilsan yahay dejinta deeqaha horayna wuxuu u haysan jirey Nesha kasoo si toosa u maamushay 3 markab halka wasiirku la oran karo doorkiisii ma qaadan.

Sadex daas markab laysma weydiin 30 casho kadibna waxaa puntland gaajo iyo haraad ugu dhintay dad jilicsan oo u badan dumar iyo caruur mana jirin dowladu wax kayd ah oo ay raashinkii ugu tala gashay abaartaas lawada ogaa dhicideeda, waloow Rashinkii lagu arkayay inuu bakhaarada u yaalay Ganacsi ahaan halkaas oo shacabku iyo culimadu lacagtay iska uruuriyeen ay bakhaarada kasoo gadeen raashinkii laftigiisii.

Waxaase aan la qarin karin inuu Axmed Karaash uu yahay nin aad u hadal adag qadiyaduna ay ku weyn tahay waxaana cadayn ugu filan in Dagaal kii Tukaraq inuu ahaa wasiirkii keliya ee Ciidanka la jiifay aaga hore waxaa kaloo xusid mudan Dagaalkii beelaha walaalaha ahee Bariga Laascaano dhaawicii laga keenay iyo diyaaradii qaadaysay

Doorkuu ku lahaa markii muranku galay waxaan shaki geli karin nin ku adag dadnimadiisa iyo dhalashadiisa inuu yahay waxaana xaqiiqa hadii uu ahaan lahaa Madaxweyne ku xigeenka puntland inaan Laascaano maqnaateen.

Anisa waxaa cunay cideedii ma aha mid gadmaysa.

42 bilood kaliya bey dalka u haysay xil siyaasadeed, marna kumaysan turan turoon, waa aqoonyahanad u timid dalka inay u shaqeyso, balse aan u imaan inay ka shaqeysato, waa shaqsi faham dhaw la wadaagtey la macaamilka dadkay wada shaqeeyeen iyo kuwii loo adeegayayba, weyna istaahishay sii joogida xafiiska iyo mid ka sareeyaba.

Waa mid ka mid ah tan ugu badan haddeysan ugu horeyn-ba oo daryeelka iyo adeegeedu gaari jirey dhamaan Gobolladda, waana wasaaradda kaliya oo muddo ka-yar 40 bilood ka dhistay lix xarumood degmooyin taasoo ay usii dheereyd taabo-galinta iyo yagleelida xarunta weyn ee Garoowe.



Waa shaqsi looga markhaati kici karo doorkii ay ku lahayd la dagaalanka musuqmaasuqa oo u horseeday fulinta mashaariic wax ku ool ah oo si hufan u tisqaaday iyo guulo puntland ugub ku ah.

Aniso Cabdulqaadir Xaaji Muumin wasiirkii horre ee haweenka puntland oo sida cadceeda aan sacabka loogu qarin karin oo kale maanta waxqabadkeedu uu uga muuqdo meel kasta oo ka mid ah gudaha dalka, waxay ka mid ahayd wasiiraddii xasaanada ku waayay mooshinkii 18 June 2017 balse ogow qof walba oo xil ka qabta hey'ad muunadeeda leh sida baarlaman ama xukuumadd wuxuu aakhirka ka tagaa erayo iyo waxqabad taariikhda u gala "Ileen magaalo waa madale inta joogtaana waa markhaatiye!

**Heerkii ugu sareeyay ee musuq-maasuq ee dhacay.**

Baarlamanka puntland oo markii ugu horeysay 18 July 2017 xasanaada si wadar ah ugala noqday xukuumadda ayaa la isweydiinayey sidey u kala hufi doonaan islamarkaana miisaanka usoo saari doonaan xubnaha loo arko inay ka mid ahaayeen wasiiradii ay ku sheegeen kuwo fashilmay, oo farta lagu fiiqayo mar labaad dib usoo noqo shadooda uu qalinka ku suntay madaxweynaha puntland.

Weydiimaha ugu badanaa ee ay is waydiinayeen dad weynaha puntland waxay ku qotomeen, hal beega uu baarlamanka puntland ku eegi doono wasiirada loosoo celiyay iyo kuwii la eryay tusaale ahaan waxqabadkiisii ama musuq maasuqiisii.

1. Wasiir Indha-guran oo lasoo celiyay?
2. Wasiir Cabdi Jamaal oo xilka laga qaaday?
3. Wasiir Axmed Karaash oo lasoo magacaabay?
4. Wasiir Aniso Xaaji Muumin oo laga dhaqaajiyay?
5. Wasiir Shire Xaaji oo aan laga bedelin meeshii horre?
6. Wasiirkii Saciid M Raage oo lasoo Celiyey?
7. Wasiir Karaash oo soo noqday?

iyo in kaloo badan oo soo noqday hadaba arinka ku saabsan ansixinta gollaha Xukuumadda lagusoo celiyay waa mid fasiraya inay tahay rajadii u dambeysay oo gollaha wakiiladdu ku noqdeen kuwo ay dhab ka ahayn Metelaada iyo dhawaaqoodii la xisaabtanka u ekaa waxaana muuqday in ay dangaar ah lahaayeen.

Waxaa kaloo ku lifaaqnaa hawshaan oo ay ansixiyeen Barlamaanku mashaariic buuq weyn ka taagnaa sida mushruuca dekedda bosaaso, baarlamaanka puntland aya cod aqlabiyad ah ku meelmariyey labo heshiis oo dowlad goboleedka puntland ay la gashay labo shirkadood oo ajnabi ah xili ay jirtey diidma weyn oo ay shacabka puntland muujiyeen.

Kulanka baarlamaanka waxaa fadhiyey 60 xildhibaan, waxaana heshiisyada u codeeyey 59 xildhibaan, hal xildhibaana waa uu ka horyimid.

Heshiiska ugu muhiimsan waa kan shirkadda DP World ee laga leeyahay dalka Imaaraadka, laguna sheegayay inay dhisayso kadibna maamulkeeda la wareegeyso dekada boosaaso, heshiiskani oo uu madaxda shirkadda la saxiixday madaxweynaha puntland Cabdiwali Maxamed Cali Gaas, waxaana la baahiyay horraantii Bishii 4.2017 waxa uu ku kacayaa mushruucan lacag dhan $336 milyan , waxayna shirkadda balaarin ku samaynaysaa dekada, kadibna maamulaysaa muddo 30 sano ah.

Iyadoo ay jirto mucaaradad horle oo ka timid shacabka iyo ganacsatada puntland siiba magaalada ganacsiga ee bosaaso.

Heshiiska labaad waxaa lala saxiixday shirkad laga leeyahay dalka shiinaha oo lagu magacaabo CCECC, wuxuuna ku saabsanyahay dhismaha waddada isku xirta Eyl iyo Garoowe, shirkadda CCECC waxa ay horey u dhistay garoonka diyaaradaha caalamiga ah ee Boosaaso.



*Xildhibaan Cabdikariin Xussen Gure (Shaacuur)*

Waxaa uu miiidiyaha iyo bulshada puntland uu la wadaagay in musuq-maasuq dhacay wuxuuna yiri "waxaa laga weeciyey wadadii baarlamaanka iyadoo loo isticmaalay laaluush taasna waxaa marag ka ah shalay golihii wasiirada ee aan erinay baanu ansixinay isla markaana DP Word oo shacabka puntland lawada ogyahay meesha ay ka taagan yihiin baanu ansixinay marka waxaan oran karaa waxaa dhacay khiyaama qaran waxaana marag idiinku filan aniga waxaa la ii keenay 28.000$ waxaana ugu deeqayaa ciidamada puntland"

**Hay'ada wadooyinka Puntland (PHA).**

Hay'adaan waxaa la'aas aasay 1997 iyadoo loo sameeyay dayactirka iyo sameynta wadooyinka puntland waxaana ay si toosa u hoos tagtaa madaxtooyada puntland waxaa magacaaba madaxweynaha.

Ilaa iyo intii hay'adan la dhisay waxaa ay ahayd hay'ad shaqa kastoo ay qabanayso uu musuq'maasuq kasoo dhex iftiimo, hay'adaan oo dhaqaale looga joogteeyay dhamaan Gaadiidka iyo qalbka gaadiidkaba inay canshuur ku leedahay isla markaana ay iyadu si toosa u maamulato shacabka puntland oo la daaalaa dhacayay wadada isku xirta Garoowe iyo Gaalkacyo burburka iyo baa'ba ku dhacay ayaa waxaa nasiib wanaag noqotay in loo helo

Mashruuc dhisaya wada cusub oo isku xiri doonta Garoowe ilaa Gaalkacyo arinkaan waxaa uu u ahaa Shacabka reer puntland codkii ugu wanaasanaa ee ay maqlaan in muda ah isla markaana waxaa sidoo kale u wada riyaaqay dhamaan Bulshada Soomaaliyeed oo ay wadadani u tahay halbawle, waxaa la gaaray bilowgii hawsha waxaana si toosa u bilaamay hawshii Xulida Shirkada lasiinayo qandaraaska dhisida wadada balse muda aan badnayn waxaa soo if baxay kala shaki ay kala shakiyeen maalgeliyayaashii iyo hay'ada wadooyinka Puntland tasoo la sheegay in musuq maasuq uu ku jiro bixinta qandaraska,

Hay´ada GIZ oo sheegtay inay baareyso musuq maasuqa mashruuca wadooyinka




Madixii mashruuca ee GIZ Mr. Christoph Schmidt ayaa hadal kooban siiyey warbaahinta. Mr. Schmidt ayaa sheegay in mashruucan iska kaashanayana hay´ada wado-oyinka ee puntland PHA, isla markaana illaa iyo hada aysan iyagu dhankooda aysan la socon wax musuq maasuq ah, balse wararka musuq maasuqa la xariira oo ay warbaahinta shaacisay ay tahay muhiim in la eego ayna baaritaan ku sameyn doonaan, wuxuu sheegay inaan weli mashruuca uusan dhamaan balse ay shaqaaleysiin doonaan khabiiro soo baara inay dib u eegaan dhamaan habkii lagu soo xulay shirkadaha ku tartamaya qandaraaskan oo ku baxayo wajiga hore 6 milyan oo dollar,

''marnaba uma dulqaadaneyno wax musuq maasuq ah'' ayuu yiri maareeyaha GIZ hase yeeshee wuxuu Mr.Schmidt cadeeyey in mashruucan hawsha xulista shirkadaha tartamaya ay u xilsaaran tahay hay'ada wadooyinka puntland PHA, iyaguna GIZ dhankooda ay qaabilsan yihiin caawinta PHA iyo dhanka maaliyada.

**Hay'adda qandaraas bixinta dowladda puntland.**

Qandaraasyada Dowladda oo ay maamusha hay'adda qandaraas bixinta u qaabilsan Dowladda Puntland taasi oo la asaasay 2000, balse dib loo howlgaliyay 2014ka ayaa cilmi-baarista lagu sheegay mid uu ragaadiyay musuqmaasuq aad u balaaran (Corruption in Public Procurement) cilm-baaristu waxaa lagu iftiimiyay siyaabaha uu ku dhaco musuqmaasuqa la xiriira bixinta qandaraasyada, taasi oo lagu sheegay in Xubnaha dowladda wakiilka uga ha qandaraasyada ay la wadaagaan xogta qandaraasyada kaliya xubnaha ay isku qabiilka yihiin ama ay saaxiibada yihiin taasi oo meesha ka saaraysa in la helo Shirkado iyo hay'ado badan oo awood u leh fulinta iyo taaba galinta qandaraaska.

Sida lagu sheegay Cilmi-baarista qandaraas qaatayaashu waxay laaluushaan (bribes) wakiilada dowladda ee xogta qandaraaska u gubiya, iyadoo qandaraas qaatuhu bixiyo marka la saxiixo qandaraaska lacag ku salaysan wadarta guud ee ku baxaysa qandaraaska,waxaa jira saddex marxaladood oo musuqmaa -suqa qandaraasyada la xiriira uu u dhaco waxaana ka mid ah; baahinta qandaraaska, qiimaynta iyo kala saarka dadka hay'adaha ugu haboon ee fulin kara qandaraaska (Advertisment, shortlisting, Checking eligilibity).

Musuqmaasuqa Mashruuca Dhismaha Wadada Jalam ilaa Xarfo.

Mashruuca dhismaha wadada laamiga ah ee isku xiraysa Garoowe iyo Galkacayo oo qayb ahaan la dhisayo 80km oo ah inta u dhaxayso Tuulo Jalam ilaa xarfo, waa mashruucii labaad ee ugu weynaa ee puntland hesho muddo 25 sanno ah, waxaana ku baxaya 6 milyan oo dollar oo ay bixisay Midowga Yurub, mashruucan oo midowga yurub ay wakiil uga tahay hay'da GIZ ee dalka Jarmalka ay markii hore la qorsheeyay in si furan ay ugu tartamaan shirkadaha caalamiga ah ee wadooyinka dhisa iyo kuwa wadaniga ah ee dalka ka howlgala, balse qorshaasi waxa diiday oo hor istaagay Agaasimihii Hay'adda Wadooyinka Puntland PHA Eng Maxamuud Cabdinuur Aadan oo ku qanciyay dowladda iyo deeq bixiyayaashiiba in dalka gudihiisa laga heli karo shirkado isgaashaan buuraystay oo leh khidbarad xirfaddeed ay ku dhisi karaan wado 80 km ah, isala markaana haysta qalab iyo injineero ajnebi ah. Sida ay ku taliyeen Engineero iyo khuburo isugu jirta Soomaali iyo Ajnebi, waxay sheegeen in aan dhismaha laamigani uunan la mid ahayn wadooyinka laga dhiso gudaha magaalooyinka puntland, waxayna sheegeen inuu aad uga ballaaran yahay awooda qalab iyo khibradeed ee shirkadaha dalka, waxayna kula taliyeen in shirkadaha Ajnebi laga qaybgaliyo qandaraaska, kuwaasi ay ka mid ahaayeen shirkadii CCECC ee Shiinayska ahayd ee dhistay garoonka diyaaradaha ee Bosaso iyo shirkado turki ah oo muqdisho ka dhisa wadooyinka, kuwasoo oo soo dalbaday qandaraaskan,balse Hay'adda PHA iyo madaxtooyadda Puntland ay diideen.




Agaasimihii Hay'adda PHA Maxamuud Cabdinuur

**Yaa Maamulaya Qandaraaska Wadada Galkacayo.**

Sida ku qoran heshiis ay wada-gaareen dowladda iyo Midowga yurub, waxaa mashruuca si wadajir u fulinayaa hay'adda wadooyinka Puntland ee PHA iyo hay'adda GIZ oo wakiil u ah Midowga yurub, waxaana si wadajir u ah maamulay sanduuqa tartanka qandaraaska ee qiimaynaya shirkadaha hay'adda PHA iyo GIZ, sida ay sheegayeenn xogo lagu kalsoon yahay, Agaasimahii PHA,

wuxuu bedelay qorshihii hore loogu heshiiyay oo oggolaanay in dhowr shirkadood ay wada fuliyaan, balse wuxuu ku bedelay in hal shirkad ay qaadan karto qandaraaska, taasi waxay cabsi iyo werwer ku riday 7 shirkadood oo ka mid ah shirkadaha qandaraaska soo dalbaday, kuwasoo cabsi ka qabo in waqti hore si hoose loola heshiiyay hal shirkad oo kaliya.

Qandaraaska dhismaha wadada galkacayo waxaa kaloo si weyn ugu lug laha ninka lagu magacaabo C/qani Dhaashane oo markii hore ahaa agaasimaha waaxda mashaariicda ee Madaxtooyada, ka dibna loo magacaabay Xoghayaha Guddiga Qandaraasyadda Puntland, oo isagu dhinac madaxtooyadda ku xiran, isku jifi hoosaadna ay yihiin Madaxweynaha Dowladda Puntland Cabdiweli

Maxamed Cali Gaas, ninkan ayaa labadii sanno ee u dambaysay wuxuu siduu doono u maamulayay dhammaan qandaraasyada dowladu hesho iyo kuwa hay'adaha caalamiga ahi ay bixiyaan.

**Shirkadaha Dalbaday Qandaraaska.**

Sida ay sheegeen guddiga qandaraasyada dowladda iyo Hay'adda PHA, ilaa 9 shirkadood oo wadani ah ayaa soo codsaday qandaraaska dhismaha, waxaa ka mid ah shirkaddaha soo dalbaday Al-baashit oo uu leeyahay Ganacsada John Yaardi, shirkadan ayaa hore u soo dhisay buundooyin, oo ugu dambaysay labo buundo oo ay ka dhistay inta u dhaxaysa Kalabayr ilaa boosaso, waxay kaloo qaadatay  mashruuca lagu dhisayay dhisme labo dabaq ka kooban oo laga dhisay dekedda boosaaso, kaasi oo lacagtii ku baxday ay gaaraysay Sidee Boqol kun dollar.

Shirkadan oo xiriir fiican la leh qaar ka mid ah madaxda Hay'da Qandaraasyada dowlada, waxa sidoo kale dowladu siisay dhowr mashruuc oo kale oo ay ka mid tahay dhismaha suuq Cusub oo Bosaso laga dhisay.

Shirkadaha u tartamaya qandaraaskan waxaa ka dhex muuqata ELGAR oo shirkadii u horraysay ee laami ka dhista dalka, balse muddooyinkii u dambaysay waxaa ku dhacay dib-u-dhac, ka dib markii ay ku fashilantay Dhismaha Wadada Jidka sodonka ee magaalada Garoowe, waxaana la hakiyay qayb ka mid ah lacagihii qandaraas, waxayna taasi sababtay in liiska madow la galiyay oo laga mamnuucay mashaariicda JPLG.

Wadada Gaalkacayo waa wadnihii dalka isku xiraayay, qof kasta oo maray dariiqaas waa dareemi karayaa dhibaatada ka jirtay, mashruucan qiimaha uu dalka iyo dadka uu leeyahay waa mid weyn oo haddii la musuqmaasuqo loo ayayo tasoo sababi kartaa in mashaariic badan oo Puntland la siin lahaa dib loola laabto.

Dowladda Puntland waxaa qaar kamid ah shacbku u soo jeediyeen wakhtigaas in nidaamka qandaraasyada sidooda loo raaco oo la dabakho hababka iyo qaababka wanaagsan ee la xiriira faafinta, qiimaynta, iyo bixinta qandaraasyada dowladda, waxaa kaloo loo soo jeediyey in dib loo eego qaabka ay u shaqayso Hay'adda Qandaraasyada dowladda puntland.

Wax kastoo lagusoo maamulo qaab musuq maasuqa waxaa ay ku danbeeyaan faashil xun oo sababa fadeexo iyo dibu dhaca saameeya dowladda, dadka iyo dalkaba kadib markii ay cadaatay musuq maasuqa ka jira hay'adda PHA waxaa lagama maarmaan noqotay oo madaxtooyadu ka qasbanaatay inay xilka ka qaado Agaasimaha PHA waxaana ay u qornayd sidaan warqadii xilka looga qaaday.

*Madaxweynaha Puntland Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa xafiis kiisa ka soo saaray degreeto xeer Madaxweyne LR.21 ee March 03 2017 kuna saabsan xilka qaadis Guddoomiyaha Hay'adda Wadooyinka Puntland (PHA).*

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند الصومالية
الرئاسة
مكتب الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
THE PRESIDENT OFFICE

**Xeer Madaxweyne Lr.21 ee March 3, 2017, kuna saabsan xilka qaadis Guddoomiyaha Haya'dda Wadooyinka Puntland PHA**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland

**Markuu arkay:** Garowsaday baahida loo qabo isbadal lagu sameeyo Maamulka saree e Haya'dda Wadooyinka Puntland

**Markuu tixgaliyey:** Talo soojeedinta Guddiga sare ee Haya'dda PHA (BOD)

**Wuxuu Xeeriyey**

1. Wuxuu Xilkii ka Qaaday Guddoomiyaha Haya'dda Wadooyinka Puntland **Maxamuud Cabdinuur Aadan**
2. Waxaa xilkaas si KMG ah u sii haynaya Guddoomiye kuxigeenka Haya'dda Wadooyinka Puntland **Siciid Maxamuud Jaamac**
3. **Xeerkani** wuxuu dhaqan gelayaa markuu madaxweynuhu saxiixo

Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dowladda Puntland

Madaxweynaha Punland Cabdiwali Maxamed Cali Gaas ayaa 08.04.2018 booqasho aan horey loo shaacin ku tagey magaalo madaxda dalka Kenya ee Nairobi.

Safarka madaxweynaha punland ee caasimada kenya waxaa uun la ogaaday markii uu ka soo muuqday baraha

bulshada isagoo la sawiran qaar kamid ah dhalinyarada soomaaliyeed ee ku nool caasimada Kenya – Nairobi.




Safarkaas madaxweyne Gaas ayaa noqday mid uu kulan kala yeelayanay Hay'ada GIZ iyo safaarada Jarmalka ee Nairobi kulankaas oo quseeya dhismaha jidka garoowe iyo gaalkacyo oo xaalkiisu cakirnaa, bil uun ka hor bay ahyd safarikiisaa markuu xilka ka qaaday gudoomiyihii hay'adda wadooyinka puntland oo lagu eedeeyay eedaymo musuq-maasuq balse aan la horkeenin maxkamad.

Safaarada Jarmalka oo musuq maasuq aawgeed u joojiyey Mashruuca dhismaha Wadada Garowe Iyo Gaalkacyo.

Dowladda Jarmalka ayaa waday mashruuc lagu dhisayey wadada isku xirta magaalooyinka garowe iyo gaalkacyo, balse waxay sheegtay inay u joojisay sababo la xiriira musuq maasuq.

War-Saxaafadeed ka soo baxay Safaarada Jarmalka ee magalada nairobi ee dalka kenya ayaa waxaa lagu sheegay in mashruuca wadadaas lagu dhisayay ay u joojiyeen sababo la xiriira daah furnaan la'aan ka timid dhinaca hay'adda waddooyinka Puntland ee (PHA).

Sidoo kale war-saxaafadeedka waxaa lagu sheegay in mashruuca dhismaha uu qorshuhu ahaa inuu bilaawdo bishii April ee 2017, islamarkaana la soo geba-gabeeyo bishii May ee sannadkaan 2018, balse uu ku suurtageli waayey daah furnaan ka timid dhinaca hay'adda wadooyinka puntland ee dhinaca PHA.

Qoraalkaas markuu kasooo baxay safaarada dalka Jarmalka ee magaalada nairobi madaxweyne Gaas waxaa uu ku sugnaa shir kasocda magaalada kismaayo, shirkaas oo ay isugu yimaadeen madaxweynayaasha maamul gobaleedyada dalka.

Markii uu madaxweyne Gaas dalka kusoo noqdayba waxaa uu qabtay shir aan caadi ahayn waxaana laga soo saara laba war murtiyeed oo ku qotoma xaaladii shirka iyo hay'adii GIZ iyo xaalada jidka jalam iyo xarfo waxaaana dowladu sheegtay inaanay shaqada jidku istaagayn ee ay soconayso cid kastoo ka baxda wada shaqaynta ka mira dhalinta dhamaystirka jida waxaana ay ugu baaqday wada shaqayn iyo wada hadal.

**Haayada Shaqaalaha Rayidka**

Baarlamaanka Puntland ayaa kala diray Haayada Shaqaalaha Rayidka ah ee Puntland,

Tilaabadaan ayaa timid kadib markii Guddoomiye Ku Xigeenkii Haayada Shaqaalaha Rayidka ah Jaamac Xirsi uu baarlamaanka ka codsaday in ay kala diraan haayada isaga oo Guddoomiyaha ku eedeeyay musuqmaasuq.

Sanadihii u dambeeyay, waxaa lagu eedaynayay Guddoomiyaha Haayada Shaqaalaha Rayidka ah ee Puntland Mustafe Siciid Shabac in uu si musumaasuq daran ah u maamulay mashruuca tayeynta shaqaalaha “Capacity Injection Project” (CIP) oo Bangiga Adduunku uu ka caawiyo haayadaha dowladda Puntland taasoo aad loogu niyad jebiyay Dhalinyaraban oo wax baratay isla markaana u gashay tartan boosas shaqo kadibna

guushoodii laga musuq maasuqay. Mr Shabac waxaa ay aad isugu xiran yihiin Madaxweyne Gaas waxaana isla astayn jirey cida guusha la siinayo labadooda iyadoo laga dheehan jiray beelahooda.

**Mushruucii labaad oo mihiim u ahaa Bulshada Puntland ee ay waday Dowlada Jarmalka Hay'ada GIZ oo isaguna galay khal khal.**

Waxaa isaguna faashil uu soo wajahay mashruucii u adkaysiga abaaraha iyo u diyaar garowga bulshada ee isbedelka cimilada (*Strengthening Drought Resilience and Preparedness of Communities Project)* oo ay maal gelinaysay dowlada Jarmalka.
Waxaa kaloo isna Faashil galay Mashruuc ay maal gelinaysay bangiga horumarinta afrika oo isna ahaa u adkaysiga Abaaraha (*Drougth Resilience and sustainable Livelihood-phase II).*

Dhamaan mashaariicdaan waxaa ay kasocdeen gobalada mudug iyo nugaal waxaana ay u ahayd bulshada kunool dhamaan puntland ama somaaliya mashaariic mihiim u ah ha noqoto maaraynta abaaraa oo ah xanuun daashaday bulshada isla markaana gumaaday xoolihii, dadkii iyo deegaankaba iyadoo sanad kasta markuu roobku da'o ay dhulka korkiisa maraan biyo aan qiyaas lahayn hadaba labada mashruuc ee ah u diyaar garooga Abaaruhu waxaa uu ka shaqaynayay  xirida biyaha kore si loogu hakiyo dhulka korkiisa si dhulku ugu noolaado isla markaana looga faa'iidaysto baahiyo badan hanoqoto waraabka dadka, xoolaha iyo berahaba ee aynan biyuhu bada u gelin.

Hadaba maxaa Mashaariicdaas khalkhalka geliyay :-

Waxaa la oran karaa waxaa sabab u ahaa bararinta musuq maasuqa kadib markii hay'ada baasawey ay ku qabsatay

wasaarada deegaanka shaqadii isla markaana aan xataa la xushmayn baahida loo qabo mashaariicadan bilowga ah inaan muran la gelin si bulshadan ay dilootey abaaruhu ay maruun uga soo kabsadaan si ay xiliga abaaraha ay u helaan biyo ku filan iyo dhul daaqsina, taasina waxaa ay ahayd barmaamij ay waday tey wasaarada Deegaanku.

Murankii waxaa uu gaaray Golaha Xakuumada iyadoo sadex goor looga dooday kadibna arinku waxaa uu galay in loo codeeyo waxaana ay Wasiiradiin badankoodu u codeye-en in wasaarada laga wareejiyo loona wareejiyo dhamaan biyaha kore iyo kuwa hoosaba ina masuul katahay Hay'ada Basaweyn.
Waxaa xusid mudan Basawey waxaa ay tahay hay'ad isku dhex jirta Doowli iyo Ganacsataba mana aha shirkad ay si rasmiya Dowladu samayn ugu leedahay dhaqaalaheeda waxaana ay ku dhisantahay nadaamka public private partnership (PPP) waxaana ay tahay shirkad ay soo galaan dhaqaale aad u badan iyadoo maamusha biyaha magaala-da Bosaaso iyo wakaalada xooga korontada, warar xogogaala ayaa sheegaya inay dhaqaale isticmaashay si ay ula soo wareegi lahayd mashaariicdaas iyo dhamaan awoodahaas wasraadu lahayd.

**Kadib wasiirkii Wasaaradu muxuu sameeyey:-**

Wasaarada Deegaanka & Isbedelka Cimilada Puntland ayaa qoraal ku saabsan cabasho ay ka qabto siyaasada Biyaha ee Puntland oo dhawaan la ansixiyey u gudbisay golaha wakiilada PL.

Warqadan cabashada ah ayey Wasaaradda Deegaanku ku sheegtay in xeerka Biyaha Puntland oo ay dhawaan ansixiyeen golaha Wasiiradu uu xadgudub ku yahay habka maaraynta Biyaha Puntland. Xeerka biyaha ayaa dhamaan biyaha iyo maamulkooda hoos gaynaya Hay'adda biyaha ee PASWEN, iyadoo horey u maamuli jirtay biyaha hoose ee

dhulka oo kaliya, sida Ceelasha,waxaana uu meesha ka sarayaa xeerkani masuuliyadii wasaaradda ee ahayd maamulidda biyaha lakabka sare ee dhulka.

Wasaaradda Deegaanka ayaa maamulaysay biyaha sare gaar ahaana dhismayaasha kaabayaasha biyaha ee biyo xireenada, biyo-weecinta iyo xurfooyinka, taas oo ay wasaaraddu horey uga dhistay in kabadan 12-Biyo xireen oo waawayn iyo xurfooyin yaryar oo intaas kabadan.

17.08.2018 ayaa Wasiirkii Wasaarada Deeganku cabasho u gudbisay golaha wakiilada iyo degrootooyin ay qoreen Madaxaweynaha Puntland Dr. Abdiweli Maxamed Cali Gaas & Madaxweynihii hore ee Puntland Cabdiraxmaan Maxamed Faroole, kuwaas oo cadaynaya doorarka ay kala leeyihiin hay'adaha kaladuwan ee dawlada Puntland.

Hase ahaatee Baarlamaanka Puntland ayaa isagu ah mikda keliya ee dhawrta maalmaha kalfadhiyada iyo u codaynta iyo ka codaynta iyagoo badankoodu xarfaan ku yihiin ka hadalka dhanka jeebka taasana waxaa ay sababtay inaynan xataa dib u dhigin inta mashaariicda socotaa dhamaanayso mana aynan tixgelin Baahida loo qabo adeegyadan inay mihiim u tahay dadka ay sida dhabta ah u metelaan horaa loo yiri (Miidaanyo dhego maleh markii malag dhawaaqaayo)- xubnahani miyir maleh markii Doolar dhex yaacayo.) barlamaankii waxaa ay si indha la aana ama sidii lagu yaqaanayba ay gacmihii dhaadheera u taageen in mashaariicdaasi khal khal gasho. Baasaweyn oo ah shirkad ganacsato ah oo ay sheer ka yihiin niman ganacsata ah oo kusoo gala Barmaamij la yiraahdo Public Private Partnership (PPP) ayaa iyagu ah mashiinka riixaya dhamaan hawlahaan oo dhan mana la garan karo waloow shaki looga qabo inaynan raali ka ahayn Biyaha lagu hakinayo dhulka korkiisa kuwaasoo

suuqa ka xiraya kuwa ceelasha ee aadka lacagta looga sameeyo xiliga Abaaraha waana mashaariicda biya dhaaminta abaaraha. **(Dal ba'ow yaa kuleh)**

**23.09.2018 waxaa is casilay wasiirkii Wasaarada Deegaanka Dr. Cali Cabdulaahi Warsame.**

waxaana uu banaaka soo dhigay in dalka xaalada uu ku jiraa yahay khatar weyn isla markaana aan dan laga lahayn masuuliyadii loo dhaartay lana lugoynayo dalka iyo dadkaba musuq maasuquna uu dhaafay canshuurihii la qaadi jiray loona ban baxay boobka deeqaha calamiga ah ee dadka dhibaataysan loogu deeqay waxaana uu sheegay in dalka  khatar weyn ay haysato uuna u baahan yahay samata bixin isagoo cadeeyay dhamaan mashaariicdii socotay inay soo wajahday in la  fashiliyay taaso ay tahay in danta guud laga door biday danta gaarka.

**Wareegto ka soo baxday xafiiska madaxweynaha Puntland Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**.

Saleebaan Xaaji Cabdalle Sardheeye ayaa loo magacabay wasiirka cusub ee Wasaaradda degaanka iyo isbedelka cimilada Puntland. Wasiir Saleebaan Xaaji Cabdalle Sardheeye wuxu bedelay Cali Cabdullaahi Warsame oo maanta xilkaas iskacasilay, kadib eedayn u jeediyay Madaxweynaha Puntland oo u sheegay in waajibaadkii iyo masuuliyadii wasaaradda uu u wareejiyay hay'ado kale oo ka tirsan Puntland. Warsaxafadeedka ayaa u qornaa sidatan :-

*Madaxweynaha Dowaldda Puntland Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas ayaa maanta oo taariikhdu tahay 23 Sep 2018 magcaabay. Xeer Madaxweyne Lr.131 Sep 22, 2018, kuna saabsan magacaabid Wasiirka Wasaaradda*

*Deegaanka iyo Isbadlka Cimilada.Madaxweynaha Dowladda Puntland. Markuu Arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Markuu arkay: Aqoontiisa, kartidiisa iyo waayo aragnimadiisa shaqo, Markuu la Tashaday: Madxaweyne ku xigeenka Dowladda Puntland Wuxuu Xeeriyey*

*1.Waxaa Saleebaan Xaaji Cabdalle Sardheeye loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo isbadalka Cimilada 2. Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa markuu madaxweynuhu Saxiixo*

*wuuna saxiixay madaxweynuhu.*

Walow wasiirkan Cusubi uu lakulamay xili dhamaada iyo Buuq badan oo ka jira wasaarada Waajibaadkeeda shaqo.

03.10. 2018 waxaa dhacay xaflad lagula kala wareegay wasaarada Deegaanka halkaaso oo uu wasiirkii hore uu isagu wareejiyey xilka kuna wareejiyay wasiirka cusub walow wasiirku uu kuwareejiyey 2aba sano oo mushahar la'aana waana uu kula wareegay wasiirka cusub.

## Gudoonka Baarlamaanka Maxaa rida?

Maxaa rida Gudoomiye kastoo Baarlamaanka Puntland Gudoomiye ka noqda siibana Gudoomiye kazoo jeeda Sanaag haduu yahay waxaa xusid mudan lagaso bilaabo Dowladii AUN Gen. Cade Muuse iyo tan Gaas halka Dowladii Faroole ay isla dhamaysteen Gudoomiyihii Baarlamanka taas waxaa ay marag u tahay hanaanka danaysiga iyo masaaliixda gaarka ah in midkii ka hor yimaada loo adeegsado mooshinka Gudoomiyaha isla markaana laba rido.

**Arimaha Siyaasada Dowladda Federaalka**

Madaxweyne Gaas waxaa lagu tilmaamayay inuu kala mid ahaa Madaxweyne Faroole dhanka Xarig jiidka awoodaha waxaa dhawr jeer khilaaf kala dhexmaray Madaxweyne Farmaajo iyo Madaxweyne Gaas badanaaba khilaafkaas waxaa uu salka ku hayay laba arimood

1.Hishiisyada Caalamiga ah

2. Qaybsiga Deeqaha Caalamiga.

Dhamaan arimahaas waxaa ay ahaayeen kuwa marar badan looga hadlay si adag  amaba laga gaaray go’aamo wada shaqayn balse markasta waxaa dib usoo noqonayay khilaafaadkaas, kama marnay faragelin shisheeye siiba dowladaha Carabta waxaa Maamul gobaleedyadu isla qaateen inay yeeshan shir u gooniya kasoo ay ku samaysteen Midowga Maamul Gobaleedyadda iyagoo Gudoomiye u doortay Madaxweyne Gaas intii ka danbeysay dhismahaas waxaa sii xumaanayay xiriiryada iyo wada shaqaynta waloo lays booqanayay lana wada hadlayay shir ka dhacay kismaayo ayay maamulado ku go’aan sadeen inay Xiriirka u jaraan Dowladda Federaalka Somaaliya waxaa iyaduna dhinac socday Dowlada fadaraalka oo baraha Bulshada ku faafinaysay in ay siiso Dhaqaalo Dowlad Gobaleedyada  isla markaana ka dalbanaysay inay xisaab celin kasoo celiyaan siday u isticmaaleen  taasoo kasii xanaajisay Maamul gobaleedyada.

Shirkii ugu danbeeyay waxaa uu ka dhacay Magaalada Garoowe kasoo ay kasoo saareen qodobo xasaasi ah oo ka duwan wixii horoo dhan waxaa ay ku dhawaaqeen Xisbi Siyaasadeed ay ku midaysan yihiin Gudoomiyana ay u doorteen Madaxweyne Gaas Halka xilkii hore ee ahaa

Gudoomiyaha Madasha loo doortay Shariif Sakiin, waxaa ay ku dhawaaqeen inay Ciidamo isku dhafa dhisanayaan waxaa ay ku dhawaaqeen 30 casha kadib inay shirweyne ku qabsadaan magaalada Dhuusa mareeb  shirkaas oo ay ka qayb Gelayaan dhamaan Bulshada qaybaheeda kala duwan.

Madaxweyne Gaas waxaa uu kala kul may cadaadis balaran oo kaga yimid Bulshada reer Puntland lakiin dhegihiisu ma maqal inta dowlada u shaqaynaysayna waxaa uu ka xayuubiyey Xilalkii ay hayeen hawshiisana waa sii watay inkastoo aan la garan doonin waxa ay ku danbayn doonto.

Waxaa sidoo kale Cadaadis fuulay Gudoomiyii cusbaa ee madasha Shariif Xasan oo isaga doorashadiisu dodobaado ka dhinaayeeyn waxaa Baydhaba ka dhacay ruxan siyaasadeed inkastoo shariifku isku dayay inuu is difaaco balse waaa uu ku guulaysan waayay waxaana uu ku danbeeyay inuu ka dego dhamaan awoodii dalkana ka dhoofo.

Axmed Madoobe iyo kismaayo wuu dareensan yahay in lagu soo socdo balse waxaa maruu hadlay uu cadeeyay inaan doorashada maalin lagu darayn, isla markaana waxaa uu dhaliil kulul u jeediyay dowladda federaalka somaaliya inay dalka bur burinayso.

**Hosaynta Sharciga Waxay Sababtaa kobcinta Musuqmaasuqa**.

- Shirkadaha Xawilaadaha
- Shirkadaha Isgaarsiinta
- Shirkadaha Gaarka loo leeyahay

**Shirkadaha Xawaaladaha:-**

Xawilaadaha oo ah kuwa keliya ee maamula Dhaqaalaha Dalka iyadoo lawada ogyahay in ay Xawilaaduhu maamulaan dhaqaalaha Debedda kayimaada iyo dhaqaalaha Ganacsiga gudaha iyo debeda ukla goosha, hadaba Dowlada Puntland ma ka qaadaa Canshuurta ku waajibta mase ogtahay dhaqaalaha bilaha ah ee ay diraan ama lagusoo diro waase noocee nooca canshuureed ee ay ka qaadaan Xawilaadahaas.

Dadka xogo'gaal u ah kana shaqeeya Wasaaradda Maaliyada waxaa ay sheegeen in canshuurta laga qaadaa ay tahay lacag duuduub ah oo is af garad ah, halka jeeblaha maskiinka ah canshuurta looga qaado madax ka tiris waxa uu lasoo degey ama uu dhoofinayo ama uu gadayoba, hadba aan fiirino lacagaha Debeda ka yimaada iyo cashuurta ku baaqata.

**Lacagaha ay qurbo jogtu soo diraan**,

Lacaga ay soo diraan qurba joogtu waxay door muhiim ah ka qaateen tageeridda dakhliga qoysaska iyo joogtaynta dhaqaalaha, dibu dhiska Deegamada iyo kobaca dhaqaale e e ganacsatada iyo Dowladaba.

Soomaalida Qurbo joogta ah lacagaha ay dalka usoo diraan waxaa lagu qiyaasay in ka badan $ 1.3 bilyan taaso ku laba jibaarantay lacagta deeqda horumarineed ku baxady ($642 milyan) iyo shan jibaar heerka lacagta gargaarka aadaminimo iyana ku baxday ($253 milyan). Xawilaaduhu waxay dakhliga guud ee dalka ka yihiin boqolkiiba 24 taaso in badan ka miisaan wayn dakhliga dawladda, waxay kalo xawaalduhu ay talo ku leeyihiin maamulada, hadaba marka aan Puntlaan u noqono waxaa lagu qiimeeyn karaa markaan yaraynoba in 30% Reer Puntland yihiin iyadoo $100ka dolar laga qaado qidmad aad u saraysa oo ka

madax banana lacagta ladirayo, lacagtaas $ 1.3 bilyanka ah oo ay qurbajoogtu soo diraan meeqa ayay xawilaadaha Puntland maamulaan markay 25% Puntlander yihiin waxay u dhigmaysaa lacag u dhiganta $325 Milyan waa lacag badan mana jirto khidmad canshuureed laga qaado oo aad ka dheehan karto dakhliga Dowlada Puntland. Miisaaniyadii ugu danbeysay ee Puntland waxaa ay ahayd $ 92,713, 364 tasoo ay dhaqaalaha ay maamulaan Xawilaaduhu ay sadex jeer ka badan tahay miisaaniyad dalka.

Marka aad weydiiso xawilaad layaasha waxaa ay kuugu jawaabayaan inaynan wax ku baaqdaa jirin.
Marka aad dhanka kale fiiriso dhamaan xawilaadah ka shaqeeyay dhulka Soomalidu ku nooshahay ee Afrika waxaad xafiiskasta oo xawilaada ugu imaanaysaa xubin canshuur ilaaliye ah oo fadhiya isagoo awood u leh inuu lasocdo dhaqaalaha baxaya iyo dhaqaalaha imaanaya wuxuu kaloo kaantaroola dhaqdhaqaaqa lacagaha debeda lagasoo diro halkaas baan dawladu canshuurteeda ka ilaashataa isla markaana ku goosataa sida Itobiya.
Waxaan kusoo koobayaa dhaqaalaha ku maqan waa dhaqa ale dadka iyo dalkaba wax u qaban lahaa mana aha wax mihiima in shirkadahana la naaxiyo shacabka iyo dalk -ana la caataysiiyo.
Lama qarin karo doorka wax qabad ee ay sameeyeen Xawilaaduhu xiligii aan isgaarsiinta casiriga ahi jirin dalka iyo dadkuna soo wajahay Burbur halkaa oo ay xawilaaduhu ina kasoo qaadan diraha ay gacanta u gelin jireen loo diraha geyiga Puntland shirkada Amal Bank waxaa ay ka mudan tahay Xusid.

**Shirkadaha Isgaarsiinta :-**

Puntland waxaa soo Maray shirkada Isgaariin oo badan balse badankood waxaa ay ka bexeen hawada sababo kayimid Dagaal Ganacsi oo wajahay iyo mid dhexdooda ka

dhacayba, hadaba waxaan kasoo qaadanaynaa shirkada ugu weyn isla markana ah mida ugu macaamiisha badan Puntland.Shirkadda Golis Telecom Somalia oo ah shirkad si gaar ah loo leeyahay waxay ku caan baxday inay bixiso adeegga isgaarsiinta howlo kalena way gashaa. Shirkaddu waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo ay ka mid yihin; Hadalka (GSM), Sahal, Koronto iwm.

Waxay shaqaalaysiisay shaqaalaha ugu badan ee Puntland ka shaqeeya shirkad waxay bahwadaag la tahay shirkadaha isgaarsiinta ee ka jira Koonfur (Hormuud) iyo Waqooyi (Telesom). Waxaana maskaxda lagu aasaasay lahaa Mr. Axmed Nuur Jimcaale oo xilli badan hantidiisu u xayirnayd howlo lagu eedeeyey, ugu dambayntiise loo siidaayey. Shirkaddaan waxaa sheerer ku leh dad badan waloow ay u badan yihiin koox culimo ah (Al-Ictisaam). Shirkadda waxaa maamula culimada, iyo rag aan ka ag fogayn wax gabar ahani uma shaqayso aan ka ahayn nadiifisada. Shirkaddaan waa shirkad Kelihayste ah (Monopoly) ah.

Deegaannada (Puntland) waxay ka tahay dowlad calan leh, waa shirkadda ugu faa'iidada badan ee aan innaba khasaarin. Shirkadda Golis waxay si aan arxan lahayn uga faydaysataa bulshada taagta daran ee maamulka puntland, dowladdu sharci saxa oo haga shirkadaha ma lahan taasina waxay keentay inay si dhiig miirasho ah shacabkii taagta yaraa oo noloshoodu kula soo baxayey kaarka shirkaddaan ay uga faydaysato ayadoo ku soo dallacaysa lacag aan caqliga galayn daqiiqaddiiba.

**Khaladaadka shirkaddu shacabka ka gasho, sababaha iyo Xalkaba waxaa ka mid ah;**

Khidmadda adeegga ay bulshada oo aan macquul ku ahayn heerka nolosha bulshada ay u adeegayaan.
Sababta:

Maamulkaan PL oo aan danayn heerka nolosha bulshadiisa, inay musuqmaasuqaan hantidii lagu aamminay ma ahane, Wasaaradda Isagaarsiintu ma lahan xeerka ay ku ilaaliso shikradaha Isgaarsiinta, hadday leedahayna ma fuliyaan ee armaajaday ku sharraxdaan xafiiskoodana ma soo dhaafo sharcigaas, ama xeerkaan aan wax arxan ah u falayn bulshada iyo nolosheeda.
Xalka:

**1.** In wasaaradda howshaan ku shaqo lihi ay jaangoyso (Price ceiling) khidmadda ugu badan ee ay saari karto shacabka maaddaama ay tahay shirkad (Monopoly) ah. Haddii ay xeerkaas jabisana ay mudanayso ciqaab sharcigeeda ganacsi diiq lagu gelinayo isla markaana ay ku dhacayso ganaax adag si ay shacabka ragaadinta uga daayaan.
**2.** Khidmadda oo ay dallacdo ayada oo aan bulshada ogaysiis siinnin (ogoow: Si ay sumcad u samaysato hal santi haddii ay dhinto/yarayso khidmadda adeegyadeeda dhambaallada ay soo dirayso kaydiyaha (Inbox) dhambaalladduu ka buuxiyaa).Waxaa keenay: "Sharci la'aanta waddanka ka jirta, iyo baraarug la'aanta shacabka, Tusaale; waxaad ku soo shubtay $2 (labo doollar), waxaad rabtay inaad la hadasho debedda, ogoowna qiimaha waad ku xisaab tamaysey oo waxaad u haystay kii hore ee aadku baratay, nasiib xumo daqiiqado yar markaad ku hadashay wuu kaa go'ay adigoo aan dantaadii dhammaysan bal isweyddii maxaad adigu dareemi lahayd hadday saas kugu dhacdo.

Waa inay shirkaddu dhambaal ahaan u soo gudbisaa khidmadda ay siyaasiday maaddaama ay jiraan shirkado la tartamaya (Somtel) oo ay ayadu suuqa ka hor taagan tahay, shayga ugu weyn ee lagu tartamayana uu yahay khidmadda hadalka iyo qancinta macaamiisha.
.3. Adeegga Sahal: Waa adeegga lacag shubista moobilka oo ah horumar la gaaray, waxa keliya ee aad ka diri kartid

waa Doolar (Ma USA baa dalkeenu? sow ma lihin lacag noo khaas ah?! SO. SH), tanina waxay soo jiidatay sicir bararka bulshada reer Puntland ay had iyo gooraale ka cabanayaan. Adeegaas wasaarada maaliyadu iyo dowladuba ma aha inay masuuliyadoodu tahay Canshuur qaade keliya, waxaa Iyana waajib ku ah inay ilaaliyaan hantida Mawaadiniinta Bangiga hawada looga dhigay Xoola hoodiina lagaga shubtay adeega Sahal mana muuqato Bangi dhexe oo lasocda hantida Dadka oo ka baxsan shirkada.

4. Tayo Xumo: Haddii aad damacdid in aad wacdid qof agtaada fadhiya (tijaabo) khadkeedu inuu galo waxay ku qaadanaysaa muddo badan. Ogow adeegga sidaas ahi waa kan ugu qaalisan geyiga Soomaalida (SL & Koonfur). (Aar lagugu sii daayey otolladuu ku jabiyaa)! ": Adeegga oo ay gaarsiisay xaddii ka badan intii ay awoodday, taasina waxay keentay anfaco wadaag. Dowladda oo aan lahayn waaxda (Wasaaradda war faafinta) hubinta tayada adeegyada bulshada la siinayo.: In shirkadda lagu sanduuleeyo inay soo iibsato xaddi ku filan dhulka ay ka howl galayso. Haddii kelena loo xadedo awoodeeda inaynan dhaafi karin!

**Canshuuraha ku waajibay malaga qaad mise lagama qaado.**

Shirkadan Golis oo ah mida ugu weyn shirkadaha isgaarsiinta waxaa lagu qiyaasaa in leedahay macaamiisha ugu badan ee reer Puntland waxaana lagu qiyaasaa in ay sitaan Karka GSM 76% dadka isticmala, halka Internetka ay isticmaalaan  dadka kaararkaas wata in ka badan 55%, Sahalka waxaa Iyana la orankaraa waxaa isticmaala dadka kararkas wata in ka badan 91% waxaa kaloo jira Korantada oo la oran karo magaalada Bosaaso oo ah xarunta ganacsi inta badan iyadaa haysata Suuqa ugu weyn ee Boosaaso iyo xaaafadaha qaybtood hadaba

shirkada samaysay baaxadaas ganacsi oo weliba la oran karo faa'iidadeedu waa 300% inaan laga dheehan karan Canshuur laga qaado miisaaniyada Puntland hadaba hadaan kormar ku samayno canshuurta ku baaqata shirkada Golis.

Tirada Dadka ku dhaqan gobalada Puntland ayaa lagu sheegay 4,284,633. Qof Tiradaasna waxaa la oran karaa mushtamaca ay ka haysato shirkada Golis inay ka badan tahay dadka qaan gaarka ah in ka badan 3 Malyan oo qof hadaba marka ay 76 % ay yihii macmiil Golis meeqa lacaga baa Bishii u xaroota Shirkada inaga oo hayna xogta qarash ee qofka ugu jeeb liita uu siiyo shirkada hadaba waxaa halkaas kaaga soo baxaya oo kugu filan xaqiiqda jirta ee ah in dadkiina la baartay xaquuqdii dawligana lagu darsaday.

Hadaba yaa leh eeda Madowlada mise Shirkada eedaas waxaa leh Dowlada oo ka gaabisay kuna bedelatay wax loogu yeero DuuDuub Canshuureed oo meel ay kaga jirto sharuucda canshuur qaadida aan la aqoon.

**Xaquuqda Shaqaalaha u shaqeeya Golis.**

Waxaa kashaqeeya tira kabadan 400 sahqaale ah dumarku ma dhama 3% shaqaalaha dowladu ma canshuurto Mushaharka shaqaalaha.

Xaquuqda waxaa tusaale kuugu filan
06/2018 waxaa shaqo isagoo ku jira oo saran Baale Koronto lagusoo fasaxay Koroto halkaas oo u ku geeriyooday Marxuum Axmed Saciid Jamac Maxamed oo ku shaqaynayey xirfada Korontiistaha isagoo ahaa nin dhalinyara ah oo laba caruura iyo Hoyadood ifka kaga tegey, shirkada Golis ma aynan Bixin Xaqiisi iyagoo banana ka mariyay Ehelkiisii Diyadii uu lahaa taasoo ah inaanay xaquuq lahayn shaqaalaha shaqada dhexdeeda ku

dhinta ama kunaafooba mana jirto wasaarad dulmigaas kala xisaabtanta shirkadaha.

**Halkudhigyada Lagu Xasuusanayo Madaxweyne Gaas.**

Waxaan Cabdiwali Cali Gaas Ku Xasuusan Doonaa Hadaladiisii Ahaa:
1. Puntland Waa Gabar Gaari Ah oo Sanad Walba Aalkuluuste Guursataa.
2. Puntland Waxaa isugu Haray Juhulo iyo Fuqura ah.
3. Ganacsatada Puntland Al shabaaba Ayay lacagta Siiyaan maxay Dp World u Diidayaan.
4. madaxdii horaa qolo warqad u qortay oo kusoo dartay reerka, waxayna markaa ka yimaadeen qayb kamida iyaga oo ay isla dhasheen, muda kabacdi bay qoladii laga yimid damceen inay iyaguna kusoo biiran balse iyagii baa udiiday oo yiri anaga ma tihidin ana warqad baan u qoray iyagii.
5. Raganimo indha adayg ayay igaga hartay. 6. Nasteexo indho waa na shiday.

7. Af Urur shabaabku caruur ayey ku laayeen ee askar ma aysan dilin.
8. Inkaar haku dhacdee muxuu u qoray waraaqda uu ku leeyahay Dakada Dp world Ma Dhisi Kartaan.
9. Ma kugu wallaahibaa ma kugu billaahibaa layskuma dhaariyo anaga dastuur ayaan leenahay dhaar ayaa noogu taal dastuurka.
10. Wadanka iyo dadka xorbuu ahaa sanadihii kacaanka ka horeeyay 1960-1969 democrasiyad dhabaa ka jirtay, Siyaad Bare ayaa been noo sheegay oo na yiri dowladihii hore musuq maasuq ayay ahaayeen, maba jirin Siyaad Bare Hortiisa musuq maasuq, waayo musuqu digtaatooriyada ayuu la bilowday.
11. Somaliya Mogadisho maaha, Mogdishana Somaaliya maaha.
12- Puntland waanu iib gaynaynaa.

13- Mar Gaas wax laga waydiiyay Lacagta falsada ahayd ee Boosaaso kusoo Saari Jiray Waxuu Yiri adigaanba kaa maqlay lacag Faalso ah in lasoo saaro.
14. Saacad kaliya midgaan noqo.
15. Baran waxay ka dakhli badantahay Qardho.
16. Wiil ka yimid Xudur, Diinsoor iyo Buurhakaba oo kabo dacas ah qaba dalka inuu nagu xakumo suurta gal ma ahan wax aan yeeli karnana ma ahan.
17. Anagu shacabka warkooda kuma shaqayno.
18. Sano ka bacdi kursiga aan ku fadhiyo nin midgaan ah ayaa ku fadhiisanaya.
19. Midgaha maalin aad xustaan ayaan idiin samaynaynaa.
20. Hadii Banki Moon yimaado waxaan leenahay NO 4.5
21.Somaliland waxaan ku qaadaynaa dagaal dabo dheeraada 22. Siigaysiga Siyaasada!
23. way nasoo weerareen weyna nagusoo socdeen ilaa ay sariirt korkeeda noogu yimaadeen (tuka raq)

**Heerka Musuqmaasuqa Dowladnimo ee Xukuumadan dhamaadka ah ee Madaxweyne Cabdiweli Gaas.**

Ilaahay biniaadamka wuxuu ku manaystay dareen iyo garasho u kala bayaanisa waxa xun iyo waxa fiican, sidaas awgeed, waxaan qalinka usoo qaadanay manta in aan wax ka qorno musuqmaasuqa dilooday maamulka Gaas islamarkaana aan waydiino dhowr su'aalood oo u baahan jawaab iyadoo waliba aan bulshadeena u bidhaamin doona kufsiga dowladnimo ee dhaqanka u noqotay dowladda Gaas.

Waxaanu ka mid ahayn dhalinyaraddii aqoonyahanadda u dabaaldegay doorashadii Gaas ee 8 Jan 2014 anagoo islahayn waxaad hesheen wiil hal door ah oo aqoonyahan ah oo wax u qaban kara reer Puntland balse (la hubsayoo goroyo haad bay noqotay).

Soomalidu sidoodaba waxay la degdegaan amaanta. Waxaa baraha bulshada qabsaday amaan xad dhaaf ah iyo boogaadin kusocota Madaxweyne Gaas iyadoo sawiro badan oo nin shiines ah iyo Khadar Faroole iyo Gaas oo wada qoslaaya baraha laga soo buuxiyey looguna hambalyeenaayo mashaaric lagu tilmaamay kaabayaasha dhaqaalaha.

Hadaba runtu maxay tahay iyo ujeedka dahsoon ee farsamaysan ee uu Gaas la ciyaaraayo bulshada xalaasha ah ee reer Puntland iyo Somaliweynba? Maxaa keenay in Gaas uu dhagaxdhigo garoonka Gaalkacyo iyo jidka Eyl iyadoo markaas ay garoonka Bosaso iyo kan caasimada Garowe ay qabyo ahaayeen? Ma wuxuu soo wadaa qabyo ninkeeda ayaa dhamaystiri karo ee xukunka hala ii kordhiyo? Cajaa'ib!! Bal aynu dib uyara milicsano taxanaha mashaaricda Gaas ku dhawaaqay ee kaabayaasha dhaqaalaha iyadoo aynu ognahay in dhamaan mashaaricda garoonadda ee Puntland ay ahaayeen kuwo dowladihii hore ay kasoo shaqeeyeen soona diyaariyeen lagasoo bilaabo dowladii Cadde Musse (AUN) iyo tii Faroole. Taasi awgeed, waxaanu dhehi karnaa in guusha uu hada Gaas sheeganaayo ay tahay libin rag hore soo shaqaysteen balse fulinteeda ku soo aaday wakhtiga xukumaddiisa inkastoo hadafkii laga lahaa aan weli laga sal gaarin taasoo ay ugu wacan tahay markii uu Gaas u bedeley hankii bulshada reer Puntland mashruuc uu ku naaxiyo jeebkiisa iyo kan asxaabtiisa.

Aan ku bilowno heshiiskii dekedda Bosaso ee uu lagalay ninkii Falastiiniga ahaa Cabdalla Darwiish ee lahaa shirkadda Aqua Divers 2015kii loona saxiixay 25ka sanadood. Waxaa heshiiskaasi dilaal ka ahaa Captain Ciise Xaaji Faraax, waxaana Gaas lasiiyey sooryo(bonus) dhan 1.2 million (Wasiir Abdalla Jama Saalax isna wuxuu helay 200,000 dollar) halka khasnadda dowladda Puntland aysan hal senti kusoo dhicin inkastoo markii dambe heshiiskii socon waayey oo ay is arkeen looyaradda shirkada P&O

(P&O waxay markaasi danaynaysay la wareegida dekeda Bosaso) oo dowladda Puntland metelayaa iyo kuwa Aqua Divers dabayaaqadii 2016 iyadoo dhaqaalihii kaga baxay dib loogu celiyey sanadkan 2017 biloowgiisii inta aan P&O lagu wareejin dekeda Bosaso. Hadaba, markaad eegto heshiiskaasi, su'aalaha u baahan jawaabta waxa weeye: Muxuu heshiisyada Gaas u horkeeni waayey Golaha wasiirada iyo Baarlamanka inta uusan qalinka ku duugin? Muxuu sidoo kale ula wadaagi waayey labada gole nuqulka heshiisyada oo saxiixan? Muxuu u qariyey xogta heshiiska uguna koobay isaga iyo wasiirkiisa hore ee dekedaha Abdullahi Jama iyo Captain Ciise Xaaji Faarax? Muxuu khubaradda reer Puntland ula tashan waayey? Muxuu Gaas lacagtii dilaalka (bonus payment) ee 1.2 million dollars uu magaca reer Puntland kusoo qaaday khasnadda dowlada ugu shubi waayey? Kasoo qaad, hadduu gadaal ka ogaaday in heshiisku dani ugu jirin Puntland, muxuu looyaradda P&O u isticmaalay oo dano gaar ah wata oo uu Looyaro Puntlanders ah iyo kuwo caalami ahba u qabsan waayey? Misse dilaalkii baa lagalay halkaas iyo P&O? P&O uma ahayn doowlada Puntland qareen ee waxaa ay qareen u ahay masaaliixdeeda iyo si ay iyadu ula wareegto Dekedda dhaamaan arimuhuna maba ahayn Disme ee waxaa uu ahaa uun kiraysi Dekedda lakiraysanayay si aan wadamo kale ama shirkada kale aynan ula wareegin iyagoo dantoodu tahay in aan dhulkaas Deked weyn aynan ka hirgelin. (dagaalka qaboob ee ganacsiga)

Maxaa hadana loo qariyay hishiiskii labaad ee P&O oo weliba ahaa mid muran badan dhaliyey kasoo xanibay Ganacsigii Bosaaso iyo shaqadii Dekedda Muxuu Gaas uga dhega adaygay Dadaaladii Isimadu ku xaliyeeen khilaafkii Ganacsatada iyo shacabka qodabadii 4 ahaa ee ay dalbeen in dawladu keento oo ay ku jirtay nuqulka saxda ah ee Hishiiska.

Aan usoo noqono heshiisyadda uu lagalay shirkadda CCECC ee shiineeska ah oo ay dilaalka ka yihiin Khadar

Faroole iyo Abdiaziz Maxamuud xaaji seyn. Waxaan lasoconaa in dabayaaqadii 2016 uu Gaas safar ugu ambabaxay Addiis Ababa halkaasoo heshiisyo lagu galay qol mugdi ah oo ay kala saxiixdeen shirkadda CCECC iyo Dowladda Gaas. Inkastoo qodobada heshiiska la qariyey, hadana waxaan ka ognahay in lagu heshiiyey in shirkada CCECC ay dhisto garoonka diyaaradaha Gaalkacyo, Dekeda Garacad iyo jidka isku xira Eyl iyo Garowe inta laamiga ka leexsan iyadoo shrikadda CCECC ay bedelkeeda lasiiyey xuquuq xad dhaaf ah oo xaga macdanta, shidaalka iyo kaluumaysiga. Waxaa dilaal ahaan Gaas lasiiyey adduun dhan 3.5 million dollars, halka Khadar Faroole lasiiyey 1 million dollar, Xaaji seyna lasiiyey 150,000 kun oo dollar isagoo ka wakiil ahaa Hay’ada Macdanta iyo Shidaalka halka Wasiir Kulmiye isna loo xantoobiyey adduun dhan 150,000 kun oo dollar isagoo ka mas’uul ahaa xaga kaluumaysiga. Waxaa wax lalayaabo ah oo muujinaysa heerka uu ka gaaray Gaas qabyaaladda in iyadoo ay joogeen Wasiirkii Kaluumaysiga Biindhe iyo Agaasimihii Macdanta iyo Shidaalka Ciise Dhoolawaa uu Gaas bedelkooda Addis Ababa usii kaxaystay Wasiirul Dowlaha Kaluumaysiga Kulmiye iyo Xaaji Seyn (wax ma akhriyo waxna maqoro) oo ku magacaaban Ku Xigeenka Hay’ada Macdanta iyo Shidaalka Puntland.

Hadaba su’aalaha u baahan jawaababaha xili kastaba hanoqotee in la weydiiyo madaxweyne Gaas ee ku taxaluqa heshiiskan ayaa ah sidatan:

Waxaa la ogaa in bishii Maarso, 2017 uu Gaas shirkii golaha wasiirada ka siiyey warbixin ku saabsan heshiiskii uu la galay shirkada CCECC isagoo aan wax cadayn ah soo hordhigin ama nuqulka heshiiska iyo cidda saxiixday. Hadaba waxaa Gaas caadou ahayd in uuna cidna la tashan waayo muxuu ula wadaaagi wayay golaha wasiiradda iyo Baarlamaankaba nuqulka heshiiska, cidda saxiixday iyo faafaahin dheeraad ah?

•Xalaal barqaa la qashaa!!! ka hadli mayno warbixinta aad soo malmaluuqday ee Saciid Farax Yare golaha wasiiradda ka akhriyey iyo tan aad afka ka sheegtay balse waxaanu ka hadlaynaa maxaad labada gole ula wadaagi wayday nuqulka heshiiska si loo wada ogaado waxa ku qoran in ay dan u tahay Puntland iyo Somalia? (goluhuse Maxay u garan waayeen iyagu)

•Maxaa ka jira in aad u saxiixday oo aad siisay "oil blocks" ama goobihii lagu tuhunsanaa in shidaal ku jiro shirkada CCECC?

• Imisa "oil blocks" ayaad saxiixday?

• Halkii oil block'ba imisaad ka qaadatay lacag?

• Xogta aynu hayno waxay sheegaysaa in gobolka Nugaal aad saxiixday ilaa afar block oo ay shirkado Mareykan ah hore u laahaayeen sida Kalis 1, Kalis 2, Burtinle 1 iyo Burtinle 2. Maxaa ka jira warkaasi?

•Waxaad kaloo u saxiixay labo block oo kuyaal Gobolka mudug. Maxaa ka jira warkaasi? Waxaad kaloo u saxiixay ilaa labo block oo ku yaal gobolka Karkaar. Maxaa ka jira warkaasi?

•Maxay tahay xiriirka ka dhexeeya shidaal barista shirkada CCECC ay ka wado gobolka Ogadeeniya ama kalilka shanaad iyo tan uu u saxiixay shirkada CCECC?

Maxay tahay kaalinta dowladda Ethiopia iyo shirkadaha laga leeyahay Ethiopia ku leeyihiin heshiiska aad la gashay shirkadda CCECC ee xarunta ku leh magaaladda Addis Ababa?

Maxaa ka jira wararka sheegaaya in mustaqbalka loo adeegsan doono ciidamada federaalka Ethiopia ilaalinta danaha CCECC ee Geeska Africa iyadoo laysku xiraayo howlaha shidaal barista kiliilka iyo tan Puntland?

Waxaanu ognahay in dowladaha reer galbeedka oo hore u lahaa oil blocks'ka Puntland ku yaal iyo Soomaliyaaba ay isha ku hayaan waxa ka socda Puntland. Maxaa kaaga qorshaysan khatarta ka iman karta heshiiskan aad saxiixday maadama ay dowladaha reer galbeedku yihiin kuwa lagu magacaabo deeq bixiyayaasha Puntland iyo Soomaliyaaba?

Waxaanu ognahay in jidka Eyl aada ee ka leexda laamiga uu dhereerkiisu yahay 120 kilometer. Sida nagu maqaal ah, waxay shirkadda CCECC ku dhisaysaa halkii kilometer 1.3 million dollars taasoo wadarta guud ka dhigaysa 120kmx1.3=156 million dollars. Hadaba Gaasoow lacagta baaxadaasi leh halkeebaa laga keenayaa? Misse dalkii baad rahan dhigtay?

• Waxaanu nagu maqaal ah in garoonka Gaalkacyo lagu dhisi doona adduun dhan 23 million dollar. Gaasoow, halkeebaa laga keenayaa lacagtan iyadoo garoonkii Bosaso iyo kii caasimadda Garoweba qabyo yihiin?

Gaasoow, xaruntii madaxtooyadda Galkacyo ee aad labo sano ka hor dhagax dhigtay meel ku sheeg?

Macdan intee le'eg bay shirkadda CCECC ka qodan kartaa degaanadda Puntland?

Saami imisa le'eg ayaad ku leedahay shirkadda CCECC? Muxuu yahay xiriirka idinka dhexeeya adiga iyo Allen lee oo ah Executive Officer'ka shirkadda?

•Waxaanu ognahay in maraakiib kaluumaysi oo tiro badan ay ku sugan yihiin xeebaha Puntland oo ay dilaal ka yihiin Khadar Faroole, Xaaji seen, buurbuurka ilmo Maxamud Gurey iyo ilmo Xaaji Xassan iyo Wasiir Kulmiye. Hadaba, imisa maraakiib ayeey shirkada CCECC leedahay iyo imisaa adiga iyo ragaaga ugu jira? Halkee ka dhacday canshuurtii laga qaadi jiray maraakiibta noocan oo kale? Misse waxaad u qortay canshuur dhaaf abadiya ah?

Bal haatana aan yara milicsano heshiiskii la buunbuuniyey ee dhexmaray P&O iyo Puntland iyadoo lagu gudoonsiiyey mudo dhan 30 sanadood shirkada P&O dekeda Bosaso. Horta sida caqliga caafimaadka qaba iyo dowladanimaduba inoo sheegayso heshiis walba waxaa kasoo shaqeeya farsamo yaqaanadda khubaro labada dhinac ah taasoo mudo soo jiitanta kadibna iyadoo howshu soo gabagaboowday heshiiska si rasmi ah loo kalasaxiixdaa. Tusaale, heshiiskii Somaliland iyo Dubai Ports waxay wadahadalka gudiyadda farsamada labada dhinac soo socotay mudo ka badan labo sanadood iyadoo qolo walba danteeda ka dhex muujinaysay qabyoqoraalka heshiiska inta aan madaxdu saxiixin.

Waxaanu ognahay in qaabka aan kor ku soo sheegnay aan loo marin heshiiskii Puntland iyo P&O kala saxiixdeen. Waxaa kaloo aynu ognahay in oday Gaas iyo oday Cumar Cabdirashid ay dilaal toos ah ka ahaayeen iyagoo kala qaybsaday adduun dhan 9.5 million oo dollar oo ka baxsanayd lacagtii bonuska ahayd ee la inooga sheegay 15 million ee dollar iyadoo cad quudheed loo tuuray gudoomiyaha baarlamanka Puntland, Wasiir Saciid Raage, Wasiir Axmed Keraash , Wasiir Cabdi Xirsi iyo Wasiir Abdulahi Raabiyo kadib markii kaarka la marsaday oo bulshada Puntland loo tusay in aan hishiiskaa cidi ka maqnayn heshiiskuna xalaal yahay taasoo runta ka fog.

Waxaan rabnaa in aan cadaynoo in lacagta Gaas iyo Cumar la siiyey horaantii February ee sanadkan markii ay labadooda keliyah safar degdeg u soo aadeen
Dubai caleemo saarkii Farmaajo ka hor, waxaa kaloo xusid mudan in buurbuurka ilmo Maxamuud Gurey iyo ilmo Xaaji Xassan, Safiya Basay iyo agaasimaha Xafiiska Gaas ugu magacaaban Warbaahinta ee la baxay Abwaan Cabdirashid loo tuuray xoogaa sandareero ah.

Docda kale, waxaan rabnaa in aan hoosta ka xariiqno in dowladda Gaas ay tahay dowladii ugu horeysay ee

Puntland soo marta oo ku guuleysatay in ay musuqmaasuqeeda la dulmarto baarlamaaanka si ay ugu xalaalaysato boobka ay ku hayso hantidda dalka iyo dadka. Waxaa cad in marka aad aragto habdhaqanka oday Gaas in uu khabiir ku yahay sida wax loo xado waana ayaan darro kusoo korordhay umadda Somaliyeed. Hadaba, su'aalaha u baahan jawaabaha degdeg ah waxaa ka mid ah:

•Maxaa banaanka loo dhigay kaalintii khubarada reer Puntland ay ka ciyaari lahaayeen diyaarinta heshiiskan?

•Waxaanu ognahay in heshiiskii dekeda Berbera ay wada galeen Somaliland iyo DP oo ay leedahay Dowladda Emirates. Hadaba maxaa heshiiskii Puntland loogu weeciyey shirkadda P&O ee qandarasleeyda ah oo waliba wax u dilaasha DP?

Warsaxaafadeedka waxaa ku cadaa in shirkadda P&O ku guuleysatay $336 million dollars. Hadaba, ma P&O ayaa tender heshay? goormaa tartanka la qabtay?

Maxaa nuqulka heshiiskani loogu soo bandhigi waayey golaha wasiiradda iyo baarlamaanka sida Dowladda Somaliland samaysay?

• Maxaa sida Somaliland yeeshay bulshada loola wadaagi waayey heshiiska?

•Sida aynu xogta ka helnay P&O gudaheeda sheegayso, waxaad adiga iyo oday Cumar Cabdirashidba jeebka ku ridateen adduun dhan $22.5 million marka laga reebo wax 6 million kayar intii kale yaa xaq idin siiyey in aad umadda magacooda inta ku qaadan aad dhacdaan?

•Maxay tahay kaalinta inaadeerkaa Bashir Abdulaahi Cali Gaas iyo Safiyo Basay ku leeyihiin maamulidda qandaraasyadda la bixin doono?

Gunaanadkii, waxaan Gaas leenahay mid, reer Puntlandna waxaan leenahay mid.

waxaa laga hayaa Madaxweynihii hore ee Mareykanka in Abraham Lincolin uu yiri " You can fool some people sometimes but you can't fool all the people all the time". Taasoo micnaheedu yahay, "Marmar baad dadka qaarkiis been u sheegi kartaa, laakin had iyo jeer dadkoo dhan been uma wada sheegi kartid."

Hadaba Shacabka Puntland ma mudan yihiiin in lagasoo garbaxo mase noqon karaan kuwa aan mar danbe aan la gaadi karin.

Madaxweyne Waxaad been u sheegtay maatadii, waxaad dayacday amaanadii, waxaad khaa'intay bulshadii, waxaad boobtay hantidii, waxaad lugooysay umaddii, waxaad iibgaysay dalkii, waxaad dhaxal wareejisay dadkii, waxaad rahantay dalkii iyo dadkii, waxaad hoos u dhigtay maqaamkii siyaasadeed ee reer Puntland!! Maxaa kuu haray oo maxaa noo haray???

Reer Puntland waxaan leeyahay mid.

Waad u jeedaan dalkii halka uu maraayo iyadoo uu Gaas nasaaray wadadii burburka maadama nabadgelyadii meesha ka baxday, dhaqaalihii burburay, eexdii iyo tuuganimadii caadi noqotay, shaqo la'aantii baahday, dalkii la iibgeeyey, caafimaadkii meesha ka baxay, biyo la'aan, gaajo iyo sicir barar taabtay bulshadoo dhan kadib markii ladaabacay lacag been abuur ah. Hadaba, maxaa la gudboon reer Puntland?

Waxaa runtii Puntland dadkeeda la gudboon inay xiligan dhamaadka ah ka fiirsadaan cida ay u xulanayaan Barlamaanka Xulashadiisu Bilaamatay hadaba si ay u noqdaa kuwa soo saari kara Madaxweyne dalkan kasoo Kabi kara Hagardaamooyinkii lagusoo sameeyay dhan

kastaba hanoqotee isla markaana kuwa noqon kara inay la xisaab tamaan Dowladda iyo Hay'adaheeda.

Markii uu Ray'sal wasaraha ahaa Gaas waxaa uu aqbalay dhismaha Maamul Gobaleedka Galmudug iyadoo Puntland uu Madaxweyne ka ahaa Dr. Faroole oo aan markaas kuba mashquulsanayn hawshii Federaalku wadeen ee ahayd in Galmudug Xaduudeedu tahay Buurtinle.
Ma gudbenimadu, ma ahan ogaal yari, aqoon la'aan ama aqoon maran, ee waa in aad is la qaladkii labo mar ku celiso, adi ha kaa dhaco ama qof kale ha ka dhacee, hore ha u dhaco ama hadaba ha dhacee, adoon dareensanayn dib u dhaca ka dhalanaya.
Waxaa ka sii daran, marka aad joogteyso, ee aad ka dhigato; sunno, siraad iyo sargoyn, sal u ah saldano maamul, sandaqad ganacsi iyo sabad qoys.

Ogoow, dhan walba, aqoon, ogaal, arag iyo agabba, waxaa ku socda, hormar ballaaran, marka laga reebo Ma fahmayaasha iyo Markhaatiyaasha meelahooda oo aad mooddo, in uusan halkiisii ka dhaqaaqin, haddii uusan dib u laaban!

### Samayntii Isbedelkii ka Dhacay Itobia.

Mala saadaalin karo isbedelkaan saamaynta uu yeelan karo balse waxaan shaki ku jirin hagardaamadii Imaara-adka iyo Dowladii Tigreegu ay ku hayeen puntlad inay dhamaatay, dhamaan Hishiisyo badan oo dhacayna ay noqonayaan kuwa faashila iyadoo weliba ay u badan tahay in shacabku si dhaba u ogaan doonaan waxay ahaayeen dhawaan.

### Waxay na badeen waxay na bareen baa ka daran.

Tan iyo dhismihii Maamul goboleedka Puntland sanadkii 1998 gobolada Puntland waxaa ay soo mareen marxalado kala duwan, maamullo kala duwan iyo madax kala duwan.

Maamuladii soo maray Puntland ayaa qaar ba dhinac ku fiicnaayeen, sida amniga, dhaqaalaha, kaabayaasha dhaqaalaha, maamul wanaagga, gaarsiinta adeegyada bulshada iyo waxyaabo kale oo tira badan, waxaa jirtay inay dhamaantood hal wax ka sinnaayeen kaas oo ah xalaalsashada xoolaha umadda iyo musuqmaasuqa.

Dowlad goboleedka Puntland ayaa ah maamul goboleedkii labaad ee la dhiso tan iyo burburkii dowladdii dhexe ee So malia sanadkii 1991. Ujeedooyinkii loo dhisay dowl-
ad goboleedka Puntland ayaa ahaa:

1.Inla ilaaliyo lana difaaco midnimada dadka kuwada nool gobolada Puntland.
2.inla taageero lana raadsho dhismaha Dowlad soomaaliye-ed oo ku dhisan nidaamka federaal ah
3.In Bulshada reer Puntland la gaarsiiyo adeegyada buls-hadu u baahantahay intan la awoodo.

4.In si cadaaladi ku jirto adeegyada Bulshada iyo dowladni-mada loo gaarsiiyo deegaanda Puntland.

5.In dadwaynaha ku nol gobolada Puntlad
la gaarsiiyo nidaam dowladeed oo qof walba codkiisa ku doo ranyo qofka uu rabo inuu xilka u qabto

Dhamaan qodobada kor ku xusan iyo kuwa kale oo badani waxaa ay ahaayeen ujeedooyinkii loo dhisay dowlad goboleedka Puntland.
Dadwaynaha ku nool gobolada Puntland ayaa noqday kuwa ka quustay gaarista goolashaas loo asteeyey ka dib markii ay ka leexdeen kuwii loo doortay inay gaarsiiyaan ama fuliyaan qodobada kor ku xusan ayna noqdeen danaystayaal ay dantooda shakhsiga ahi kala wayn tahay tan danta guud.

Waxaa xoog lagu qabsaday gobolada Sool, Sanaag iyo Cayn. Waxaa la baday dadkii ku noolaa goboladaas ciil iyo caloolyow ka dib markii ay waayeen cid ka dhicisa cadowga qabsaday ama uga soo gurmata, waxaa gaari waa lagu sheegay goboladii iyo deegaanadii baahida adeegyada dowladnimada qabay, waxaa la samaystay maamul shaqaalaysiintiisu iyo ka mid noqoshadiisu ay saldhig u tahay, eex, qabyaalad, musuqmaasuq, bahdil, nin jeclaysi ,kala hor marinta Deegaamada,Dadka iyo kuwa kale oo badan oo bud dhige looga dhigay ka mid noqoshada ama ka faa'iiday ´sashada adeegyada dowladda waxaana ayna sababtay inay hoos u dhacdo kalsoonidii shacab mid maamul iyo mid bulshaba.
20 Sano ka dib dadwaynaha reer Puntland waxaa ay ka quusteen inay gaaraan nidaam dowladnimo oo qofkasta codkiisa uu ku dooranayo qofka uu isleeyahay waakan rajadaada rumayn kara Puntland gaarsiin kara nidaam dowladeed oo ku dhisan taageersanna ujeedooyinkii loo dhisay.

**Waxay na badeen!**
Laga soo bilaabo madaxnimadii allaha u naxariistee Jeneraal Cadde Muse ilaa iyo madaxda hadda wakhtigu ka dhamaanayo.

Puntland waxaa ay qaaday waddo ka duwan tii loo dhisay, khilaafsanna ujeedooyinkii iyo ahdaaftii loo asaaasay.

Waxay nabadeen in Puntland noqotay goob loo soo shaqo tago lagana dhigto meel dhaqaale abuur laga sameeyo, waxaa ay noqotay meel xaaraantu, musuqmaasuqu, xatooyadu,maamul xumadu iyo waxqabad xumadu cadi ka noqdan.
Waxay na badeen Puntland inaynoqoto meel qurba joogtu dhaqaalo usoo doonato waxay na badeen in
Puntland noqotay meel qof kasta oo raba inuu dowladda ku

soo biiro ujeedkiisa ugu wayn yahay inuu dhaqaale kasama ysto.

Waxay na badeen in Puntland noqotay meel madaxdu (wasiirada, xildhibaanada, saraakiisha ciidanku, agagsimayaashu, shaqaalaha rayidka ah) iyo qofkasta oo k ale oo kamid noqdaa uu ku shaqeeyo laaluush, qabyaalad iyo danaysi shaqsiyadeed,
- Waxay na badeen in Puntland noqotay meel la isugu faano xatooyada hantida dowladda,

- Waxay nabadeen in Puntland noqotay meel midkasta oo umadda xoolaheeda xadaa uusan qarsan balse uu ku muujiyo guryo, gaariyaal iyo ganacsiyo uu gaar u leeyahay dadkana usoo bandhigo isaga oo aaminsan inuu samaynayo wax wanaagsa.

Waxay na badeen in cabsi daraadeed guryaha la galo ka hor qoraxdoon dhicin.
Waxay na badeen inaan shaki ku noolaano oo ay kalsoonidii lunto.

Waxay na badeen inaan hada Federaalba nacno oo aan u aragno in dhankaas nalooka soo dhacayba.
Waxay na badeen inaan marti kanoqono wixii aan lahayn ama aan wada lahay.
Waxay nabadeen inaan inaan qaxooti Puntland ku dhex noqono

**Waxay na bareen!**

Dhalinyaro, wadaado, odayaal, aqoonyahan, indheer garad iyo dhamaan qofkasta oo bulshada ka mid waxaa ay qaateen fikir ay ka siman yihiin oo ku aadan dowladnimada aan rabno inaan dadkeena barno ayna ka barteen macalimiintooda ku jirta maamulka sida Madaxweynaha, wasiirada, agaasimayaasha,

xildhibaanada, saraakiisha iyo shaqaalaha, waxay na bareen in xatooyada xoolaha umaddu ee xubnaha dowladd u cunaan caadi tahay xalaalna ay
utahay xubunaha dowladda waxay na bareen in aan tuuga xoolaha umadda dhaca aan sharci qabtaa jirin.

Waxay nabareen in fulinta sharciga ayka sarayso aragtida qofka xilka hayaa, waxay na bareen In dowladnimada loo galo in dhaqaalo laga sameeyo.

Waxay na bareen In dhaca xoolaha/hantida umaddu caadi yahay, waxay na bareen In waxqabad la'aanta laamaha do wladdu tahay wax iska caadi ah.

Waxay na bareen in qofka wax dhaliila ee sheega dhibka jira yahay balo sheeg ama nin shisheeye u adeega sir umm-addu leedahayna faafshay waxay na bareen in sharciga dowladnimada iyo dastuurka Puntland ay ka wanaagsan tahay aragtida ama rabitaanka masuulka xilka haya.

Waxay na bareen in Madaxweynuhu denbi kasta oo uu galo aan lala xisaab tami karin mudadiisana uu leeyahay oo aan laga qaadi karin.

Waxay na bareen in dowladnimadu Puntland ku dhisan tahay qaab qabiil oo hadii qof danbi galo beeshiisa aan loo dhaafi karin isla markaana ay beeshu mid kale keento oo isna sameeya wuxuu rabo Waxay nabareen in shaqaalay-siinta dowladdu ku dhisan tahay nidaam qabiili ah oo aan loo dhamayn.

Waxay nabareen in Beentu tahay midan laga xishoon.
Waxaa ay nabreen Aflagaadadu inay caadi tahay.
Waxay na bareen in waxqabadkii dowladnimada Puntland laga rabay ay tahay masuuliyad saaraan hay'adaha iyo bee-sha Caalamka.

Waxay na bareen in Canshuurto ay tahay wax ninku iska qaato aana dalka wax loogu qaban.

Waxay na bareen in qofka raba inu afkaartiisa cabbiro ama soo bandhigo loogu cagajugeelyo waa lagu xirayaa ama waa lagu dilayaa ama waxaa tahay xagjir.

Waxay na bareen dhamaan awoodaha Metelaada heer Federaal iyo heer Puntland in hal dhinac keliya laga raro dadka kalena ay daawadaan kuna qancaan.

Waxay na bareen in qofka sheega khalad jira oo uu masuul sameeyey ay ka dhigaan qof qabiil kale sharaftiisa iyo dadkooda wax u dhimay waxay na bareen in dadku wada noqdaan maangaab aan waxba sheegin, kuna dhexjiro arag tiyaha cariiriga ah ee sameeyeen kuwa dowladnimada hagardaaminaya.

Waxay na bareen Dowlad kastaa markii wakhtigeedu dhamaado inay qaadato agabkii shaqada siiba dhanka ciidanka madaadama agabka ciidanka ay gacanta ku hayeen Beeshiisu oo awalba laga dhawray lagana ilaaliyay in dhismaha awoodaha ciidan ay u sinaadaan dadka reer Puntland (dadka kale waa Sacabooley halka iyaguna ay Dabley yihiin) iyadoo weliba lagu yiraahdo maxaad dalka u qabataan difaciisa kama qayb qaadataan uma dhimataan iwm, balse xaqiiqdu waanba loogu tala gelin inay awooda ciidanka kamid noqdaan lakiin hadalkaas waa u dhimo iyo in lagu fogeeyo si ay ugu qancaan inay ku ekaadaan Canshuur bixiye markhaati ah oo daawade ah isla markaana calaacal ku nool ah.

Waxaana markhaati ka ah ciidamada Puntland sida ay u dhisan yihiin Ciidamada Godod ee mudug waa hal jifo walow ay furin taagan yihiiin balse waxaa ay kasoo hareen Awoodii AUN Cabdulahi Yuusuf, Ciidamada Caagadayste waa AUN Cade Muuse, Ciidamada Jimcaale iyo Muxyidiiin

waa Faroole. Waxaa ugu danbeeyey Gaas oo isagu kuwa kadaran samaystay kuwaasoo mixnad ku noqon doona madaxweynaha ka danbeeya,
Dhamaantood mileyshiyaad beeleedkaasi waxaa ay yihiin ciidamo ku gaashaaman hub iyo gadiid laga gaday canshuurta dalka amaba deeq loogu keenay dalka waxaana ay noqdeen awood reer leeyihiin waxaa kaloo ay horjoogayaashaasi u qoran ciidamo tirabadan oo ay mushaharkooda qaataan (caaglayaal) haday waayaana waa kuwa wadooyinka jara ama xarumaha dowlada qabsada, waxaa kaaga sii daran ciidamadaasi waxaa ay laftigoodu sugaan isbedel kasta si ay madatxtooyada u galaan ileen waa hadbad awoodi ku dhex jirtee balse dadku hada waa ay ogaadeen xaqiiqda dhabta ah waxaana fashilay dagaalkii Tukaraq.

Dadka qaar baa yiraahda Maxaa xaduudaha loosoo xiri waayay xaduudaha ma waxaa soo xira ciidamadan hebel, waxaana tusaale kuugu filan dagaaladii ugu danbeeyay ee ka dhacay Tukaraq oo ay ka muuqatay in ciidamadu ay ahaayeen mileeyshiyaad beeleed ilaashanay inaan gaarigu ka guban inaan gaariga laga qabsan iyo inuu dhaqaalaystoba rasaasta uu ku dagaalami lahaaba taasana waxay keentay inuu lumo miiisaanka dagaalka mararka qaybtoodna ayba ka dhalato khasaare iyo inaaba lagaba amar qaadan Taliyaha u magaacaban ciidamada puntland ee ay ka amar qaataa kan beeshooda ah ee taliyaha u ah. Waxaynan la gaban in laga ilaasho han siyaasadeed nin kastoo u muuqan kara inuu yahay siyaasi samayn kara waxaana laga oodaa dhamaan ilbaabada uu horay usii geli karo waxaana lagu tilmaama inuu yahay mid u adeegaya dana ka baxsan puntland isla markaana waxaaba loo adeegsadaa dadka uu kasoo jeedo iyadoo loo marayo farsamooyin qaawan iyo kuwa dahsoonba tasoo saldhig u ah kala qaybin dadka uu kasoo jeedo. Halkaas waxaa uu ku noqdaa mid han jaba.

## Ololaha Barlamanka iyo Madaxweynaha ee Dorrashada Puntland 2019.

### Xubinta Barlamaanka:

Waxaa dhamaan magaalooyinka iyo degmooyinka Puntland kasocda loolan adag oo is dhinac socda ha ahaato soo xulidii xubnihii barlamaanka loolan kasocdo iyadoo aynan ka marnayn Musharaxiinta Xilka Madaxweyne inay samayn ku yeeshaan xubinta soo baxaysa iyagoo kala qayb qaadanaya am ka taageeraya dhanka dhaqaalaha iyo dhiiri gelintaba si soo bixidiisa uu ugu guuleysto hadaba mala oran karaa Musuqmaasuqii wuu kasii bararay wuuna kasii qaali garoobay 20kii sano oo aan soo dhaafnay maxayse ku tegaysaa musharaxa marka uu laaluush bixinta kasoo bilaabo soo saarida Xubinta Baarlamaan oo hadii uuba ka guulaysto kuwa kale ay sugayso Xarquunkii Xildhibaanka iyo weliba intii Guusha lasoo hoysay.

Waxaa kaloo xusid mudan in isbedel wayn uu ka jiro qaabka soo xulida xubin nimada Barlamaanka Puntland isla markaana qaab hada loo xulo uunan qabin Dastuurka Puntland. Shuruudaha ka mid noqoshada xubnaha Golaha Wakiillada ee la soo xulayo waa kuwa ku xusan qodobka 61-aad ee dastuurka Puntland. Qodobkaan iyo firqooyikiisu waxaa ay oo ay qabiil kasta cadaynayaan soo xulida iyo sharuudaha kamid noqoshaha xubinimada Barlamaanka, taasoo hada aad moodo inay iska bedeshay Kadib markii dadka reer Puntland ay noqdeen kuwa samyn ku leh xubinta codkeeda taasoo ay kasoo bilaamatay dhawaan markii shacab u codeeyeen xubnihii Barlamanka DFS balse Saxiixii nabadoonka iyo Isimka ayay dadku si wakhtigu keenay ku qaabileen inay wax ka bedelaan oo ay la yeeshaan taasoo hada ku socota in xaflado waa wayn laysugu yimaado kadibna loo codeeyo xubnaha ku loolamaya Xubin nimada . Taasi waxaa ay Markhaati

madoonto u tahay in dadka reer Puntland ay u Hamuuman yihiin inay maruun Codkooda ritaan.

**Musharaxa Madaxweyne**

Ilaa hada musharaxiinta Puntland waxaa ay marayaan in ka badan sadex jibaar xiligii kan ka horeeyay waxaana la rajeynayaa in ay kasii badan doonaan, wax yaalaha aan kasoo qaadan karno dhacdooyinka ugubka ah waxaa ka mida in ay ka duwan tahay sidii kal hore , Dawlada hada ee Gaas ma aynan saarin wax cadaadis ah Musharixiinta waloo dhawaan Gaas ku dhawaaqa ciidamo Horleh oo aan jirin Balse aan la aqoon waajibaadkoodu waxa uu noqon doono waa Ciidanka Xasilinta Garoowe iyo Ciidanka Kaydka Puntland.

Balse weli musharaxiinu waxaa ay si caadiya u wataan ololahooda halka xiligii Dowladii Faroole ay aad u kaanta-rooshay dhaqdhaqaaqa Musharixiinta iyo Gaadiidkooda, waxaa kaloo xusid mudan in ay kaga duwan tahay kuwii hore ma jirto Guruubyo kooban oo ku hirdemaya Kursiga lakiin hada waxaa ay u muuqdaan ilaa 3 guruub inay yihiin oo ay dhimantahay Dowlada Talada haysa waa haday isa soo sharaxdee.

Waxaana la oran karaa doorashadani waa Doorashadii abid ugu adkayd ee soo marta Puntland anigoo ku xusi kara, waa xiliguu Musuqmaasuqu ugu saraynayo abid waa xili hada looba magic bixyo ama la banaystay Musumaasuq in lagu doono kursiga.

Waa xili Musharax kastaa uu ku haminayo inuu lacag helo si uu ugu gato Xubnaha Barlamaanka. Ilaa hada waxaa dhacay oo masharixiinta qaar sameeyeen arimo lala yaabo hadal ama ficilba hanoqotee kuwana waxay ahaayeen kuwa lasoo dhaweeyay hal qarna lala yaabay.

Waxaan kasoo qaadan karnaa in musharax meel fagaara ah uu ka yiri “ laalush inaan bixino waa la ii fidwooday “ (Faraax Shire).

halka musharax kalena uu yiri ‟aniga dhamaan 66 xildhibaan waxaan siinayaa Had’diyad marka ay idoortaan kadib had’yadaasna macadanta dalka baan u gadi”
(eng Eenaw)

halka musharax kalena uu ka hor yimid oo uu yiri “ Laaluush waa la ii fidwooday dalkana ceeb bay ku tahay mushariхiintana ceeb bay ku taha diintana waa laga been sheegay” isagoo isaguna sheegay faankii xiliyada doorashada, oo yiri anigu Millioner baan ahay waloow uuba ku cusub yahay Puntland dhib kasta, Abaar kasta, Colaad kasta oo soo dhacay. (Jebiye)

Musharax kale baa isagoo odayaal la hadalay yiri “ odayaalow hadaad xildhibaanka diirataan oo xildhibaankuna mushariхiinta diirto oo mushariхiintuna kan kasoo dhex baxa ay diirtaan sow madaxweynahaasi Dalka diiran mayo, war yaan lays diiran oo dalka yaan la diiran” (Ali Xaji Warsame).

Hadii lay doorto maalin Paul (ninka Dekedda Bosaaso xukuma) dalka joogi maayo (Janagale)
Bosaaso Lacagteedii waxaa lagu dhisaa Meela kale (Deni)
Idinkaa i dalbay ana dalabkiinii waan aqbalay (Asad Di’aano)
Puntland manta Sarkaal hogaamiya bay u baahan tahay (Gen. Mudan)

**Waxa la gudboon madaxweynaha Mustaqbalka Puntland 2019 iyo Talada aan siinayo.**

Waxaa fooda inagu soo haya doorashadii jagadda madaxweynenimo ee Puntland Doorasada 2019 oo u

muuqata mid rag badani isu soo taageen, hardan badanina uu ka dhici doono, lakiin waxaa hubaal ah tiradii doontaaba ha is sharaxdee in nin qudha un la dooran doono, sidaa awgeed waxaa iswaydiin mudan hadii doorashada lagaga adkaado madaxweynaha maanta talada haya waa haduu isa soo sharaxee Dr, Abdiweli Gaas, tolow dhibaatooyinka yaala maanta Puntland xal ma loo heli doonaa, mase dhici kartaa in shacabka Puntland nabad iyo badhaadho ay galaan, mise sheekadu waa kaalinkii geela oo uu hadba nin wadaanta darsanayay oo cidina dan guud iyo adeeg shacab umaba socoto, ee tuubada suro weeye arinku.

Markaad fiirisid figradaha musharaxiinta ilaa hada qaarkood ay ka duulayaan waxaa kuu soo baxaysa inay tahay warfaa qabtay, wardheeraana ku xugay ee waa kalinkii warsuge.

Markaad eegto (Platform-ka) ama qorshayaasha (waaba hadii hadal iyo qorshe dhaxal gal ah ayba soo bandhigeene) musharaxiinta qaarkiis ama badankoodaba waxaad arki in aysan abaarin boogaha in la dhayo u baahan.

Markaad eegto taageerayaasha ragga is sharaxay badankii waxaad dareemi in weli uusan shacabka reer Puntland bislaan, ninkastana jifadiisa hoose isku hareereeyay, taas oo aan oran karno waa dhaqan lagu fashilmay, kaas oo dib u dhac u keenay Puntland, sababayna in rag iyo hablo badan oo howlkar ah wax badana tari lahaa dadka iyo dalka ay faraha ka laabtaan.

Sidaa awgeed dhamaan dhaqamadaan kor ku xusani waa kuwo u baahan in isbadal taabo gal ah laga sameeyo, wacyi intaa ka qota dheerna ay la yimaadaan musharaxiinta maanta, hadii kale sheekadu miyaysan noqonay tii reer Xamarka "jug-jug meeshaada joog"

dhaqamadaan kor ku xusani waa kuwo u baahan in isbadal taabo gal ah laga sameeyo, wacyi intaa ka qota dheerna ay la yimaadaan musharaxiinta maanta, hadii kale sheekadu miyaysan noqonay tii reer Xamarka "jug-jug meeshaada joog"

Hadaba inta aanan u gelin dardaarankayga ayaan jeclaan lahaa inaan idinla wadaago sheeko dhab ah oo ka dhacday wadan Africaan ah, taas oo wax badan inooga faaìidayn karta doorashada maanta.

Shacabka ayaa doortay madaxweyne, kaas oo ay u arkayeen mid wax ka qaban doona dhibaatada haysata, madaxweynahaas oo balaqaadyo badan oo ka turjumaya baahida shacabka sameeyay.

Kadib markii xukunkii uu qabsaday ayuu musuqmaasuq iyo in reerkiisu kaalinka keligood ka cabaan ka dhigay maamulkii, shacabkiina gaajo iyo dhib kii hore ka badan u horseeday.

Kadib markii la soo gaaray doorashadii ayaa rag badan isa soo sharaxeen kuwaas oo dhamaan ku andacoonaya inay wax ka qaban doonaan cadaalada, musuqmaasuqa, una adeegi doonaan danaha shacabka.

Madaxweynihii markuu arkay in dabayshu sidato, ayuu shacabkii isugu yeeray isbartiimada, dabadeed ayuu khudbad dheer ka jeedshay, nuxurka hadalkiisu wuxuu ahaa sidan:

Shacabkaygiiyoow waa run inaan ka soo bixi waayay balanqaadyadii hore, waa run in aniga iyo reerkaygu ku takrifalnay hantidii shacabka iyo qaranka, waa run in aanan wax ka qaban dhibaatadd indin haysatay, hadaba laba idinkaa maanta u dowr leh. ama inaad doorataan mid gaajaysan oo shan sano oo soo socota isaga iyo reerkiisu masruuftaan hantida shacabka ama aniga oo hada dhargay

diyaarna u ah inaan u soo jeesto adeegii shacabka inaad mar labaad idoorataan.

Sidaa awgeed, hadii arintu tooko ber tooko tahay, waxaan oran lahaa shacabka masaakiintaa yaan la daalin beena loo sheegin, hadiise isbedel, horumar, nabadgelyo, iyo cadaalad ay rabaan inay keenaan musharaxiinta qaarkood, waa in taas laga arkaa Campaign-kooda.

Taas waxaan ula jeedaa in musharaxiintu ka waantoobaan dib ugu gurashada jifada hoose, iskuna dayaan in ay hantaan dhamaan shacabka reer Puntland iyagoon u eegayn gobol iyo qabiil, taasna waxaa dhalin karta inay la yimaadan hadaf, mabda ama qorshe ayku hogaaminayaan Puntland dhibaatadana kaga saarayaan. Xaaji Cali Majeerteen ayaa gabay uu tiriyay waxaa ku jiray oraah dhahaysa: "Nin anfacii canshuur yahay iimaan ka dheeraa". Sidaa awgeed, waa in ragga jagadaan u tartamayaa ogaadaan in hantida ay maamuli doonaan ay tahay canshuur laga soo qaaday rag iyo dumar dhidid iyo dhiig u tufay kasbashada hantidaan.

Waa inay ogaadaan in xisaab aduun iyo mid aakhiro ka danbayn doonto masuuliyadda. "Nin xilqaaday eed qaad"

## Gunaanad

Gunaanadkaygan Buuga 20 Sano iyo Sooyaalkii Puntland waxaan isku dayi doonaa inaan u iftiimiyo madaxweynaha mustaqbalka dhowr boogood oo u baahan in la dhayo, boogahaas oo maamuladii hore ku fashilmeen daway-ntooda, waa boogo hadii aan dhakhso loo dawayn soo dadajin karta fashil ku yimaada maamulka cusub.

Baarlamaanka Puntland oo ah mid aan lagu soo dooran hab cadaaladeed ama aqoon- eed ama kartiyeed ee uu qofku leeyahay ee waxaa uu ku yimaadaa Tookadan waxaa leh jifi hebel, dadka xubnaha ka noqdana ay yihiin dad aan u qalmin, balse ku caan baxay laaluush qaadasho si looga

meel marsiisto hadba wixii la doono. sidoo kale muujiya awood dari iyo la xisaa- btan la'aan madaxda iyo maamulka Puntland.

Sidaa awgeed, hadii xal laga rabo Puntland waa in la badalaa dhamaan qaab sharuudeed ee xubnaha baarlamaanka cusub ee Puntland, waana in lagu soo doortaa hab doorasho beel kasta dhexdeeda ee uusan oday kaaba qabiil ah warqad u soo saxiixin xubinta reerka, waana in shuruudo adag oo aqooneed, cadaaladeed, iyo u qalmida xilkasnimo lagu xiraa.

**Dowladihii soo maray Puntland**

dhamaan Dawladihii soomaray Puntland waxa lagu nisbeeyay madax ka nool. Taas oo micnaheedu tahay in hadba ninka madaxweynaha ahi uu ku takrifalo awooda iyo dhaqaalaha Puntand, isagoo rakaab xun oo aan xilkas ahayn wasiiro u magacowda, si markaasi rag dhufaanan oo isaga ka liita ay u noqdaan, dababeedna shacabka loo fahamsiiyo in madaxweynuhu fiican yahay ee tuugta xaaranta cunataa oo aan shaqaysan ay yihiin wasiirada.

Sheekadaan oo laga dhaxlay macalinkii Ummadda AUN Siyaad Bare, isagoo wasiiradiisa ugu yeeri jiray iimaan laawayaal aan dhargin. Hadana Madaxdii Puntland sidoo oo kale u ilhaameeyaan wasiirada weliba dadka hortooda ku bahdilaan, taas oo ah mid ay istaahilaan, maadaama ay damiir laawayaal yihiin.

Inkastoo aan aamin sanahay inay jiraan wasiiro aan sidaa u sii tira badnayn oo howl kar ahaa oo soo maray wasaarado laakiin badanku waa kuwa aan kor ku xusay. Sidaa awgeed, waa in wasiiro xul ah ay noqdaan kuwa taladda dalka qabanaya ee aysan sheekadu noqon reer hebaloow nin keensada aan wasiir idiinka dhigo, dabadeedna reerku ay keenaan nahaab xaraan cun ku caan

baxay ama aan lagusoo xulan waa nin jilicsan oo aan talada kula qabsanayn hadaad qalooociso.

### Xeer Ilaalinta

Xeer Ilaalinta oo howsheedii gabtay, lana xisaabtami wayday dowladda, sharcigiina ilaalin wayday. Sidaa awgeed, waa in xeer ilaaliyaha dowladda la doortaa shaqsi karti leh isla markaana ilaaliya dhamaan Xeerarka wadanka iyo ku tagri falka awoodaha, dhaqaalaha iyo sharuucda Dalka.

### Hantidhowrka Guud.

Hantidhowrka Guud waa in la helaa masuul leh awood ka timid awooda Sharci iyo mid kartidiisa aqooneed oo ku sifoobay cadaalad, aaminimo iyo ilaalinta hantida Dowlada iyo dadkaba loo magacaabaa, awood buuxdana loo siiyaa la xisaabtanka cidkasta oo hantida qaranka masuul ka ah, sida wisiirka maaliyadda, kastamka, airportka iyo dhamaan madaxda illaha dhaqaalaha.

Canshuur bixiyayaasha oo aan awood u lahayn dabagalka meesha lagu baxshay lacagtooda Sidaa awgeed, waa in la abuuraa waxa loogu yeero (Tax Payers Association) Ururka canshuur bixiya yaasha ururkaas oo ay ku bahoobaan, ganacsatada waaweyn sida: kuwa wax dhoofiya soona dejiya, shariikadaha taleefoonada, diyaaradaha, maraakiibta, korantada, biyaha, hoteelada, iyo dhamaan ganacsatada kale oo yar yar.

Ganacsatada waaweyn sida: kuwa wax dhoofiya soona dejiya, shariikadaha taleefoonada, diyaaradaha, maraakiibta, korantada, biyaha, hoteelada, iyo dhamaan ganacsatada kale oo yar yar. Waa in dowladu dhiiri gelisaa ururkaan ayna awood siisaa inay dabagal madax banaan ku samayn karaan sida loo isticmaalay lacagtooda. Maadaama ay yihiin udbaha iyo awooda dhaqaale ee Puntland ku taagan tahay. Sidoo kale waa in canshuur

bixiyayaashu fahmaan sababta looga qaadayo canshuurtaas o ah in dowladu ugu adeegto bulshada iyadoo ku fulinaysa arimaha bulshada sida tacliinta, caafimaadka, amniga, iyo dhamaan hayàdaha kale ee u adeega bulshada. Canshuurta micnaheedu maaha in jeebkii ninkii iyo gabadhii u dhididay oo kasbaday laga qaado jeebkale oo aan kasban istaahilina ay gasho.

### Ciidanka dalka (boolis/ daraawiish/sirdoon)

Dhamaan waxaa howlgab noqday Ciidamada kadib markii ay waayeen Daryeel iyo Xaquuqdoodii Nololeed Marka laga Reebo Xoogaaga ilaaliya Madaxda maamulata dhaqaalaha Dalka iyo Ciidamo xoogaaya oo shisheeye gacanta ku hayo. Sidaa awgeed.

Waa in ciidan cusub oo musahaar u qalma la siiyo la qoraa, laguna soo xulaa: aqoon dugsi sare, jir ahaan caafimaad qabo, balwad iyo laaluush cunisna ka dhowrsan. Waa in ciidankaasi dhalinyarada dalka u bataa, waana in mushahaar iyo nafaqo ku filan la siiyaa si howshooda ay hufnaan u gutaan. (fiiro gaar ah: maanta waxaa soo baxay dhibaatooyin akhlaaqiyaad, dhaqan xumo, tahriibiyayaal, mukhaadaraad, dil aan la aqoon cida geysata, tuugo habeenkii dadka baarata, sidaa awgeed isbadalkaas waxa laga fili karaa waa dhalinta maanta, ee maaha odayadoo cali boobaaye ka soo haray in ay isbaaro dhigtaan hay'adaha amniga, sidaa awgeed waa in la howl geliyaa dhalinyarada dalka xoogooda iyo xirfadoodana laga faa'iidaystaa.

Hadii kale Al-Shabaab iyo dhamaan Cadowga Puntland ayaa u adeegsan doonta burburka Puntland.

Khasab maaha in ciidankaasi tiradiisu badan yahay waxaase lagama maarmaan ah in tayadiisu fiican tahay.

### Saraakiisha Ciidamada :-

Darajada Saraakiisha Puntland ayaa waxaa ay u badan yihiin kuwa loo miisay oo laysaga taxay ee balse aan lagu qaadan dhamaan dariiqa mudnaanta derajada waxaana caado noqotay masuul kastaa inuu garbaha u caseeyo xigtadiisa, waxaana lagama maarmaana in dib loo milicsado wixii ka sareeya xidigle isla markaana bulshadu u sinaato hogaanka ciidamada iyo ciidankaba.

**Dowlada oo aan haba yaratee wax la taaban karo ka samayn goboladda dalka.**

Waa in dowladu ogaataa in dalku uu ka kooban yahay gobalo ka kooban degmo, tuulo, beel, kaam, iyo badiye loona baahan yahay in si cadaaladi ku jirto wax loogu wada qabto dhamaan dalka. Dowladu ka wayn Garoowe iyo Boosaaso, waa in Mudug, Nugaal, Sool, Sanaag, Cayn, Karkaar, Bari iyo Ciid intaba wax ay ka qabataa, maada-ama bahwadaagta Puntland dhulkoodu baaxadaas leeyahay looguna cadaalad sameeyaa.

**Jaaliyaddaha Qurba joogta reer Putland**

Doorkii qurba joogta oo noqday howlgab, sidaa awgeed, waa in maamulka cusubi sameeyaa ama xoojiyaa hay'ad madax banaan oo samaysa isku xirka qurba joogta reer Puntland iyo maamulka iyo shacabka Puntland si qurba joogto ay uga qayb qaadato horumarinta deegaan iyo in lagu dhiiri geliyo ina maalgashi ay sameeyaan si ay u abuurmaan fursado shaqo.

**Ururada aan dowliga ahayn ee caalamiga ah :-**

Ururadaas oo aan wax la taaban karo ka fulin deegaamada Puntland wallow ay dhacdo dhaqaalaha loogu deeqo dalka inaynan fulin dayac awgeed ay dhaqaalahaas hay'aduhu u wareejiyaan Gobala kale. Sidaa awgeed, waa in maamulka cusubi uu la xisaabtamaa uraradaasi, isagoo u samaynaya

hayàd awood leh, dad xirfad u lihina ka shaqeeyaan, taas oo xaqiijisa   in ay ururadaasi ka run sheegaan wax qabadkooda, hadii kale ay dalka isaga baxaan.

Ugu danbaystii waxan kula talin lahaa madaxweyna mustaqbalka in dowlad kooban oo wasiira badnayn dalku yeesho, sidoo kale ciidan iyo shaqaale dowladeed oo kooban yeesho, iskuna dayo in tayada iyo tacliinta shaqaalahaas kor loo qaado , si taasi u dhacdana waxaa lagama maarmaan ah in (secondary school education) tacliin dugsi sare ugu hoosayso shuruuda tacliineed laga dhigo iyadoo weliba la xaqiijinayo wax barashada qofka, markii taasi dhacdo kadib waa in dowladu ay awooda saartaa in mushahar u qalma ay siiso wasiirada, agaasimayaasha , shaqaalaha, iyo ciidamada, taasi waxay meesha ka saari doontaa in la dhaco hantida qaranka, la qaato laaluush, waxayna laba jibaari doontaa shaqada ay qaban doonaan shaqaalaha Dowladu.

Waana in loogu cadaalad sameeyo bulshada reer Puntland fursadaha shaqo iyo maskabkaba. Tixgelin weyna lasiiyaa Beelaha horay loo dulmiyay hanoqoto Metelaada Dowladda Federaalka iyadoo lagu miisaamayo cadaalad.

## Dhaqanka.

Waxaa laga maarmaan ah dalka dantiisuna ku jirtaa in kor loo qaado maqaamka dhaqanka loona sameeyo aqal isla markaana la xaliyo dhaqanka dhexdiisa xurgufaha ka jira lana mideeyo quluubtooda iyo wada shaqayntooda awood muuqatana loogu daro Dastuurka.

### Furida Hanaanka isla Xisaaabtamka.

Waa in dowladda cusubi ay dib u baarto dhamaan musuq-maasuqii dhacay waana in si daah furan loo soo ban dhigaa kadibna lagu soo saaraa Maxkamad dadkii sameeyay musuq maasuqa isla markaana waa in dhamaan hantidii ay dib ugu soo noqotaa gacanta Dowladda Puntland iyaguna ay mutaan ciqaab, si ay u noqoto mid tusaale ugu filnaada kuwa masuuliyaddaha haya.

### Maxkamada Dastuuriga ah

Maxkamada Dastuuriga ah waa in ay ka mid noqotaa taalabada ugu horeysa ee ka soo baxda hogaanka cusub si wadanka hay'adihiisa Dawliga ah ay u dhamays tirmaan.

### Duco

**D**hul-udug waxaa uu u baahan yahay intaas iyo wax ka badan waxaana aan ku soo uruuri duco.

Waxaan Ilaaha qaadirka ah ka baryaynaa inuu taladda Puntland gacanta u geliyo qof u qalma, qof danta guud ka hormariya danta gaarka ah, sida mida jifo iyo mida shakhsiyadeed isla markaana Ilaah baa Cadaaliye mid caadaalada u dhow, sidoo kale inuu Eebe ka saaro dhibaatada Umada Soomaaliyeed meelay joogaanba qalbiyadoodana isku soo dumo, midnimo, wada noolansho iyo cadaaladna qiimaheeda tuso.

Gabaygan abwaanku wuxuu kaga cabanayey caddaalad xumi waxaana loo soo qaataa markastoo ay muuqato cadaalad dari.

”Rag caddaalad waayaa sidii, cawsha kala yaacye
Caarrow shabeel iyo Dhurwaa, nalagu cawreeye
Canka nagu gur bahal Goodiroo loo cimaamadaye.

Canda tarantay Caash-Boorri, bay ciidan leedahaye
Cunbullayska reeraha xigey, kula Carrawdaaye
Citiqaadday Raageba inuu kuu ciniin yahaye.”

"Aqriste, hal QAACIDDOO DAHABI ah, iga QABO aniga, oo iga QORO; “QOF WALBA, OO BEESHIISA SOOMAALI UGA EEXDAA/SEDBURSHAA, WAXAA HUBAAL AH, IN BEESHANA UU UGA SEDBURIN DOONO JIFADIISA, JIFADANA UU UGA SEDBURIN DOONO ILMA ADEERRADIISA!”

## Xasuusin II

Dhamaan Buugaan dhacdooyinka ku qoran waxaa ay yihiin dhacdooyin dhacay, waxaa dhici karta in qaar ka maqan yihiin laakiin waxaan hubaa inay ku dhan tahay mihiimadii Sooyaalkii 20 sano ee Puntland.

Waxaa kaloo buugan kaaga soo baxaya wax badan oo jira balse laga leex leexdo waxaana dhici karta inaad is weydiiso muxuu u qarin waayay waxaan hadaba wixii la qariyo waxaa ay ku danbeeyaan waxaan la filayn, hadaba in la sheego oo kadibna saxeeda la aado ayaa mihiima.

Khaladka oo lasheegaa waa saxa oo la gaaraa.

Aqoontu ma aha khaladka oo aad daboolato ee aqoontu waa khaladaadka oo aad ku beegto indhaha bulshada si aynan u dhicin mar danbe.

Ma aha inaan qabiil gaara iyo guruub gaara ku maagay balse wixii dhacay oo aan loo baahnayn inay sii jiraan, waxaan u qoray si loogu gudbo midnimo wada tashi ku qotonta wada lahaansho.

Waxaan ka tegey warbixino badan oo dhacdo ah oo iyaga aan loo baahnay in la qoro balse 20 Sano kadib hadii sidaan lagu sii jiro ay lagama maarmaan ay noqonayso in la qoro oo banaanka lasoo dhigo.

Waxaana dhul-udug u rajeynayaa in 20 Sano kadib ay hesho hogaamiye ku haga jidka Cadaaladda, Amniga iyo Horumarka.

***20 SANO IYO SOYAALKII PUNTLAND***

WQ. Siyad Ali Jama (Buryar)

*……………………….DHAMAAAD………………………….*